Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH

الرسمية الجريدة

OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 8aad **FAAFIN SANADLE** **Muqdisho** **2020**

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

Uruurinta Sharciyada iyo Wareegtooyinta ee Jan-December 2020

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar.
Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCI

W.M

BOGGA LABAAD

XEER

BOGGA SEDDEXAAD

TALOOYIN, ISGAARSIIN, OGAYSIIS, IWM

SANADKA

2020

Ku dhaqan Xafiis D.

FAAFINTA RASMIGA AH
الرسمية الجريدة
OFFICIAL BULLETIN

EE JAMHUURIYADDA SOOMAALIYA

Sanadka 7aad Muqdisho, February 2020 Lr. 1

Waaxda Maamulka Faafinta Rasmiga ah
Ee Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dawladda

FAAFIN BIL SOO BAXA

Qiimaha waa $XXX Dollar, lambar waliba – **RUKUNKA**: Sanaddii waa $XXX Dollar, Soomaaliya gudaheeda – Dibaddeedana waa $XXX Dollar. Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyay wuxuu ka bilaabmaa **1** Janaayo. Qiimaha Qoritaanku F.R halkii sadar iyo wixii ka yar waa $XXX Dollar – Rpukunka iyo Qoritaanku waxaa la weydiistaa Laanta Maamulka Faafinta Rasmiga ah – Lacagta waxaa lagu bixiniyaa Xafiiska Canshuuraha ee Wasaaradda Maaliyadda.

KOBNIIN

BOGGA KOOWAAD

SHARCIYO KELIYA

BILAHA

Janaayo – February

2020

TUSMO

1. SHARCIGA BATROOLKA JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA.....2
2. SHARCIGA WAX-KA-BEDDELKA SHARCIGA IIBKA & QANDARAASYADA QARANKA.....56
3. SHARCIGA CANSHUURAHA FURDOOYINKA.....67
4. SHARCIGA DOORASHOOYINKA QARANKA EE HEER FEDERAAL.....97
5. SHARCIGA ISTAATISTIKADA QARANKA.....136

6. SHARCIGA JAAN-GOYNTA IYO TAYO-DHAERKA SOOMAALIYEED.....182
7. SHARCIGA DUULISTA RAYIDKA.....203

8. HESHIISKA MIDOWGA AFRIKA EE KA-HORTAGGA IYO LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA.....272
9. HESHIISKA CARBEED EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA.....327
10. HESHIISKA QARAMADA MIDOOBAY EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA.....407
11. ANSIXINTA WAX-KA-BEDDELID QODOBKA 9AAD SHARCIGA LAGU DHISAY GUDDIGA MADAX BANNAAN EE DOORASHOOYINKA QARANKA IYO CUSBOONEYSIIN MUDA XILEEDKA GMDQ.....532
12. SHARCIGA HEY'ADDA DIIWWAANGELINTA IYO AQOONSIGA DADWEYNAHA SOOMAALIYEED.....536
13. ANSIXINTA WAX-KA-BEDDELID QODOBKA 9AAD SHARCIGA LAGU DHISAY GUDDIGA MADAX BANNAAN EE XUDUUDAHA IYO FEDERAALKA.....549

14. SHARCIGA DOORASHADA 2020-2021 EE BAARLAMAANKA 11-AAD.....554
15. ANSIXINTA SHARCIGA GOLAHA MIHNADLAYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA.....565

SHARCI LR. 19 Taariikh: 08/02/2020

ANSIXINTA SHARCIGA BATROOLKA JF SOOMAALIYA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. GSH241/12/01/B-10/20 Taariikh 09/01/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Batroolka Soomaaliya

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Batroolka JF Soomaaliya.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 08/02/2020

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HAN/047/2020
TAARIIKH 24/03/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Baarlamaanka
Federaalka Soomaaliya Golaha Shacabka

Sharciga Batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

5/16/2019

HORDHAC

Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, isaga oo tixgelinaya horumarinta dhaqaalaha iyo dhiirigelinta maalgashiga kheyraadka dalka wuxuu soo saarayaa Sharciga Batroolka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

CUTUBKA 1AAD
TALAAABOOYINKA AASAASIGA AH EE SHARCIGA BATROOLKA

Qodobka 1aad:
Aasaaska Sharciga Batroolka

Iyada oo la tixraacayo Qodobada 7(1), 44, 63(b), 69[(1)(a)] iyo 79[(1)(d)] ee Dastuurka KMG, Barlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soo saarayaa sharcigan oo laga hirgelin doono Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, dhammaan dhulkeeda, badda iyo berrigaba.

Qodobka 2aad:
Erey Bixin

Marka sharcigan laga hadlayo, ereyada soo socda waxay leeyihiin macnaha mid walba ku hor qoran:

1. **Ogolaansho**: waxaa loola jeedaa Ruqsad baaris, Heshiis Wax Soosaar Wadaag ah, oggolaansho isticmaalka dhulka korkiisa, ama heshiis kasta oo ay gasho Dawladda oo la xiriira oggolaanshahaas.

2. **Aagga la Oggolaaday:** waxaa loola jeedaa dhulka ama goobta ogolaanshaha xilli ka xilli lagu baxsho.
3. **Shakhsiga Ogolaanshaha la siiyay**: waxaa loola jeedaa:
   b. Qandaraaslaha Heshiiska Wax- Soo saar Wadaagga; iyo

   t. Shakhsiga Ogolaanshaha la siiyey, noocay rabto ha noqotee;

4. **Muddo Sannadeed:** waxaa loola jeedaa laba iyo toban bilood oo ka bilaabata 1da Janaayo kuna dhammaata 31da Diseembar, ee tirsiga sannadka Miilaadiga ah.
5. **Aagga Heshiiska:** waxaa loola jeedaa goobta Ogolaanshaha Heshiis Wax-Soo saar Wadaagga lagu bixiyey;\
6. **Qandraasle**: waxaa loola jeedaa shakhsiga Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta la gashay heshiis wax-Soo-saar Wadaag;
7. **Kontrool**: waxaa loola jeedaa markii ay shakhsi ku saabsan tahay, awoodda uu uleeyahay shakhsi kale inuu ku hanto awood suurta galinaysa in shakhsiga koowaad lagu maamulo qaab waafaqsan rabitaanka ama tilmaamaha shakhsigaas kale, taasoo ku salaysan:

b) lahaanshaha saami ama awood codeed, oo la xirirta shakhsiga hore ama shakhsi kastoo kale; ama

t) awood kasta oo ay bixinayaan shuruucda unkidda, ama xeerarka kale ee nidaamiya shakhsiga hore ama shakhsi kasta oo kale;

8. **Saliid Ceyriin:** waxaa loola jeedaa macdan saliid ah oo aan la sifeyn iyo dhammaan hydrocarbon-ada dareera ama laga miiray gaaska dabiiciga.
9. **Dib u Furfurid:** waxaa loola jeedaa marka laga hadlayo aagga heshiiska ama qayb ka mid ah, hadba xaaladdu siday tahay, ka tagista, furfuridda, wareejinta, bixinta ama/iyo duduminta dhismooyinka, kaabayaasha, iyo walxaha rakiban, qalabka ama hantida kale, iyo shaqooyinka kale ee loo adeegsado hawlaha Batroolka ee aagga heshiiska, si looga nadiifiyo aaggaas, loogana dhigo mid wanaagsan oo aan khatar lahayn, loona dhawro bii'ada;
10. **Habdhaqan-wanaagga Goobta Saliidda:** Waxay leedahy macnaha lagu sheegay Qodobka 36.1;
11. **Xukuumad:** waxaa loola jeedaa hay'adda fulinta ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, oo ay wakiilo ka yihiin masuuliyiinta ama Wasaaradda shaqada ku leh, sida uu go'aamiyo Golaha Wasiirada.
12. **Kormeere**: wuxuu leeyahay macnaha lagu sheegay Qodobka 39.1
13. **Sharci**: waxaa loola jeedaa Sharciga Batroolka, iyo sida dib u eegis ama wax ka beddel loogu sameeyo waqti ka waqti.

14. **Wasaarad:** waxaa loola jeedaa Wasaaradda hadba mas`uul Dawladda uga ah dhaqan-gelinta Sharcigan, sida ay u dejisay Dawladdu, oo hadda ah Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta.
15. **Wasiir:** waxaa loola jeedaa wasiirka hadba xukuumadda mas`uul uga ah dhaqan-gelinta Sharcigan, sida ay u go'aamiso Dawladda, kaas oo hadda ah wasiirka Batroolka iyo Macdanta.
16. **Gaaska Dabiiciga ah**: waxaa loola jeedaa dhammaan hydrocarbon-ada gaaska ah iyo kuwa aan falgelin, oo ay ka mid yihiin gaaska qoyan, gaaska qalalan, gaaska ka koreeya saliidda iyo midka ka hara, kadib marka hydrocarbon-ka dareera laga saaro gaaska qoyan, oo aan ahayn saliidda ceyriin.
17. **Hawl Fuliye:** waxaa loola jeedaa shakhsi idman ama shakhsi kale oo ogolaansho Heshiis Midayn ku magacaaban, oo u xilsaaran iskudubaridka iyo kormeerka Hawlaha Batroolka;
18. **Baarlamaan**: waxaa loola jeedaa Baarlamaanka Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya.
19. **Shakhsi**: waxaa soo galaya shirkad ama hay'ad qaanuuni ah.
20. **Batrool:** waxaa loola jeedaa:
    b. hydrocarbon kasta oo iskiis u samaysmay, ha lahaado qaab gaas, dareere ama adke; ama
    t. iskujir kasta oo hydrocarbon ah oo iskiis u samaysmay, ha lahaado qaab gaas, dareere, ama adke.
21. **Hawlaha Batroolka**: waxaa loola jeedaa hawlo looga danleeyahay in:
    b. Lagu sahamiyo Batroolka;
    t. Lagu baaro, hormariyo, soo saaro, iibiyo ama lagu dhoofiyo Batroolka; iyo
    j. Lagu dhiso, lagu taago, ama lagu hawlgaliyo dhismooyin, kaabayaal iyo xarumo loo adeegsanayo horumarinta, wax-soosaarka iyo dhoofinta Batroolka, ama dib u habaynta ama kala furfurista dhismo kasta oo ka mid ah kaabayaashaas ama xarumahaas.
22. **Heshiis Wax Soo-saar Wadaag:** waxaa loola jeedaa heshiis lagu galay ama lagu bixiyay si waafaqsan qodobka 3aad, kaas oo uu

qandaraasluhu ku helayo saami ka mid ah shidaalka lagu soo saaro hawlaha Batroolka, saamigaas oo loo gu badalayo hawlihii uu qabtay.

23. **Sarkaal Dawladeed:** waxaa loola jeedaa shaqaalaha madaniga ah ee Dawladda ama shakhsi u dhigma, xubnaha Baarlamaanka, Xukuumadda, Garsoorka ama Garyaqaanada guud, ama shakhsi ka tirsan Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed.
24. **Ogolaansho baaritaan:** waxaa loola jeedaa ogolaansho lagu bixiyay si waafaqsan Qodobka 23aad.
25. **Xeerarka**: waxaa loola jeedaa xeer-nidaamiyeyaal iyo xeer hoosaadyo ay Wasaaraddu waqti ka waqti soo saarto oo la xariira maamulka Hawlaha Batroolka, sida ku cad sharcigan.
26. **Haro Batrool**: waxaa loola jeedaa waro ama ilo ku samaysmay dhulka hoostiisa oo ay ku jiraan kayd ama kaydad kala qaybsan oo badan ee hydarokarboon dabiici ah oo ku qafilan (Saliid iyo/ama gaas) dhagax aan la mari karin iyo/ama haraynayaan biyo xireenno kuwaas oo isaga mid ah cadaadis dabiici ah oo wada kulmiya.
27. **Qandraasle Dawlad Goboleed**: waxaa loola jeedaa shakhsi ku dhex shaqaynaya sharciyada Soomaaliyeed, oo ay leedahay kontoroolkeeda, si toos ah ama dadban, dawlad ka mid ah dawlad goboleedyada Soomaaliyeed.
28. **Hay'adda Batroolka Soomaaliyed (HBS)**: waxaa loola jeedaa hay'ad awood leh oo sharciyeysan, iyada oo la tixraacayo Qodobka 19aad.
29. **Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed (SHBQS):** waxaa loola jeedaa shirkad awood leh oo sharciyeysan, iyada oo la tixraacayo Qodobka 20aad.
30. **Ogolaansho Isticmaal Dhulka Korkiisa:** waxaa loola jeedaa oggolaansho isticmaal dhuleed sida ku cad Qodobka 25aad.
31. **Dhulka Soomaliyeed:** wuxuu ka kooban yahay dhulka, biyaha iyo hawada oo hoos yimaada madax-bannaanida Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana ku jira xuduudaha badda iyo berriga iyo aagagga dhaqaale iyo Dhulbadeedka u cabiran Dalka Soomaaliya, oo horey loogu gudbiyey Qaramada Midoobay sida ku cad sharciyada la isku raacsan yahay ee caalamiga ah oo Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya xaq u siinaya baarista, horumarinta iyo soo saarista kheyraadkeeda dabiiciga ah.

32. **Soomaaliya**: waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.
33. **Ceel**: waxaa loola jeedaa qodid ama daloolin dhulka iyo badda gunteeda, looguna tala galay soo-saaris batrool.
34. **Heshiiska Lahaansha, Maamulka iyo Wadaagga Dhakhliga Khayraadka Dabiiciga ee Dalka (shidaalka iyo macdanta)**: Waxaa loola jeedaa heshiiskii Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ee Dalka (Shidaalka iyo macdanta) ee lagu saxiixay Baydhaba 5tii Juun 2018.
35. **Madaxda fulinta:**

b. **Heer federal:** waxaa loola jeedaa Ra'iisul Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

t. **Heer dawlad goboleed:** waxaa loola jeeda madaxweynayaasha dawlad goboleedyada iyo Gudoomiyaha Gobolka Benaadir.

Qodobka 3aad:
Ujeeddo

Ujeeddooyinka sharcigan waa:

1. In uu xaqiijiyo xuquuqda madax bannaanida qaranka Soomaaliyeed uu u leeyahay inuu baaro, horumariyo, soo-saaro, ka faa'iidaysto, maareeyana kheyraadkiisa Batroolka ee ku jira badda iyo berriga.
2. In uu oggolaado dadaallada lagu xaqiijinayo baaxadda hantida Batroolka ee ku jira Soomaaliya, iyada oo loo samaynayo qaab nidaameed, heshiisyo iyo qaab xisaabeed oggolaanaya sahmin, baaris, horumarin, wax soo-saar iyo suuqgayn batrool kasta oo la helo.
3. Haddii kheyraad batrool laga helo Soomaaliya, waa inuu dalka Soomaaliya iyo dadkiisuba ka helaan manfaca ugu badan oo ka imaanaya horumarinta iyo wax soo-saarka Batroolka.
4. In uu hubiyo ilaalinta, kaydinta iyo daryeelka bii'ada inta ay socdaan hawlaha Batroolka.
5. In la dhiirrigeliyo lana taageero maalgelinta shisheeye ee dalka soo galaysa, si loo gaaro himmilooyinka kale ee sharcigan.

6. In la dhiso Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed oo noqonaysa hay'adda u xilsaaran nidaaminta hawlaha Batroolka, iyada oo dhaqan gelinaysa mabaadi'ida sinnaanta, furfurnaanta, isla xisaabtanka, hufnaanta iyo kala soocid la'aanta.

7. In la dhiso Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed oo ah hay'ad kontoroolkeedu Dawladdu yeelanayso oo ka qaybqaadanaysa hawlgallada Batroolka ee ka socda gudaha Soomaaliya.

8. In loo hoggaansamo talaabooyinka dawliga ah si loo xaqiijiyo hufnaanta ku saabsan wax soo-saarka Batroolka, iyada oo la xoojinayo mamulka maaliyadeed ee guud iyo isla xisaabtanka, lana qirayo in maamulidda kheyraadka dabiiciga ah ay u dhacayso si faa'iido ugu jirto muwaadinka Soomaaliyeed, xilkeeduna saaran yahay dawladda, iyada oo u maamulaysa si waafaqsan horumarinta danaha qaranka.

9. In si siman loo sugo xaqsoorka ay yeelan karaan shakhsiyaadkii qaanuuniga ahaa ee horay u haystay xuquuq baaritaan batrool oo ay ka dhaxleen xukuumaddii Jamhuuriyadda Dimuqraadiga ee Soomaaliya, intii ka horaysay Disember 30, 1990.

Qodobka 4aad:
Lahaanshaha Batroolka

Kheyraadka Batroolka waa hanti qaran oo ay wada leeyihiin dhammaan shacabka Soomaaliyeed, oo ay wakiil uga yihiin Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka.

Qodobka 5aad:
Milkiyadda Kheyraadka Dabiiciga ah

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waa milkiilaha kheyraad-keeda dabiiciga ah berriga iyo baddaba.

Qodobka 6aad:
Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Batroolka

Dakhliga Batroolka ka soo xarooda waa wadaag, waxayna Dawladda Federaalka iyo Dawlad-Goboleedyada xubnaha ka ah u wadaagayaan si waafaqsan Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka (shidaalka & Macdanta) oo ku qotoma Qodobka 44 ee Dastuurka KMG.

Qodobka 7aad:
Maamulka Kheyraadka Batroolka

Maamulka kheyraadka Batroolka waxaa si wadajir ah u maamulaya Dawladda Federaalka, Dawladaha Xubnaha ka ah, kuwa ka mid noqon doona iyo gobolka Banadir, si waafaqsan Qodobka 2aad ee Heshiiska Lahaansha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dalka (shidaalka iyo macdanta).

2. Golaha kheyraadka dalka waa golaha ugu sareeya ee lagu lafa guro arrimaha kheyraadka ee u baahan in laga heshiiyo, loolana noqdo wixii lagu xallin waayo golayaasha maamul ee kale, wuxuuna ka kooban yahay madaxda fulinta ee heer federaal iyo heer dawlad goboleed.

Qodobka 8aad:
Qorsheynta Qeybinta Saamiyada Dakhliga Batroolka ee Degaannada aan Batroolka Soo Saarin

Dawladda Federaalka waxay xaqiijinaysa helidda gobollada aan soo saarin Batroolka saamiga ay ku leeyihiin dakhliga Batroolka si waafaqsan Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dalka (Shidaalka iyo Macdanta).

Qodobka 9aad:
Shirkadaha Batroolka Horey uga Haystey Heshiis Dawladda Soomaaliya

1. Dhammaan heshiisyada la xiriira Batroolka ee lala saxiixday maamullo ka jira qaybo ka mid ah Soomaaliya, ama dawladihii kumeel-gaarka ahaa

mudada u dhexeysa Disember1990 ilaa Setember 2012, waa waxba kama jiraan.

2. Dhammaan heshiisyadii ay wada saxiixdeen shirkadaha ajnebiga iyo Dawladda Soomaaliya wixii ka horeeye 1991 waxaa loo tixgelinayaa inay yihiin heshiisyo jira.
3. Shirkadahaas heysta heshiisyadii ka horeeyay 1991 Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay u cusbooneysiin doontaa si waafaqsan Qodobka 54aad.

Qodobka 10aad:
Hababka Xaqiijinta iyo Ilaalinta Batroolka
Ka dib Soo Saaristiisa

Dawladda Federaalka Soomaaliya iyadoo la kaashanaysa dawladaha xubnaha ka ah Dawladda Federaalka waxay mas'uul ka tahay ilaalinta iyo xaqiijinta ammaanka shirkadaha iyo hawlgallada Batroolka ee gobolada iyo degmooyinka kala duwan ee dalka.

Qodobka 11aad:
Ilaalinta Bii'ada.

Shirkadaha ogolaanshaha Batroolka la siiyay waa in ay ilaaliyaan bii'ada deegannada ay saamaynta ku yeelan karaan hawlgalladooda, si waafaqsan xeerarka dalka, xeerarka iyo heshiisyada caalamiga ah ee ilaalinta Bii'ada. Shirkadahaasi waa in ay dhawraan badqabka:

b) ***Bani'adamka***
t) Xoolaha la dhaqdo iyo duurjoogta .
j) Beeraha iyo daaqa
x) Badda
Kh) Webiyada
d) Haraha
r) Hawada
s) Dhulka/Ciidda
Sh) IWM.

Dawladda Federaalka Soomaaliya waa inay ku ilaaliso shirkadahaas gudashada waajibaadka ka saaran dhawrista badqabka bii'ada si waafaqsan shuruucda bii'ada ee dalka, kuwa caalamiga ah, qodobada sharcigan iyo xeer nidaamiyeyaashiisa.

Qodobka 12aad:
Magdhow Khasaare La Geystay

Hawlgal kastoo sahmin iyo qodis ah oo waxyeello u geysta bani'aadamka iyo hantida gaarka ah, waxaa waajib ah in ay shirakadaha Batroolku ka bixiyaan magdhaw u dhigma khasaaraha ka dhashay.

Qodobka 13aad:
Awoodda Bixinta ogolaanshaha Shidaalka

Shirkadaha caalamiga, shirkadaha qaran, shirkadaha wadaniga ah iyo shirkadaha isu tegay ee sameynaya sahan ama qodis batrool, waxay heshiis la geli karaan Dawladda Federaalka oo kaliya si ay hawlaha Batroolka uga fuliyaan Soomaaliya si waafaqsan Qodobada 19.14 iyo 24.1, iyo Heshiiska Lahaanshaha, Maamulka iyo Wadaagga Dakhliga Kheyraadka Dabiiciga ah ee Dalka (shidaalka & Macdanta).

CUTUBKA 2AAD
QAYBAHA GUUD
QODOBKA 14AAD:
BAXAADDA DHUL EE SHARCIGAN
SHARCIGAN WUXUU KA DHAQAN GELAYAA DALKA SOOMAALIYA.

QODOBA 15AAD:
BAAXADDA MAADDO EE SHARCIGAN

1. **Baaxadda**: Sharcigan waxaa lagu dhaqayaa hawgallada Batroolka.
2. **Macdan kale:** Jiritaanka ogolaansho lagu bixiyey aag cayiman ma reebeyso in la bixiyo ogolaansho baaritaan iyo soo saaris walxo macdaneed oo ka duwan batrool, haddii mudnaanta ay lahaanayaan hawlgallada Batroolka oo aanay hawlaha kale carqalad ku ahayn habsami u socodka halwgallada Batroolka.

Qodobka 16aad:
Xuquuqda Hanashada Batroolka

1. **Xuquuqda Batroolka**. Xuquuqda iyo hanashada Batroolka ku jira dalka Soomaaliya waa hanti qaran oo ay dadweynuhu ku aamineen

Dawladda Federaalka iyo Dawladaha xubnaha ka ah, iyaguna gacanta ku hayaan.

2. **Wareejin lahaansho dib u hanasho ka dib**. Shakhsi wuxuu yeelan karaa lahaansho batrool, keliya ka dib markii si sharci ah loo siiyo ogolaansho Heshiis Wax-Soo-saar Wadaag sida ku cad Sharcigan.

Qodobka 17aad:
Ku Dhaqanka Awoodaha, Shaqooyinka Wasaaradda iyo Ha'yadda Batroolka

1. Isticmaalka Awoodaha iyo xilalka Shaqo waxaa iska leh Wasaaradda iyo Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) oo ugu dhaqmaya si waafaqsan sharcigan iyo xeer nidaamiyeyaashiisa, ayna ka mid yihiin ogolaansha lagu bixiyey sharcigan, sida:

b. Xaqiijinta habsami u maaraynta kheyraadka;

t. Xaqiijinta horumarinta Batroolka iyada oo la ilaalinayo bii'ada, si loo sugo kobcinta dhaqaalaha, iyo barnaamijyada horumarinta fog ee

j. Loo fulinayo si macquulna ah; lana jaanqaadi karta Habdhaqan-Wanaagga Goobta Saliidda;

2. **Fursad soo Bandhig Cabashooyin**. Inta aanay isticmaalin awoodda shaqo, Wasaaradda iyo hay'addu waa inay siiyaan fursad shakhsiyaadka ay dhici karto in arrintu saamaysay in ay soo gudbiyaan cabashooyinkooda, kuwaas oo tixgelintooda mudan marka la soo gudbiyo hadday u muuqdaan kuwo maangal ah;

Qodobka 18aad:
Hawlaha Wasaaradda

1. Hawlaha Wasaaradda.
Wasaaraddu waxay gudanaysaa shaqooyinka soo socda;

b.Waxay go'aan ka gaaraysaa istiraatiijiyada, qorshaha iyo siyaasadda horumarinta hawlaha Batroolka.

t. Waxay soo saaraysaa xeerar ku saabsan maareynta hawlaha Batroolka, iyada oo tixgelinaysa soo jeedinta HBS, sida ku cad Sharcigan.

J. Waxay go'aan ka gaaraysaa siyaasadda iyo iskaashiga lala yeelanayo shirkadaha shisheeye, ayna ku jirto qaabka ogolaanshaho oo ay soo diyaarisay HBS.

x. Waxay maareynaysaa hannaanka loogu bedelayo Heshiis Wax-Soosaar wadaagga, xuquuqihii ogolaanshiyaha la xariiray oo ay horey u bixisay Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya, ka hor Disember 30, 1990, sida lagu xusay Qodobka 54.1.

Kh. Waxay dejinaysaa siyaasadda lagu dhiirigelinayo ama lagu xakamaynayo dhoofinta Batroolka si loo ilaaliyo danaha Soomaaliyeed.

d. Inay la socoto dhaqdhaqaaqa Hawlaha Batroolka ee gudaha Soomaaliya iyo gobolada saaran xuduudaha Soomaaliya.

r. Inay la xaajooto, iyada oo kaashanaysa hay'adaha dalka ee ay khusayso, wasaaradaha, waaxyaha iyo hay'adaha u xilsaaran mas'uulkana ka ah xeerarka wadamada deriska ah ee la xariira hawlgallada Batroolka, taas oo saamayn ku yeelan karta isu gudubka xuduudeed oo ay ka mid tahay haraha iyo dhuumaha isu gudba oo ay wadaagi karaan dalalka deriska ah.

Sh. Dawladdu waxay u xilsaari kartaa Wasaaradda shaqo dheeri ah oo la xiriirta nidaaminta iyo la socodka hawlaha Batroolka iyo haddiiba ay haboonaato, u kuur galidda arrimaha ku saabsan shaqada ay wasaaraddu qabanayso hadba waqtiga la joogo.

2. **Sir Xajinta Wasaaradda**. Marka shaqaalaha Wasaaradda heer qaran iyo heer dawlad goboleed ay gudanayaan hawlahooda sharciyeysan, waxaa waajib ku ah inay dhawraan xog ogaalnimada siraha ganacsi ee shakhsiyaadka iyo shirkadaha oo ay ogaadeen, wasaaradduna ku qanacday in:

b. Bixinta xogtu u keeni karto khasaaro ama faa'iido si toos ah u taabanaysa shakhsiga ugana imaanaysa xilgudashada Wasaaradda, ama dhalin karta inay wax u dhinto shakhsiyaadka la filayo inay tartamaan, ama

t. Xogtu tahay mid maaliyadeed, ganacsi, cilmi ama farsamo oo ka mid ah sirta loo gudbiyey Wasaaradda oo mar walba loo arkaayey mid xajin ka mudan shakhsiga ay sida tooska ah u saamaynayaan hawlaha Wasaaradda, oo iyaduna

u aragto in danta shakhsiga ee ku jirta ilaalinta xogtan ay ka muhiimsan tahay danta guud ee ku jirta baahinteeda.

Qodobka 19aad:
Aasaasida iyo Hawlaha Ha'yada Batroolka Soomaaliyeed (HBS)

1. **Dhismaha HBS.** Sharcigan waxaa lagu dhisay Hay'adda nidaaminaysa hawlaha Batroolka, oo ah hay'ad loo dhan yahay laguna magacaabo Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed oo leh shakhsiyad qaanuuni ah, oo hoos imaanaysaa Wasaaradda;

2. **Waqtiga Dhismaheeda:**

b. Waxaa la dhisayaa HBS, waxayna awood u leedahay in ay ku dhaqaaqdo gudashada xilkeeda waqtiga la dhiso.

t. Waxaa lagu dhisayaa HBS ugu badnaan muddo 6 bilood gudahood ah, laga bilaabo maalinta uu sharcigan dhaqan galo.

3. Maamulka HBS

b. Maamulka HBS wuxuu ka kala imaanayaa, laba xubnood (2) oo matalaya Dawladda Federaalka, min hal xubin oo matalaya Dawladaha Xubnaha ka ah Dawlada Federaalka, kuwa ka mid noqon doona (markay dhismaan) iyo Gobalka Banaadir.

t. Xubnaha hay'adda waa inay noqdaan xubno aqoon uleh Maamulka, Dhaqaalaha, Bii'ada, Sharciga ama Batroolka laguna soo xulay xirfad, karti iyo hufnaan.

j. Dawladaha Xubinta ka ah Dawladda Federaalka waxay Wasaaradda u soo gudbinayaan xubnaha iyaga matalaya. Wasiirka ayaa u gudbinaya golaha wasiirrada soo jeedinta xubnaha matalaya Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubinta ka ah oo wada jira, si loo ansixiyo.

x. Guddigu wuxuu haynayaa maamulka muddo afar sano ah, Dawladduna waa ka qaadi kartaa xilkooda hadday galaan xadgudubyo maamul, waqti kasta. Sababaha looga qaadi karo xilka waxaa ka mid ah, hadday xadgudub u gaystaan

Qodobka 19.8, ama Qodobka 19.9. ama aanay buuxin karin shuruudaha xubinimada ee ku qeexan Qodobka 19.5.

4. **Shaqaalaha Hay'adda (HBS).** Xoghayaha Guud iyo shaqaalaha kale ee looga baahan yahay habsami u socodka hawlaha hay'adda waxaa magacaabaya guddiga maamulka ee HBS.
5. **Shuruudaha Guddiga Maamulka.** Qofka ka mid ahaanaya guddiga maamulka ee HBS lama magacaabi karo ama looma ogolaan karo xubinimo haddii aanu muwaadin Soomaali ahayn, ama uu yahay milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, la wadaage ganacsi, iwm, oo ku dhex jira hawlaha wax soo-saarka, gaditaanka, iibinta, gudbinta, dhoofinta iyo keenista, iwm, ee la xariira arrimaha Batroolka ee wadanka ama haysta caddayn, ballanqaad la hubo oo waqtigiisu dheer yahay oo khidmad cayiman leh, ama ku lug leh cayminta shirkad ku hawlan shaqadan oo kale.
6. **Shuruudaha Shaqaalaha**. Qofka shaqaalaha ka mid noqonaya lama magaacabi karo ama looma ogolaan karo in uu sifadaas sii haysto haddii uu yahay milkiile, saamile, agaasime, sarkaal, la wadaage, iwm, oo ku dhex jira hawlaha wax soo-saarka, gaditaanka, iibinta, gudbinta, isu-gudbinta, dhoofinta, keenista, iwm, ee la xariira hawlaha Batroolka ee Soomaaliya ama haysta caddaymo, ballanqaad la hubo oo waqtigiisu dheer yahay oo khidmad cayiman leh, ama ku lug leh cayminta shirkad ku hawlan shaqadan oo kale mid la mid ah.

7. **Guddoomiyaha Hay'adda.** Soojeedinta wasiirka kadib Xukuumaddu waxay u magacaabaysaa xubin ka mid ah guddiga maamulka in uu noqdo guddoomiyaha HBS, iyada oo xubin kale oo isla guddiga ka mid ah u magacaabaysa guddoomiye ku xigeenka. Guddoomiyahu waa sarkaal madaxeedka fulinta hawlaha HBS, wuxuuna kormeer iyo hagitaan ku leeyahay shaqooyinka iyo maamulka shaqaalaha hay'adda. Haddii xubinta guddoomiyaha ahi maqan yahay ama aanu awoodi karin in uu waajibkiisa guto ama uu banneeyo jagada uu hayo, guddoomiye ku xigeenka ayaa yeelanaya dhammaan awoodaha iyo xilalka guddoomiyuhu xambaarsanaa.

8. **Waajibaadka Feejignaanta.** Xubnaha iyo shaqaalaha HBS waxay waajibaadkooda u gudanayaan si daacadnimo ku jirto, shaqadoodana waxay u qabanayaan si sharciga waafaqsan oo aan dhinac-u-xaglin ku jirin kuna dheehan tahay daacadnimo, iyaga oo aan uga faa'iideysanayn

jagooyinka ay hayaan in ay ku raadsadaan macaash aan sharciga waafaqsanayn.

9. **Sirta HBS**. Xubnaha guddiga maamulka iyo shaqaalaha HBS waxaa waajib ku ah in ay hawlahooda u qabtaan si sharciga waafaqsan, ilaaliyaanna xogta sirta ganacsi ee shakhsiyaadka iyo shirkadaha ay xog ogaal u noqdaan, markay HBS ku qanacsan tahay in:

b. Faafinta wararka loo filan karo inay keeni karto, khasaare maadi ah ama faa'iido shakhsiga ay saameeyaan hawlaha hay'adda si toos ah ama ay wax u dhinto heerka tartanka ee shakhsiga si macquul ah.

t. Nooca wararku ay yihiin kuwo ku saabsan dhinaca lacagta, ganacsiga, cilmiga ama farsamo oo loogu soo gudbiyey hay'adda xog ahaan, loona arkayey in ay sir u yihiin shakhsiga ay sida tooska ah u taabanayaan hawlaha HBS, isla markaana hay'addu u aragto in xajinta xogtaas ay ka weyn tahay danaha guud ee dhawrista mudan.

10. **Xarunta Hay'adda HBS**. Xarunta dhexe ee HBS waxay noqonaysaa magaala madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

11. **Xafiis Goboleedka HBS**. Hay'addu waxay qiimaynaysaa hawlaha maamul ee la xiriira shakhsiyaadka hawlaha shidaal ka wada gudaha mid ka mid ah gobolada Soomaaliya:

b. Haddii ay HBS ogaato in mugga shaqadaas ay qasbayso aasaasidda xafiis goboleed ay ku yeelato HBS gobolkaas, ama in xafiis goboleedkaas loo sameeyo wax ka badan hal gobol, waa inay sidaas ugu tala bixiso wasaaradda. Wasaaradda ayaa waxay markaas bixin kartaa fasaxa aasaasidda xafiis goboleedkaas, dawladda ayaana u magacaabaysa saddex xubnood oo ka mida HBS, kuwaas oo fariisin ka dhigan doona gobolkaas.

t. Laba ka mid ah xubnaha HBS ee gobolkaas waxaa laga dooranayaa liis ka kooban ugu yaraan shan qofood oo u qalma shaqadaas kartina u leh, kuwaas oo ay dawladdu u soo gudbiso gobolkaas.

j. Qodobada sharcigan ee ku saabsan magacaabidda, waqtiga, shaqa ka fariisinta, shuruudaha shaqa siinta, ilaalinta sirta iyo arrimaha kale ee la xiriira waxay si la mid ah ugu dhaqan gelayaan xubnaha HBS ee xafiis goboleedkaas ka hawlgala.

x. Arjiyada, fasaxyada, go'aannada, tilmaamaha ama amarrada laga rabo ama ay xaq u leedahay HBS inay maamusho, lana xiriira hawlgallada shidaalka ka socda gobol hoos yimaada xafiis goboleedka HBS ee loo sameeyay inuu ka shaqeeyo, waxaa maamulaya xafiiskaas iyo xubno goboleedka HBS, kuwaas oo shaqadan u gudanaya si waafaqsan xeerarka dhaqangalka ah iyo habraacyada HBS.

Kh. Marka uu gudanayo waajibkiisa, xafiis goboleedka HBS, wuxuu ilaalinayaa mabaadi'da qaran, siyaasadda, yoolalka iyo halbeegyada, isaga oo dhawraya habraacyada HBS.

12. **Wajibaadka HBS.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay nidaaminaysaa Hawlaha Batroolka si waafaqsan sharcigan ama sharciyada kale ee Soomaaliya;

13. **Hawlaha HBS.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waxay qabanaysaa hawlaha soo socda:

b. Nidaaminta hawlaha Batroolka iyada oo loo marayo habka bixinta, ilaalinta, isbeddelka iyo dhaqangalinta ruqsadaha, iyo soo saarista go'aammo, amarro iyo tilmaamo iyada oo la cuskanayo sharcigan iyo xeer nidamiyeyaashiisa oo saldhig u ah hawlaha Batroolka si waafaqsan oo hoos imaanaysa qodobada isla sharcigan ku xusan.

t. Xaqiijinta kartida shakhsiyaadka ruqsadaha la siiyey, iyada oo aan cidna loo xaglinayn, lana hubinayo in shaqsiyaadkaasi ay ganacsi iyo dhaqaale ahaanba u dhisan yihiin aaminaadna galaan, leeyihiinna xirfad ay ku gutaan waajibaadkooda.

j. Hubinta shakhsiyaadka ruqsadaha la siiyey in ay fulinayaan una hoggaansamayaan sharciyada, go'aamada, amarrada ama tilmaamaha ka soo baxa HBS si waafaqsan sharcigan.

x. U kuurgalidda iyo la socodka arrimaha la xariira hawlaha Batroolka oo Wasaaraddu ka codsatay HBS in ay isha ku hayso, soona gudbiso' waqti ka waqti, warbixinno la xariira arrimahaas, talana ka soo jeediso tallaabooyinka hadba loo baahan yahay, iyada oo la eegayo danaha Qaranka ee la xariira ilaalinta iyo horumarinta ee qaybta Batroolka.

Kh. Xukuumadda, iyada oo la raacayo talo soo jeedinta Wasaaradda, waxay u xilsaari kartaa HBS xilal dheeri ah oo la xariira nidaaminta, u kuurgelidda iyo gacan ku haynta hawlaha Batroolka iyo arrimiha kale ee la xiriira hawlaha hay'adda hadba sidii dan la moodo loona arko in ay habboon tahay.

14. **Awoodaha HBS:** Marka ay hawlaheeda u gudanayso si sharciga waafaqsan HBS waxay leedahay awoodaha soo socda:

b. In ay bixiso Ruqsadaha Sahmineed si waafaqsan Qodobka 23.1.
t. In ay gasho wadaxaajoodka
j. In ay bixiso Ruqsado lagu ogolaanayo isticmaalka ku saabsan dhulka korkiisa si waafaqsan Qodobka 25.1.
x. In ay ka cafiso culaysyada ku imaan kara Heshiisyada Wax-Soosaar Wadaagga si waafaqsan Qodobka 24.1. Shaqsiga ruqsadda haysta si waafaqsan Qodobka 34.
Kh. In ay wax ka beddesho, ama la noqoto ruqsad kasta si waafaqsan sharcigan, xeerarka iyo qodobada ruqsadaha la bixiyey.
d. In ay soo saarto, meel marisana, tilmaamo lagu hubinayo ku dhaqanka ruqsadaha la bixiyay.

r. In ay waydiiso, dhagaysato, go'aanna ka gaarto dhacdo kasta oo ugu muuqata HBS in shakhsiga gudan waayo hawl, ama wuxuu farayey sharcigan, xeerarka ama Ruqsadaha, go'aannada, amarrada ama tilmaamaha la baxshay iyadoo la tixraacayo sharcigan iyo xeerarkiisa, ama lagu joojinayo meel marinta iyo sii socodsiinta shaqo kasta iyo waxyaalaha ka hor imaanaya sharcigan, xeerarkiisa ama wixii la mid ah oo ruqsad, sharci, go'aan, amar ama tilmaamo ah.
Sh. In ay amarto, ama weydiiso shakhsi kasta in uu sameeyo waqti kasta oo loo cayimo iyo si kasta oo HBS wax ugu sheegto shaqo kasta ama wax kasta oo shakhsigaas laga rabay in uu sameeyo isaga oo raacaya sharcigan, xeerarka ama sharci, go'aan, amar ama tilmaan kasta oo waafaqsan sharcigan ama xeerarka, ama lagu joojinayo meel marinta iyo sii socodsiinta shaqo kasta iyo waxyaalaha ka hor imaanaya sharcigan, xeerarkiisa ama wixii la mid ah oo ruqsad, sharci, go'aan, amar ama tilmaamo ah.

Dh. In ay uruuriso wixii xog ah iyada oo la tiigsanayo arrimaha kor ku xusan, taas oo ay ku jirto ku waajibinta shakhsi kasta oo ruqsad haysta in uu raaco amarrada dhiibista xogta.

c. In ay qiimayso ciqaabaha ka dhalan kara ku xad gudubka ruqsad, go'aan, amar ama tilmaamo ay bixisay HBS, si waafaqsan cutubka 8aad.

g. In ay la shaqayso si iskaashi leh hay'adaha shisheeye ee dhiggeeda ah, wasaaradaha ama waaxyaha mas`uulka ka ah nidaaminta hawlaha la xariira dawladaha deriska ah ee ku saabsan hawlaha Batroolka ama dhuumaha isaga gudba xuduudaha.

f. In ay samayso qawaaniin ku salaysan Qodobada 19.17 iyo 19.18.

q. In ay iskeeda ugu dhaqaaqdo baarista, dhageysiga iyo go'aaminta wax kasta oo sharcigaan iyo xeerarkiisa hoos yimaada, una baahan in la baaro go'aanna laga gaaro.

15. **Baaris**. Waxaa waajib ku ah HBS, in ay baarto ama abuurto xaaladdii lagu baari lahaa, si loo hubiyo in lagu xadgudbay qodob ama shardi muhiim u ah ruqsad la baxshay.

16. **Iskaashiga lala yeelanayo HBS.** Marka hay'addu iyo xubnaha guddigeeda maamuleed iyo shaqaaleheeduba gudanayaan waajibaadkooda sharciga ah, shakhsiyaadka iyo shirkadaha baaritaanka iyo kormeerka lagu samaynayo waa in ay gacan ku siiyaan bixiyaanna si hagar la'aan ah dokumintiyada iyo waxyaalaha laga dalbado. Shakhsiyaadkaas iyo shirkadahaas waa in aysan diidin la shaqaynta looga baahan yahay, kana hor imaanin kormeerada iyo baaritaanka, iskuna dayin in ay qariyaan dokumintiyada iyo waxyaalaha aasaasiga ah.

17. **Shuruucda Hawl Fulinta HBS**. Hay'addu waxay dejin kartaa, hadba sida ay ugu muuqato, kadib markay wasaaradda la tashato, wixii lagama maarmaan iyo lama huraanba ah ee la xariira gudashada waajibaadka iyo xilalka oo ay ku jirto soo saaris qawaaniin dalbaya ama reebaya dhaqanka ganacsi qaarkiis oo ku saabsan shakhsi ruqsad hasta, iyada oo looga jeedo in la hubiyo habsami u socodka hawlaha Batroolka ee Soomaaliya.

HBS waxaa kaliya oo ay samayn karta qawaaniintaas kadib markay la tashato shakhsiyaadka ruqsada haysta ama shirkado iyo hay'ado ula muuqda in ay wakiilo u yihiin dad laga yaabo in ay shuruucdu saamayn ku yeeshaan. Shuruucda la soo saarayo oo la xariira isla faqraddan ma yeelan karto saamayn

dib ugu laabasho ama wax ka beddelid maadi ah xagga qodobada ama shuruudaha ruqsad kasta la xiriira.

Dib ugu laabashada iyo wax ka beddelidda ruqsadaha waxay dhici karaan oo keliya sida uu qeexayo Qodobka 34aad;

18. **Xeerarka habraaca ee HBS.** Hay'addu (HBS) waxay samaynaysaa xeerar ku saabsan qaab dhismeedka hay'adda, qaabka dalbashada ruqsooyinka, wakaalashada, cabashooyinka loo soo gudbinayo HBS iyo sida loo qaadayo dacwooyinka la hor keenayo, iyo habka loo qabanayo shaqo kasta ee HBS hor timaadda, iyo guud ahaan, sida HBS ay hawlaha u fulinayso, maaraynta arrimaheeda gudaha iyo waajibaadka shaqaaleheeda. Markay samaynayso xeerarkaan, HBS waxay ku saleynaysaa mabaadi'da daahfurnaanta, hufnaanta, isla xisaabtanka iyo madax bannaanida;

19. **Warbixin sanadeedka.** Markasta oo sannadka dhammaadkiisa la gaaro, lana dhaafin muddo ka badan lix bilood, HBS waxay wasaaradda u soo gudbinaysaa warbixin la xiriirta hawl qabadkeeda sanadlaha ah.

20. **Xogta aan qarsoodiga ahayn.** Hay'adda (HBS) waxay dadweynaha u soo bandhigaysaa:

b. Qawaaniinta lagu dhisay HBS ee ku xusan faqradaha kala ah 19.17 iyo 19.18.

t. Go'aanada, amarrada iyo tilmaamaha HBS.

j. Ciqaabaha ay soo rogtay HBS.

X. Warbixinada guud ee HBS ee ku cad faqrada 19.19.

Kh. Qaababka ay yeelanayaan foomamka mid kasta oo ka mid ah ruqsadda Sahaminta, ruqsadda ka hawlgalka dhulka dushiisa iyo Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.

d. Ruqsooyinka ay bixisay HBS.

21. **Doorka Wasaaraddu ku leedahay HBS.** Wasaaraddu waxay u jaangoynaysaa HBS siyaasadda guud ee hagaysa, wixii la xiriira qabashada hawlaheeda si waafaqsan sharcigan iyo xeerarka. Siyaasadda hagitaanka ee Wasaaraddu jaangoyso waxaa loo faafinayaa si la mid ah qaabka loo faafiyo shuruucda iyo arrimaha siyaasadda.

Markay HBS fulinayso hawlaheeda si waafaqsan sharcigan iyo xeerarka, hay'addu waxay tixgelinaysaa talooyinka iyo tilmaamaha ka soo fula Wasaaradda. Wasaaraddu waa in aanay faragelin ku yeelan shaqo maalmeedka caadiga ah ee ku saabsan gudashada hawlaha HBS.

22. **Racfaan.** Marka laga reebo sida ku cad faqradan, go'aan, amar ama tilmaan kasta oo ay gaartay HBS waa lagama noqdaan buuxa. Racfaan waxaa laga qaadan karaa arrin kasta oo ku saabsan go'aan, amar ama tilmaan uu horay u gaaray xafiis goboleedka HBS. Racfaanka waxaa loo qaadan karaa maxkamadda sare, marka uu ku saabsan yahay go'aan, amar ama tilmaan ay bixisay HBS kuna saabsan dhinacyada sharciga, xeerarka ama baaxadda masuuliyadeed ama gaboodfal uu ku kacay xubin ka mid ah guddiga maamulka oo ka qayb qaatay go'aan gaarista, amar bixinta ama tilmaanta iyo u hoggaansanaanta qawaaniinta habraaca hagar la'aaneed ee ku cad faqradda 19.23.

Racfaan laga ma qaadan karo go'aan kale oo ay HBS gaartay, meel kasta oo salka ku hayo. Codsiga Rafcaanka waa in la soo gudbiyaa 60 maalmood gudahood ka dib marka u soo baxo go'aanka, amarka ama tilmaanta laga qaadanayo Racfaanka.

23. **Habraac cadaalad ah.** Marka ay fulinayso hawlaheeda sida ku cad sharcigan ama xeerarka, HBS waxay:

b. Ku wargalinaysaa shakhsiyaadka danaynaya arji kasta oo la qabto ama dhageysi kasta oo ay samaysay, iyada oo la raacayo qaabka uu jideeyey sharcigaan ama ay tilmaameen xeerarkiisa.

t. Diyaarisaa dhageysiyo la xariira bixinta, ka qaadidda ama ka joojinta ruqsadaha ku yimaada xaaladaha lagu sheegay sharcigan ama xeerarka.

j. Bixin kartaa qoraallo cadaynaya sababaha keenay go'aamadeeda, amaradeeda ama tilmaamaheeda, kuwaasoo loo arkaayey in ay habboonaayeen waqtiga la soo saaray go'aanka, amarka ama tilmaanta.

x. Ku salaynaysaa go'aanadeeda ku saabsan talaabooyinka ay qaaday, ammarada ama tilmaamaha ay bixisay dhagaysi ka dib, caddaymo, dood iyo xog la soo hordhigay dhagaysiga.

24. **Canshuuro, Khidmado iyo Ganaaxyo.** Wasaaraddu, iyada oo tixgelinaysa talooyinka HBS, ugana dan leh in ay soo ceshato dhammaan ama qaar ka mid ah kharashyada la galay, hadba sida ay go'aamiso hay'addu, iyada oo cuskanaysa masuuliyadda saaran, marka loo eego sharcigaan iyo xeerarkiisa, waxay ku soo rogaysaa shirkad kasta oo ruqsad haysata, si waafaqsan sharcigaan iyo xeerarkiisa, canshuuro, khidmado iyo ganaaxyo munaasib ah, iyadoo soo gudbinaysa habka loo xisaabayo dakhliyadaas ka imaanaya shakhsiyaadka iyo shirkadaha iyo qaabka ay ku bixinayaan lacagta.

HBS, waxaa kaloo ay qeexaysaa heerka ganaaxyada dheeriga ah iyo qaab xisaabeedka loogu go'aaminayo shakhsiyaadka iyo shirkadaha inta ganaaxyada dheeriga ah ee kaga aaddan canshuuraha, khidmadaha iyo ganaaxyada aanay bixin markii laga rabay.

Qodobka 20aad:
Dhismaha Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed (SHBQS)

1. Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waxay leedahay shakhsiyad qaanuuni oo leh qaab shirkadeed.

b. Xarunta Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waxay noqonaysaa magaalo madaxda Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

t. Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waxay leedahay, marka laga eego xaggga awoodaha, dhammaan xuquuqaha, awoodaha, mudnaanta iyo karti-sharciyeedka ay leeyihiin shakhsiyaadka kale.

j. Sharcigaan waxaa lagu dhaqayaa Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed si la siman sida lagu dhaqayo shakhsi kasta oo ruqsad haysta, lana waafajinayo hadba duruufaha soo kordha ama xaaladaha isbedbeddala.

2. Ujeeddada Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed waa mid ganacsi oo ay kontroosho Dawladda, si ay u qabato hawlaha Batroolka. Shirkaddu waxay isticmaali kartaa xaqa ka qeybgalka ee ku cad Qodobka 35.1.

Shirkaddu waxay heli kartaa ruqsad toos ah, ama mid la mid ah tan shirkadaha kale si waafaqsan habraaca tartanka ay soo bandhigtay HBS.

3. **Golaha Maamulka shirkadda.** Shirkaddu waxay yeelanaysaa gole maamul oo ka kooban Maareeye guud iyo laba xubnood oo ka socda Dawladda Federaalka iyo min hal xubin oo ka socda Dawladaha Xubnaha ka ah.

b. Shir gudoonka waxaa magacaabaya dawladda wuxuuna xilka haynayaa, markuu si fiican waajibaadkiisa u gudanayo, waqti kasta oo dawladda la habboon.

t. Maareeyaha guud waxaa magacaabaya xukuumadda soo jeedinta wasaarada kadib, wuxuuna xilka haynayaa, markuu si fiican waajibaadkiisa u gudanayo, waqti kasta oo xukuumadda la habboon. Waxaana xilka looga qaadi karaa sabab jirta. maareeyaha guud mar kale waa la soo magacaabi karaa marka xilligiisu/xilligeeda dhammaado.

j. Agaasimayaasha kale waxaa soo magacaabaya xukuumadda ka dib soo jeedinta wasaaradda waxayna xilka haynayaan muddo aan ka badnayn saddex sano si loo xaqiijiyo, intii la karo, in sanadkiiba aanu xilka ka dhamaan wax ka badan kala bar oo bar agasimayaasha. Agaasime kastoo kale dib ayaa loo soo magacaabi karaa marka xilligiisu/xilligeedu dhamaado.

x. Iyada oo la tixgelinayo Qodobka 20.3.kh, ma jiro qof xaq u leh in loo magacaabo ama u hayo xilka shir-gudoonka, jagada maareeye guud, ama agaasime haddii aan qofkaasi ahayn Soomaali.

Kh. Maareeyaha Guud waa sarkaal madaxeedka fulinta hawlaha shirkadda, wuxuuna awood u leeyahay, isagoo matalaya golaha maamulka, haggidda iyo maamulka hawlaha iyo arrimaha la xiriira shirkadda, isaga oo awood shaqo u leh arimaha aan ku jirin sharcigan ama xeer-hoosaadyada kale ama go'aanada gaar-ahaaneed ee uu sameeyo golaha maamulka shirkadda ama guddigeeda fulineed.

4. **Kaalinta Golaha Maamulka SHBQS.** Goluhu wuxuu hagayaa, maamulayaana hawlaha iyo arrimaha la xiriira SHBQS isaga oo go'aanno kusoo saari kara xeer-hoosaadyo lagu nidaaminayo hawlaha iyo arrimaha la xiriira SHBQS:

b. Goluhu wuxuu, go'aanno ku soo saarayaa xeer-hoosaadyo lagu nidaaminayo hawlaha iyo arimaha la xariira SHBQS.

t. Goluhu wuxuu dhisayaa guddi fulineed, ama guddi kale oo kasta ama koox la talineed oo goluhu u arko in loo baahan yahay, wuxuuna cayimayaa inta ay ka kooban yihiin xubnahoodu, xilalkooda iyo mudada ay xilka haynayaan.

j. Goluhu wuxuu awood siin karaa, caddayn karaana xilalkooda iyo awooddooda guddiga fulinta si ay u qabtaan arrimo kasta oo aan ku jirin sharcigan ama xeer-hoosaadka ama go'aan, gaar ah, oo loogu tala galay in goluhu qaato.

x. Shir-gudoonku wuxuu ku dhaqmayaa awoodaha lagu qeexay xeer-hoosaadka shirkadda;

Kh. Maareeyaha guud waa sarkaal madaxeedka fulinta hawsha SHBQS, wuxuuna hayaa, isagoo matalaya golaha, haggidda iyo maamulka hawlaha iyo arrimaha la xiriira SHBQS, isaga oo awood shaqo u leh arrimaha aan ku jirin sharcigan ama xeer-hoosaadka kale ama go'aanada gaar ahaaneed oo loogu tala galay in uu sameeyo golaha ama guddigeeda fulineed.

d. Dawladdu waxay siin kartaa maareeyaha guud magac kasta oo ay isleedahay waa ku habboon yahay, ilaa iyo inta uu yahay sarkaal madaxeedka fulinta hawsha shirkadda.

r. Haddii Maareeyaha Guud uu maqan yahay, ama aanu xilkiisa gudan karin, ama haddii xilka xafiisku bannaanaado, goluhu wuxuu magacaabayaa sarkaal ka tirsan shirkadda in uu si ku-meel-gaar ah u qabto xilka Maareeyaha Guud muddo aan ka badnayn sagaashan (90) cisho iyadoon la haynin ogolaanshaha xukuumadda.

5. **Saraakiisha iyo Shaqaalaha Shirkadda.** Shirkaddu waxay qoran kartaa saraakiil iyo shaqaale, waxayna shaqo galin kartaa wakiilo, la-taliyayaal iyo

talo-bixiyayaal ay u aragto in ay yihiin lagama maarmaan si loo fuliyo ujeeddada sharcigan iyo habsami u socodka hawlaha, SHBQS waxay kol walba caddaynaysaa shuruudaha iyo xaaladaha shaqaalayntooda ama qaadashadooda la xariirta.

6. **Gunnooyinka Golaha Maamulka Shirkadda.** Shir-gudoonka iyo agaasime kasta, marka laga reebo maareeyaha guud iyo agaasime kale oo kasta oo ka mid ah shaqaalaha dawladda, waxay xaq u leeyihiin in shirkaddu siiso gunno ay xaddiday wasaaraddu inta ay ku hawlan yihiin shirarka golaha ama gudiyada golaha oo ay gudanayaanna waajibaadka sharcigu farayo.

7. **Kharashka Agaasimayaasha SHBQS.** Agasimayaashu waxay xaq u leeyihiin in SHBQS siiso sahay safar iyo kharash nololeedka ku baxaya marka ay gudanayaan waajibaadka shaqo uu sharcigu farayo inta ay uga maqan yihiin degaankooda shaqo rasmi ah.

8. **Gunnooyinka Saraakiisha iyo Shaqaalaha SHBQS.**
Saraakiisha, shaqaalaha, wakiilada, la taliyayaasha, iyo talo-bixiyayaasha waxay xaq u leeyihiin in SHBQS siiso gunnooyin, kharashyo, iyo manfacooyin ay SHBQS u xaddido.

9. Haddii shakhsi ruqsadle ahi go'aansado in uu iska wareejiyo kulli ama qayb ka mid ah saamiga uu ku leeyahay ruqsadda, SHBQS waxay xaq uleedahay in ay kula wareegto qiimaha suuqa.

10. **Shirkadaha Batroolka Dawlad Goboleedyada**: Waa shirkado ganacsi oo ka shaqeeya danaha dawlad goboleedyada ee ganacsi ee arrimaha shidaalka, waxayna dawlad goboleedyada u matalaan saamiga ay ku leeyihiin SHBQS, shaqadooduna noqonayso dhisidda iyo maamulidda kaabayaasha shidaalka ee heer dawlad goboleed iyo suuq gaynta cadadka shidaalka ee wadanka gudahiisa lagu isticmaalayo, iyada oo aan wax loo dhimayn mabaadi'da suuqa xorta ah.

Qodobka 21aad:
Xadidaada Xuquuqda Saraakiisha Dawladda.

1. **Xadididda iska Horimaadka Danaha Gaarka ah.**
Saraakiisha dawladdu ma heli karaan, iskumana dayi karaan in ay helaan ama haystaan:

b. Ruqsad ama ku hammin dan gaara, ha ahaato mid toos ah ama dadban, la xariirta ruqsad.

t. Saami uu ku yeesho shirkad haysata ruqsad, ama mid iyada ku laran.

2. **Waxa ka dhalan kara Xadgudubka.** Qaab kasta oo wax lagu siiyo ama loogu doodo in loogu ogolaado sarkaal dawladeed, wax dan gaar ah u muuqda, si toosan ama dadban, oo la xiriirta ruqsad, loona arki karo siismo aan sharci ahayn, waa wax kama jiraan;

3. **Ehelada.** Helitaanka ama haysashada, ruqsad, ama yeelashada dan ama saami, oo la xiriirta carruurta aan qaan gaarin ama xaasaska saraakiisha dawladdu, waxaa loo arkayaa mid uu helay ama haysto sarkaal dawladeed,

4. **Aan ka ahayn.** Saraakiisha dawladda, oo ah Agaasimayaasha, shaqaalaha ama talo-bixiyeenada Shirkadda oo dan ku leh ruqsad ay haysato shirkaddu laguma dabiqi karo faqradaha kor ku xusan ee Qodobka 21aad.

Qodobka 22aad:
Naqshadeyn.

Iyada oo la raacayo ujeedada sharcigaan, Dhulka Soomaaliyeed, ama qaybo ka mid ah, waxaa loo qaybinayaa xirmo-xirmo si waafaqsan habka iyo shuruucda caalamiga ah ee xadidaadda xirmooyinka.

CUTUBKA 3AAD
RUQSADAHA HAWLGALLADA BATROOLKA

Qodobka 23aad:
Ruqsada Sahanka Indha-Indheynta

1. **Awoodda Bixinta.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay siin karta Ruqsad Sahamineed, oo la xiriirta goob cayiman, qof qaanuuni ah ama koox shirkado ah.

2. **Xuquuqaha Ruqsadda Sahminta**

b. Ruqsad Sahmineed waxay oggolaanaysaa in lagu sameeyo baaritaan ah geological, geophysical, geochemical iyo geotechnical oo ku saabsan ruqsadda aagga la baxshay.

t. Ruqsadda Sahmintu waxay faraysaa Shaqsiga ruqsadda haysta in uu soo sheego horumarka iyo natiijada baaritaanka, uuna xajiyo sirta arrintaas la xiriirta.

j. Ma jirto in ruqsad sahmineed marnaba u oggolaanaysa Shaqsiga haysta inuu ceel qodo, ama uu ugu xagliyo, kuna yeesho xuquuq uu uga mid noqon karo Heshiis Wax-soosaar Wadaag ah.

3. **Ruqsadaha Isdul-fuula.** Inta aan lagu bixin Ruqsad Sahmineed goob horay ruqsad loogu haystay, HBS waxay qoraal ogaysiin ah siinaysaa qofkii horay **u** haystay ruqsadda.

4. **Tanaasulid iyo Joojin.**

b. Shakhsiga haysta Ruqsadda Sahminta wuxuu iska celin karaa ruqsadda, markuu doono, isagoo qoraal wargalin ah siinaya HBS, waxaana shardi ah in Ruqsad haystuhu oofiyey dhammaan waajibaadkii saarnaa.

t. Haddii Ruqsad Haystuhu uusan buuxin shuruudihii ku xirnaa Ruqsadda Sahminta, HBS way ka joojin kartaa ruqsadda sahminta Shaqsiga ruqsadda haysta, kadib markay siiso waqti cayiman oo u ku saxo shardiga uu jebiyey.

Qodobka 24aad:
Heshisyada Wax Soo Saar Wadaagga

1. **Awoodda Bixinta.** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay la gali kartaa wada xaajood Heshiis Wax-Soosaar Wadaag oo ku saabsan goob cayiman, qof ama koox dad ah, ka dib markay cadaato in shakhsigaas ama kooxdaasi ay galeen heshiis wadashaqayn iyadoo ay oggolaatay HBS, sida ku cad Qodobka 31.1. Heshiis kasta oo Wax-Soosaar Wadaag ah waxaa saxiixaya Wasiirka, kaddib soo jeedinta HBS.

2. **Qaabka Loo Noqdo Qandaraasle.** Si uu ugu qalmo in uu galo Heshiis Wax-Soosaar Wadaag, Shaqsiga waa:

b. In uu haystaa, ama uu heli karaa, awood dhaqaale, aqoon iyo karti xirfadeed, si uu u fuliyo hawlgallada Batroolka ee aagga qandaraaska lagu bixiyey.

t. In uusan lahayn taariikh xun ee muujinaysa ku dhaqmid la'aan mabaadii'da wanaagsan ee qoysnimada ka dhaxaysa shirkadaha Batroolka. j. In ay tahay shirkad leh mas'uuliyad xaddidan ama dad sidaas oo kale u leh mas'uuliyad kooban.

x. In uu ku jiraa caymis caalami ah oo u qalma hawlgallada Batroolka ee ruqsadiisa ku cayiman.

3. **Keli-Lahaansho**

b. Iyada oo aan waxba loo dhimayn Qodobka 25, ama xaqa HBS u leedahay in ay bixiso Ruqsad Sahmineed, Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaggu wuxuu siinayaa qandaraaslaha xaq kali-lahaansho si uu qabto hawlgallada Batroolka ee aagga qandaraaska lagu siiyey.

t. Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagu waxuu ku kali ahaan karaa saliidda ceyriin, gaaska dabiiciga ah ama qaybaha kale ee Batroolku ka samaysan yahay.

j. Qandraaska bilawga ah ee goobta qandaraaska lagu bixiyey kuna salaysan Heshiis Wax- Soosaar Wadaag kama badnaan karo 5,000 km2.

4. **Ogeysiin Helitaan Batrool.**

b. Qandraaslahu wuxuu HBS ku siinayaa qoraal ogeysiin ah afar iyo labaatan (24) saac gudahood markasta oo batrool laga helo goobta uu ruqsadda u haystay.

t. Qandaraaslahu waa in uu gudbiyaa warbixinnada la xiriira helitaanka Batroolka oo HBS codsatay.

5. **Barnaamij Shaqo, Qorsho iyo Misaaniyadeed.** Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaggu wuxuu ku waajibaad yeelayaa qandraaslaha inuu fuliyo, hawlgallada Batroolka si waafaqsan, kaña baxsanayn barnaamijka shaqo, qorshaha iyo miisaaniyadda ay oggolaatay HBS.

6. **Qodobada looga baahanyahay Heshiiska Wax-soosaar Wadaagga:** Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaga waxaa ku jira shuruudo qeexaya arrimaha soo socda:

b. Waajib shaqo midka ugu yar oo la qaban karo inta lagu jiro mudada baaritaanka ee ku cad Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.

t. Ka tanaasulid qaybo ka mid ah goobta qandaraaska lagu haysto inta marxaladda baaritaanka lagu jiro.

j. Qaab xisaabeedka royaltiga iyo qaybsiga Batroolka ka dhaxeeya qandaraaslaha iyo Dawladda Federaalka Soomaaliya;

x. Hadday ku haboon tahay, leedahayna, sifo maaliyadeed oo ka duwan royaltiga iyo qaybsiga Batroolka, oo ay ku jiraan xurmo (bonus) la xiriira saxiixa iyo wax soo saarka.

kh. Sharciyo degaan oo qeexaya sida loo ilaalinayo loona kaydinayo bii'ada.

d. Hadday ku haboon tahay, waajibaad dhigaya shidaal siinta suuqa gudaha Soomaaliya, gaar ahaan, marka ay jiraan xaalado degdeg ah.

r. Tababarada iyo shaqo siinta muwaadiniinta Soomaaliyeed.

s. Doorbididda isticmaalka qalabka iyo adeegyada laga heli karo Soomaaliya gudaheeda.

sh. Hadday ku habboon tahay, sugidda iyo hubinta xasiloonida maaliyadeed iyo heshiisyadaba.

dh. Dhaxdhaxaadin Caalami ah.

7. **Canshuuraha hoos taga Heshiiska Wax-soosaar Wadaagga:** Canshuuraha hoos yimaado Heshiiska Wax-soosaar Wadaagga waxaa lagu qeexayaa sharci gaar ah iyada oo la waafajinayo hanaanka maaliyadeed ee dalka.

8. **Tanaasul iyo Joojin**

b. Haystaha Heshiiska Wax-Sooaar Wadaaggu waa iska celin karaa heshiiska, waqtiga uu doono, isagoo qoraal wargalin ah siinaya HBS, iyadoo shardi looga dhigayo in Ruqsad Haystuhu fuliyey dhammaan waajibaadkii saarnaa.

t. Haddii Ruqsad Haystuhu aanu u hoggaansamin shuruudaha ku xiran Heshiiska Wax-Soosaar Wadaaga, HBS waxay awood u leedahay in ay qoraal wargelin ah kaga joojiso heshiiska, qandaraaslaha uu quseeyo, ka dib markay Ruqsad Haystaha siiso waqti macquul ah oo uu ku saxo xaaladda.

9. Shakhsiga ruqsadda la siiyay waa in uu xafiis ku lahaadaa Soomaaliya si uu ugu fuliyo hawlaha Batroolka, wuxuuna yeelanayaa wakiil u xilsaaran xafiiska oo leh awood buuxda oo uu ku hawlgeli karo, kuna geli karo asaga oo wakiil ka ah Shaqsiga ruqsadda la siiyay ballanqaadyo fulintoodu ay waajib tahay. Shakhsiga ruqsadda la siiyay waa in uu ka furtaa xisaab socota bangi ku yaal Soomaaliya.

Qodobka 25aad:
Ruqsadaha ka Hawlgalka Dhulka Dushiisa.

1. Awoodda Bixinta

b. HBS waxay siin kartaa qof ama koox dad ah ruqsad ku dhaqan dhuleed, oo la xariirta aag cayiman.

t. HBS ma bixin karto ruqsad ku dhaqan dhuleed oo aag ku saabsan, kaasoo ku haysta Heshiis Wax-Soosaar Wadaag ama Ruqsad Sahmineed, ilaa iyo inta la tixgelinayo dhammaan codsiyada ka yimid ruqsad haystayaasha si muujinaysa in aysan jirin faragelin xadgudub ku ah xuquuqda uu leeyahay Shaqsi kale oo ruqsad haysta.

2. Xuquuqaha la Bixiyay

b. Inta ay jirto, ruqsad ku dhaqan dhuleed oo u oggolaanaysa ruqsad haystaha inuu sameeyo mid ama ka badan arrimaha soo socda:

i. In uu dhiso, rakibo kuna shaqeeyo dhismooyin, kaabayaal iyo qalab kale.

ii. Hawlo kale qabto, sida ku cad ruqsadda goobta loo oggolaaday.

t. Ma jirto ruqsad ku dhaqan dhuleed oo oggolaanaysa in ruqsad haystuhu ceel qodi karo.

3. **Tanaasul iyo Joojin**

b. Ruqsadda ku Dhaqanka dhulku:

i. Waa ka tanaasuli karaa ruqsad haystuhu, isagoo qoraal ku wargelinaya HBS, taasoo lagu xirayo in ruqsad haystuhu fuliyo dhammaan waajibaadkii saarnaa.

ii. Way joojin kartaa HBS, waqtikastaba, iyadoo qoraal wargelin ah siinaysa ruqsad haystaha, haddii uu san buuxin shuruuduhii ku xirnaa Ruqsadda, ka dib markay ruqsad haystaha siiso waqti macquul ah oo uu ku saxo xaaladda.

t. HBS waxay u gudbinaysaa qoraal looga soo celinayo ama lagu dhamaynayo ruqsadda uu haysto qofku, kaas oo aaggiisii ka socdaan hawlo la oggolaaday in lagu fuliyo ruqsadda u oggolaanshaha dhulka korkiisa ee markaas laga hadlayo.

4. **Isku Xirka Hawgalinta**. HBS waxay tilmaan siinaysaa haystayaasha ruqsadda dhul ku dhaqanka iyo Shaqsiyaadka kale ee ruqsad haysta ee ku saabsan isku duba-ridka hawlgallada Batroolka oo ay ka wada siman yihiin.

Qodobka 26aad:
Bandhig Codsi

1. Dalabyada Ruqsadaha (Ogolaanshaha).

b. HBS waxay ku soo bandhigaysaa ogeysiis guud in loo soo qorto araaji codsi ruqsado, taasoo loo arko in ay tahay habka ugu wanaagsan oo ruqsadahaas lagu bixin karo.

t. Iyadoo aan la raacin Qodobka 26.1.b, HBS waxay door bidi kartaa in ay ruqsado ku bixiso wada hadal toos ah, iyadoo aan soo bandhigin ogeysiisyo guud, hadday ku jirto dan guud oo sidaas waajib yeelaysa, kuna fadhida tilmaanta Wasaaradda ama Dawladda.

j. Haddii ay HBS bixiso ruqsad, iyadoo aan soo bandhigin in loo soo gudbiyo dalabyo, waa in ay u gudbisaa Wasaaradda iyo Xukuumadda sababta ay sidaas u samaysay.

x. Dalabyada ama araajida waa in lagu soo gudbiyaa luqadda rasmiga ah ama luuqadda labaad ee dalka ama, hadday dhacdo in ay ku qoran tahay luqad kale, waa in ay la socotaa tarjumaad rasmi ah oo ku qoran luqadda rasmiga ah ama luuqadda labaad ee dalka, waana in lagu soo ridaa laguna soo gudbiyaa baqshad xiran.

2. Qodobada soo Bandhigga Dalabyada

b. Codsiga dalabyada la soo bandhigo waa in ay ku cadahay aagga laga hadlayo, shaqooyinka la damacsan yahay, qaabka arjiyada loo xulayo, ujuurada lala dhiibi doono arjiga, waqtiga, iyo habka araajida loo samaynayo, lagana dhigo tartan furan.

t. Haddaan codsiga dalabyada si kale u sheegin, HBS waxay dooran kartaa in aysan siin ruqsad cid kastoo soo doonata.

3. Qodobada Arjiga ku Qoran.

b. Arjiga ruqsadda waa in ay ku jirtaa soo jeedimo ku saabsan:

i. Xaqiijinta caafimaadka, nabadgelyada iyo daryeelka dadka ka shaqeeya ama kuwa ay wax ka soo gaaraan hawlgallada Batroolka.

ii. Dhawridda degaanka (Bii'ada), lagana hortago, lana yareeyo ama dib looga nadiifiyo wasakhaynta iyo dhibaatooyinka kale ee bii'ada uga imaanaya hawlgallada Batroolka.

iii. Tababaridda loo fidinayo shaqaalaha, iyadoo mudnaan gaar ah la siinayo kuwa ka shaqeeya hawlgallada Batroolka, iyo guud ahaan muwaadiniinta Soomaaliyeed.

iv. Isku taxallujinta manaafacaadsiga loo fidinayo bulshada ku dhaqan aagga ruqsadda lagu bixiyay iyo yaraynta, iyo ka hortagga saamayn kasta oo dhimaal leh oo ay hawlgallada Batroolku ku keeni karaan aagga ruqsadda.

i. Badeecooyinka iyo adeegyada loo baahan yahay, waa in laga gataa dadka degan gudaha Soomaaliya;

t. Ruqsadda la siiyey dalab keensadaha waxay ku waajibyelaysaa in uu u hoggaan samo soo jeedimada ku yaalo oo dhan sida ku cad Qodobka 26.3.b.

4. **Tixgelinta Arjiyada**. HBS ruqsad dhul ku saabsan ma bixinayso, tan iyo inta ay tixgelin ka siinayso dhammaan araajida la soo hordhigay oo jawaabta u baahan, xurmaynaysana codsiyada dalabyada loo soo wada gudbiyey.

Qodobka 27aad:
Guud ahaan Hawlgallada Batroolka

1. **la-Isticmaalka dhinac Saddexaad.** Heshiis kasta oo Wax-Soosaar Wadaag ah iyo Ruqsad ku Dhaqan dhul, waxaa shardi ah inuu ogolaado la-isticmaalka dhinac saddexaad marka loo baahdo iyadoo sababo macquul ah loo cuskanayo.
2. **Wadar iyo Keli Keli.**

b. hadii ay jiraan hal Shaqsi wax ka badan oo wada haysta hal ruqsad oo cayiman, waajibaadyada iyo qaamaha dul fuulaya Shaqsi oggolaansho ruqsadeed haysta waxay la mid yihiin kuwo saaran dhammaantood, wadar ahaan iyo keli keliba.

t. Marka laga hadlayo Heshiiska wax-Soosaar wadagga, SHBQS iyo qandaraasle kasta oo ay dawladdu leedahay, waxaa HBS ka dhaafi kartaa shuruudaha lagu soo bandhigay Qodobka 27.2.b.

3. **Waxa ka Imaanaya ku Xadgudubka Sharciyada.** Ruqsad la baxshay, waa waxba kama jiraan hor iyo horaanba, haddii lagu helay ku xadgudub sharciyada Soomaaliya, oo ay ku jiraan kuwa la xariira musuq maasuqa.

Qodobka 28aad:
Ilaalinta degaanka (Bii'ada).

1. **Waajibaadka wax ka Qabashada degaanka.** Shaqsiga ruqsadda haysta ee wada hawlgallada Batroolka waxaa laga rabaa:

b. In ay ka hortagaan wax u dhimidda Bii'ada.

t. In ay iska ilaaliyaan in khasaare loo gaysto Batroolka.

j. In ay ka hortagaan wixii dhib ah iyo khasaare oo loo gaysan karo xirmooyinka dhulka hoostiisa oo Batroolku fadhiyo.

x. In ay ka hor tagaan wasakhaynta Bii'ada iyo macno daro u isticmalka qaab dhismeedyada dhulka, ilaha iyo ceelasha biyaha nadiifta ah ku jiraan, dalagyada, xoolaha iyo nafleybadeedka.

kh. In ay ka hor tagaan inuu Batroolku ku fakado deegaanka, isagoo maraya marinno ama fogeeyayaal aan la hubin.

d. In ay la yimaadaan barnaamijyada nadiifinta deg degga ah iyo hababka loo raacayo.

r. In ay sameeyaan, waqtiyada ay ku haboon tahay, cilmibaaris deegaan oo saldhig ah inta aan la bilaabin hawlgallada Batrolka, qiimaynta iyo raadka ay deegaanka ku reebayso hawl kasta oo Batroolka la xariirta.

s. In ay isticmaalaan, habka wanaagsan ee hawlgalka ceelasha Batroolka, marka dib loo soo noolaynayo degaan, dhammaadka hawlgallada la xariira Batroolka.

sh. Inay abuuraan sanduuqa khasaaraha wasakhda si loogu nadiifiyo oo dib loogu soo nooleeyo goobta wasakhdu khasaaraha u geysatay.

2. **Xeerarka Nidaamiya degaanka.** Wasiirka waa inuu soo saaraa xeerar si cad oo buuxda u qeexaya waajibaadyada saaran shakhsiga ruqsadda haysta sida ku soo aroortay Qodobka 28.1.

3. Dacwada magdhawga ee la xiriirta khasaaraha wasakheynta waa in la horgeeyo maxkamadda awoodda u leh

Qodobka 29aad:
Soo Celin iyo Magdhaw

1. **Shuruudaha Lagu Helo Ruqsadda**. Qofna kama samayn karo hawlgal Batrool dhulka Jamhuuriyadda Soomaaliya gudihiisa, marka laga reebo ruqsad daba joogta ruqsad kale oo waafaqsan sharcigan ama xeerarkiisa.
2. **Dib u Celin.** Iyadoo aan loo eegayn wax masuuliyad dambiyadeed oo uu leeyahay shakhsiga qabta hawlo Batrool oo ka duwan habka ruqsadu ogoshahay waxaa laga doonaya:

b. In uu dib ugu soo celiyo Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya lacag u dhiganta qiimaha suuqa uu ka joogo Batroolka la hormariyey, ama la soo saaray ama la dhoofiyay, iyada oo ay la socoto khidmadaha lacag bixintii u dambaysay oo heerkeeduna aan ka badnayn midka ay jidaysay Wasaaraddu.

t. In ay qiyaasto, qiimaha dhammaan dhismayaasha iyo qalabka loo isticmaalay in lagu fuliyo hawlgallada Batroolka, ama ay furfurto oo meesha ka qaado dhismayaashaas iyo qalabkaas, ama ay dhabarka u ridato bixinta kharasha ku baxaya furfuridooda iyo qaadidooda;

j. In ay nadiifiso, wasakhda ka timid hawlaha Batroolka ama ay u celiso Soomaaliya kharashka nadiifinta ku baxaya.

3. **Baaxadda Tirada.**

Qaamaha ku cad Qodobka 29.1 waxay u dabaqmaysaa si iskuduub ah; haddii kale, waxay noqonaysaa mid ay go'aamiso HBS hadba sida ay dan mooddo, iyadoo loola jeedo in Soomaaliya aysan hoos uga dhicin meeshii ay mudnaan lahayd, haddii hawlgallada Batroolka ee la guda galay loo fulin lahaa sidii la rabay, iyadoo la tixraacayo ruqsadda la bixiyey.

4. **Qaan Wadareed iyo Mid Keli Keli ah.**

Qaamaha ku cad Qodobka 29.1 oo ay wada galeen Shaqsiga hawlgallada Batroolka ku wada jira ama horay ugu wada jirey, waa qaamo loo haysto dadka ay khusayso wadar ahaan iyo keli keliba.

Qodobka 30aad:
Xaddidaadda Adeegsiga Xuquuqda

1. **Magdhow Munaasib u ah Mulkiilaha Dhulka**

b. Shaqsiga ruqsadda haysta kuma isticmaali karo, marnaba, xuquuqda la siiyey ee ku cad ruqsadda ama sharcigan hadday taabanayso:

i. Hantida guud ee ma guuraanka ah, haddii aan ogolaansho looga helin HBS.

ii. Hantida gaar ahaaneed ee ma guuraanka ah ee dalka, haddii aan ogolaansho looga helin HBS.

iii. Hantida gaar ahaaneed ee ma guuraanka ah, iyadoo aan la siin mulkiilaha magdhaw munaasib iyo macquulba ah, oo ay xaddiday HBS.

t. Mulkiilaha hantida ma guurtada ah ee ku taal goob ruqsad lagu baxshay wuu haysanayaa xuquuqdiisa isticmaalka dhulka, haddii isticmaalkaasi uusan faragelin ku sameyneynin socodsiinta hawlgallada Batroolka.

j. Ruqsadi waa xaddidi kartaa ama si la mid ah waa u kontrooli kartaa Shaqsiga ruqsadda haysta ee isticmaalaya kaabayaasha dawladda, iyo khayraadka kale ee dabiiciga ah oo ay ka mid yihiin geedaha, carrada, jayga, dhagaxa, biyaha, iwm.

x. Ruqsadi ma aha mid ridaysa waajibaadka looga raadsanayo masuuliinta xilku saaran yahay ogolaansho qoraal ah, marka laga reebo arrimaha sida gaarka ah ruqsadda loogu caddeeyey.

2. **Inaan Faragelin Lagu Samaynin Hawlaha Sharciga ah ee Badda ka Socda.** Shakhsi ruqsad haystaa uma isticmaali karo xuquuqda ku cad ruqsadda, ama sharcigan iyo xeerarkiisa, si faragalin ku ah kalluumaysiga, badmareenimada ama hawlkasta oo badda laga hayo ee sharci ah, iyadoo aan oggolaansho qoraal ah laga helin mas`uuliyiinta awoodda u leh.

3. **Magdhawga Carqaladaynta ku Saabsan.**

b. Shaqsiga ruqsadda haystaa, wuxuu mas`uul ka yahay bixinta magdhaw caadil ah oo macquul ah oo ay qeexday HBS, haddii inta ay socoto hawsha Batroolku uu:

i. Carqaladeeyo, xuquuqda Shaqsi iska leeyahay oo ku saabsan hanti maguurto ah, ama uu wax yeellayn gaysto;

ii. Ku sameeyo, si muuqata, faragalin kaluumaysiga, badmareenimada ama hawl kasta ee badda laga hayo oo sharci ah.

t. Haddii qiimaha xuquuqdu ay kordhiyaan hawlgallada Batroolka, magdhawga xuquuqdaas laga bixinayaa, waa in aanu ka badnaan qiimaha markasta la bixin lahaa haddiiba laga soo qaado in aanu qiimuhu kordhin.

4. **Magdhow ku habboon oo macquul ah.** Waxa noqon kara magdhow munaasib iyo macquulba ah, sida ku cad Qodobka 30aad, waxaa goynaya HBS, ka dib markay tixgeliso cabashooyinka dhinacyada danaynaya arrintaan.

5. **Magdhowga Carqaladeynta.** Haddii Shaqsi ruqsadda haysta uu bixin waayo magdhawga laga dalbay ayadoo la raacayo faqradda (2aad), ama uu milkiilahu ama haystahu uu ku qanci waayo qaddarka magdhawga loo soo jeediyay, milkiilaha ama haystaha wuxuu dacwo ka oogi karaa maxkamadda degaanka ee awoodda u leh go'aan ka gaarista iyo hanashada magdhawga (haddiiba uu jiro) ay u badan tahay in la bixiyo iyada oo la raacayo faqraddan, soddon (30) cisho gudahood ee ka billaabanaysa taariikhda la sameeyay dalabka magdhawga ama la soo jeediyay magdhawga.

Qodobka 31aad:

Ansixinada Hayada Batroolka Soomaliyeed

1. **Ansixinta Heshiisyada.** Heshiis wada shaqayneed, is afgrashooyinka dhoofinta iyo heshiis kasta oo la xiriira hawlgallada Batroolka, iyo sidoo kale isbedello kasta oo ku yimaada heshiisyadaas, waa in ay marka hore soo helaan ogolaanshaha HBS. Hay'adda (HBS) waa in ay ansixisaa heshiisyada noocaas oo kale ah ama isbedellada, iyada oo hubinaysa in ay la socon karaan shuruudaha ruqsadaha, sharciga iyo xeerarkiisa.

2. **Ansixinta Isbeddellada Kontroolka**

b. Dhammaan isbeddellada ku yimaada kontroolka shakhsiga ruqsadda haysta, waa in uu marka hore helaa ansixinta HBS.

t. Meesha uu ka dhaco isbedel kontrool isagoo aan marka hore haysan ansixinta HBS, hay'addu way joojinaysaa meel marinta ruqsadaas iyada ah.

j. Iyadoo la fulinayo ujeeddooyinka Qodobka 31.2.1, isbeddel Kontrol waxaa ka mid ah Shaqsi joojiyey inuu lahaado Kontroolka (ha yeesho ama yuusan yeelan kontroolka Shaqsi kale) iyo qof lahaaday kontroolkaa isaga ah (ha yeesho ama hore ha u lahaadee kontroolka qof kale).

3. **Ansixin kala wareejin.** Iyada oo aan qoraal ogolaansho laga haysanin HBS (kaasoo aan sabab la'aan la hakin karin ama la daahin karin), ama si cad ugu qeexan shuruudaha ruqsadda, ma jiri karo u xilsaarid, wareejin, gudbin, cusboonayn, iskudar, rahmid, ama macaamil kaloo la mid ah oo la xiriira ruqsadda, oo noqon karta dhaqangal ama lahaan karta raad midna. Xeerarku waa in ay qeexaan habka ay HBS u qiimaynayso ku haboonaanta oggolaanshaheeda.

Qodobka 32aad:
Heshiiska Mideynta

4. **Mideynta**

b. Haddii ama markii hara Batrool la helo oo qaarkeed ku yaal gudaha aag qandaraas lagu galay, qaar kalana ku yaal aag qandaraas kale lagu galay:

i. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay dalab qoraal ah ku codsan kartaa, in qandraaslayaashu la galo midba midka kale heshiis midayn ah si loo xaqiijiyo waxtarka iyo sare u qaadidda wax soosaarka Batroolka ku jira harada.

ii. Haddii aan heshiis la gaarin sided iyo toban (18) bilood gudahood, laga bilaabo, marka la helo qoraalka dalabka ah sida uu dhigayo Qodobka 32.1.b.i, HBS ayaa go'aan ka gaaraysa heshiiska midaynta.

t. Haddii ama markii kayd Batrool la helo uu qaarkiis ku yaal gudaha aag qandaraas lagu galay, qaar kalana ku yaalla aagga heshiis wax-soosaar qaybsi aan ku jirin:

i. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (H.B.S) waxay codsan kartaa si qoraal ah, in qandraaslahu la galo heshiis midayn ah HBS, si loo xaqiijiyo wax tarka iyo sare u qaadidda wax-soosaarka Batroolka ku jira harada.

ii. Haddii aan heshiis la gaarin siddeed iyo toban (18) bilood gudahooda, laga bilaabo marka la helo qoraalka dalabka ah, sida ku cad Qodobka 32.1.2.1, HBS ayaa go'aan ka gaaraysa heshiiska midaynta, haddii aan si kale loogu caddayn Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.

2. Heshiis Midayn. Iyadoo aan la xadidayn arrimaha la cadaynayo, heshiiska midayntu waa in uu qeexaa inta Batrool ku jirta mid walba oo ka mid ah aagagga heshiiska midayntu daboolayo, waana in uu magacaabaa hawl-fuliyaha mas'uulka ka ah soo saarista Batroolka heshiiska midayntu sheegayo.

3. U Baahnaan Ansixin. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waxay oggolaan kartaa sii wadidda horumarinta ama wax-soosaarka haro qaarkeed ka mid yahay aag qandaraas lagu bixiyay sida ku cad Qodobka 32.2, keliya marka la ansixiyo ama go'aan laga gaaro heshiiska midaynta.

4. Ansixin Isbeddello. Isbedel kasta oo lagu samaynayo heshiiska midaynta waa in uu marka hore haysto ansixinta HBS.

Qodobka 33aad:
Xallinta Khilaafaaka

1. Kaalinta HBS ee La Xariirta Khilaafaadka

b. HBS way baari kartaa go'aanna way ka gaari kartaa dhammaan khilaafyada la xariira ashakhaasta ku hawlan shaqooyinka Batroolka, ha ahaadeen kuwo:

i. Iyaga dhexdooda ah, marka heshiiskoodu uusan qeexayn habka loo xallinayo khilaafaadka.

ii. La xariira qolo saddexaad (oo aan ahayn dawladda), oo aan sidaa isla markaana ugu xirnayn, ilaa iyo inta ay qoladaas saddexaad aqbalsan yihiin xukunka HBS ee xallinta khilaafaadka.

t. **HBS** way diidi karta in ay go'aan ka gaarto khilaafaad kasta oo loo soo gudbiyo, hadday sidaas samaysana, waxay qoraal ahaan ku ogeysiinaysaa qolooyinkii khilaafaadku ka dhexeeyey.

j. **HBS**, iyadoo tixgelinaysa dhammaan xaaladaha muhiimka ah ee jira, waxay talo ku bixin kartaa tilmaan kastoo loo baahdo si go'aankeedu ugu yeesho

saamayn dacwadaha socda, sida ku cad qodabka 20aad, uuna ka mid yahay, ku amridda bixinta kharaj celin oo qolo khilaafaadka ka mid ah u celinayso qolo kastoo kale oo khilaafka iyaduna ka mid ah, hadba sidii munaasib iyo maangal noqon karta.

2. **khilaafaadka la Xariira Dib u Oggolaanshaha**

b. Haddii khilaaf dhasho, la xariira fasiraadda iyo/ama meel marinta shuruuraha ruqsadda ku qoran ee u dhexeeya qof ruqsad haysta iyo HBS, dhinacyada arrintaasi taabanayso, waa in ay isku dayaan in ay ku dhameeyaan khilaafkaas, si wada hadal ku salaysan.

t. Haddii khilaafka lagu xallin waayo, si saaxiibtinimo leh oo wada-hadal ku dhisan, labada dhinacba waxay dacwadooda u gudbin karaan dhaxdhaxaadiye caalami ah si waafaqsan xeerarka la aqoonsan yahay, oo rugtiisu tahay meel dhexdhexaad ah, ama Maxkamadda Sare, sida uu door bidayo dhinaca dacwadda soo gudbiyey.

Qodobka 34aad:
Ka-dhaafid ama Wax ka-beddelid Shuruudo

1. Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed (HBS) waa ka dhaafi kartaa shakhsi Ruqsad haysta fulinta shuruudaha ku qoran Ruqsadiisa, waxay kaloo wax ka beddeli kartaa ama laali kartaa shuruudahaas, haddii looga maarmi waayo danta qaranka isla markaasna ay wasaaradda ogolaansho ka hesho.

2. Qodobka 34aad, kuma jirto awood ka dhaafid ama ka laalis waajibeed oo ku saabsan in la bixiyo lacag kastoo ruqsadda ka timaada.

CUTUKA 4AAD
KA QAYBGALINTA SOOMAALIYA

Qodobka 35aad:
Shirkadda Batroolka Qaranka Soomaaliyeed iyo ka Qayb Galinta Dawlad Goboleedyada

1. **Ka Qayb galinta Shirkadda iyo Dawlad Goboleedyada.** Heshiis kasta oo Wax-Soosaar Wadag ah waa in ay ku caddahay:

b. Xaqa ay SHBQS u leedahay in ay ka qayb gasho hawlaha Batroolka, ugu badnaan ka qayb gal dhan 20%.

t. Xaqa qandaraaslaha ee ka midka ah Dawlad Goboleed, taasoo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaallo, si ay uga qayb gasho hawlgallada Batroolka ilaa iyo heer gaarsiisan 10% ugu badnaan marka la eego xaqa ka qaybgalka.

2. **Go'aan ka Qaybgal.** Go'aanka SHBQS ay uga qayb galayso hawlgallada Batroolka ee si cayiman ugu cad heshiis wax soo-saar wadaag ah, waxaa gaaraya Wasiirka, haddii talada ka qaybgalka ay soo jeedisay SHBQS. Go'aanka qandaraasle dawlad goboleed oo ka mid ah Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaallo, uga qaybgalayo hawlgallada Batroolka waxaa qaadanaya dawlad goboleedka uu hoos imaanayo halka dhulka ruqsadda lagu baxshay uu ku yaallo.

3. **Waqtiga ka Qaybgalka.** Xaqa ka qaybgalka ee lagu sheegay Qodobka 35.1, waxaa la hanan karaa inta lagu guda jiro marxalad kasta oo ay hawlgallada Batroolku socdaan, iyada oo la raacayo xeerarka iyo shuruudaha loo dhigay Heshiiska Wax-Soosaar Wadagga.

CUTUBKA 5AAD
FULINTA HAWLGALLADA BATROOLKA

Qodobka 36aad:
Hab-Dhaqannada Shaqo

1. **Hab-dhaqan Wanaagga Goobta Saliida.** Hawlgallada Batroolka waxaa loo qabanayaa si waafaqsan Dhaqanka Wanaagsan ee Goobta Saliida, kaasoo la waafajinayo dhaqamada iyo hababka ay isticmaalaan shirkadaha Batroolka adduunku, ayna fuliyaan hawl wadeenno taxaddar iyo xilkasnimo leh, iyaga oo dhawraya shuruudaha iyo xaaladaha la midka ah ee ay horay u soo mareen, lana xariira dhinacyada muhiimka ah hawlaha Batroolka, oo asalkeediiba loola jeeday in lagu sugo:

i. Dhawridda khayraadka Batroolka, oo loola jeedo ka faa'iidaysiga hababka iyo nidaamyada haboon, si halka ugu saraysa loo gaarsiiyo soo kabashada wax soo saarka haydrokarbooniska, si iswadis leh xag farsamo iyo xag dhaqaale, iyadoo lala beegsanayo in aanay dhicin hoos u dhac ku yimaada kaydka, lana isticmaalayo mabaa'diida wax ku oolka ah ee heerarka

wax soo-saarka iyo dhawrista degaanka, si loo yareeyo wax yeelaynta dhulka korkiisa;

ii. Falgalka nabadgalineed, oo la xariira isticmaalka hababka iyo nidaamyada horumarinaya nabadgelyada shaqada iyo ka hortagga shilalka;

iii. Dhawrista degaanka, oo waajib ka dhigaysa in la raaco hababka iyo nidaamyada yaraynaya wax u dhimidda degaanka ee ka dhalan kara hawlaha Batroolka;

2. **Xanaanaynta.** Wax-Soosaarka Batroolku wuxuu u dhici karaa:

b. Intii la kari karo oo suuragal ah, si walba, looga soo saaro Batroolka meesha uu ku jiro oo ka mid'ah kayd walba, ama kaydad isku darsan;

t. Si waafaqsan dhaqanka wanaagsan ee goobta saliidda iyo maba'diida dhaqaale ee caafimaadka leh; iyo

j. Intii la kari karo, si walba, laga fogaado khasaare ku yimaada Batroolka iyo tayada kaydka saliidda.

3. **Qiimeynta Joogtada ah.**

Qandaraaslayaashu waa in ay sameeyaan qiimeyn joogto ah ee qorshaha fog Batroolka iyo isticmaal xirfadeedka ee xal u helidda umuuraha, isla markaana waa in ay qaataan talaabooyinka loo bahanyahay, si loo gaaro arrimahaas, lana socodsiiyaan HBS isbeddel kasta oo macna leh, siduu qabo dhaqanka wanaagsan ee goobta saliidda.

Qodobka 37aad:
Dib u furfuridda Agabka Shaqo ee Batroolka
(Decommissioning)

1. **Waqtiyeynta Dib u Furfuridda.** Shaqsiga ruqsadda haystaa marka ugu dhaqsiyaha badan oo u samaynayo dib u furfuridda waa marka:

b. Uu joojinayo ruqsadda.

t. Aan looga baahnayn, mar dambe, qabashada hawlo batrool.

j. Aanay jiri karin ogolaansho qoraal ah oo laga helo HBS, waafaqsanna xaaladaha ogolaanshaha la bixiyey.

x. Aanay , si kale, ruqsaddu u sheegin

2. **Faahfaahinta Ruqsadaha iyo Xeerarka.**
Ruqsadaha waa in ay ku jirtaa qodobo ka hadlaya dib u furfuridda hawlaha Batroolka. Wasaaraddu, iyadoo raacaysa talada iyo ku talinta HBS, waxay samaynaysaa Xeerar Sharcigaan hoos yimaada oo la xariira dib u furfuriddaa hawlaha Batroolka.

3. **Sanduuqa Dhaqaalaha Furfuridda**. Shaqsiga Ruqsadda haysta waa in uu sameeyaa sanduuq dhaqaale ee furfuridda wax yar ka dib marka la oggolaado qorshaha soo saaridda iyo hawlgalka ama bixinta ruqsadda loo qaato nidaamka daabulaadda, sida ku qoran xeernidaamiyayaasha. Sanduuqa dhaqaale ee furfuridda waa in uu ahaado mid ku filan in uu daboolo kharashka furfuridda oo buuxa.

CUTUBKA 6AAD
MACLUUMAAD IYO DABAGAL

Qodobka 38aad:
Xog iyo Macluumaad

1. **Xaq-u-yeelashada ogaanshaha Macluumaadka iyo Xogta.**
Soomaaliya waxay xaq u leedahay lahaanshaha dhammaan macluumaadka iyo xogta, kuwo cusub, la soo xigtay, laga shaqeeyey, la tarjumay ama la falanqeeyey, oo la helay, lana xiriira ruqsad kasta oo la baxshay. Xilkasnimada sir xajinta haboon, waxaa loogu dhaqmayaa si la mid ah sida ku cad Qodobbada 18.2 iyo 19.9.

2. **Xog Gudbin.** Macluumaadka iyo Xogta la helo, inta lagu guda jiro hawlgallada Batroolka, waxaa si xor ah u gudbin kara Shaqsiga haysta Ruqsad, iyadoo shardi looga dhigayo in HBS ay dalabto asalka shayga, marka laga hadlayana nuxurkoodu uu yahay dhagxaan, dareerayaal ama muuqaad kaloo muuqaal leh, iyadoo Soomaaliya gudaheeda lagu haynayo qayb la isticmaali karo oo asalka shayga ah, lana xariira dhammaan macluumaadka iyo xogta oo qaab muuqaal iyo elektroonikba leh.

Qodobka 39aad:

Hanti Dhawr iyo Kormeer

1. Kormeere

b. HBS waxay u magacaabi kartaa qof in uu noqdo kormeere, marka laga hadlayo ujeeddooyinka Sharcigaan.

t. Kormeeruhu, wuxuu yeelanayaa awoodaha iyo xuquuqaha lagu siiyey Xeerarka.

2. **U Madax Banaanaanta Helista Diiwaanada iyo Xisaabaadka.** Shaqsiga Ruqsada haysta, codsi ka dib, waxuu ku soo wareejinayaa HBS diiwaanada iyo xisaabaadka lahayo si loo baaro.

Qodobka 40aad:
Dhammaadka Ruqsadda

1. Joojinta

b. Joojinta ruqsad la baxshay, sabab kasta awgeed, waa in ay noqotaa mid aan waxba u dhimayn xuquuqda iyo waajibaadka lagu caddeeyey sharcigan, xeerarka ama ruqsadda; loogana dan-leeyahay in looga samata baxo ficilka joojinta, xuquuqda iyo waajibaadka ka soo unkamaya talaabadaas iyada ah, ka hor inta aan la hirgelin in falka joojinta, iyo dhammaan qodobada ku soo arooray ruqsadda, looguna baahan yahay si caqli gal ah, oo ka dhigaysa in xuquuqda iyo waajibaadku si buuxda u noqdaan kuwo dhaqangal ah oo raali galin kara Shaqsiga , keeni karana ka gudubka wixii ku saabsan falka joojinta, intii muddo ah ee loo baahan yahay.

t. HBS waxay leedahay awoodda ay ku joojin karto ruqsadda, sida lagu caddeeyey isla ruqsadda.

2. Dad Ruqsad Wadareed Haysata

b. Haddii ay jiraan, tiro wax ka badan hal shakhsi oo ruqsad haysta, oo ku saabsan ruqsad cayiman; xaaladana dhashaan oo keenaya in HBS ay joojiso ruqsad, HBS waxay door bidaysaa in ay ruqsadda xarigga u jarto, iyadoo lagu soo koobayo oo kaliya shaqsiga ruqsadda haysta oo ficilladoodu ama gaabintoodu (markay la xariirto Shirkadaha ficilada, gaabinta ama dhacdooinkuba la soo gudboonaadeen), kuwaas oo dhaliyey xaaladaha

caynkaas oo kale, waxayna ogeysiin sidaas ah siinaysaa inta soo hartay ee Shaqsiga ruqsadda haysata.

t. Marka HBS ay joojiso ruqsadda, sida ku cad Qodobka 40.2.b, waa inay siisaa Shaqsiga ruqsadda leh ee soo haray, xaqqa mudnaantaasi ay u noqdaan kuwa ugu horeeya ee hela saamigii la joojiyey si u dhiganta saamiyada la kala leeyahay. Saami kasta oo aanay iibsan kuwa ruqsadda ku soo haray waa in uu ku soo wareegaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 41aad:
Hufnaanta Dawladda Dhexe, Wasaaradda iyo HBS

1. **Beriyeelidda.** Shaqsi haysta ruqsada waa inuu:

b. Ka difaacaa, kana dhawraa, waxna usan ugu dhimin Dawladda, Wasaaradda iyo HBS, dacwo kasta oo ka timaada dhinac saddexaad, ha ahaato mid toos ah ama dadban, oo la xariirta hawlaha Batroolka, bixiyaanna dhammaan magdhwyada ku saabsan dacwadaha madaniga ah, ashtakooyin ismoodsiin ku dhisan ama codsiyo.

t. Ilaa iyo inta ay Wasaaraddu ku qancayso, kadib markay la tashato shakhsiga ruqsadda haysta; dembiyada la filayo ee ku cad Qodobka 41.1.1, waxaa lagu xallin karaa siyaablo kale oo ay ka mid tahay talo galin shirkad kale ama damaanad bangi ama warqadda ballanqaad ee caddaynaysa dhabar u ridashada deynka iyo caymis galin la xiriira baaxadda daymanka, kuna dhisan xisaabtan xoog leh, hadba sida Wasaaradda u rabto, waqti ka waqti.

CUTUBKA 7AAD
MACLUUMAAD SHAACSAN

Qodobka 42aad:
Faafinta Hay'adda Batroolka Soomaliya (HBS)

1. **Faafin.** HBS waxay ku shaacinaysaa faafinta rasmiga ah;

b. Wargelinta ku saabsan bixinta ruqsadaha, iyo shuruudaha kooban ee ruqsadaha caynkaas oo kale ah.

t. Soo bandhigid dalbashada codsiyada ka qaybgalka ruqsadaha sida ku qoran Qodobka 26.1.1.

j. Wargelin la xariirta sida loo joojinayo Ruqsadaha.

2. **Faafinta Dalabka Codsiyada**. HBS waa inay soo bandhigtaa dalabyada codsiyada, kuwaasoo loogu soo gudbinayo araajiyo ruqsado weydiin ah, sida ku cad Qodobka 26.1.1, kadib marka la faafiyo, si waafaqsan xeerarka.

Qodobka 43aad:
Xog Shaacsan

1. **Ka Qaybgalka Dadwaynaha**

b. HBS waa in ay la wadaagtaa dadweynaha:

i. Shuruudaha muhiimka ah ee la soo koobay, lana xiriira, dhammaan ruqsadaha iyo isbeddellada ku saabsan ee la soo bandhigay, haddii ay yihiin kuwo la joojiyey ama haddii kalaba.

ii. Faahfaahinta canshuur dhaafyada la sameeyey, ama bedellada iyo hakinnada ee la xiriira shuruudaha ruqsadda ee ku cad Qodobka 34; iyo

iii. Nuqullada dhammaan heshiisyada Midaynta.

t. HBS waa in ay dadweynaha la wadaagtaa, in ku siman waqti macquul ah gudihiisa, faah-faahin kooban, haddii la weydiisto arrintaas, oo ah:

i. Qorshaha Horumarineed ee la ansixiyey; iyo

ii. Dhammaan shaqooyinka iyo macaamilada kale oo la ogolaaday ee la xariira ruqsadaha, iyada oo loo tixgelinayo in is-aamininaada kala ganacsigu uu yahay mid ku dhisan shuruudaha ganacsiga.

2. Soo Bandhigidda Sababaha.

Toban casho, oo maalmo shaqo ah gudahood, oo la xiriira codsi la sameeyey, HBS waa in ay soo bandhigta, si kooban, sababaha ay:

b. U bixisay ruqsad, ka dib, marka ay shaacisay dalabyo la xiriira codsi, sida ay sheegayso Qodobka 26.1.1.

t. U bixisay ruqsad, iyadoo aan la shaacin dalabyo la xiriira codsi, sida ku qoran Qodobka 26.1.2.

j. U ansixisay qorshaha horumarineed ee hoos imaanaya Heshiiska Wax-Soosaar Wadaagga.

x. U bixisay canshuur dhaafka, ama u ogolaatay beddelaad iyo hakin ku saabsan shuruudaha Ruqsadda ee ku cad Qodobka 34.

Kh. U gaartay go'aan kasta ama ay u bixisay ogolaansho u baahan faafin, iyada oo la xurmaynayo Ruqsadda.

3. **U Hoggaansanaanta Warbixinada.**

b. Shirkaduhu waa in ay warbixin ka keenaan sida ay ugu hoggaansan yihiin shuruudaha la xiriira sharciga iyo ruqsadaha, si waafaqsan habka iyo faah-faahinada looga baahan yahay ruqsaddooda, sida lagu caddeeyey xeerarka.

t. HBS waa in ay u soo bandhigtaa dadweynaha warbixinadaas,marka laga reebo qayb kasta oo ka mid ah warbixinta oo shakhsiga ruqsada haysta uu codsaday in sir ahaan loogu xajiyo, taasoo hay'addu u aqoonsatay in ay ka mid tahay sir wax kala iibsiga.

4. **Ogaanshaha Dadwaynaha ee Xogta Lacagaha la Baxshay**. HBS waa in ay dadwaynaha soo hor dhigtaa warbixinada lacagaha laga helay Shaqsiyada ruqsadaha haysta, oo ku saabsan lacagaha la xiriira hawlaha Batroolka oo ay siiyeen Dawladda Soomaaliyeed
5. **Khidmada ka Qaybgalka.** macluumaadka ku xusan qodobka 43, way u furan yihiin ogaalkooda qof kasta, marka laga hadlayo, bixinta khidmadaha halkaas ku cad, sida uu qorayo xeerka.
6. **Luqadda.** macluumaadka ku qoran Qodobka 43.1.2, waa in ay ku soo baxdaa ugu yaraan hal luqo oo rasmi ah ama luqadda labaad ee dalka.

Qodobka 44aad:
Daah Furnaan

1. **Mabaadi'da daah furnaanta.** Mabaadi`ida soosocota, Waxaa lagu dhaqayaa hawlaha Batroolka, iyada oo loo marayo sharcigaan, iyo xeerarka la soo saarayee lagu fulinayo sharcigaan, iyo qawaaninta, tilmaamaha, go'aamada iyo amarrada loo dejiyey in sharcigaan lagu dabagalo:

b. Waxaa jiraya faafin joogta ah oo lagu sameeyo dhammaan lacagaha la xiriira Batroolka oo ay Shaqsi ruqsad haysta siiyaan Dawladda iyo dhammaan dakhliga maadiga ee Dawladda uga soo xarooda Shaqsiga ruqsadda haysta. Faafinnadaan waa in lagu soo bandhigaa kulammo ballaaran, ka qaybgalkoodu dhan walba u furan yahay, loona qabto si macquul ah.

Qodobka 46aad:
Tilmaamo

Ka sokow awoodda ay u leedahay bixinta tilmaamaha ee ku qeexan Qodobbada 25.4 iyo 33.1.3, HBS, waxaa kaloo ay tilmaamo siin kartaa Shaqsi ruqsad haysta, taas oo la xiriirta:

b. Arrin kasta, sida lagu cadeeyay Qodobka 45.1.

t. Arrimo si kale waajib uga dhigaya, u hoggaansanaanta sharicigaan, xeerarkiisa ama ruqsadda.

CUTUBKA 9AAD
QODOBBADA CIQAABTA

Qodobka 47aad:
Baaxadda Xududeed iyo Maaddo ee Cutubkan.

Qodobada cutubkan, waa kuwo aan waxba u dhimaynin, mas`uuliyadda ciqaabeed iyo midda madani ee ka dhalan karta sharciga guud ee dalka.

Qodobka 48aad:
Dembiyada iyo Ciqaabaha.

Dambiyada ka dhasha hawl gallada aan ruqsadaysnayn, khatarta ku imaan karta dadka, hantida iyo bii'ada, is hortaagga ku dhaqanka awoodaha kormeeraha, marin habaabinta, u-hogaansamid la'aanta xeerarka ama tilmaamaha, ciqaabaha iyo ganaaxyada ka dhalanaya waxay Wasaaraddu ku soo saaraysaa xeer gaar ah.

Qodobka 49aad:
Mas`uuliyadda dadka , Shirkadaha iyo
Hay'adaha Kale ee Qaanuuniga ah.

1. **Mas`uuliyadda Hay'adaha iyo wakiiladooda.** Shaqsiyaadka qaanuuniga ah, shirkadaha ama hay'adaha kale ee sharciga ah, oo ay ku jiraan kuwa aan shakhsiyad sharciyeed lahayn, waxaa lagu soo oogi karaa ciqaab ku wajahan xadgudubyada lagu sheegay cutubkan, markay xadgudubyadaas galaan waaxyo ama wakiillo ka tirsan, iyagoo isticmaalaya magaca ay xambaarsan yihiin iyo danaha wada jirka ah ee ka dhexeeya.

2. **Difaaca ku salaysan habraaca saxan:** Mas`uuliyad dembiyeed way ka wareegaysaa shirkadda, haddii Qofka dambiga galay uu u dhaqmo, si bareer ah, ee waafaqsan, kuna beegan amarada iyo tilmaamaha sida hagaagsan loo baxshay.

3. **Mas`uuliyadda Wakiilka.** Mas`uuliyadda hay'adaha ee lagu sheegay Qodobka 49.1, kama baxsana masuuliyada shakhsiyadeed ay kala leeyihiin wakiilada.

4. **Masuuliyad wadareed iyo midda keli'keliga ah.** Hay'adaha lagu sheegay Qodobka 49.1, waxay si wadajir ah ama kala gooni ah masuul uga yihiin, sida lagu sheegay sharciga madaniga ah, bixinta ganaax kasta ama magdhaw, ama fulinta waajibaadyada ka dhashay dhacdooyinka ama ka yimid arrimaha ujeeddada sharcigani ka hadlayo.

Qodobka 50aad:
Ganaaxyada Shaqsiyaadka, Shirkadaha iyo Hay'adaha kale ee Qaanuuniga.

1. **Ganaaxyada.** Marka laga hadlayo, xaaladaha Shaqsiyaadka sharciyeysan, shirkadaha ama hay'adaha kaloo qaanuuniga ah, oo ay ku jiraan kuwa aan haysan shakhsiyad sharciyeed, heerka ganaaxu wuxuu noqonayaa hadba sida ay maxkamaddu goyso, iyadoo la tixgelinayo xaaladda dhaqaale iyo maaliyadeed ee shakhsiga sharciyeysan, shirkadda ama hay'adaha kale ee qaanuuniga ah, lana eegayo culayska iyo waxa ka imaan kara fal dembiyeedka.

2. **Wax ku Lahaanshaha Raasumaalka.** Haddii ganaaxa lagu fuliyo hay'ad aan la hayn shakhsiyad sharciyeed, bixinta ganaaxaas waxaa dusha laga saarayaa raasumaalka Hay'adaasi; haddayse, aanu jirin raasumaalkaasi ama uu ka hooseeyo heerka koboca loo baahan yahay, waxay bixintu dushiisa tahay, wadar ahaan ama kali kali, rasumaalka mid kasta oo shirkadda ka mid ah.

Qodobka 51aad:
Kormeeridda

HBS iyo kormeeraha, sidoo kale, waaxyada ka midka ah maamulka guud oo loo wakiishay hawlaha kormeerka, sida ku cad sharciga iyo xeerarkiisa, waxay mas`uul ka yihiin in ay sugaan, sidii kormeerku ugu dhici lahaa, si waafaqsan qodobada sharcigan ama xeerarkiisa.

Qodobka 52aad:

Warqad Fulin Xukun oo ka Baxsan Hannaanka Garsoorka.

Iyada oo looga dan leeyahay soo uruurinta qasabka ah, sida sharciga guud sheegayo, caddayn ay soosaartay HBS oo la xariirta dayn jirta, ama lacag bixinteeda la joogo, taasoo ka dhalatay dhaqan galinta qodobada sharcigan ama xeerarkiisa, oo aan la bixin waqtigii ku haboonaa oo ay HBS horay u cayintay, caddayntaas oo qoraal ah aan loo ogeysiinayo shakhsiga deynta qaba, waxay noqonaysaa warqad fulin xukun ah, oo ka baxsan hannaanka garsoorka.

Qodobka 53aad:

Sharciyada Is Kaabaya

1. **Ciqaabaha iyo Sharciyada kale.** Sharciga guud ee ciqaabaha, iyo wixii la mid ah ee ku saabsan sharciyada maamulka iyo madaniga ee muhiimka ah ee Soomaaliya, waakuwo loo fulin karo qaab is dhamaystiraya, iyada oo la samaynayo iswaafajinta loo baahan yahay, si loo dabbaqo qodobada cutubkan ku xusan.

2. **Diidmo Iska horimaad.** Marka ay dhacdo in qodobada sharciyada kale Soomaaliya ay ka horyimaadaan qodobada sharcigaan ama xeerarkiisa, kuwaasi waxay noqonayaan kuwa aan waxba ka jirin, markay timaado ku dhaqankooda hawlgallada Batroolka.

CUTUBKA 10AAD
QODOBBADA GUNAANADKA AH IYO
KUWA KU-MEEL-GAARKA AH

Qodobka 54aad:

Qodobka Kala guurka ah

1. **Ruqsadihii Hore.** Wasaaraddu waxay soo saaraysaa Xeerar caddaynaya hab maamulka ay raacayaan, iyo sidoo kale waajibaadyada laga rabo, Shirkadaha ka mid ahaa ama ku jira hawlgallada Batroolka ee la xiriira qandaraasyadii hore oo muujinaya xuquuq ay bixisay Jamhuuriyaddii Dimoqraadiga ee Soomaaliya, 30kii Disember, 1990, ama ka hor, kuwaas oo loola jeedo bixinnadii hore. Xeerarkaas waa in ay ku jiraan qodobada soo socda:

b. Qandaraasle hore, wuxuu xaq u leeyahay inuu u rogo heshiiskiisii hore qaab ruqsadeedka ugu dhaw ruqsaddiisii hore. Heshiiskii hore
oo lahaa qaab ku dhaqan kaliya (Concession) oo siinayey qandaraaslihii hore inuu kaligii qabto hawlaha Batroolka waxaa loogu badalayaa heshiis leh qaab Wax-Soosaar Wadaag (PSA).

i. Qandaraasle hore oo raba inuu beddalo heshiiskiisii hore waa inuu siiyaa Wasaaradda:

- Nuqul dhab ah oo sheegaya wixii uu ka qabtay heshiiskii hore.

- Caddayn lagu qanci karo oo muujinaysa in arrinku dhacay 30kii, Disember 1990, ama ka hor sheegaysana inuu si buuxda u fuliyay waajibaadyadii ku qeexnaa bixinnaddii hore.

- Nuqulka diiwaanka hawlgalka, si waafaqsan heshiiskii hore, oo ay ku jirto ka tegista qayb uun ka mid ah goobtii heshiiska ee ruqsaddii hore.

Nuqul la xiriira dhammaan macluumaadkii iyo wararkii ku caddaa heshiiskii hore ee loo baahnaa in loo soo gudbiyo Dawladda.

- Caddaynta dhinacyada wali ku jira heshiiskii hore, iyo sida ay dhinacyadaasi u hanteen dantoodii la xiriirtay heshiiskii hore, oo ay ka dhaxleen qolooyinkii assal ahaan u haystay ruqsaddii hore.

ii. Inuu Ogolaado in waajibaadka dib u furfurista ku cad Ruqsadda cusub, ay ka mid noqotaa furfuridda shaqooyinkiisii uu horay u qabtay, iyadoo la raacayo heshiiskii hore.

iii. Ogolaado shuruudaha Ruqsadda cusub ee dhexmarta qandaraaslihii hore iyo Wasaaradda, waqti, ama ka hor, taariikh ay Wasaaraddu cayintay, kaasoo aan ka dambaynaynin taariikhda lagu sheegay Qodobka 54.2.

t. Ruqsad hoos timaada Qodobka 54.1.b.iii waa in ay la socotaa mabaadi'da Sharcigaan, Xeerarkiisa iyo qaabka Qandaraaska ay faafisay Hay'adda (HBS), lana xariirta Qodobka 19.20.kh.

2. **Dadaalka Wada Xiriirka**. Wasaaraddu waa in ay samaysaa dadaalo macquul ah si ay ula xiriirto Shaqsi kasta oo horay Qandaraas u haysatay, si ay ugu suurtagasho in ay ogaato kuwa ay yihiin, talana uga siiso xuquuqdooda ku cad Qodobka 54.1.

Ref, OPM.0.27/04/18 Date: 05/06/2018

HESHIISKA LAHAANSHAHA, MAAMULKA IYO WADAAGA DAKHLIGA KHEYRAADKA DABIICIGA AH EE DALKA (SHIDAALKA IYO MACDANTA)

Hordhac - Mabaadiidda Asaasiga ah

Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnta ka ah iyo Maamulka Gobolka Banaadir ayagoo:

1. **Kaqiijinaayo** in si isu dheelitiran oo cadaalad ah shacabka **loo gaarsiiyo** adeegyada lagama maarmaanka u ah horumarka Dalka.
2. **Garwaaqsan** muhiimada in Dakhliga khayraadka Dabiiciga ah ee dalka ka soo kareeda loogu adeegi doono shacabka Soomaaliyeed iyadoo la tix galinayo baahida qaranka iyo baahiyaha kala duwan ee ka jira gobolada laga soo saarayo khayraadkaas iyo gobolada ma soo saarayaasha ah intaba.
3. **Aaminsan in Wadaagida** khayraadka dalka **lagu saleeyo** baahiyaha dalka ee mustaqbalka, kuwa jilasha soo socda, difaaca dalka iyo midnimada qaranka, tix gaar gaar ahaaneedna la siiyo dhibaatada ugu badan ama bay'ada ee soo saaridda khayraadku ay keeni karaan.
4. **Tixgelinaaya** baahida weyn ee loo qabo ilaalinta, maareeynta iyo in si caddaalad ah looga faaideysto kheyraadka shidaalka iyo macdanta.
5. **Aqoonson** muhiimadda ay **leedahay** in Dowladda Federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalku iyo kuwa kamid noqon doona ay heshiis **ka gaaraan** lahaanshaha, maamulka iyo wadaagidda dakhliga **shidaalka** iyo macdanta.
6. **Tixgelinaaya** baahida loo qabo in lihii dhaqaalaha dalka dib loo soo noqeeyo si ay dowladda ugu suurta-gasho in ay ku fillaato bixinta kharashyada sugidda amniga iyo dib-u-dhiska waddanka oo ay ugu muhiimsan yahiin dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka iyo kuwa kamid noqon doona.
7. **Garowsaday** baahida loo qabo in si caddaalad ah oo daahfuran loo maamulo dakhliga Shidaalka iyo Macdanta.
8. **Arkay qodobbada** 44aad iyo 54aad ee Dastuurka Ku-meel Gaarka ah oo qeexaaya in Dowlada Federaalka iyo Dowladaha xubinta ka ah kawada xaajoodaan awood qaybsiga iyo lahaanshaha, Maamulka iyo wadaagidda dakhliga kheyraadka dhabiiciga ah ee Dalka.
9. Tixgelinnaya danta guud ee dalka iyo dadka Ayaan waxaan ku heshiinay qodobada soo socda:

Qodobka 1^na Lahaanshaha Khayraadka Dabiiciga (Ownership)

1.1 Kheyraadka macdanta iyo shidaalka ee ku jira dalka, bad iyo bariba, waxaa iska leh shacabka Soomaaliyeed; waxaana wakiil uga ah Dawladda Federaalka iyo dawladaha xubnaha ka ah iyo kuwa ka mid noqon doona.

Qodobka 2^na Maamulka Khayraadka (Management)

1.2 Maamulka khayraadka shidaalka iyo macdanta waxaa si wada jir ah u maamulaya Dowlada Federaalka iyo dowladdaha xubinta ka mid ah ama kamid noqon doona waxaana la dhisi doonaa hay'addo oo ka shaqayn doona amnimaha shidaalka iyo macdanta oo ay kamid yihiin

1.2.1 **Golaha Khayraadka Dalka:** Golaha Khayraadka Dalka waa golaha ugu sarreeya ee lagu lafa guro arrimaha khayraadka ee u baahan in laga heshiiyo, loolanka noqdo wixii lagu xallin waayo golayaasha maamul ee kale, wuxuuna ka koobanyahay madaxda fulinta ee heer federal iyo heer dowlad goboleed.

1.2.2 **Wasaarada Betroolka iyo Macdanta ee Federaalka:** Diyaarinta Hindise Sharciyeedyada, dejinta siyaasadda, qorshaynta iyo saxiixidda shatiyada ee la xiriira arrimaha macdanta iyo shidaalka ee heer federal waxaa ka masuul ah Wasaaradda Batroolka iyo Macdanta iyadoo wada tashi kala sarreynaysa Hay'adaha Shidaalka ee dowlad Goboleedyada.

1.2.3 **Wasaaradaha/Hay'adaha Kheyraadka Betroolka & Macdanta ee Dowlad Goboleedyada:** Diyaarinta Hindise Sharciyeedyada, Siyaasadaha iyo Qorsheynta la xiriirta arrimaha Betroolka iyo Macdanta ee heerkooda si waafaqsan Shuruucda iyo Siyaasada guud ee Dalka.

1.2.4 **Hay'adda Batroolka Soomaaliya-HBS (Somali Petroleum Authority SPA):** Hay'adda Batroolka Soomaaliyeed waa mid loo dhanyahay oo lagu dhisi doono Sharci gooni ah waxayna ka shaqeyn doontaa, Wada hadallada heshiisyada, iyo Diyaarinta shatiyada (Licensing), kormeerka, hubinta iyo hirgalinta Sharciyada Batroolka. Maamulka Hay'ada wuxuu ka koobnaanayaa Labo xubnood oo matalaaya Dawladda Federaalka iyo min hal xubin oo matalaya Dawladaha Xubinta ka ah iyo kuwa ka mid noqon doona. Xubnaha Hay'adda ka midka ah waxa ay noqon doonaan xubno aqoon, xirfad, karti iyo hufnaan lagu soo xulay.

1.2.5 **Shirkadda Shidaalka Soomaaliyeed (Somali National Oil Company-SONOC):** Waxaa la asaasi doonaa shirkad ganacsi oo ay wada yeelanayaan Dawladda Federaalka iyo Dawladaha Xubnaha ka ah ama ka mid noqon doona taas oo ye elanayso xirmooyinka (blocks) shidaalka dalka iyagoo kaligood ah ama lawadagaya shirkadaha caalamiga ah mas'uulna ka ah sahaminta (Upper Stream). Dhismaha kaaba yaasha shidaalka, sifeynta (Mid-Stream) iyo suuq geeynta wax soo saarka shidaalka. Maamulka shirkada wuxuu ka koobnaanayaa labo xubnood oo matalaaya Dawladda Federaalka iyo min hal xubin oo matalaya dawladaha xubinta ka ah iyo kuwa ka mid noqon doona. Rasmaalka iyo wadaaga Saamiyada shirkadda waxaa lagu faahfahin doonaa sharci gaar ah.

1.2.6 **Shirkadaha Shidaalka Dowlad Goboleedyada-SSDG (State Oil Companies-SOC)** Sidoo kale Dowlad Goboleedyaddu waxay yeelanayaan shirkado ganacsi oo ka shaqeeya danahooda ganacsi ee arrimaha Shidaalka waxeyna Dowlad Goboleedyada u matalaan saamiga ay ku leeyihiin Shirkada Shidaalka Somaaliyeed, shaqadeeduna waxay noqonaysaa dhismidda iyo maamulidda kaabayaasha shidaalka ee heer dowlad goboleed (Down Stream) iyo suuq geynta cadaska shidaalka ee wadanka gudahiisa lagu isticmaalayo ama isaga oo sifeysan dibadda loo ka-gaymayo.

Qodobka 3aad Waddaaga Dakhliga (Revenue Sharing)

1.3 Dakhliga ka soo xarooddo macdanta iyo shidaalka waa wadaag (sharing) waxaana si isu dheeli tiran loogu qaybinayaa Dowlada Federaalka iyo Dowladaha xubinta ka ah ama ka noqon doona

Qodobka 4aad Maamulka Maaliyadeed ee Dhakhliga Shidaalka iyo Macdanta

1.4 Keydinta iyo maamulida dakhliga kaso xarooda kheyraadka shidaalka iyo macdanta waxa lagu keeydin doonaa Xisaab (Account) gaar ah oo laga furi doono bangiga dhexe ee Soomaaliya. Waxaa xisaabta lacag loogu saari kara go'aanka golaha kheyraadka dalka iyadoo la raacayo hanaanka maaneulka maaliyadeed ee Dalka

Saxiixa Heshiiska

Dawladda Federaalka Soomaaliya:

Mudane Xasan Cali Khayre
Ra'isal Wasaaraha JFS

Madaxda Dawladaha Xubnaha ka ah Dawladda Federaalka ah iyo Gobolka Benaadir

Mudane Cabdiwali Maxamed Cali Gaas
Madaxwaynaha Puntland

Mudane Axmed Maxamed Islaam
Madaxwaynaha Jubbaland

Mudane Sharif Xasan Sheekh Adan
Madaxwaynaha Koonfur Galbeed

Mudane Axmed Ducaale Geelle
Madaxwaynaha Galmudug

Mudane Maxamed Cabdi Waare
Madaxwaynaha Hirshabeelle

Mudane Cabdiraxmaan Cumar Cusmaan
Guddoomiyaha Gobolka Benaadir

Taariikh 05 June 2018.

----------Dhamaad----------

Qodobka 6[and] Lifaaq

1. Shaxda Wadaaga Dakhliga Shidaalka

Faahfaahin	DFS	DXF (Soo-saaraha)	Degmada soo-saaraha)	DXF (ma soo-saarayaasha)	Faalo
Investment Fund					Wasaaradaha Maliyada ee FGC/FMS aya go'an ka gaaraya
Offshore	55%	25%	10%	10%	
Onshore	30%	30%	20%	20%	
Royalty	40%	40%	10%	10%	
Signing Bonus	40%	60%			
Surface Rent	30%	50%	20%		
License fee	50%	50%			
Production Bonus	30%	50%	10%	10%	
Corporate Income Tax	100%				
Export Tax	60%	40%			
Capital gains	50%	30%	20%		
Seismic Data	50%	50%			
Capacity Building	50%	50%			
Local Community development	%	30%	70%		

2. Shaxda Wadaaga Dakhliga Macdanta

MACDAMAYSIGA					
Faahfaahin	DFS	DXF (Soo-saaraha)	Degmada soo-saaraha)	DXF (ma soo-saarayaasha)	Faalo
Investment Fund					Wasaaradaha Maliyada ee FGC/FMS aya go'an ka gaarsya
Corporate income tax	100%				
Capital gains tax	65%	35%			
Mineral royalty	30%	40%	30%		
Surface rental	20%	50%	30%		
Licensing fees	50%	25%	25%		
Community development	10%	30%	60%		
Training	50%	50%			
Net profit	50%	50%			

SHARCI LR. 20 Taariikh: 05/02/2020

ANSIXINTA WAX KA BEDELKA SHARCIGA IIBKA QARANKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. GSH253/12/01/B-10/20 Taariikh 16/01/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Wax ka bedelka Sharciga iibka Qaranka

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Iibka Qaranka.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 05/02/2020

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HHN/045/2020
TAARIIKH 24/03/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

SHARCIGA WAX-KA-BEDDELKA
SHARCIGA IIBKA & QANDARAASYADA QARANKA

Sharci Lr. _____ ee _____

WAX-KA-BEDDELKA SHARCIGA IIBKA & QANDARAASYADA QARANKA

QOD.1AAD
Magaca Sharciga

1. Magaca Sharciga Iibka & Qandaraasyada Qaranka ee **2016** waxaa loo beddelay "Sharciga Iibka ee Qaranka"

QOD.2AAD
Qeexitaannada

2. Qod.3aad ee ku saabsan Qeexid, Faqradda 1aad waxay u qormaysaa sidan: (**Sarkaalka Idman**: waxaa loola jeedaa qofka loo magacaabo Sarkaalka Madaxa Hay'adda Dowladeed ee fulineysa iibka iyo qandaraasyada.)

QOD 3AAD
Kordhin Qodob Cusub

1. Sharciga Iibka & Qandaraasyada Iibka ee **2016** waxaa lagu kordhiyay qodob cusub oo u qoran sidan:

Qod.3aad Bis
Sarkaalka Idman ee Ururada Dowliga & Shirkadaha ay Dowladdu Leedahay

1. Hay'ad kasta iyo mashruuc ama wakaalad kasta oo dowladeed waxaa loo magacaabayaa Sarkaal Idman kaas oo caadiyan ah sarkaalka mas'uulka ka ah hay'adda ama mashruuca. Sarkaal Idman waxaa ka mid ah;

   b) Agaasimaha Guud ee Xafiiska Madaxwaynaha Dawladda Federaalka ee Soomaaliya;

   t) Agaasimaha guud ee Xafiiska Raysulwasaaraha Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya;

j) Labada Xoghaye Guud ee Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka;

x) Agaasimaaha Guud ee Maxkamadda Sare;

kh) Hanti-dhowraha Guud ee Xafiiska Federaalka Hanti-dhowraha Guud ee madaxa-bannaan;

d) Agaasimaha Maamulka iibka Dawladda Federaalka;

r) Agaasimaha Guud ee masuulka ka ah Maaliyadda ee Wasaaradda Federaalka;

s) Agaasimaha Guud ee masuulka ka ah Maaliyadda Komishinka Qaranka;

sh) Agaasimaha Guud ee masuulka ka ah Maaliyadda hay'ad dawli ah ama shirkad dowladdu leedahay ee uu ansixiyay wasiirka ay qusayso.

2. Sarkaalka idman ee Wasaaradda Federaalka ah wuxuu gudanayaa waajibaadkiisa asagoo raacaya jiheynta guud ee Wasiirka Federaalka ah ee Wasaaradda Federaalka ah, laakiin Wasiirka Federaalka lama wareegi karo awoodda Sarkaalka idman. Haddii Sarkaalka idman iyo Wasiirka Fedraalka isku waafaqi waayaan fasiraadda sharicigan, Sarkaalka idmani wuxuu jiheyn weydiisanayaa Wasaaradda.

QOD 4^AAD

Wax-Ka-Beddelka Qod.27 Faqradda 3^aad

1. Qod.27^aad Faqradda 3^aad kuna saabsan Qorshaha Qandaraaska Iibka waxaa loo beddelay sidan: (Guddiga Qandaraaska Iibka wuxuu ogolaanaya qorshaha qandaraaska iibka wuxuuna si joogta ah dusha kala soconayaa hawsha fulinteeda.

   (i) Marka iibka gaarka ah ee ku xusan qorshaha iibka uu dhaafo qiimihii la jaangooyay ee ku xusnaa Xeer nidaamiyaha, qorshaha iibka waa inuu ansixinayo Guddiga Iibka Hay'adda.

   (ii) Marka xaaladdan oo kale ay jirto, Wasiirku wuxuu xeer-nidaamiye ku caddayn karaa shuruudaha korjoogteynta dheeraadka ee ku habboon hababka iibka gaarka ah ee ka saramara qiimiha la jaangooyay.

   (iii) Shuruudaha caynkaasi ah waxaa ku jira indho-indhayn, ama dib u eegidda qoraallada iyo hababka tartanka ee Guddiga Qandaraasyada.)

QOD 5^AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.29^aad Faqradda 4^aad

1. Qod 29^aad Faqradda 4^aad ku saabsan Sixitaanka Qiimaha waxaa loo qoray sidan: (Kala duwanaansha kasta oo qiima ee ka badan boqolkiiba inta lagu xusay xeernidaamiyayaasha ee qiimaha heshiiska asalka waxey hoos imanaysaa si loo ansixiyo Guddiga Qandaraaska Iibka ay khuseyso.)

QOD 6^AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.30^aad

1. Qod 30^aad ee ku saabsan Ansixinta iyo Wax ka bedelka Heshiisyada waxaa loo qoray sidan:

Qod 30^aad
Ansixinta iyo Wax ka bedelka Heshiisyada

1. Ansixinta abaalmarinta heshiis la soo-jeediyay waxay noqon doonaan si waafaqsan Xeernidaamiyaha.
   (i) Xeer Nidaamiyayaashu waxa ay u jaangoyn karaan qaddar ama xaddi lacageed marka Madaxa Waaxda iibka, Guddiga iibka, ama cid kale oo uu wasiirku u xilsaaray ay ansixinasyo qandaraasyada lagu guulaystay.
   (ii) Si loo gaaro ujeedkaas, Wasiirku wuxuu kaloo hir galin karaa guddi qandaraas, waxaana lagu qeexi doonaa Xeer nidaamiye.
2. Wax ka baddalka qandaraaska sare u qaadaya qiimihii hore, waa in ay ogolaato Hay'adda Iibka ay ogolaadaan (approved) ka hor intaan la saxiixin, markay jiraan xaaladahan:
   (a) Marka hay'adda looga baahanyahay ansixnta qiimaha qandaraaska la beddelay, iyadoo la eegayo xaddiga qiimaha la jaangooyey ee qodobka 30aad faqradiisa 1aad ay ka duwanaato hay'addii ansixisay qandaraasyadii horey loogu soo guulaystay; ama
   (b) Marka kororka qiimaha qandaraasku uu ka badanyahay midkii xaddiga boqollayda ee lagu caddeeyay xeer nidaamiyaha.
3. Wasaaraddu waxay xeer nidaamiye ku caddayn kartaa duruufaha keenaya in wax ka baddal lagu sameeyo qandaraaska oo kordhin kara qiimiha, in ka badan boqoleeyda lagu caddeeyay xeer nidaamiyaha oo keeni karto ogolaansho.

QOD 7AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.31aad

1. Qod.31aad Faqradda 9aad ee ku saabsan Kaydka iyo Warbixinnada ee Qandaraaska Iibka: (Warbixinnada iyo dokumintiyada ay kaydiyaan Hay'adaha Qandaraaska Iibka si waafaqsan Sharcigan waa inay heli karaan markii ay u baahdaan Maamulka, Guddiga La Dagaalanka Musuqmaasuqa, iyo Hanti Dhowraha Guud, Guddiga Baarlammanka uga wakiilka ah iyo xafiis dowladeed kasta ee lagu aaminay mas'uulidaas marka la codsado si ay u baadhaan, kaas oo xaqiijin doona caddaaladnimada, dhex dhexaadnimada tartan la mariyay isla markaana lahaanshaha qiimo macquul ah.)

QOD 8AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.38aad

1. Qodobka 38aad Faqradda 1aad ee ku saabsan Xubinnimada iyo Magacaabista Guddiga waxaa loo qoray sidan: (Guddiga wuxuu ka kooban yahay sagaal (9) qof ee u magacaabayo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, ka dib markey u soo Jeediyaan Golaha Wasiirada, Wasiirka Maaliyaddana waa in uu kala tashadaa soo jeedinta Guddiga Iibka ee Qaranka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka, isla markaasna xaqiijiyaa qoondada haweenka Soomaaliyeed, ka hor inta aanu horgaynin Golaha Wasiirada; si waafaqsan Qod.3aad (5) iyo Qod.51aad (5)(a) ee Dastuurka KMG ah.)
2. Waxaa lagu kordhiyay **Faqardda 1aad Bis** oo u qoran sidan: (Xubnaha Guddigu waa in ay yihiin dad lagu yaqaanno hufnaan iyo aqoon maamul.)

QOD 9AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.55aad

1. Qod.55aad Faqradda 1aad Faqrad hoosaadka III ee ku saabsan Xilalka Sarkaalka Idman waxaa loo qoray sidan: (Abaalguddida iyo wargelinta go'aanka abaalmarinta qandaraaska kaddib ansixinta talo bixinta cidda qandaraaska ku guleysatay ee uu soo jeediyo Hay'adda leh ogolaanshaha waa inay waafajisaa qodobka 30aad farqadiisa 1aad ee xeerkan.)

QOD 10AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.57aad

1. Qodobka 57aad Faqradda (b) oo cinwaankiisa oo beddelay Shaacinta Hay'ad Iibin waxaa loo qoray sidan:

(b) Ma jireyso hay'ad iib Qandaraas oo qaban karta wax hawlo iib ah ilaa uu caddeyo Maamulku in:

(i) Guddiga iibka, iyo Unuga iibka oo la soo dhisay/ la sameeyay;

(ii) Waxaana si rasmi ah loo magacaabay sarkaal idman; iyo,

(iii) Maamulku wuxuu qiimeeyay Waaxda iibka inay leedahay awooddii ay ku qaban lahayd hawlaha iibka ayadoo u hoggaansamaysa Xeerkan

(c) Maamulka ayaa go'aan ka gaaraya haddii la arko khaladaad soo noq noqday oo ay samaynayso Waaxda iibka si ay u qabato shaqooyinkeeda si waafaqsan Xeerkan,

(i) Maamulka wuxuu joojinayaa Waaxdaasi haddii aysan laheyn awooddii loo baahnaa inay shaqada iibka ku qabato sida Xeerku qabo.

(ii) Waaxda Iibku marka laga joojiyo shaqada iibka, waxa ay arrimaheeda iibka u wakiilan kartaa wakiil iib ama hay'ad kale oo iib, si waafaqsan Qodobka 64aad Faqradda 2aad.

QOD 11AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.59aad

1. Qod.59aad Faqradda 4aad oo ku saabsan Hawlaha Guddiga Qandaraaska Iibka waxaa loo qoray sidan: (Dib u eegista dalabka iyo qiimeynta warbixinnada soo jeedinta iyo abaalmarinta heshiis la soo jeediyay oo siinaya ansixin ama haddii kale ay awood u siyaan Waaxda Qandaraaska Iibka iney sii waddo hannaanka Qandaraaska Iibka, halka ansixinta caynkaasi ah ay tahay masuuliyadda Guddiga iibka sida ku xusan Qodobka 30aad farqadiisa 1aad).

QOD 12AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.68aad

1. Qod.68aad oo ku saabsan Waqtiga Qandaraaska La Galayo waxaa loo qoray sidan: (Marka laga reebo xaaladaha deg dega ah ama go'aan oggolaansho hore oo ay gaareen Guddiga Qandaraasyada Iibka Hay'adda, Hay'adaha

Iibinta ma geli karaan qandaraas iib ilaa ay ka soo wareegto afar iyo toban (14) maalmood maalintii la shaaciyey ciddii ku guuleysatey qandaraaska lagu tartamayey sida ku cad Qodobka 83aad farqadiisa 4aad.)

QOD 13AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.83aad

1. Qod.83aad (Faq 3aad & Faq 4aad) oo ku saabsan Abaalmarinta Qandaraaska waxaa loo qoray sida:

   (3. Isla mar ahaantaa uu qiimaha qandaraaska ka bato heerarka ku qeexan Xeer Nidaamyaha, waa in la ogeysiyaa tartamayaasha kale iyo Maamulka, iyadoo la tilmaamayo magaca iyo cinwaanka guuleystaha la soo jeediyey iyo qiimaha qandaraaska.

   4. Qandaraaska waa inaan la saxiixin ilaa ugu yaraan ay ka soo wareegtay 14 cisho gudahood, kaddib siinta ogeysiiskaas loogu oggolanaayo tartame walba oo caraysan inuu ku soo gudbiyo cabasho ama racfaan. Inta lagu jiro 14-ka maalmood ee la sugayo natiijada qandaraaska la shaaciyay qiimihiisana la jaangooyay ee ku xusan Qodobka 74aad ee Xeerkani, Maamulku wuxuu samayn kara arimahan:

   a) Dib u eegista dhammaan habraaca loo maray qandaraaska lagu guulaystay;

   b) Iclaamin kusaabsan in la kordhiyo waqtigii sugitaanka oo ahaa 14-ka maalmood, si ay waqti ugu helaan dib u eegista, haddii loo baahdo; iyo

   c) Iclaamin ku saabsan in la hakiyay ku- dhawaaqidda natiijada qandaraska haddii Maamulku u arko in Qodob ku xusan Xeerka la jebiyay.)

QOD 14AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.84aad

1. Qod.84aad Farqadda 2aad & 3aad oo ku saabsan Aqbalaada Qandaraaska Dhaqangalka iyo Saxiixa Qandaraaska waxaa loo qoray sidan:

2) Marka loo baahan yahay qandraaska iibka in la saxiixo:

   (a) Qandaraaska iibka waa in ay bilaabaan Waaxda iibka iyo qandraaslaha loona gudbiyaa Hanti- dhowraha guud si loo diiwaan galiyo.

   (b) Diiwaangalinta Hantidhowraha guud waxay ka dhigan tahay:

(i) Xaqiijinta in qandaraaskii uu helay Hanti-dhowraha guud si loo diwaan galiyo;

(ii)Hanti-dhowraha guud wuxuu xaqiijinayaa in qiimaha ku yaalla qandaraaska uu la jaan qaadayo ama uusan khilaafsanayn miisaaniyadda loo qoondeeyay Waaxda iibka; iyo,

(iii)) In saxiixa lagu saxiixay magaca waaxda iibka uu yahay mid munaasab ah.

(c) Hanti-dhowraha guud awood uma leh inuu dib u eegis ku sameeyo ama uu ansixiyo dhinacyada kale ee qandaraaska, ama dhinacyada la xiriira tallaabooyinka iyo hababka uu soo maro iibku.

(d) Hantidhawrka Guud waxaa u bannaan inuu meesha ka saaro shuruudaha diiwaangelinta kuna bixiyo qoraal ahaan, isagoo eegayo Wax ku oolnimada, qandaraasyada ka hooseeya xaddiga qiimaha la jaangooyey. Marka sharcigan ama dukumintiga lagu dalbanayo (solicitation document) in lasoo gudbiyo codsiyada ay qeexaan in qandaraaska ay tahay in uu ogolaado maamul kale, oo ay ku jiraan ogolaanshihii lagu xusay Qodobka 30aad, qandaraaska iibka ma noqon doono mid dhaqangala haddii aan la ogolaan.

3) Qandaraasyada iibka waxay si rasmi ah u dhaqan galayaan oo kaliya ka dib marka:

(a) Bixintiisu waafaqsan tahay qodobada sharcigan;

(b) Uu Diiwaan galiyo Hanti-dhowraha guud, hadii aan shuruudaha laga cafin sida ku xusan Qodobka 84aad faqradiisa 2aad. Faqradiisa d. iyo,

(c) Qandraaska ay saxiixaan dhincyada ay khuseyso

QOD 15^{AAD}
Wax-Ka-Beddelka Qod.86^{aad}

2. Qod.86^{aad} Faqradda 1^{aad} oo ku saabsan Tartan Ka Qaybgal Dalab Xaddidan ama Kooban waxaa loo qoray sidan:

1) Hay'adda Iibinta waxay sameyn kartaa tartan ka soo qaybgal qandaraas dalab xadidan ama kooban halkii ay ka qaban lahayd tartan ka soo qaybgal qandaraas dalab furan oo la shaaciyay waxayse ku xiran tahay ogolaanshaha Guddiga Qandaraaska iibka Hay'adda marka qiimaha ku xusan qandaraaska la filayo inuu dhaafo qaddarkii lacageed ee la jaangooyay ee lagu xusay xeer nidaamiyaha, iyo in ay Guddiga iibku ogoladaan dhammaan xaaladaha kale:

(a) Badeecadaha, hawlaha ama adeegyada laga heli karo oo keliya tiro xaddidan ee tartamayaal qandaraas ah oo la yaqaano; ama.
(b) Hay'adda Iibinta ay waajib ku tahay bixinta iney xaq u leedahay si ay uga jawaabto jiritaanka baahi iib oo deg deg ah.

QOD 16AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.89aad

1. Qod.89aad Faqradda 1aad oo ku saabsan Qandaraas Bixinta Tooska ah waxaa loo qoray sidan:

2) Marka oggolaansho (prior approval) hore laga haysto guddiga iibka, marka qiimaha ku xusan qandaraaska la filayo inuu dhaafo qaddarkii lacageed ee la jaangooyay ee lagu xusay xeer nidaamiyaha, iyo in ay Guddiga iibku oggoladaan dhammaan xaaladaha kale, Hay'adda Iibinta waxay u hawlgelin kartaa si toos ah ama habraaca bixin qandaraas hal il kaliya marka ay jiraan xalaadaha soo socda:

QOD 17AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.94aad

1. Qod.94aad Faqradda 3aad oo ku saabsan Xulashada Ku Salaysan Tayada iyo Qiimaha waxaa loo qoray sidan:

3) Hay'adda Iibinta waxay adeegsaneysaa "Codsiga Loogu Talogalay SooJeedimaha" caadiga ah oo ay ku jiraan warqadda ka qaybgalka dalabka, wargelinta talo bixiyeyaasha, shuruudaha tixraaca iyo heshiiska la soo jeediyay.
(i) Haddii qiimaha ku xusan qandaraaska iibka uu ka sara maro heerkii lacageed ee la jaangooyay ee lagu caddeeyay xeer nidaamiyaha, shuruudaha lagu muujiyay qodobka 72aad ee tartammada furan waxa uu khusaynayaa hab-raac ku salaysan xulasho ku dhisan tayo iyo qiimo.

QOD 18AAD
Wax-Ka-Beddelka Qod.176aad

1. Qod.176aad Faqradda 2aad oo cinwaankiisu yahay Qoddobo Ku Meel Gaar ah waxaa loo qoray sidan:

2) Sida lagu xusay qodobka 125aad (1) halka aragtida Maamulka ee sii wadidda wax heshiis sharcigan ah ama wax kasta oo la qabtay ama uu qof sharcigan ku xadgudbay, markaa Maamulka wuxuu qaadi karaa talaabooyinka ku habboon ee

lagu saxayo meelaha isdhaafku ka jiro ilaa laga gaarayo in la is waafajiyo si waafaqsan sharcigan.

(a) Inta laga magacaabayo Guddiga Iibka ee Qaranka iyo Agaasimaha, muddo ku siman 120 maalmood gudahood laga billaabo maalinta Madaxweynuhu saxiixo wax-ka-beddelka sharcigaan laguna soo saaro faafinta rasmiga ah, Wasaaradda ayaa sii qabanaysa awoodihii uu lahaa Guddigaas sida xeerkan ku xusan.

(b) Wasaaradda ayaa go'aan ka gaaraysa qorshaha horrumarinta ee ku habboon ee dhinaca shaqaalaysiinta xoghaynta Guddiga Qandaraaska iibka. Qorshahaasi shaqaalaysiinta waxaa ku jiri Kara, isticmaalidda shaqaalaha sii joogay ee Wasaaradda Maaliyadda si ay u buuxiyaan doorarka xoghaynta, illamaa waqtiga si madax bannaan ay Guddiga Qandaraaska ee Iibka uga shaqaalaysiinayaan shaqaale leh tayaddii looga baahnaa.

(c) Ayadoo aan la baalmarayn Qodobka 176^{aad} Faqradiisa 5^{aad}, Wasaaradda waxaa lagula xisaabtamayaa, hubinta in imkaaniyaatkii (resources) loo baahnaa ay diyaar u yihiin Maamulka iyo Guddiga Dib u eegista si ay waajibaadkooda u gutaan sida ku cad sharcigan.

2. Qod. 176^{aad} waxaa lagu kordhiyay faqrad cusub oo u qoran sidan: (Sharciga Iibka ee Qaranka wuxuu qabanayaa howlaha iibka iyo qandaraasyada heer federaal, Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka waxay leeyihiin shuruuc iib oo heerkooda ah.)

SHARCI LR. 21 Taariikh: 05/02/2020

ANSIXINTA WAX KA BEDELKA SHARCIGA FURDOOYINKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. GSH252/12/01/B-10/20 Taariikh 16/01/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Wax ka bedelka Sharciga Furdooyinka

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Wax ka bedelka Sharciga Furdooyinka.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 05/02/2020

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: 1111/0111/2020
TAARIIKH 24/03/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

SHARCIGA
CANSHUURAHA FURDOOYINKA

Sharci Lr. _____ ee _____

SHARCIGA CANSHUURAHA FURDOOYINKA

QEYBTA 1^AAD
MAAMULKA FURDOOYINKA

Qodobka 1^aad
Qeexid

1. **"Shuruucda Furdada":** waxaa ka mid ah sharcigan iyo sharci kasta oo kale oo la soo saaro oo la xiriira furdooyinka iyo bayaan kasta, xeer, xeer-nidaamiye ama qaraar kasta oo lagu soo saaro awood kasta oo sharci oo la xiriira furdooyinka meel kasta oo ka mid ah Jamhuuriyadda dhexdeeda.
2. **"Canshuurta Furdooyinka"** waxaa loola jeedaa canshuur kasta oo laga qaado xuduudaha Jamhuuriyadda iyo meelaha xuduudaha u furan oo ah badda, bariga iyo cirkaba.
3. **"Alaabo"** wax kasta oo ay ka mid yihiin maacunta, waxa laga ganacsado, iyo xoolaha.
4. **"Sarkaal":** waxaa loola jeedaa sarkaal ka tirsan waaxda furdooyinka.
5. **"Sarkaalka ugu habboon":** waxaa loola jeedaa sarkaal kasta oo xaqiisa ama waajib ay ku noqon karto qabashada ama sameynta falka la xusey.
6. **"Goobta Furdada"** waxaa loola jeedaa goob kasta oo Madaxa Waaxdu u magacaabey in ay tahay goob furdo.
7. **"Jamhuuriyadda":** waxaa loola jeedaa Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaana ka mid ah guud ahaan dhulka Jamhuuriyadda iyo biyaha soo hoosgelaya khad khayaali ah oo barbar-socoda xeebaha ama jamallada kore ee badda Jamhuuriyadda ee ka kor muuqda biyaha hoose marka ay jiraan mowjadaha caadiga ah ee gu'ga iyo masaafo dhan lix mayl *(nautical miles)*.

Qodobka 2^aad
Canshuurta Furdooyinka Ee Ay Tahay in La Qaado

1. Canshuurta furdada waxaa laga qaadayaa badeecadaha iyo xoolaha la keeno Jamhuuriyadda ama laga dhoofiyo.

Qodobka 3aad
Waaxda Furdooyinka

1. Waa in ay jirtaa waax furdooyin oo uu xukumayo agaasime uga mas'uul ah Wasaaradda Maaliyadda.
2. Adeege dowladeed kasta oo ka shaqeeya goob furdo ah waxaa marka uu joogo furdada uu hoos tegayaa Madaxa Waaxda Furdooyinka.

Qodobka 4aad
Canshuurta Furdooyinka

1. Canshuurta furdooyinka waxay noqon kartaa mid cayiman iyo mid qiima ku salaysan waxaana lagu soo rogi karaa, lagu burrin karaa waxna looga beddeli karaa sharci canshuureed oo ay ansixiyeen labada aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya.

Qodobka 5aad
Waqtiga Lacagta La Bixinayo ayaa Hagaya Qiimaha (Rate) Canshuurta

1. Haddii qiimaha canshuurta la beddelo, qiimaha canshuurta laga bixinayo alaab kasta waxay noqonaysaa qiimaha dhaqangalka ah waqtiga lacagta la bixinayo.

Qodobka 6aad
Bixinta Canshuuraha iyo Lacagaha Kale

1. Waajibka lagu bixinayo canshuurta furdada waxaa ku jiraya lacagaha kale ee lagu leeyahay alaabta, uruurintoodana waxaa mas'uuliyaddeeda iska leh madaxda furdada, lacag bixintaasina waa in ay dhacdaa ka hor inta alaabta aan laga saarin furdada.

Qodobka 7aad
Mas'uuliyadda Wakiilka

1. Qof kasta oo milkiilaha alaabo mas'uul uga ah mid ka mid ah ahdaafta sharcigan waxa uu shakhsi ahaan mas'uuliyaddeeda u qaadayaa bixinta

canshuurta furdada ee ay tahay in laga bixiyo alaabta waxaana waajib ku ah in uu sameeyo, dhammaan hawlaha la xiriira alaabta ee milkiilaha uu sharcigan ku waajibinayo in uu sameeyo laakiin ma jiraan wax sharcigaan ku qoran oo milkiilaha wakiilka laga yahay ka qaadaya mas'uuliyadda wax kasta oo lagu leeyahay.

Qodobka 8aad
Mas'uuliyadda Qofka Wakiilka Laga Yahay

1. Shakhsi kasta oo qof u wakiishay in uu ku metelo wax kasta oo la xiriira wixii alaab ah si waafaqsan ujeeddooyinka sharcigan, fal kasta oo uu ku kaco wakiilku, masuuliyadeeda waxaa iska leh shakhsiga wakiishay, waxaana ka dhalan kara ganaax si la mid ah sidii oo uu qofkaasu laftiisu sameyay falkaas, laakiin laguma xukumayo xabsi ilaa uu shakshigu qirto in uu amray dembigaa, iyada oo wax kasta oo halkaan ku xusan aanay meesha ka saaraynin in wakiilka lagu soo oogi karo dembi.

Qodobka 9aad
Diyaaradaha iyo Maraakiibta Dalalka Shisheeye

1. Ka dib marka la sameeyo baarista/hubinta caadiga ah ee furdada, waxaa reebban in diyaarad ama markab ka socda dalal shisheeye la fuulo ama la baaro, haddii uusan sarkaalka ku habboon ku tuhmin in diyaaradda ama markabku ay saaran yihiin alaabo shuruucda Dalka u yaal aysan oggolayn in la soo geliyo Dalka.

Qodobka 10aad
Saacadaha Shaqada

1. Maalmaha iyo saacadaha shaqada waxaa lagu xeerinayaa xeer-nidaamiye. Sarkaalka ku habboon waxaa uu oggolaan karaa codsi uga yimaada dadweynaha oo ay ku codsanayaan in loo adeego waqtiyo ka baxsan saacadaha loogu talogaley shaqada si waafaqsan xeer-nidaamiyeyaasha iyo bixinta ujuurooyinka u dhigan.

Qodobka 11aad
Muran La Xiriira Qiimeynta ama Kala-Soocid

1. Marka uu yimaado muran la xiriira qiimeynta ama kala-soocidda la xiriirta alaabo, soodejiyaha, la wareegaha, ama dhoofiyaha ama wakiilka waa in uu dhigo lacagta canshuurta ay ka dalbatey hay'adda furdooyinka waana in lacagtaasi loo arkaa in ay tahay midda ku waajibtay, haddii aan muddo labo bilood gudahood maxkamadda awoodda u leh go'aan ka duwan ka gaarin, ka dib marka uu ka dalbadado dhigaal-bixiyaha lacagta ama wakiilkiisa.

Qodobka 12aad
Soo-dejin Ku-meelgaar ah

1. Madaxa Waaxda Furdada waxaa uu shakhsi kasta u oggolaan karaa in uu soo dejiyo alaabo nooca ay doonto ha ahaatee isaga oo aan bixin canshuur ka dib marka uu ku qanco in alaabta noocaas ah si ku-meelgaar ah loo soo dejinaayo oo aysan ahayn mid la iibinayo. Oggolaanshaha noocaas ah waa in uu waafaqsanaadaa shuruudahan soo socda:
   a. In alaabtaas dib loogu dhoofinayo muddo saddex bilood ah oo ka bilaabata taariikhda oggolaanshaha;
   b. In qofka la siinayo oggolaanshaha uu qaddarka lacagta canshuurta ku waajibi lahayd alaabta noocaas ah uu dhigaal ahaan u bixiyo ama damaanad ahaan uu u dhigo hadba sida uu faro Madaxa Waaxda.
2. Madaxa Waaxda marka uu sabab ku filan uu helo waxa uu kordhin karaa waqtiga dib-u-dhoofinta.

Qodobka 13aad
Dhoofin Ku-meel-gaar ah

1. Alaabooyin waxaa si-ku-meelgaar ah loo dhoofin karaa muddo saddex bilood gudahood ah, iyada oo Madaxa Waaxdu uu kordhin karo waqtiga marka uu helo sabab ku filan.

Qodobka 14aad
Mamnuucidda Soo-dejinta Ama Dhoofinta Waxyaabo Gaar ah

1. Wasiirka ayaa wareegto ku soo saari kara in alaabo kasta oo uu ku cayimo wareegtada aan si ku-meelgaar ah loo soo dejin Karin sida ku cad Qodobka 12aad, ama aan si ku meelgaar ah loo dhoofin Karin sida ku cad Qodobka 13aad.

Qodobka 15aad
Soo-dejinta Ku-meel-gaarka ah ee Baabuurta

1. Iyada oo aan wax loo dhimin qodobadda kale ee Sharcigan, baabuurta ayaa si ku-meelgaar ah loo soo dejin karaa si waafaqsan qodobadda ku jira heshiis kasta oo caalami ah oo ay Jamhuuriyadda qayb ka tahay.

Qodobka 16aad
Shuruudo Gaar ah oo La Xiriiro Alaabo Gaar ah

1. Hadii ay jirto alaabo la mamnuucay ama la xakameeyey waxaa loo sameyn karaa shuruudo gaar ah. U hoggaansamid la'aanta shuruudaha oggolaanshaha lagu bixiyey in si kumeelgaar ah loo soo dejiyo ama loo dhoofiyo waxaa lagu muteysanayaa ciqaab sharci.

Qodobka 17aad
Alaabta Loo Isticmaalo Si Ka Soo Horjeedda Shuruudaha Gaarka Ah

1. Haddii alaabo ay ku waajibeyso canshuur oo si sharci ah loo oggolaado in lagu soo dejiyo qiimaha canshuurtuna ka yar tahay intii caadiga ahayd, ama canshuur dhaaf loo sameeyo si loogu isticmaalo hadaf gaar ah ama si gaar ah uu u isticmaal sarkaal dowladeed, iyo haddii alaabta noocaas ah loo isticmaalo hadaf kale ama si xadgudub ku ah ogolaanshihii gaarka ahaa ama uu isticmaalo shakhsi kale, alaabta noocaas ah waa in lala wareegaa ilaa canshuurtii ku waajibtay oo buuxda la bixiyo, waxaana qof kasta oo ku lug leh isticmaalka alaabta noocaas ah lagu qaadi karaa ciqaabta uu dhigayo sharciga.
2. Alaabta noocaas ah waa la iibin karaa, la wareejin karaa ama waxaa loo isticmaali karaa ahdaaf kale haddii canshuurta la qiimeeyey in ay ku waajibtey alaabta si waafaqsan qiimaha waqtiga la iibinayo, la wareejinayo ama la isticmaalayo, waa in canshuurtaas lagu bixiyay waaxda furdada.
3. Soo-dejiyuhu alaabo kasta uu soo dejinayo sida uu dhigayo Qodobkan, waxaa marka uu ka dalbado sarkaalka furdo ku uu keenayaa ama uu cadeeynayaa alaabtaas si uu ugu qanci karo Madaxa Waaxda. Haddii uu ku guul-darreysto in uu keeno alaabta noocaas ah ama uu cadeyn kari waayo, waxaa lagu soo oogayaa ciqaabta u dhigan sharciga ee la xiriirta soo gelinta sharci darrada ah.

Qodobka 18aad

Heshiis oo lagu Saxayo Is-beddelka Qiimaha Canshuurta

1. Haddii la galo heshiis la xiriira iibinta ama geynta alaabo ay canshuuri ku waajibtey, qiimaha canshuurta ay is-beddesho ka hor inta aan alaabta la geynin, haddii aaney jirin qodob si cad u tilmaamaya taas beddelkeeda, waa in sicirka la bixinaayo saamigiisa la waafajiyaa is-beddelka ku yimid canshuurta.

Qodobka 19aad

Dembiga Soo Gelinta Sharci Darrada ah (Smuggling)

1. Qof kasta oo:

a. Isaga oo og oo **ay** gacantiisa soo gasho ama si uun ugu lug yeesha qaadista, bixinta, meel-dhigista, qarinta ama si uun ula tacaamula alaabo isaga oo hadafkiisu yahay in uu maamulka furdada ku khiyaamo canshuur kasta oo ku waajibtey, ama

b. Isaga oo og si uun ugu lug yeesha in uu si khiyaano ah ugula dhuunto canshuur ama shuruucda iyo xannibaadaha furdada ee la xiriira soo-dejinta, dejinta, bakhaardhigista, geynta, saarista, rarista iyo dhoofinta alaabo, ama

c. Uu, diyaarad, markab, gaadiid kale ama alaabadu ay noqdaan kuwa lala wareegi karo sida ay dhigayaan shuruucda furdada isaga oo si bareer ah ugu lug yeesho falka ama waajib ka soo-bixid la'aan ka dhigta mid lala wareegi karo. Waxaa lagu qaadayaa dembiga soo gelinta sharci darrada ah (smuggling) waxaana mid kasta oo ka mid ah dembiyada oo lagu helo ka dhalan kara ciqaab aan ka yareyn saddex jibaar ama wax ka badaneyn toban jibaar canshuurtii laga qaadi lahaa alaabta waxaana lala wareegayaa dhammaan alaabta dembigaa lagu galey.

2. Qof kasta oo noocaas ah waxaa soo qaban kara oo xiri kara sarkaal kasta oo boolis ah. Haddii aan damaanad lagu sii deyn, waa in muddo afartan iyo siddeed saac gudahood ah, oo aan ku jirin waqtiga safarka halka lagu xirey ilaa maxkamadda, la hor gaynayo maxkamadda awoodda u leh una qaada dacwadda si waafaqsan sharciga.

Qodobka 20aad
La-wareeggida Markab ama Diyaarad

1. Haddii markab ama diyaarad ku sugan Jamhuuriyadda dhexdeeda ama badaheeda ay u hoggaansami waydo amar kasta oo sharci ah oo uu siiyo sarkaal dowladeed iyaga oo baxsanaya la ceyrsado, ama alaabtii qaar ka tuuraan oo wax yeelo soo gaarto iyagoo diidan in la qabto ama ay burburiyaan caddeymaha waxa ay tahriibinayaan, markabkaas ama diyaaraddaas waa lala wareegayaa.

Qodobka 21aad
Soo Gelinta Sharci Darrada ah ee Ba'an/Dhibta Badan
(Aggrevated Smuggling)

1. Haddii qof ku howlan yahay in uu ku kaco dembi ka dhan ah shuruucda furdada yahay na mid ku hubeysan hub khatar ah, marka lagu helo dembi kasta oo furdo, wuxuu muteeysanayaa toban jibaar canshuurtii ku waajibtey alaab kasta oo dembiga lagu galey, waxa intaas loo raacinayaa xabsi u dhexeeya sanad ilaa seddex sano.
2. Haddii qofka noocaas ah uu adeegsado hub khatar ah isaga oo u jeedkiisu yahay in uu cid dhaawaco ama uu dhaawaco sarkaal waajibkiisa gudanaya, waxaa loogu sii darayaa in u ku muteeysto xukunka ku xusan faqradda 1aad xabsi muddadiisu aaney ka badneyn toban sano.
3. Marka dembi kasta ee ku xusan shuruucda furdada ay galaan saddex qof ama ka badan oo iska kaashanaya hadafkaas, ciqaabta dembiga noocaas ah waa in ay ahaataa mid aan ka yareyn laba-jibaarka inta ugu yar waana in qof kasta oo ka mid ah lagu qaadaa xabsi aan ka badneyn toban iyo laba bilood ama ganaax iyo xabsi u dhigma dembigaaslabada kan culus.
4. Marka qofka lagu helo dembi jebinaya sharciga furdada oo qofkaasna horey-loogu helay dembi uu horey uga galay sharciga furdada, ciqaabta uu muteysanaayo qofka noocaas ahi ee lagu qaadayo dembiga uu mar labaad galay waa in aaney ka yaraan lix jibaar canshuurtii laga qaadi lahaa alaabta dembiga lagu galey, dembi kaste oo uu galo qofkaasi dembiga labaad ka dib waxa uu muteeysanayaa in loogu daro ciqaabta xabsi aan ka badneyn laba sano.

Qodobka 22aad
Dammaanad

1. Marka qof aan loo haysan waaran lagu soo qabto ama lagu soo xiro dembi la xiriira arrimaha furdada oo aan ciqaabtiisu ahayn xabsi oo uu qofkaasu waqti kasta diyaar u yahay inta uu xiranyahay in u bixiyo damaanad, qofkaas waa lagu sii deyn karaa damaanad.
2. Ka hor inta aan qofka la hor keenin maxkamadda awoodda u leh waa in damaanadda ay siiyaan Saraakiisha Furdada ee awoodda u leh. Lacagta damaanadda ah waa in aaney ka yaraan saddex-meelood laba meel (2/3) ciqaabta ugu badan ee dembiga loo soo qabtey ama loo soo xirey.
3. Qodobkan waa in uusan saameyn ku yeelan awoodda ay maxkamad ama cid kale ku leedahay in ay cid ku sii deyso damaanad.

Qodobka 23aad
La-wareegidda Gaadiidka Lagu Qaado

1. Marka gaadiid nooca uu doono ha ahaadee loo adeegsado dembi ay tilmaameen shuruucda furdada, waa in lala wareegaa marka laga reebo haddii milkiiluhu uu maxkamadda awoodda u leh ku qanciyo in gaadiidkaas aan si gaar ah loogu adeegsanin dembigaas iyo in qiimaha alaabta ay khuseyso aaney u dhigmin qiimaha gaadiidkaas.
2. Markab kasta oo culeyskiisu ka badan yahay laba boqol iyo konton tan waxa sii deyn kara sarkaalka ku habboon ka dib marka uu ku qanco in milkiilayaasha markaas ay u hoggaansami doonaan amarrada maxkamadda awoodda u leh.

Qodobka 24aad
Xaraaashidda/ Ka-takhalusidda Waxyaabaha Lala Wareego

1. Marka alaabo ama gaadiid loola wareego si waafaqsan shuruucda furdada, alaabtaas ama gaadiidkaas waxaa ay noqonayaan hanti ay leedahay Dowladda waxaana looga takhalusayaa/xaraashayaa (dispose off) sida ay u dhigaan xeer-nidaamiyeyaal uu soo saaraayo Wasiirka Maaliyadda.

Qodobka 25aad
Baarista

1. Haddii qof uu sarkaal ku daba-joogo la qabto isaga oo faraha kula jira dembiyo uu dhigayo sharciga furdada, waxaa uu sarkaalkaas isaga oo aan haysan waaran adeegsan karaa dhammaan awoodihii uu lahaan lahaa in uu adeegsado haddii uu heli lahaa amarka uu dhigayo Qodobka 97aad ee Sharciga Maamulka Dakhliga, waase in uu warbixin ku siiyaa maxkamadda awood u u leh labaatan iyo afar saac gudahooda marka uu awooddaas adeegsado.

Qodobka 26aad
Xuquuqda Roondo-Sameynta

1. Sarkaalka, marka uu shaqada ku jiro, waxaa uu roondo ku sameyn karaa oo uuna si xor ah u dhinac mari karaa una kor mari karaa una geli karaa meel kasta oo Jamhuuriyadda ka mid ah marka laga reeebo guri ama dhismayaal kale oo la deggan yahay, sarkaalka noocaas ah ee roondada sameynaya laguma qaadi karo eed, tallaabo ama dacwad la xiriirta roondada uu sameeyey.

Qodobka 27aad
Qiimeynta Alaabta

1. Xeerarka loo adeegsanayo qiimaynta alaabta iyada oo ujeedku yahay ganaaxa ama canshuurta ku waajibtay waxaa qeexaya xeer-nidaamiyeyaal uu soo saarayo Wasiirka Maaliyadda, hadba heer xukuumadeedka u xilsaaran si waafaqsan Qod.50aad (b) ee Dastuurka KMG ah.

Qodobka 28aad
Xeer-nidaamiyeyaasha

1. Wasiirka Maaliyadda waxaa uu soo saari karaa xeer-nidaamiyeyaal lagu kobcinayo, laguna wanaajinayo oo sida ugu wanaagsan loogu hirgelinayo qodobadda ku jira sharcigan, iyada oo aanay saamaynayn qodobbada sare ee sida guud u hadlaya, oo ay ka mid yihiin:

a. Shuruudaha dhoofinta ku-meelgaarka ah iyo qiimeynta canshuurta alaabooyinka dib loo soo dejiyo;
b. Shuruudaha soo-dejinta ku-meelgaarka ah iyo qiimeynta canshuurta laga bixinaayo dib-u-dhoofinta;
c. Waajibaaddka saaran milkiilayaasha, madaxda, wakiillada iyo shakhsiyaadka kale ee la xiriira imaanshaha, soo-sheegidda, raridda, dejinta, habraaca imaanshaha iyo bixidda, koridda ama ka degidda rakaabka, baarista shakhsiyaadka, maraakiibta, diyaaradaha, baabuurta iyo dhismayaasha ama goobaha, awoodaha ay u leeyihiin in ay amarro waajib ah siiyaan, in ay shakhsiyaad ka soo qabtaan ama ka soo xiraan maraakiib, diyaarado, baabuur ama gaadiid kasta oo kale;
d. Sameynta iyo hawlgelinta bakhaarrada iyo goobaha furdooyinka, ee wax la dhigo lagana qaato alaabta iyo shuruudaha iyo habraaca ay tahay in ay ilaaliyaan shakhsiyaadka ka shaqeeya ama isticmaala bakhaarrada;
e. Ganacsiga ka dhexeeya dekadaha dalka dhexdooda;
f. Ganacsiga dalka sii mara ee dal kale ku wajahan (Ganacsiga Transitka ah);
g. Soo-dejinta iyo dhoofinta badeecooyinka;
h. Soo-dejinta iyo dhoofinta loo adeegsado boostada;
i. Awoodaha, hawlaha iyo waajibaadyada saraakiisha oo ay ka mid tahay awoodda barista shakhsiyaadka, maraakiibta, diyaaradaha, baabuurta iyo dhismayaasha ama goobaha, awoodahooda amarsiinta, qabashada ama xiridda shakhsiyaadka ama alaabta;
j. La-wareegidda alaabo, maraakiib, diyaarado ama gaadiid lala xiiriiyo dembiyada ama ka baxsashada shuruucda furdada;
k. Dukumentiyada ay tahay in ay uruuriyaan iyo ujuurooyinka ay tahay in ay bixiyaan shakhsiyaadka ee la xiriira hawlgallada furdada;
l. Dibaajiyada (bonds) iyo damaanadaha kale, shuruudaha la xiriira iyo sida loola wareegayo, sii-hayntooda ama lacagayntooda;
m. Alaaabada laga tago ama la dayaco iyo habraaca la xiriira;
n. Saacadaha shaqada ee xafiisyada furdada iyo joogitaanka saraakiisha ka shaqeeya, ujuurooyinka ay tahay in lagu bixiyo waqtiga dheeraadka ah (overtime) ee la shaqeeyo iyo kharashaadka kale ee soo baxa;
o. Sharikadaha soo dejinta iyo raridda badeecadaha,

QEYBTA 2^AAD
TARIIFADA FURDOOYINKA

Qodobka 29^aad
Canshuurta Alaabta Waxyeeladda soo Gaartay

1. Canshuur cayiman waa in lagu soo rogaa alaabta la soo dejiyo iyada oo aan loo eegin sida ay tahay xaaladdeeda; waa in aan canshuurta gebi ahaan ama qayb ahaan looga dhaafin haddii ay alaabta soo gaarto dhibaato sabab kasta ha ku timaaddee.
2. Canshuur dhimis ayaa loo sameynayaa alaab la soo dhoofiyey oo dhibaato soo gaartey marka xisaabinta canshuurta ay ku saleysan tahay 'qiimaha alaabta': Milkiilaha alaabta dhibaatadu soo gaartey ayaa xaq u leh in alaabta la burburiyo isaga oo kharashka burburintaas la baxaya taas oo ku xiran taxaddarada ay waajibiyeen madaxda furdooyinka.

Qodobka 30^aad
Canshuurta soo Dejinta ee Ku Saleysan Miisaanka

1. Canshuurta soo dejinta ee alaabta canshuurta ku waajibtey loo cayimey si waafaqsan miisaankooda, waa in lagu saleeyaaa miisaanka guud ee alaabtaas, marka laga reebo haddii si kale loogu waajibiyo tariifadda.
2. Miisaanka guud waa miisaanka alaabta iyo xirmooyinkooda.
3. Miisaanka saafiga ah waa miisaanka alaabta ka dib marka laga saaro xirmooyinka iyo cabeynta.
4. Qaddarka canshuurta "qiimaha" ku saleysan waa in qiimeynteeda lagu saleeyaa qiimaha alaabta ay canshuurtu ku waajibtey, sida ay dhigayaan qodobbada soo socda ee sharcigan.
5. Mar kasta oo tariifad ay dhigeyso canshuur cayiman iyo sidoo kale mid ku saleysan "qiimaha", waa in ay ku waajibtaa labadaba.

Qodobka 31^aad
Dalka Asal Ahaan Ay Ka Soo Jeedo iyo Dalka Laga Soo Rarey

1. Dalka asal ahaan ay alaabtu kasoo jeedo, waa dalka alaabta lagu sameeyey ama qeybtii ugu dambeeysay lagu farsameyay soo saaristeeda.
2. Dalka laga soo rarey waa dalka alaabta lagu keydiyey, waase haddii dalkaasi lacagta loo shubey.

Qodobka 32aad
Kala Soocidda Alaabta

1. Alaabta waa in loo kala soocaa si waafaqsan madaxyada Tariifooyinka. Cinwaannada Qaybaha, Cutubyada iyo, Cutub-hoosaadyada ayaa loo kala bixiyey si uu u fududaado tixraaca oo keliya, maaddaama kala-soocidda lagu go'aaminayo keliya ereyada madaxdaya gaarka ah ee Tariifooyinka iyo Qoraallada Qaybaha ama Cutubyada ee u habboon ee ku dhex jira Tariifada.

2. Marka alaabo lagu kala sooci karo labo madax ama wax ka badan, madaxyada tariifada, kala-soocidda waa in loo sameeyaa sidan soo socota:

   a. Cinwaanka bixinaya tilmaanta ugu sugan waa in laga doorbidaa cinwaannada bixinaya tilmaamaha guud;

   b. Alaabta kala duwan ama isku jira oo ka kooban agab kala duwan ama laga sameeyey cunsurro (components) kala duwan, waa in loo soocaa sidii in ay ka kooban yihiin agabka ama sheyga alaabta siinaya tilmaanta aasaasiga ah, waase haddii aan lagu kala sooci karin iyada oo la tixraacayo farqadda *a.*

   c. Marka alaabta la kala sooci karin iyada oo la tixraacayo farqadda *a.* ama *b.*, waa in lagu kala soocaa cinwaanka la halmaala qiimaha canshuurta ugu badan waxaana, haddii qiimaha canshuurtaas ay isku mid ka yihiin wax ka badan hal cinwaan, cinwaanka ugu dambeeya ee Tariifada ku jira.

3. Alaabta aan hoos geleynin cinwaan Tariifo waa in lagu soocaa cinwaanka ku habboon alaabta ay isugu dhow yihiin. Qodobada kore waxaa sidoo kale lagu saleynayaa go'aaminta cinwaan-hoosaadka ugu haboon isla halkaa cinwaan gudihiisa ah.

Qodobka 33aad
Qiimaha La Canshuurayo

1. Canshuurta dhoofinta alaabta ee ku saleysan qiimaha alaabta waa in loo xisaabiyaa iyada oo la adeegsanayo qiimaha la canshuurayo ee waqtigaas jira, tusaale ahaan, qiimaha waqtigaas ay ka joogto suuqa degaanka ee dalka laga soo iibsadey, oo lagu darey lacagta lagu soo qaadey, dillaalka, bakhaar-dhigidda, iwm., ilaa laga soo gaaro xafiiska furdada ee ku yaalla dekadda ay ka soo degayso ama ay ka baxayso.

Qodobka 34aad
Canshuur ku Saleysan Qiimaha Alaabta

1. Canshuuraha ka waajibay soo dejinta alaabta waa in lagu saleeyaa qiimaha alaabta canshuurta laga qaadayo, qiimahasna waa in uu noqdaa qiimaha caadiga ah ee hoos ku dhigan.

Qodobka 35aad
Qiimaha Caadiga Ah

1. Qiimaha caadiga ah waa in uu noqdaa qiimaha loo arki karo in lagu heshiiyey alaabta la soo dhoofiyey, kaas oo ka dhashey iib ku dhacay xaalado tartan buuxa oo u dhexeeya iibsade madax-bannaan iyo iibiye madax bannaan ee dhacay taariikhda alaabta la baarayo.
2. Haddii baarista noocaas ah ay ku dhacdo waqtiga lagu xaddidey xeer nidaamiyeyaasha furdada in furdada loogu soo gudbiyo cadeynta (declaration), madaxda furdomada way diidi karaan kala duwanaanshaha qiimaha ee jira.
3. Qiimaha caadiga ah ee alaabta la soo dhoofiyey waa in loo qiimeeyaa sidan soo socota:
   a. Alaabta waxaa loo tixgeliyanayaa in iibsadaha lagu guddoonsiiyey dekadda ama goobta laga soo galo dalka ee dhulka furdada ee Jamhuuriyadda.
   b. Iibiyaha waxaa loo tixgelinayaa in uu dusha u rito oo uuna qiimaha ku darsado dhammaan kharashaadka la xiriira iibinta iyo geynta alaabta ee ilaa dekadda ama barta laga galo dalka.
   c. Canshuurta furdada iyo canshuuraha kale ee dhulka Soomaaliyeed waa in loo tixgeliyaa in laga qaadayo iibsadaha sidaa daraaddeedna waa in aan lagu darin qiimaha caadiga ah.

Qodobka 36aad
Iib Ku Dhaca Tartan Furan

1. Iib waxaa loo tixgelinayaa in uu ku dhacay xaalado tartan buuxa ku dhisan oo dhex marey iibsade madax-bannaan iyo iibiye madax-bannaan marka:

a. Bixinta qiimaha lagu iibsanayo alaabta ay tahay shuruudda keliya ee xireeysa dhameeystirka heshiiska iibka.

b. Qiimaha lagu heshiiyo aaney saameyn ku lahayn xaaladaha ganacsi, maaliyadeed ama xaalado kale, haddii lagu xuso ama lagu xusin qanadaraaska, marka laga reebo shuruudaha, iibinta daraaddeed, u dhex mara iibiyaha ama shakhsi caadi ah ama shakhsi qaanuuni ah oo xiriir ganacsi la leh iibiyaha oo dhinac ah, iyo iibsadaha ama shakhsi caadi ah ama shakhsi qaanuuni ah oo xiriir ganacsi la leh iibsadaha oo dhinaca kale ah.

c. Aaney jirin qayb ka mid ah faa'iidada laga sameeyey dib-u-iibinta, sii-wareejinta ka dambeysa ama ka-faa'iideysiga alaabta urureysa taas oo si toos ah ama si aan toos ahaynba uu iibiyaha ama shakhsi caadi ah ama shakhsi qaanuuni ah oo xiriir ganacsi kala dhexeeyo iibiyaha.

2. Laba qof waa in loo tixgeliyaa in uu xiriir ganacsi ka wada dhexeeyo haddii midkood uu wax ku leeyahay ganacsiga midka kale ama haddii labadooduba ay wax ku wada leeyihiin ganacsi uu wado mid ka mid ah labada, iyada oo aan loo eegin in ay tahay wax ku lahaansho toos ah ama mid aan toos ahayn.

Qodobka 37aad
Qiimaha ku Saleysan Tirada Alaabta

1. Haddii qiimaha caadiga ah uu ku xiran yahay tirada alaabta ay tahya in la iibiyo, qiimahaas caadiga ah ee la soo sheegey ayaa lagu go'aaminayaa qiyaasta ah in iibintu ay la xiriirto tirada alaabta la soo gudbiyey ee ay tahay in la qiimeeyo.

Qodobka 38aad
Qiimeynta iyo Batantaha

1. Marka alaabta la rabo in la qiimeeyo oo:
   a. loo soo saaro si waafaqsan nidaamka batantaha (patented) ama lagu ilaaliyey nooc ama nakh-shad ama xuquuq diiwan gashan;
   b. ay leedahay calaamad ganacsi oo ajnebi oo loona soo dhoofiyey in lagu iibiyo calaamaddan ganacsi, xataa haddii sii hagaajin kale lagu sameeyo.

2. Qiimaha caadiga ah waxaa la go'aaminayaa iyada oo la tixgelinayo in qiimahan uu ku jiro qiimaha xuquuqda ka-faa'iideysiga batantiga, nakh-shadda ama nooca ama xuquuqda ama calaamadda ganacsi ee ay leedahay alaabtaasi.

Qodobka 39aad
Qiimaha Caadiga ah ee Iibka

1. Marka alaabta la soo dejiyo lagu iibiyo xaalado tartan furan ku saleysan oo uu iibiye madax-bannaan ka iibiyo iibsade madax-bannaan, qiimaha la bixiyey ama la bixin doono ee iibka daraaddii ah ayaa loo tixgelin karaa in uu si sax ah u tilmaamayo qiimaha caadiga ah ee looga soo hadley Qodobka 35aad ee kore.
2. Kharashaadka raridda, xamuulka, caymiska, khidmadda iyo dhammaan kharashaadka kale ee la xiriira iibka, diridda iyo geynta alaabta ilaa laga gaaro dekadda ama goobta laga soo galo dhulka Jamhuuriyadda waa in lagu daraa, haddii aan horeyba loogu darin qiimaha qaan-sheegga; qiimaha canshuurta laga qaadayo waa in sidoo kale lagu daraa sicir-dhimista qeyru-caadiga ah iyo hoos-u-dhigista kale ee Qiimaha alaabta ee qeyru-caadi ah iyada oo aay jirto xaalad tartan furan.
3. Wax-ka-dhimista qiimaha ee wakiillada gaarka ah iyo iibiyeyaasha kale ee u dhexeeya waa in sidoo kale la tixgeliyaa si loogu daro qiimaha canshuurta.

Qodobka 40aad
Qiimeynta Qiimaha Caadiga ah

1. Kharashaadka lagu xusey Qodobka 35aad (b) ee qiimeynta qiimaha caadiga ah waa in ay ku jiraan:
   a. Xamuulka
   b. Caymiska
   c. Khidmadda
   d. Dilaalka
   e. Kharashaadka lagu galo dibadda ee la xiriira diyaarinta dukumentiyada looga baahan yahay si alaabta loogu soo dejiyo dhulka Jamhuuriyadda, oo ay ka mid yihiin ujuurooyinka rasmiga ah;

f. Lacagaha iyo canshuuraha kale ee lagu soo rogo alaabta ee ay tahay in dalka dibaddiisa lagu bixiyo, marka laga reebo kuwa canshuur dhaafka loo sameeyay ama lacagta loo celinayo ama ay tahay in loo celiyo;
g. Kharashaadka rarridda;
h. Kharashaadka kale ee la galo ee la xiriira iibinta, diridda iyo geynta alaabta ilaa laga gaaro dekadda ama barta laga soo gelayo ee furdada dhulka Jamhuuriyadda.

2. Qiimaha canshuurta laga qaadayo alaabta waa in uu ka mid ahaadaa qiimaha xirmooyinka gudaha iyo kuwa dibadda iyo cabeynta guud ahaan.

Qodobka 41[aad]
Kharashka Xamuulka

1. Marka ay u jeedadu tahay xisaabinta kharashka xamuulka, dekadda ama barta laga soo gelayo ee furdada dhulka Jamhuuriyadda waa in ay noqotaa:
   a. Marka alaabo badda la soo mariyey la soo dejiyo, dekadda ay u socoto;
   b. Marka alaabo dhulka ama hawada la soo mariyey la soo dejiyo, xafiiska furdada ee ugu horreeya.

Qodobka 42[aad]
Bedelaada Lacagaha Qalaad

1. Marka waxyaalaha canshuurta ku waajibtey lagu saleeyay lacag qalaad, waa in shilin Soomali loo rogaa iyada oo la isticmaalayo heerka rasmiga ah ee sarifka ee jira maalinta kormeerka alaabatu la bilaabayo.

Qodobka 43[aad]
Caddeynta Qiimaha Alaabta

1. Haddii cadeynta marka la sameeyo aan isla markiiba la baarin alaabta, milkiilaha alaabtu waa in uu u cadeeyaa maamulka furdada qiimaha alaabta la canshuurayo ee loo qiimeeyey si waafaqsan qodobadda kore waana in uu sixitaanka loo baahan yahay ku sameeyaa cadeyntii hore taas oo ku timid isbeddello ku yimid qiimaha.
2. Waa in uu sidoo kale bixiyaa macluumaad kasta iyo qaan-sheegta, xamuulka iyo dukumentiyada kale ee ganacsi ee la xiriira iibka, soo raridda

iyo keenista alaabta ee ay hay'adaha furdada ugu baahan yihiin qiimeynta qiimaha la canshuurayo alaabta.

3. Waajibaadyada kor lagu xusay ee quseeya alaabta dhan ay tahay in lo soo bandhigo furdada, oo ay kujiraan alaabta canshuur-dhaafka loo sameeyo iyo kuwa laga qaado canshuuro gaar ah.
4. Qaan-sheegta waa in ay la socotaa qoraal uu saxiixay soo-dejiyahu ama dhoofiyahu, oo sheegeysa in xogta ku qoran qaan-sheegtan ay sax tahay. Marka lagu daro nuqulka asalka ah, waa in nuqul labaad oo qaan-sheegta ah la socotaa, oo lagu lifaaqayo dukumentiga asalka ah ee furdada ku fasaxayaan alaabta.
5. Maamulka furdooyinka waxaa ay qaadi karaan tallaabooyinka ay u arkaan in ay lagamamaarmaan tahay si ay u eegaan qiimaha canshuurta ku waajibtey alaabta.
6. Wasaaradda Maaliyadda ayaa diyaarineeysa jadwallada canshuurta ku waajibtay alaabta oo loo adeegsan karo hadii qaansheegta asalka ah ama dukumentiga kale ee sheegaya in "qiimahii caadiga ah" aan la heli karin ama marka qaan-sheegyada iyo dokumentiyada la soo gudbiyey aan la aqbali karin si loogu saleeyo "qiimaha caadiga ah".

Qodobka 44aad
Dukumeentiyada Furdada ku-meel-gaarka ah

1. Haddii milkiilaha alaabta uusan keeni karin dukumentiyada loo baahan yahay oo ay la socoto cadeeynta, maamulka furdada waxaa uu alaabta ku fasixi karaa dukumentiyo furdo oo ku-meelgaar ah (iyada oo qiimeynta dib loo dhigayo) oo la heli karo wax aan ka badneyn 30 maalmood iyada oo laga dhigayo dibaaji la mid ah canshuurta furdada ee la xisaabiyey iyada oo sal looga dhigayo qiimaha alaabta la nooc ah oo horey dad u soo martey oo lagu darey 20% (labaatan boqolkiiba). Marka uu dhammaado waqtiga ay madaxda furdada u qabteen in la soo gudbiyo dukumentiga, canshuurta furdada waa in la bixiyaa iyada oo lagu saleynayo qiimaha ay madaxda furdoku ku qiimeeyeen oo lagu darey labaatan boqolkiiba.

Qodobka 45aad
Cabbeynta

1. Xirmooyinka iyo cabeeynta alaabta waa in canshuur gaar ah laga qaadaa marka qiimahoodu uu ka badan yahay qiimaha alaabta.

Qodobka 46aad
Alaabta La Isku Soo Cabbeeyey

1. Marka qiimaha ama miisaanka xirmooyinka sare ay tahay in lagu daro qiimaha oo canshuurta waajibtay ama miisaanka ee alaab laba ama ka badan ah oo isku-cabeeyay laakiin qiimaha canshuurta ee laga qaadayo ay kala duwan tahay ama shuruudaha lagu qiimeynayo canshuurtooda ay kala duwan tahay, markaas qiimaha ama miisaanka noocaas ah waa in si saamigal ah loogu kala qeybiyaa alaabta kala duwan iyada oo loo eegayo qiimaha ama miisaanka alaabta iyada oo aan laga jareynin qiimaha ama miisaanka xirmooyinka sare, alaabo kasta oo isku mid ahba waxaa loo tixgelinayaa in ay gaarkeeda loo cabbeeyay.

Qodobka 47aad
Mamnuucista

1. Adeegsiga tariifada waa in aan loo qaadan in ay meesha ka saareyso qodobbada kale oo sharciga ah ee mamnuucaya, xaddidaya ama si kale u nidaaminaya soo-dejinta, dhoofinta ama sii gudbinta alaabada qaarkood.
2. Alaabta kuwa ay qodobo sharci oo gaar ah dartood aan loo keeni karin dhulka Jamhuuriyadda waa in dib looga dhoofiyaa dalka iyada oo uu kharashkana qabo milkiilaha.
3. Alaabta ay xafiisyadda dowladda ee ku shaqada leh, hadii ay u arkaan in ay dhibaato u leedahay caafimaadka dadweynaha, waa in waqtigii loo cayimey gudihiisa dib looga dhoofiyaa ama lagu burburiyaa iyada oo kharashkuna uu qabo milkiilaha.

Qodobka 48aad

Canshuur-dhaafka Furdooyinka

Alaabtan soo socota waxaa laga dhaafayaa canshuurta soo dejinta iyada oo lagu saleynayo shuruudaha loo cayimey:

1. Waxyaabaha ay leeyihiin Dalalka iyo Madaxda Dalalka ajnebiga ah oo u yimid in ay joogaan Soomaaliya, si ku saleysan wax is weydaarsi dibloomaasiyadeed ee labada dal ka dhexeeya.
2. Waxyaabaha iyo baabuurta ay leeyihiin wakiillada diblomaasiga iyo qunsuliyadaha ee laga aqoonsanyahay Jamhuuriyadda Soomaaliyeed, si ku saleysan wax is weeydaarsi dibloomaasiyadeed ee labada dal ka dhexeeya, waxyaabaha lagama maarmaanka u ah aasaasidda hore ee xafiisyada diblomaasiga iyo qunsuliyadaha, baabuurta iyo waxyaabaha kale ee hawsha rasmiga ah loo adeegsanayo, si ku saleysan wax is weeydaarsi dibloomaasiyadeed ee labada dal ka dhexeeya.
3. Waxyaabaha iyo baabuurta ay leeyihiin wakiillada, saraakiisha iyo khubarrada Qaramada Midoobey, Hay'adaheeda Gaarka ah iyo Ururrada Caalamiga ah sida ay dhigayaan Heshiisyada lagu oggolaadey Sharci. Waxyaabaha iyo gaadiidka loo adeegsanayo hawlaha rasmiga ah ee Ururrada Qaramada Midoobey, Hay'adaheeda Gaarka ah ama Ururrada Caalamiga ah iyo waxyaabaha iyo baabuurta lagama maarmaanka u ah hirgelinta mashaariicda Soomaaliya ay Hay'adahaas uga fulinayaan si waafaqsan Heshiisyo lagu ansaxiyey Sharci. Marka laga reebo oggolaansho ka ballaaran oo lagu oggolaadey Heshiisyo loo rogey Sharci, waxaa loo oggol yahay hal baabuur saddexdii sanaba mar khubarrada haysta heshiis shaqo oo aay lacagtooda bixiyaan Dowlado ajnebi ah ama Ururrada Caalamiga ah, si loo hirgeliyo barnaamijyada hormarineed ee dhinaca farsamo ee laba-geesoodka ah ee ka socda Soomaaliya. Canshuur-dhaafka waxaa bixiya Wasaaradda Maaliyadda marka oggolaansho hore looga helo Wasaaradda Arrimaha Dibadda. Furdada waxaa uu oggolaanayaa iibinta ama ka-takhalusidda kale ee waxyaabaha ama baabuurta canshuur-dhaaf ay si sharci ah ku soo dejisteen shakhsiyaadka ama loo soo dejiyay ahdaaf aan ahayn kuwiii markii hore la sheegey ka dib marka la bixiyo canshuurta ku waajibtey si waafaqsan qiimaha alaabta ama baabuurta waqtiga la iibinayo ama laga takhalusayo.

4. Alaabta si shaqsi ah loo leeyahay, qalabka guryaha, raadiyeyaasha, rikoodhada, kaamaradaha sawirka/fiidiyowga, kaamaradaha shaneem-ooyinka, TV-yada iyo borojectarrada/*projectors* (8 mm), hubka sharcigu oggolyahay sida kan ciidanka ama sida gaarka ah loo leeyahay, teebabka, harqaamada, agabka guryaha, qalabka iyo aaladaha xirfadlayaasha marka laga reebo baabuurta ee ay leeyihiin shakhsiyaadka degganaansho ka qaadanaya Soomaaliya sababtu waxa ay doonto ha ahaatee, waase in waxyaabahaasi dhammaantood ay yihiin kuwo horey loo isticmaaley oo aaney ka sarreyn maqaamka qofka ay khuseyso. Alaabtaa ayaa la soo dejin karaa iyada oo marar kala duwan la soo rarayo lix bilood gudahooda oo ka bilaabma taariikhda uu qofku imaanayo Soomaaliya. Canshuur-dhaafka waa in uu oggolaadaa maamulka furdada ka dib marka loo soo gudbiyo codsi uu la socdo liis mid mid u sheegaya alaabta la soo dhoofinayo oo iskumar ama marar kala duwan la soo kala rarayo, iyo sidoo kale waraaq muujineysa in uu qofku deggan yahay dalka oo ay soo saarto dowladda hoose ama dokumenti kaas u dhigma.
5. Waxyaabaha shakhsi ahaan loo leeyahay, hubka sharcigu oggolyahay sida kan ciidanka ama sida gaarka ah loo leeyahay, kaamaradaha sawirka/fiidiyow, kaameradaha shaneemooyinka (8 mm), TV-yada, harqaamada iyo teebabka, qalabka iyo agabka guryaha, iyo buugaag tiro yar iyo dharka lagu goglo sariirta iyo kuwa la saaro miisaska ee ay la yimaadaan, waa in dhammaan qalabkaasi ay yihiin kuwo horey loo isticmaalyey oo aaneyna ka sarreyn maqaamka qofka ay khuseyso.
6. Dharka, agabka loo isticmaalo jilidda iyo agabka riwaayadaha ee jilayaasha iyo fannaaniintu ay la yimaadaan, qalabka ay isticmaalaan kuwa dadka madadaaliya iyo xayawaannada qaybta ka ah madadaalada dadweynaha loo soo bandhigo. canshuur-dhaafka waa in loo sameeyaa ka dib marka maamulka furdada loo soo gudbiyo liis ay mid-mid ugu qoran yihiin alaabta kor lagu soo sheegey.
7. Waxyaabaha lagu tabarruco ee loo adeegsado ku-dhaqanka iyo faafinta diinta Islaamka ee aan ahayn ganacsi.
8. Daabacaadaha iyo waxyaabaha kale ee si toos ah loogu deeqo macaahidda iyo ururrada dhaqanka iyo waxyaabaha loo isticmaalayo ahdaaf cilmi-saynis ama dhaqan.
9. Naamuunado alaabo taas oo aan si toos ah loo isticmaali karin

10. Daabacaadaha, xusuus-qorrada, kalandaariyeyaasha, buugaagta yaryar, kaararka boostada, boostarrada, boorarka, taarikada birta ah, albumada, kataloogyada sawirrada leh iyo kataloogyada kale, iyo liisaska qiimayaasha ee lacag la'aanta lagu qeybinayo ee loogu talogaley dalxiis ama ganacsi.
11. Faranga-boolooyinka, waraaqaha faranga-booleysan, lacagta daabacan iyo qoraallada kale ee wax lagu amaahdo.
12. Alaabta si toos ah ay u soo dejiso Dowladda ama ay iibsatey markii ay yimaadeen laakiin ka hor inta aan laga saarin furdada. Labaddan arimood tan dambe, canshuur dhaafka waxaa loo oggolaanayaa keliya marka la soo gudbiyo oggolaansho ay soo saartey Wasaaradda.
13. Agabka loogu baahan yahay qabanqaabinta Sahanka Ayaxa Deegaanka Waxyeelleeya (*Desert Locust Survey*), ee loo adeegsado ololaha wax ka qabashada ayaxa iyo ololaha ciribtirka mallaariyada (duumada) ee loogu tabarrucay Dalka ama ay keentay hay'ad dowladeed.
14. Hadyadaha iyo gargaarka mootka iyo noolka ah ee la gaarsiinayo dadka ay taabteen aafooyinka guud.
15. Lugaha iyo gacmaha macmalka ah iyo kuraasta lugaha leh ee ay naafadu adeegsato.
16. Agabka u gaarka ah ee loogu talogaley in ay isticmaalaan dadka baahiyaha gaarka ah qaba ama wax lagu barayo, oo ay soo dejiyeen hay'adaha samafal ee waxtarka u leh ama hay'adaha samafal ee iyaga u shaqeeya.
17. Matoorrada, qalabkooda dayactirka, iyo agabka loo isticmaalo dhisidda maraakiibta, calanka ay doonaan ba badda ha ku maraane.
18. Xayawaanno dab-joog ah, lab iyo dheddigba, oo loo soo xuley taran iyo xayawaannada dab-joogga ah ee loo adeegsado beeraha.
19. Geedaha nool iyo dhirta kale, laamaha yaryar ee la tallaalo, tallaalada kale ee la xabaalo, qaar ka mid ah abuurka oo loogu talogaley dalagyada beeraha iyo kuwa jikada, bacrimiyeyaasha iyo sunta disha ku-dul-noolayaasha ee gebi ahaanba loo adeegsanayo beeraha, waase in si toos ah ay u soo dejiyaan beeraleyda ay khuseyso ama in la caddeeyo in si buuxda loogu adeegsanayo beeraha.
20. Qalabka xirfadda kalluumeysiga, laakiin kuma jiraan qalabka kalluumeysiga isboortiga ah.
21. Agabka keydka maraakiibta, oo aaney ku jirin alaabta maanabooliyada ah, ee gebi ahaanba ay isticmaalayaan rakaabka iyo shaqaalaha markabka, ee la

isticmaalayo inta safarka lagu jiro iyo inta ay maraakiibtu ay joogaan dekad ama meelaha ay barroosinku u yaallo, taas oo ku xiran ballanqaadyada iyo xaddidaadaha ay u dhigeen maamullada furdada.

22. Agabka wax lagu cabeyo iyo cabeynta wax lagu xirxiro nooca ay doonaan ha ahaadeen ee loogu baahan yahay gaadiid-ku-qaadista miraha iyo khudaarta la rabo in la dhoofiyo; taas oo hadba ku xiran ballanqaadyada ay u dhigeen maamullada furdada.
23. Dhalooyinka, baakadaha, gasacadaha iyo weelasha kale ee cuntada la rabo in la dhoofiyo, taas oo hadba ku xiran ballanqaadyada ay u dhigeen maamullada furdada.
24. Shidaalka iyo garaasada loogu talogaley:

a. Maraakiibta baxaya ee ka hawlgalaya dibadda biyaha dalka;
b. Diyaaradaha baxaya ee u socda dibadda oo ay ka mid yihiin kuwa ku sii degaya meelo kale oo ka mid ah dhulka Soomaaliya.

25. Naxashka ama sanduuqa lagu shubo waxyaabaha ka hara meydadka ee loo soo qaadayo Soomaaliya, iyo waxyaabaha kale ee lagu qurxinayo. Canshuur-dhaafka ayaa waxaa oggolaanaya maamulka furdada marka loo soo gudbiyo oggolaanshaha ay soo saareen hay'adaha ku shaqada leh.
26. Ubaxyada iyo waxyaabaha kale ee lagu qurxiyo xabaalaha ku yaalla Soomaaliya.
2. Hawl-wadaneenada goobta ka hawlgalaya oo dhan oo ay ku jiraan xubnaha ciidanka ah ee amniga goobta sugayaa waxay ka amar qaadanayaan maamulaha goobta.
3. Maamuluhu waxaa uu amri karaa in dibadda looga saaro goobta codbixinta ama loo dhiibo hay'adaha amniga cid kasta oo goobta khalkhal gelinaysa.

4. Xubnaha ciidanka ee amniga goobta sugaya looma ogola in ay soo galaan gudaha goobta codbixinta haddaan Maamulaha goobtu sidaas codsan.
5. Maamulaha goobtu waxaa uu awood u leeyahay in uu goobta codbixinta xiro haddii duruufo adag oo aysan doorashadu ka socon karayn la soo darsaan.
6. Maamulaha goobtu waa in uu xarunta goobtu hoostimaada wargaliyaa marka uu isticmaalayo awoodda ku xusan faqrada 5aad ee qodobkan.
7. Maamulaha goobtu isaga ayaa ku dhawaaqaya in codbixinta goobtu furan tahay isaga ayaana ku dhawaaqaya in codbixintii goobtu xiran tahay marka ay gaarto saacaddii loo qabtay.
8. Haddii maamulaha goobtu awoodi waayo gudashada waajibaadkiisa si kastaba haku timaadee waxaa beddelkiisa gelaya maamule ku-xigeenka isla goobtaas.

Qodobka 39-aad:
Nidaamka Goobta Codbixinta

1. Goobta codbixinta ee doorashadu ka socoto waxaa gali kara oo keliya shaqaalaha iyo hawl-wadeennada ka shaqeynaya ee GMDQ ka socda, wakiillada xisbiyadda, codbixiyeyaasha, warbaahinta iyo goob-joogayaasha doorashada.
2. Goob-joogayaashu waa in ay wataan kaararka lagu aqoonsado oo GMDQ bixiyey muujinayana in ay yihiin goob-joogayaasha doorashooyinka.
3. Codbixiyeyaashu saf ayey galayaan goobta codbixintana marba qof baa galaya iyada oo dadka loo kala safayo sida safka ay ugu soo kala horeeyeen una kala istaagayaan rag iyo dumar.
4. Dadka jilicsan ee da'da ah, baahiyaha gaarka ah leh, hooyooyinka uurka leh ama caruurta sita waa in loo samo-falaa oo dadka kale laga hormariyaa.
5. Waxaa reebban in codbixiyeyaashu hub nooc kasta oo uu yahay la yimaadaan goobta.

Qodobka 40-aad:
Goobta Codbixinta dhexdeeda

1. Goob kasta oo codbixineed waxaa ay yeelanaysaa ugu yaran laba qolqol oo yar yar (daahyo ayaa laga sameyn karaa) oo loogu talo galay in codbixiyuhu ku calaamadiyo warqadda codbixinta.

2. Goobta codbixinta waxaa loo oggol yahay oo keliya dadka ku xusan qodobka 39aad faqradda 1aad ee Sharcigan.
3. Goob kasta oo codbixineed waxaa la dhigayaa liiska magacyada shaqaalaha iyo hawl-wadeenada oo ay ku jiraan wakiillada xisbiyadu.
4. Goobta codbixinta iyo agabka doorasho ee dhexyaalaba waxaa ilaalinaya tiro ciidan ah oo loogu talo galay, haseyeeshee looma oggola in ay galaan goobta maamulaha oo sidaas codsada mooyee.
5. Qolqolka codbixinta dhexdiisa waxaa mamnuuc ka ah in lagu xiro qalabka kasta oo wax lagu sawiro ama lagu dhageysto.

Qodobka 41-aad:
Codbixinta

1. Xoghayaha goobtu wuxuu hubinayaa in kaarka codbixinta ee uu sito codbixiye kasta uu yahay midkii saxda ahaa qofka sitaana uu yahay qofkii lahaa isla markaana uusan horey codkiisa u soo dhiiban.
2. Codbixiyaha waa in la siiyaa warqaddii cod-bixinta oo shaabbaddii goobta leh marka la hubiyo kaddib.
3. Codbixiye kasta marka uu codka dhiibanayo wuxuu gelayaa qolqolka codeynta wuxuuna u calaamadinayaa warqadda codbixinta qaabka loogu talo-galay.
4. Codbixiyuhu wuxuu sanduuqa codbixinta ku ridayaa warqadda codbixinta iyadoo isku laaban.
5. Codbixiyuhu marka uu codka dhiibto waa in faryarada bidix lagaga calaamadiyo khad aan tirtirmayn oo muujinaysa in uu codeeyay, haddii aanu lahayna gacanta midigta ayaa beddeleysa, haddii iyadana aysan jirin waxaa laga calaamadinayaa meel muuqata oo jirkiisa ka mid ah.
6. Haddii warqadda codbixintu aysan dhamayn ama dhaawac qabto inta uusan calaamadeyn, codbixiyuhu waa in uu soo celiyo oo maamulaha goobta weydiisto mid dhamaystiran oo sax ah.
7. Codbixiyeyaashu waa in aysan cudurdaar la'aan ku daahin qolqolka codbixinta, haddii ay dhacdana maamulaha goobtu waxaa uu awood u leeyahay in uu ka soo saaro kana qaado waraaqda codbixinta qof kasta oo ku daaha.

8. Codbixiyeyaasha goobta looga saaray si waafaqsan faqrada 7aad ee qodobkan waxaa mar kale loo oggolaan karaa inay codkooda dhiibtaan marka dhammaan dadka kale ee goobta ku sugani codkooda dhiibtaan.
9. Haddii cod-bixiye lagu helo in uu sito waraaq cod-bixineed oo aan ahayn tan goobta laga bixiyey ama waraaqo dheeraad ah ama uu hore codkiisa u soo dhiibtey, maamulaha goobtu waa in uu si degdeg ah u amro in la qabto oo booliska loo dhiibo si maxkamad loo horgeeyo, waana in arrintaa warbixinteeda loo gudbiyo saraakiisha sare ee doorashooyinka.
10. Codbixiyeyaasha qaba duruufo gaar ah oo aan u saamaxayn in ay codkooda si caadi ah u dhiibtaan sida dadka baahiyaha gaarka ah qaba ama da'da ah iyo qof kasta oo codsada in la caawiyo, waxaa loo calaamadinayaa rabitaankiisa waxaana qofka uu rabo u calaamadinaya maamulaha goobta ama maamuluhu qof uu u wakiishay iyadoo ay goob-joog yihiin wakiillada xisbiyadu.

Qodobka 42-aad:
Muddada Codbixinta

1. Muddada codbixintu waa hal maalin oo ka bilaabmeysa 6:00am subaxnimo kuna eg 6:00pm maqribnimo.
2. Wakhtiga ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan lagu camal fali maayo oo codbixintu way soconaysaa haddii ay jiraan codbixiyeyaal safka ku jira oo aan wali codkooda dhiiban ilaa laga dhammrystirayo codbixiyeyaasha markaas safka taagan.
3. Marka ay gaarto saacadda xiritaanka (6:00 maqribnimo) ee goobta doorashada, maamulaha goobta ama hawl-wadeen uu igmaday ayaa soo baxaya oo eegaya/fiirinaya dadka safka ku jira ee aan wali codkooda dhiiban qofka u danbeeya ayuuna calaamadsanayaa si aysan cid danbe ugu soo biirin safka.
4. Marka la dhammeystiro codeynta dadka safka ku jira ee ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan ayuu maamuluhu ku dhawaaqayaa in codbixintii xirantahay.

Qodobka 43-aad:

Cabashooyinka Goobta

1. Wixii cabashooyin ah ee ay qabaan wakiillada xisbiyadu, codbixiyeyaasha ama qof kasta oo ka cabanaya in xuquuqdiisa doorasho la duudsiyey waa in ay qoraal ugu gudbiyaan xarunta ka sarreysa goobta codbixinta iyo GMDQ ayadoo nuqul la siinayo maamulaha goobta.
2. Maamulaha goobtu waa in uu warbixin qoraal ah ka soo saaro cabashooyinka loo soo gudbiyey iyo wixii muran ah ee ka dhashay hawsha doorashooyinka goobtiisa.
3. Cabashooyinka goobta ee loo soo gudbiyey maamuluhu waa in uu qoraal ahaan u diiwaangeliyaa si xafiisyada sare ee GMDQ loola socodsiiyo.

CUTUBKA 6-aad:

TIRINTA CODADKA IYO NATIIJADA DOORASHOOYINKA

Qodobka 44-aad:

Isu Diyaarinta Tirinta Codadka

1. Marka ay codeynta goobtu dhammaato goobtana albaabada loo xiro, maamulaha goobtu waxaa uu iskugu yeerayaa dhammaan shaqaalaha iyo hawl-wadeennada goobta, wakiillada xisbiyada iyo goob-joogaayasha isaga oo ku wargalinaya in goobtu xiran tahay lana bilaabayo tirintii codadka la dhiibtay iyadoo cid soo gali karta iyo cid ka bixi kartaana aysan jirin inta ay tirintu socoto.
2. Ka hor inta aan la bilaabin tirinta codadka, maamulaha goobtu waa in uu hawl-wadeenada goobta ku amraa in dhammaan waraaqaha iyo qalabka goobta yaal ee aan muhiimka u ahayn tirinta codadka laga qaado meesha.
3. Maamuluhu waxaa uu hubinayaa tirada guud ee codbixiyeyaasha codka dhiibtay isaga oo fiirinaya tirada waraaqaha codbixinta ee la isticmaalay iyo tirada codbixiyeyaasha ka diwaangashan goobta isagoo ku qoraaya foomka warbixinta.
4. Waxaa uu tirinayaa maamuluhu iyagoo dhammaan hawl-wadeenada, wakiillada xisbiyada iyo goob-joogayaasha ay goob-joog ka yihiin waraaqaha codbixinta ee aan la isticmaalin waxaana uu ku ridayaa bashqad loogu talo galay.
5. Waxaa la tirinayaa tirada waraaqaha codbixinta ee xumaaday ee ay soo celiyeen codbixiyeyaashu ama la arkay in ay xun yihiin waxaana lagu ridayaa bashqad u gaar ah oo loogu talo galay.

Qodobka 45-aad:
Bilaabidda Tirinta Codadka

1. Marka la dhammeystiro hawsha diyaargarawga tirinta codadka ee ku xusan qodobka 44aad ee sharcigan waxaa la bilaabayaa tirinta waraaqaha codbixinta ee sanduuqa ku jira.
2. Tirintu waxay ku bilaabmeysaa furista sanduuqa, xoghayaha goobta ayaana marba hal warqad codbixineed ka soo saaraya sanduuqa wuxuuna u dhiibayaa maamulaha goobta oo furaya warqadda cod la maqli karana ku sheegaya Murashaxa uu codbixiyuhu codkiisa siiyay.
3. Marka uu maamuluhu sheego Murashax codka la siiyay waxaa uu ku celinayaa xoghayaha oo sii tusaya wakiillada xisbiyadda
4. Marka lagu dhawaaqo xisbiga codka la siiyay, hawl-wadeenka u xilsaaran ayaa galinaya natiijiyada foom loogu talo galay tirinta codadka xisbiyadu kala heleen warqaddana wuxuu ku ridayaa bashqad xafidan oo calaamadda xisbiga codka helay leh.
5. Hawsha tirinta waxaa maamulaya hawl-wadeenada GMDQ ee goobta, wakiillada xisbiyaduna si feejigan ayey ula soconayaan si ay u xaqiijiyaan in tirintu si habsami ah u socoto.
6. Marka hawsha tirintu dhammaato, hawl-wadeenada goobta oo uu maamuluhu hoggaaminayo waxaa ay hubinayaan in ay tiro ahaan isleeyihiin isu gaynta waraaqaha codbixinta, waddarta tirada codadka xisbiyadu heleen, codadka lagu muransan yahay, xumaaday ama aan ansaxa ahayn, kuwa aan la isticmaalin iyo codbixiyeyaasha diiwaanka ku qoran.
7. Maamulaha goobtu waxaa uu waraaqaha codbixinta ee xumaaday, kuwa waxba kama jiranka laga soo qaaday, kuwa muranku ka taagan yahay iyo waraaqaha cabashada ku ridayaa bashqad gaar ah oo loogu talo galay.
8. Sidoo kale maamuluhu waxaa uu waraaqaha codbixinta ee la tiriyay ku ridayaa bashqad gaar ah iyagoo kala soocan ama u kala xiran xisbi-xisbi sanduuqii ayaana lagu celinayaa laguna ningaxayaa/ lingaxayaa.

Qodobka 46-aad:
Soo-gabagabeynta Tirinta Codadka

1. Marka la dhameystiro hawsha tirinta codadka doorashooyinka ee ku xusan qodobka 45aad ee sharcigan, Maamulaha goobtu waxaa uu ku

dhawaaqayaa wadarta guud ee tirada codbixiyeyaasha, codadka guud ee ansaxay, codadka xumaaday, waraaqaha soo haray ee aan lagu codeyn iyo Murashax kasta tirada codadka uu goobta ka helay.

2. Bashqadaha lagu riday waraaqaha kala duwan ee codbixinta waa la xirayaa oo la ningaxayaa/lingaxayaa waxaana dusha lagaga dhufanayaa shaabbadda goobta waxaana dusha ka saxiixaya maamulaha goobta iyo wakiillada xisbiyadda.
3. Wakiillada xisbiyada waxaa waajib ku ah in ay saxiixaan natiijada goobta, hadday cabasho ka qabaana waa in ay soo gudbiyaan loona diiwaangaliyaa cabashadaas.
4. Foomka natiijada doorashada waxaa lagu dhejinayaa goobta codbixinta.
5. Bashqad walba oo wax iagu riday waxaa dusheeda lagu qorayaa faahfaahinta waxa ku jira bashqadda.
6. GMDQ waxaa ay awood u leeyihiin in ay soo saaraan habraacyo faahfaahinaya hawlaha tirinta haddii loo baahdo.

Qodobka 47-aad:
Codadka Xumaaday

1. Warqaddaha xumaaday waa kuwa aan codkooda cidna loo tirinayn sababahan awgood:
   a. *Waxay ka duwan yihiin waraaqihii rasmiga ahaa ee GMDQ go'aamiyey in doorashooyinka lagu galo;*
   b. *Waxaa aysan lahayn shaabbaddii goobta;*
   c. *Haddii aysan calaamadba lahayn;*
   d. *Haddii hal murashax wax ka badan loo calaamadiyey;*
   e. *Haddii warqadda laga aqoonsan kari waayo murashax codka la siiyay.*
2. Warqadda codbixintu waxaa ay waxba kama jiraan noqoneysaa marka ay si wada jir ah iskugu raacaan maamulka, hawl-wadeenada goobta codbixinta iyo wakiillada xisbiyaddu.
3. Haddii ay isku khilaafaan maamulka, hawl-wadeenada iyo wakiilladu saxnimada warqadda codbixinta, waxaa warqadda codbixinta loo aqoonsanayaa warqad muran ka taaganyahay.
4. Waraaqaha codbixinta ee laysku qabsado ama muranku ka taaganyahay waxaa go'aan ka gaaraya hawlwadeennada goobta codbixinta.

5. Haddii ay xallin kari waayaan muranka waxaa la keenayaa xarunta dhexe ee tirinta codadka ee GMDQ.

Qodobka 48-aad:
Gudbinta Natiijada Goobta

1. Marka la dhammeystiro hawlaha tirinta ee goobta codbixinta si waafaqsan qodobada sharcigan isla markaana waraaqaha lagu rido bashqadaha loogu talo galay, waxaa la raacinayaa qoraallada raadraaca ah ee tilmaamaya waxaa ku jira sanduuqa agabka lagu ridayo.
2. Natiijadii goobta codbixinta oo ay la socdaan qoraalada raadraaca ahi ayaa loo gudbinayaa xarunta ay hoostimaad goobta codbixintu.
3. Maamulaha goobta codbixinta wuxuu ku wareejinayaa maamulaha xarunta doorashada natiijada codbixinta goobtiisa oo u kala soocan labada aqal, marka ay ka soo idlaadaan natiijada goobaha hoos yimaada ayagoo goobjoog ka yihiin wakiillada axsaabta, maamulaha xarunta wuxuu ku dhawaaqayaa murashaxa Golaha Shacabka ee guuleystay kadib marka la isku geeyo wadarta cododka uu murashax kasta ka helay goobaha codbixinta ee degaan-doorashadaas wuxuuna u sii gudbineya xafiiska xarunta dhexe **GMDQ** ee Muqdishu, nuqulna siinayaa xarunta **GMDQ** ee Dowlad Goboolleedka.
4. Nuqullada qoraalka raadraaca ah ee natiijada goobta laga soo raacinayo waxaa go'aaminaya **GMDQ**, waxaana waajib ah in nuqul ka mid ah lagu rido sanduuqa agabku ku jiro, iyadoo min hal nuqulna la siinayo xafiiska GMDQ ee heer Dowlad-goboleed iyo xarunta dhexe ee **GMDQ**.
5. Maamulaha Xarunta doorashooyinka heer Gobol marka ay soo gaaraan natiijooyinka deegaan doorashooyinka Gobolkaas, waxa uu ku dhawaaqayaa murashixiinta ku guuleystay kuraasta Xubnaha Aqalka Sare ee heer Gobol iyadoo loo dirayo natiijada **GMDQ** heer dowlad Goboleed nuqulna la siinayo xarunta dhexe **GMDQ** ee Muqdishu. **GMDQ** heer dowlad Goboleed marka ay soo gaaraan dhammaan magacyacyada Xubnaha ku guuleestay kuraasta Aqalka Sare ee Dowlad Goboleedkaas wuxuu u dirayaa Xarunta dhexe **GMDQ** ee Muqdishu.

6. Haddii ay dhacdo in laba murashax ama ka badan ee ugu codadka badan ay helaan codad tiro is le'eg doorashadooda waxaa lagu celinayaa muddo 30 casho gudahood ah.
7. **GMDQ** waxay go'aan ka gaarayaan cabashooyinka la xiriira Natiijada doorashooyinka **shan** maalmood **(5)** oo shaqo gudahood oo ka billaabata maalinta xigta marka ay dhammaato codbixintu.

Qodobka 49-aad:
Qaabka Xisbiyadu ugu kala Guuleysanayaan Kuraasta

1. Xisbiyadu waxay u kala helayaan kuraasta loo tartamay sida ay u kala helaan tirada murashaxiinta ku guuleysta tartanka;
2. Xisbi kasta ee ka gudba xaddi-hoosaadka (Threshold) ku xusan Qodobka 12(8) ee Sharcigan, wuxuu ku lahaanayaa Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya tirada kuraasta uu ku soo guuleystay;
3. GMDQ wuxuu ku dhawaaqayaa tirada iyo magacyada xildhibaannada labada Aqal uu xisbi walba ku guuleystay natiijo hordhac ah muddo aan ka badnayn 48 saacadood maalinta doorashada kaddib.
4. GMDQ wuxuu ku dhawaaqayaa natiijada kama dambeysta ah muddo aan ka badneyn 7 maalmood gudahood.
5. Haddii xubin ka mid ah Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya lumiso xubinnamadeeda waxaa beddelaya qofka doorashadii hore ku xigay si waafaqsan qodobka 59(2) ee Dastuurka.

Qodobka 50-aad:
Dacwadaha la xiriira Doorashooyinka

1. Khilaafaadka la xiriira doorashooyinka waxaa awood u leh oo ka garnaqaya GMDQ si waafaqsan Qodobka 111G(2)(g) ee Dastuurka iyo Qodobka 14(8) ee Sharciga lagu dhisay Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka (Sharci Lr. 4 ee 2015).
2. Cabashooyinka ku saabasan go'aannada maamul ee ka soo baxay GMDQ, waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda Sare ee Dalka.
3. Dacwadaha Maxkamadaha u gudbi kara, waa kuwa la xiriira xaqa codbixinta, xaqa ka qeybgalka doorashada iyo go'aanka kama dambeysta ah ee natiijada doorashada.

4. Dacwadaha la xiriira xaqa codbixinta, xaqa ka qeybgalka doorashada iyo go'aanka kama dambeysta ah ee natiijada doorashada ee ay ku dhawaaqeen GMDQ, waxaa racfaan looga qaadan karaa Maxkamadda Dastuurka ee dalka sida ku cad qodobka 14aad farqaddiisa 15aad ee Sharci Lr.04, 2015 ee lagu dhisay Guddiga Madaxa-bannaan ee Doorashooyinka Qaranka.
5. Xisbiyadda dacwadda ka qaba Natiijada doorashada waa in ay Maxkamadda **Dastuurka** ee Dalka u soo gudbiyaan dacwadooda muddo 14 maalmood gudahood ah oo ka bilaabanta maalinta GMDQ ku dhawaaqaan natiijada doorashada.
6. Maxkamaduhu waa in ay dacwadaha doorashooyinka ee ay u soo gudbiyeen dhinacyada ku xusan faqradda 2aad ee qodobkani go'aan kaga gaartaa muddo 15 maalmood ah oo ka bilaabata maalintii dacwadda ay qabatay maxkamaddu.

CUTUBKA 7-aad:
QODOBBO QUBANE AH
Qodobka 51-aad:
Dembiyada iyo Ciqaabaha ka Dhalanaya Jabinta Sharcigan

1. Qof kasta oo ku xadgudba qodobbada sharcigan waxaa uu mutaysanayaa ciqaab u dhiganta xadgudubka uu gaystay. Iyadoo aan laga hor-imaaneyn Xeerka Ciqaabta Guud ee dalka, ciqaabta dembiyada la xiriira doorashadu waxay noqonaysaa sidan soo socota:

a. Qof kasta oo hal mar ka badan isdiiwaangaliya waxaa uu mutaysanayaa xarig dhan afar (4) bilood ama ganaax lacageed oo qaddarkiisa Maxkamaddu go'aamin doonto;
b. Qof kasta oo ka been sheega xogtiisa waxaa uu mutaysanayaa ciqaab xarig aan ka badnayn 2 bilood ama ganaaax 3 milyan oo Soomaali shilling ah.
c. Qofka aan u dhalan Dalka Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo isku daya in uu isku diiwaangaliyo codbixiye ama ay caddaato in uu sifo qaldan isku diwaangaliyey waxaa uu mutaysanayaa ciqaab aan ka yarayn 6 bilood oo xarig ah iyo ganaax lacageed oo qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamin doonto.
d. Mas'uuliyiinta iyo hawl-wadeenada ka shaqeynaya doorashooyinka iyo hawsha ka horeysa ee diiwaan-gelinta codbixiyeyaasha ee ku xadgudba

qodobada sharcigan waxaa ay mutaysanayaan xarig sanad ilaa saddex sano ah.

e. Qof kasta oo isku daya in uu been abuuro kaararka codbixinta ama isku daya in uu si wax uga beddelo diiwaanka codbixiyeyaasha waxaa uu mutaysanayaa xarig ciqaab ah oo u dhaxeeya laba sano ilaa afar sano.

f. Codbixiyaha la yimaad goob codbixineed uguna talo gala in uu ku codeeyo kaar codbixineed oo uusan lahayn waxaa uu galay fal-dembiyeed waxaana uu mutaysanayaa ciqaab 6 bilood ilaa sanad ah iyo ganaax lacageed oo ay Maxkamada awoodda u leh qaddarkeed go'aamiso;

g. Qof kasta oo ururSada kaarar codbixineed oo cid kale leedahay isagoo uga jeeda in uu si kale uga faa'iidaysto maalinta codbixinta doorashooyinka waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa ciqaab xarig oo aan ka yarayn sanad kana badnayn laba sano iyo ganaax lacageed oo ay Maxkamadda awoodda u leh qaddarkiisa go'aamiso;

h. Qof kasta oo isku daya in uu sameeyo, ka qeyb qaata in la sameeyo kaar codbixineed oo been abuuur ah, waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa xarig laba (2) sano ilaa afar (4) sano ah iyo ganaax lacageed ay Maxkamadda awoodda u leh qaddarkiisa go'aamiso; iyo

i. Qof kasta oo isku daya in uu sameeyo ama si uga qeyb qaata samaynta waraaqo codbixineed oo been abuur ah oo aan ahayn kuwa GMDQ doorashadu soo sameeyay, waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa xarig saddex (3) sano ilaa Shan (5) sano ah iyo ganaax lacageed ay qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamiso.

2. Hawl-wadeen kasta oo ka qeyb qaata samaynta dembiyada ku xusan faqrada 1aad ee qodobkan ama fududeeya in la sameeyo waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa saddex (3) ilaa lix (6) sano oo xarig ah iyo ganaax lacageed ay qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamiso.

3. Waxaa mamnuuc ah oo aan la ogolayn in goobta codbixinta laga ololeeyo, codbixiyeyaasha loo cago jugleeyo, hanjabo, laga hor istaago in ay coddeeyan ama khalkhal la galiyo habsami u socodka doorashooyinka ee goobta.

4. Qof kasta oo isku dayda ama sameeya danbiyada ku xusan faqrada 3aad ee qodobkan waxaa ay gashay fal-dembiyeed waxaayna mutaysanaysaa ciqaab

xarig oo aan ka yarayn hal (1) sano iyo qaddar ganaax lacageed ay qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamiso.

5. Hawl-wadeen kasta ee GMDQ oo si bareer ah u gudan waaya waajibaadkiisa shaqo ama isku daya ama sameeya in uu wax ka beddelo natiijada doorashooyinka ee uu gacanta ku hayo, waxyeeleeya waraaqaha codbixinta ama agabka kale ee goobta codbixinta waxaa uu galay fal-dembiyeed wuxuuna mutaysanayaa xarig aan ka yarayn sanad (1) ilaa saddex (3) sano iyo ganaax lacageed oo ay qaddarkiisa Maxkamadda awoodda u leh go'aamiso.

Qodobka 52-aad:
Dhawrista Sharciga

1. Dhawrista iyo ku dhaqanka sharcigani waa waajib saaran dhammaan shacabka Soomaaliyeed iyo hay'addaha Dowladda ee sida gaarka ah ay u khuseeyo howlaha doorashada.
2. Ku dhaqan la'aanta iyo ku xadgudubka sharcigan waxaa lagu mutaysanayaa ciqaabaha ku xusan sharcigan iyo **xeerka** ciqaabta ee dalka.
3. GMDQ waxaa waajib ku ah meelmarinta iyo ku dhaqanka qodobada sharcigan.

Qodobka 53-aad:
Dib-u-dhaca Doorashooyinka

1. Muddada xilhaynta Goleyaasha Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya iyo madaxda la doortay wuxuu shacabku u idmaday muddo cayiman oo ku xadiddan Qodobbada 60aad iyo 91aad ee Dastuurka;
2. GMDQ waa in ay labada Gole ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya oo wadajira hor keenaan jadwalka, xogta iyo waxyaabaha lagama-maarmaanka u ah qabsoomidda doorashada muddada ku xusan Qodobka 13aad Faqradiisa 3aad ee Sharciga;
3. Haddii GMDQ ay awoodi waayaan soo gudbinta qorshaha qabsoomidda doorashooyinka muddada ku xusan **Qodobka 13 (3) ee Sharcigan**, ama ay ku dhawaaqan in aysan qaban karin doorashada, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ayaa fadhi wadajir ah go'aan ku soo saaraya.

Qodobka 54-aad:
Sugidda Amniga

1. Qof kasta oo Soomaali ah waxaa waajib ku ah in ay ka qeybqaataan sugidda amniga xilliga doorashooyinka.
2. Sugidda amniga waxaa si gaar ah uga mas'uul ah Ciidanka Booliska heer Fedeeraal iyo heer Dowlad Gobolleed.
3. Hay'addaha mas'uuliyadda sugidda amniga leh ee ku xusan faqrada 2aad ee qodobkan waxaa waajib ku ah in ay awaamiirta GMDQ ku shaqeeyaan xilliga doorashooyinka lagu jiro.

Qodobka 55-aad:
Xaaladaha Anshax Marinta

1. Sida uu tilmaamayo qodobka 14aad ee Sharciga dhisidda GMDQ (Sharci Lr. 04 ee 2015) iyo qodobka 6aad ee sharcigan, GMDQ waxay ka mas'uulyihiin taabagalinta doorashooyinka iyo habsami u socodka doorashooyinka, sidaa daraadeed waxay awood u leeyihiin in ay anshax mariyaan qof kasta oo ku kaca gef maamul ama ku xadgudba doorashooyinka iyo xeerarka doorashooyinka wakhtiga doorashooyinka lagu jiro.
2. Anshax marinta GMDQ ee ku xusan faqrada 1aad ee qodobkani waxaay noqon kartaa:
    a. *Canaan af ah;*
    b. *Digniin qoraal ah;*
    c. *Ganaax lacageed.*
3. Xisbi kasta oo ku xadgudba nidaamka doorashooyinka iyo shuruucdeeda, waxaa la marinayaa xeerarka anshaxmarinta axsaabta oo ay soo saaraan GMDQ si waafaqsan qodobka 56aad ee Sharcigan.
4. GMDQ wuxuu tallaabooyin ku habboon oo anshaxmarin ah ka qaadayaa hawl-wadeenada iyo shaqaalaha doorashooyinka ee fulinwaaya sharciga ama jabiya qodobada shuruucda doorashooyinka.
5. Xadgudubyada waaweyn ee wax u dhimaya habsami u socodka nidaamka doorashooyinka, waxay GMDQ amrayaan in la soo qabto lana xiro cid kasta oo ku lug leh sharcigana la horkeeno.

Qodobka 56-aad:

Soo-Saarista Xeer-nidaamiyeyaasha

1. GMDQ wuxuu awood u leeyahay in uu curiyo soona saaro xeer-nidaamiyayaal, habraacyo iyo hageyaal si ay u dabaqaan una dhaqan galiyaan qodobada sharcigan, kuwaas oo ay ka mid yihiin.

a. ***Xeer-nidaamiyaha Anshaxa Doorashooyinka;***

b. ***Xeer-nidaamiyaha hab-dhaqanka shaqaalaha iyo hawl-wadeenada doorashooyinka;***

c. ***Xeer-nidaamiyaha habraaca Samaynta Xafiisyo Doorasho iyo Astaynta Goobaha Codbixinta***

d. *Xeer-nidaamiyaha diiwaangelinta codbixiyaasha wixii aan sharcigan lagu sheegin,*

e. *Xeer-nidaamiyaha habraaca Tabeelayaasha iyo halku-dhigyada;*

f. *Xeer-nidaamiyaha hab-dhaqanka saxaafada ee xilliga doorashooyinka;*

g. *Xeer-nidaamiyaha habraaca Waraaqaha Codbixinta.*

h. *Xeer-nidaamiyaha habraaca hawlaha tirinta codadka haddii loo baahdo;*

i. *Xeer-nidaamiyaha korjoogtaynta Doorashada; iyo*

j. *Xeer-nidaamiyaha habraaca jadwaleynta ololaha doorashooyinka ee axsaabta.*

2. GMDQ waxaa ay soo saari karaan buug yareyaal iyo hageyaal lagu wacygalinayo codbixiyeyaasha iyo dadweynaha Soomaaliyeed guud ahaan oo lagu hirgalinayo laguna faahfaahinayo sharcigan.
3. Sharcigaan ayaa aasaas u ah dhammaan xeer nidaamiyeyaasha, xeerarka anshaxa, hageyaasha iyo buugyare-yaasha doorashooyinka la xiriira, mana ka hor imaan karaan.

Qodobka 57-aad:

Baabi'in

Waxaa la baabi'iyay sharci ama xeer kasta oo Doorasho oo ka hor-imaanaya sharcigaan.

Qodobka 58-aad:

Dhaqan-galka Sharciga

Sharcigan waxaa uu dhaqangalayaa marka ay ansixiyaan goleyaasha Baarlamaanka Federaalka, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyana saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda.

SHARCI LR. 24 Taariikh: 24/02/2020

ANSIXINTA SHARCIGA ISTAATISTIKADA QARANKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka Lr. GSH260/B-10/20 Taariikh 20/02/2020 kuna saabsan Ansixinta Sharciga Istaatistikada Qaranka.

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Istaatistikada Qaranka.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya.

MUQDISHO: 24/02/2020

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HHN/052/2020
TAARIIKH 24/03/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

SHARCIGA ISTAATISTIKADA QARANKA

Cutubka 1aad
Horudhac
Qodobka 1aad
Ujeeddada Sharcigan

Ujeeddada Sharciga:

b) Sharcigaan wuxuu beddelayaa Sharcigii Istaatistikada Soomaaliya Lr.35 ee soo baxay 18kii Juun1970 si loo waafajiyo nidaamka Federaalka Dalka loona horumariyo hannaanka waxqabad ee Qeybaha kala duwan ee Istaatistikada Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS).

t) Sharcigan waxa lagu dhisayaa Hay'adda Istaatiskada Qaranka Soomaaliyeed (HIQS) oo u xil saaran Qaadista, ururinta, isku-duwidda xogta, falanqeynta, qiimaynta iyo faafinta macluumadka Istaatistikada Qaranka.

Qodob2aad
Qeexid

Sharcigani haddii uusan macnes kale tilmaamin, ereyada soo socda waxaa loo qeexayaa sidan:

1. "Diiwaan maamul" waxaa loola jeedaa xogta la ururiyey, iyadoo aan wax arrin Istaatistikada ah looga dan lahayn, tusaale ahaan ururinta xogta, isu socodka dadka, ganacsiga ka gudbaya xuduudaha iyo diiwan-gelinta xogta, dhalashada iyo dhimashada iyo canshuuraha ganacsiga"
2. "Sarkaal Idman" waxaa loola jeedaa:
   b) Shaqaale ka tirsan Xafiis oo fulinaya shaqo kasta oo sharcigan hoos-imaanaysa; iyo
   t) Qof kasta oo loo idmado shaqo una xilsaaro Agaasimaha Hay'adda Istaatistikada.
3. "Xog-Mug leh" waxaa loola jeedaa xogta ay macluumaadkeedu aad u ballaaran yahay, lehna macluumaad badan sida dalabka iyo qiimaha ganacsiga si macluumadkaas go'aanna haboon looga qaato;
4. "Hay'ad" waxaa loola jeeda "Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya";

5. "Golaha Maamulka" waxaa loola jeedaa Golaha Maamulka lagu dhisay Qodobka 8aad ee sharcigan;
6. "Tiro-koob" waxaa loola jeedaa ururinta, isku-duwidda xogta, falanqeynta, qiimayntaiyo faafinta macluumadka asaasiga ah ee ku saabsan qeybaha dadka, dhaqaalaha, bulshada,beeraha, warshadaha, deegaanka iyo qeybaha kale oo si fiican loo qeexay loona cayimay waqti;
7. "Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada" Waxaa loola jeedaa madaxa maamulka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya;
8. "Bulshada Rayidka" waxaa loola jeedaa hay'adaha aan dawliga ahayn ama aan faa'iido doon ahayn; kana dhex jira bulshada mar walbana u taagan danaha bulshada dhinac kasta sida dhaqanka, waxbarashada, caafimaadka iyo adeegyada la midka ah;
9. "Faafinta" waxaa loola jeedaa daabacaad toos ah ama dadban, iibinta ama siinta xogta rasmiga ah ama wax kale oo Istaatistika ah.
10. "Diiwaan" waxaa loola jeedaa noocyada kaydinta xogta sida su'aalaha, jadwalada, warqadaha warbixinnada, daabacaadda lagu xafido gal ama wax kasta oo la mid ah qoraal ama macluumaad elektaroonig ah oo looga baahan yahay ujeeddooyinka ururinta xogta rasmiga ah ee Istaatistikada.
11. "Dukumenti" waxaa loola jeedaa qoraallada muuqaallada, codadka iyo wax kasta oo loo adeegsan karo tixraac.
12. "Baaritaan" waxaa loola jeedaa sahanka xogta istaatistikada ama macluumaad kale oo loo baahan yahay sahankooda;
13. "Sannad-maaliyadeed" waxaa loola jeedaa waqtiga loogu talo-galay miisaaniyadda sanadla ah ee la siiyo, in ay ku shaqeyso hay'adda istaatiskada Qaranka muddo Labo iyo Toban (12)bilood ah;
14. "Xubnaha Dowladda" waxaa loola jeedaa:
    b) Xubin kasta oo ka mid ah Dowladda Federaalka;
    t) Xubin kasta oo kamid ah Dowladaha xubinta ka ah federaalka;
    j) Xubin kasta oo ka mid ah dowladdada gobaleedyada;
    x) Hay'ad kasta oo lagu asaasay sharci Baarlamaan; ama
    Kh) Hay'ad kasta oo lagu asaasay sharci ujeeddadiisu tahay danta guud;
15. "Waaxda Dowladda" waxaa loola jeedaa xubnaha Dowladda federaalka ama dawladaha xubnaha ka ah Federaalka;
16. "Dowladda hoose" waxaa loola jeedaa waax-maamul-dadweyne oo ka jira heerka ugu hooseeya Dowladda Federaalka;

17. "Heshiis is-fahan" waxaa loola jeedaa heshiis laba geesood ah ama dhinacyo badan ka dhexeeya, iyo mid ay galeen labo dhinac ama in ka badan, kaasoo muujinaya wax wada qabsi;
18. "Xog-sharraxaad" waxaa loola jeedaa xog-faahfaahin ka bixinaysa, sifooyinka dadweynaha, qofka, qoyska ama xog lagu soo uruuriyey tiro-koob-sahan ama cilmi baaris tijaabo ay ku jiraan ganacsi;
19. "Wasiir" waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta
20. "Hannaanka Tiro-koobka Qaranka" waxaa loola jeedaa hannaanka tiro-koobyada Qaranka ee lagu asaasay si waafaqsan Qodobka 3aad ee Sharcigan, loona soo gaabiyo "HTQ"
21. "Xogta Rasmiga ah" waxaa loola jeedaa tiro-koobka uu qorsheeyay AgaasimahaHay'adda Istaatistikada Qaranka, sida tiro-koobka rasmiga ah ee ku xusan qodobka 51aad ee Sharcigan;
22. "Tilmaamid" waxaa loola jeedaa qeexidda ku xusan Sharcigan dhexdiisa,
23. "Madaxweyne" waxaa loola jeedaa Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya (JFS);
24. "Ra'iisal Waraare" waxaa loola jeedaa Ra'iisal Waasaaraha Xukuumadda JFS;
25. "Hay'ad Cilmi-baaris" waxaa loola jeedaa hay'ad walba oo samaysa cilmi-baarista lagu qeexay Jadwalka1aad ee Sharcigan ama qof kasta oo sameeynaya cilmi-baaris;
26. "Jawaab-celiye" waxaa loola jeedaa:
    b) Qof ama qoys la siiyey tixgelin si loo wareysto;
    t) Hay'ad kasta oo dawladeed ama ururro kale oo la rabo in la ogaado dhaqdhaqaqa hawlahooda wareysina looga baahday;
27. "Muunad" waxaa loola jeedaa nidaam-macluumaad oo la xiriira koox, bulsho ama dadweynaha oo laga soo dhex saaro qeyb kamid ah, iyadoo la adeegsanayo farsamooyinka tiro-koobka si macluumaad looga helo dadweynaha;
28. "Waax" waxaa loola jeedaa waax hay'adaha dowladdada kamid ah, una adeegta dadweynaha, lana leh xiriir Wasaaradaha ay shaqada wadaagaan, lehna shaqo iyo qorshe u gaar ah;
29. "Daneeyeyaasha" waxaa loola jeedaa daneeyeyaasha ama ka faa'ideystayaasha tiro- koobka;

30. "Heerarka tayada" waxaa loola jeedaa heerarka tayada iyo wax ku oolnimada tiro-koobka la sameeyey marka la eego Sharcigan,
31. "Hay'adaha Istaatistikada" waxaa loola jeedaa Wasaaraddaha Dowladdada Federaalka ama dowladaha hoose oo leh mas'uuliyad, uu oggolaanayo Sharcigan in ay soo ururiyaan xogta, iskuna duwaan ama faafiyaan macluumaadka xogta dadweynaha iyaga oo raacaya:
    (b) Sharcigan Istaatistikada JFS ee 2019;
    (t) Sharciga lagu dhisay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya Xeer Lr: 130 ee 22kii Abriil 2011;
    (j) Sharciga dakhliga dowladda
    (x) Sharciga canshuuraha; iyo
    (kh) Sharciga Dawladaha hoose.
32. "Xog-ururinta tiro-koobka" waxaa loola jeedaa hab-raaca loo marayo:
    b) Tiro-koob kasta oo aan ahayn tiro-koobka lagu xusay faqrada (t) ee soo socota, ama in la sameeyo sahan iyadoo la raacayo arrimaha lagu sheegay jadwalka 1aad ee Sharcigan.
    t) Ururinta dokumentiyada maamulka, macluumaadka iyo galka diiwaan gelinta ooah in la kaydiyo macluumaadka, in la soo ururiyo, in la soo saaro iyo in la faafiyo xogta rasmiga ah, loomana adeegsan karo si shakhsi ah;
    j) In la sameeyo tiro-koob dadka, xoolaha iyo guryaha ah; ama
    x) In la sameeyo soo ururin xogta juqraafiga iyadoo loo adeegsanayo si tirokoob ahaan ah;
33. "Daneeyaha tiro-koobka" waxaa loola jeedaa qof, koox ama urur daneynaya ka fa'ideysiga ama horumarinta hawlaha tiro-koobka;
34. "Tiro-koob soo-saare" waxaa loola jeedaa Hay'adda Istaatistikada Qaranka ama hay'adaha kale ee dowladdada ee soo-saara xogta tiro-koobka iyo hay'adaha caalamiga ah oo ay iyagu u baahan yihiin si waafaqsan faqradaha Qodobka 48aad ee Sharcigan, si ay u sameeyaan xog-ururin;
35. "Tiro-koob" waxaa loola jeedaa tirooyin-macluumaad oo la xiriira arrimaha tiro-koobka dadka, dhaqaalaha, maaliyadda, deegaanka, arrimha bulshada oo ay ka uruuriso Dowladda Federaalku dhammaan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka (DXDF) iyo Gobolka Banaadir xogtaas oo la isugu-duway loona falanqeeyey si waafaqsan cilmi-baarista iyo qaababka

tiro-koobka oo ay ku jirto xogta juqraafiga iyo dayax gacmeedka lagu qaado;

36. "Maamul gobol" waxaa loola jeedaa Maamul gobaleedyada ka tirsan Dawladah Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.
37. "Sahan" waxaa loola jeedaa xog-ururinta tiro-koobka ee lagu sheegay Jadwalka 1aad ee Sharcigan, halka macluumaadka laga soo qaadayo dhammaan dadweynaha ama laga qaadayo qeyb kamid ah bulshada iyadoo la adeegsanayo habka muunadda (sampling);
38. "Machadka tababarka" waxaa loola jeeda machad kasta oo bixiya waxbarasho sare;
39. "Adeegsadeyaasha tiro koobka" waa isticmaalayaasha xogta tirakoobka waxaana ka mid ah hay'adaha dowladda, hay'adaha ganacsiga gaarka loo leeyahay, hay'adaha cilmi-baarista, hay'adaha tababarka, ururada caalamiga ah iyo kuwa gobolka ama qofkasta oo adeegsada xogta tiro koobka

Cutbabka 2aad
Hannaanka Istaatistikada Qaranka
Qodobka 3aad
Dhisidda iyo Horumarinta Hannaanka Istaatistikada Qaranka

1. Waxa la asaasayaa oo la hormarinayaa hannaanka Istaatistikada Qaranka iyo qeybaha uu ka kooban yahay iyo sidoo kale xiriirka ka dhexeeya ee lagu xusay Qodobka4aad ee xeerkan, kuwaas oo ay ka mid yihiin;
   b) Bixinta macluumad ujeeddadiisu tahay in la'isu-keeno, la soo-saaro, la lafaguro iyo in la faafiyo xogta tiro-koobka dawladda iyo xogaha kale ee isticmaalka xogta rasmiga ah ee dawladda **marka laga reebo waxyaabaha la xiriira arrimaha ciidamada iyo amniga.**
   t) In la sameeyo cilmi-baaris, lana hormariyo heerka, qaabka iyo farsamada tiro-Koobka dalka; iyo
   j) In la tababaro khubaro ku takhasustay Istaatistikada iyo adeegsiga Istaatistikada.

Qodobka 4aad
Qeybaha Hannanka Istaatistikada Qaranka

1. Qeybaha Hannanka Istaatistikada Qaranka waxa kamid ah:

b) Soo saaridda xogta oo ay ku jirto xogta Wasaaradaha Dawladda iyo xogta Danceeyeyaasha kale ee soo saara xog iyaga u gaar ah;
t) Jawaab bixiyeyaal bixiya xogta tiro-koobka;
j) Adeegsiga xogta iyada oo la marinayo, sida warbaahinta; iyo
x) Adeegsiga Cilmi-baareyaasha, jaamacadahaha iyo macaahidda.

Qodobka 5aad

Ujeedooyinka iyo maamulka Hannaanka Istaatistikada Qaranka iyo mabaadi'da xogta rasmiga ah

1. Ujeedooyinka iyo maamulka Hannaanka Istaatistikada Qaranaka waxaa kamid ah:
   b) Diyaarinta in la soo ururiyo xogta, in la isku-duwo, in la soo saaro, in la faafiyo iyo in la kaydiyo oo la xifdiyo xogta rasmiga ah iyo xogaha kale;
   t) Xiriirin iyo dhisid tayo waarta oo lagu ururiyo xogta, lagu soo saaro, lagu lafo guro iyo in faafiyo xogta tiro-koobka iyadoo la raacayo mabaadi'da asaaska u ah Qaramada Midoobay iyo Xeerka Istaatistikada Afrika ee ururinta xogta rasmiga ah;
   j) In la xaqiijiyo dhowrista si qarsoodi ah macluumaadka ay bixiyaan jawaab celiyeyaasha; iyo
   x) In sare loo qaado muhiimadda adeegsiga xogta istaastikada oo ah;
      i. Caddeymo ku saabsan sameynta qorshaha iyo in go'aan laga gaaro;
      ii. Qaabeynta naqshadda;
      iii. Kormeerid iyo qiimayn lagu sameeyu go'aannada la gaaro.
2. Xogta tiro-koobka dawladdu waa inay noqotaa:
   b) Mid xiriir la leh jihooyinka laga keenay, sax ah, la isku haleyn karo oo waqtiyeysan;
   t) Leh ujeedo iyo dhammaystirnaan;
   j) La isu-keeno, la soo saaro, loona lafa-guro hab cilmiyeysan oo si cad u muuqda;
   x) In loo faafiyo si waafaqsan sharcigan.
   Kh) In ay ahaato mid daah-furan oo la awoodi karo;
   d) In loo raaco sida ugu haboon ee heerarka Qaran iyo kuwa Caalamiga ah; iyo

r) In si taxaddar leh loo qeybiyo iyada oo la dhowrayo jinsiga qofka, aqoontiisa, shaqada uu hayo, hadii uu naafo yahay, meesha uu ku nool yahay iyo wixi kale ee xiriir la leh tilmaamaha la gorfeynayo.

3. Qeybaha uu ka kooban yahay Hannaanka Istaatistikada Qaranka wuxuu la fal-galayaaiskaashi iyo xog is-dhaafsi xagga Istaatistikada, taasna waxa kamid ah:
   b) Horumarinta sameynta qoraallada iyo in la is dhaafsado dokumentiyo iyo macluumaad la xiriira isu keenidda, soo saaridda, faafinta, kaydinta iyo meel ku haynta xogta rasmiga ah ee dawladda;
   t) Adeegsiga xogta rasmiga ah iyo xogaha kale oo ay kamid yihiin xogaha ballaaran ee loo adeegsado xogta tiro-koobka dawladda;
   j) Xafiiska Istaatistikada Qaranka waa in uu horumariyaa oo xiriiriyaa xafiis-gobaleedyada iyo dawladaha hoose iyo kuwa kale ee xogta soo saara;
   x) Ilaalinta wadajirka qeybaha si loo horumariyo xogta Istaatistikada dawladda;
   kh) In la caawiyaa isticmaaleyaasha xogta tiro-koobka waqti kasta oo baahidooduxiriir la leedahay ama ay tilmaamaan baahida ay u qabaan xogta;
   d) Horumarinta cilmi-baarista ku saabsan habka tiro-koobka, farsamada iyo heerarka tayada;
   r) Tababarro loo fidiyo shaqaalaha Istaatistikada iyo isticmaaleyaasha Istaatistikada.
4. Hannaanka Istaatistikada Qaranka waa in loo maamulaa loona xiriiriyaa si-hufan si loo hubiyo in ujeeddooyinkiisa lagu gaaro:
   b) Qiimo wax ku ool ah oo hufan; iyo
   t) Iyadoo loo raacayo si waafaqsan ujeeddada iyo mabaadi'da Istaatistikada ee ku Xusan faqrada (b) ee qodob-hoosaadka 1aad ee Qodobkaan.

Cutubka 3aad

Dhismaha iyo shaqooyinka Hay'adda Istaatistikada

Qodobka 6aad

Dhismaha Hay'adda Istaatistikada

1. Sharcigan waxa lagu asaasayaa hay'ad madax-bannaan oo leh sifo-sharciyeed, loona yaqaano Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya loona soo gaabiyo HIQS, taas oo ah midda kaydisa dhammaan xogaha tiro-koobka Waddanka soomaaliyeed.
2. Hay'addu waxay leedahay shaqsiyad qaanuuni ah, waxayna awood u leedahay:
   b) In ay dacwad soo oogi karto, laguna soo oogi karo;
   t) In ay geli karto heshiisyada shaqadeeda iyo waxqabadkeeda kor u qaadaya, kuwaas oo sharcigan waafaqsan;
   j) Hay'adda Istaatistikada Qaranku, waxay iibsan kartaa, haysan kartaa ama iska iibin kartaa hantideeda si waafaqsan Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka;
   x) Hay'adda Istaatistikada Qaranku, waxay xaq u leedahay in ay iska ilaaliso wax kasta oo u keenaya khasaare, sida in ay deyn qaadato ama in ay dhibaato soo gaarto;
   kh) Hay'addu waxay ammaahan kartaa qaddar lacag ah oo dawladdu u oggolaato si waafaqsan sharciga maamulka maaliyadda;
   d) Hay'addu waxay qaadan kartaa wixii qalab ama lacag ah ee loogu deeqo;
   r) Hay'addu waxay qoran kartaa shaqaale qabta shaqooyinka hay'adda si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed ee dhaqan galka ah.
3. Iyadoo aan laga tageyn ujeeddooyinka ku xusan faqrada (1) ee Qodobkan, hay'addu waa in ay sameysaa nidaam guud oo dhexe oo xogta lagu ururiyo sida ugu wanaagsan iyadoo la raacayo:

b) In shaqaalaha hay'adda iyo khubarada kale ee la shaqeeya lagu dhiso baahiyaha lagu qeexay faqradaha (b), (t), (j) iyo (x) ee farqada 2aad ee Qodobkan ee lagu qeexay awoodaha dhismaha hay'adda;

t) In shaqaalaha hay'addu si ereg ah ula shaqeyn karaan hay'adaha kale ee dowladda; iyo

j) In tababarrada la siiyo shaqaalaha hay'adda iyo khubarada la shaqeeya xiriir la leeyihiin sida lagu xusay faqrada (b) ee Qodob-hoosaadka 3aad ee Qodobkan.

4. Xarunta Hay'adda Istaatistikada Qaranka waxay ahaaneysaa Caasimadda Dalka ee Muqdisho, waxayna xarumo qeybeed ku yeelaneysaa dowlad gobaleedyada iyo degmooyinka JFS
5. Xarumaha qeybaha dowlad-gobaleedyada, iyo degmooyinka dhammaantood waxay warbixin siinayaan Agaasimha Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyo hay'adaha xiriirka la leh ee **DXDF** ka jira.

Qodobka 7aad
Shaqooyinka Hay'adda Istaatistikada Qaranka

1. HIQS waa hay'adda dalka mas'uulka uga ah horumarinta iyo maareynta xogta rasmiga ah, isla markaana awoodda u leh ilaalinta xogaha iyo macluumaadka dawladda, waxaana Shaqadeeda kamid ah:
   b) Xiriinta Hannaanka Istaatistikada Qaranka;
   t) Talo-siinta Dawladda Federaalka iyo maamul gobaleedyada arrimaha la xiriira
      Horumarinta Istaatistikada Qaranka;
   j) Talo-siinta Wasiirka arrimha la xiriira xogta rasmiga ah, haddii ay tahay waajibka hay'adda ama codsi uga yimid wasiirka;
   x) Horumarinta iyo dhiirigelinta adeegsiga Istaatistikada iyadoo la waafajinayo heerarka iyo habka ugu haboon Hannaanka Istaatistikada Qaranka;
   Kh) Ururinta, isku-hagaajinta, lafa-guridda, tarjumidda, baahinta iyo faafinta macluumaadka Istaatistikada Qaranka keligeed ama iyadoo la kaashaneysa Waasaaradaha Dawladda, DXDF iyo Daneeyayaasha kale;
   d) Horumarinta, adkeynta si dhammeystiran iyo ururinta xogta Istaatistikada Qaranka, iyadoo la dhiiri gelinayo in la sameeyo waaxyo Istaatistikada qaabilsan Wasaaradaha xogta soo saara dhexdooda si Dawladaha hoose xogta u kaydiyaan uguna diraan Xafiiska Istaatistikada Qaranka;
   r) Dhiirigelinta iyo horumarinta xogaha Mugga-weyn sidii loogu isticmaali lahaa lafa gurka iyo soo saaridda xogaha Dawladda;
   s) In la sameeyo xafiis qaabilsan la xiriirka hay'adaha caalamiga ee arrimaha Istaatistikada; iyo
   Sh) In ay qabato dhamman shaqooyinka la xiriira Istaatistikada maadaama hay'addani dawladda ugu xilsaaran tahay tiro-koobka.

2. Xafiiska Hay'adda Istaatistikada Qaranku waa inuu:

b) Qaabeeyaa iyadoo ogolaansho laga helayo Wasiirka qaabilsan IstaatistikadaSameynta qaabka siyaasadda Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyadoo la raacayo mabaadi'daasaasiga Qaramada Midoobay ee xogta rasmiga ah iyo Xeerka Istaatistikada Afrika, lana hubiyo fulinteeda, dabagalkeeda iyo qiimayn lagusameeyo; iyo

t) Go'aamiyaa qabashada mas'uuliyadda loo qaabeynayo fulinta howl-sanadeedka hay'adda, ayna ku jirto:

i. Ururinta xogta, soo saaridda, lafaguridda iyo faafinta xogta rasmiga ah iyadoola raacayo ujeeddooyinka Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyo mabaadi'da Istaatistikada ee lagu xusay Qodobada Xeerkan;

ii. Iyadoo sharcigan lagu dhaqmayo in la sameeyaa xog-ururin waqtiga iyo markaay ku habboon tahay, wixii dokumenti iyo foomam oo ku saabsan xogtaasna la kaydiyo.

iii. In sida ugu fiican loo kala dhig-dhigo, la kaydiyo loona xafido xogta macluumaadka Istaatistikada;

iv. Qaabkii, baaxadda iyo waqtiga ugu wanaagsan faafinta macluumaadka Istaatistikada;

v. Hormarinta habka loo adeegsado xogta mugga-weyn ee soo saaridda xogta rasmiga ah;

vi. In la iswaafajiyo, la iskuna geeyo xogta laga soo uruuriyay gobollada iyadoo aan loo eegeynin in ay soo uruuriyeen dawladaha hoose ama haya'daha kale ee dawladda ama kuwa gaarka ah;

vii. Horumarinta shaqooyinka Istaatistikada; ama

viii. Joojinta shaqooyinka Istaatistikada.

Cutubka 4aad
Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada (Board of Directors)
Qodobka 8aad
Dhismaha Golaha Maamulka (Board of Directors)

1. Waxaa la asaasayaa Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada Qaranka, kaas oo mas'uulka ka ah arrimaha la-socodka, kor-joogteynta iyo ka talo-bixinta shaqooyinka ay qabanayso Hay'adda Istaatistikada Qaranka.

Qodobka 9aad
Awoodaha iyo Shaqooyinka Golaha Maamulka

1. Awoodaha iyo shaqooyinka Golaha Maamulka waxay noqonayaan:
   b) Dejinta, kormeeridda iyo fulinta qaabka ay hay'addu u shaqaneyso;
   t) La-socoshada si joogta ah qaab-dhismeedka hay'adda iyo heerarka shaqaalaha;
   j) Qoridda shaqaalaha ku habboon hay'adda marka ay buuxiyaan shuruudaha iyo xaaladaha shaqada iyadoo la raacayo Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed;
   x) Iyadoo lala tashanayo hay'adaha ay khuseyso waxaa si ku meel gaar ah loo magacaabayaa dad dheeraad ah in ay noqdaan shaqaaale loo igmaday soo ururinta macluumaad gaar ah iyadoo la raacayo shuruudaha iyo xaaladaha shaqaalaha taas oo Golaha Maamulka iyo cidii kale ee awood u leh ay go'aan ka gaari karaan;
   Kh) Iyadoo la raacayo Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed, waa in ay tTallaabo sharciga waafaqsan ka qaadaan shaqaalaha hay'adda ee hor-istaaga ama jebiya sharciyada Istaatistikada, ama sameeya ficil wiiqaya maamulka maaliyadda iyo maamulka gudaha hay'adda, ama ku-kaca wax is dabamarin;
   d) Ogolaanshaha qorsha-hawleedka hay'adda, barnaamijyada shaqo ee sanadlaha ah iyo Miisaaniyaddiisa, kuwaas oo ay tahay in uu diyaaro Xafiiska Hay'adda Istaatistikada Qaranka;
   r) Soo-gudbinta miisaaniyadda ay ogolaadaan Goluhu loona gudbiyo Wasaaradda Maaliyadda; iyo
   s) Soo-gudbinta war bixinta Saddex biloodlaha ah ee wax-qabadka Hay'adda Istaatistikada Qaranka oo loo gudbinayo markuu codsado wasiirku.
2. Goluhu wuxuu magacaabayaa Guddiyada Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada Qaran ee Maaliyadda iyo Hanti-dhowrka, iyo sidoo kale Guddiyo kale marka loo baahdo.
3. Goluhu wuxuu wada shaqeyn la samaeyn karaa hay'ado kale oo gudaha dalka iyo dibadda ah oo ay u arkaan in ay ku habboon yihiin sii-xoojinta ujeeddooyinka hay'adda loo dhisay.

4. Golahu wuxuu talo-ka-bixin karaa tallaabooyin fulineed iyo sharciyeed ee Hay'adda si loo horumariyo hufnaanta Hannaanka Istaatistikada Qaranka oo ay ku jirto qaab dhismeedka haya'dda Istaatistikada.
5. Iyadoo la tixgelinayo isku xirka Hannaanka Istaatistikada Qaranka, goluhu wuxuu, si waafaqsan sharcigan:

b) soo-jeedinayaa, sidoo kalena ogolaanayaa marka la sameeyo Istaraatiijiyadda Qaranka ee lagu horumarinayo Istaatistikada;

t) Dejinayaa qaab lagu hago laguna dabagalo fulinta qorshayaaasha iyo barnaamijyada hay'adda;

j) Dhisayaa habka ugu habboon ee kor loogu qaado Hannaanka Istaatistikada dawladeed oo toosan wax ku oolna ah;

x) Dejinayaa siyaasad ku saabsan dhammaan arrimaha la xiriira Shaqooyinka haya'dda Istaatistikada, heerarka iyo qeybaha ay ka kooban tahay

Kh) sharaxayaa hababka ugu habboon ee lagu horumarin karo isku- xirka Istaatistikada, wuxuuna abuurayaa hannaanka isku-xirka Istaatistikada heer Federaal iyo heer DXDF iyo

d) Dib-u-eegis ku sameeyaa barnaamijyada Istaatistikada ee waaxyaha iyo hay'adaha dawladda federaalka iyo DXDF si loo dhiso mas'uuliyad la xiriirta arrimaha barnaamijyada Istaatistikada dawladda.

6. Goluhu wuxuu go'aamin karaa inuu bixiyo kaalmo farsamo iyo kormeer ay ku sameeyaan howlaha Istaatistikada ee ka socda heer Federaal iyo heer Dowlad-gobaleed;
7. Goluhu wuxuu sidoo kale fulin karaa hawl kasta **oo** la xiriirta istaatiistikada ee uu goluhu ku tala bixiyo oo wasiirkuna uu ku waafaqo.

Qodobka 10^aad
Waajibaadka Ammaano ee Golaha Maamulka

1. Golaha Maamulka waxaa ku waajib ah:

b) Inuu u dhaqmo si ammaano, daacadnimo iyo hufnaan leh, isla markaana si daah-furan hay'adda arimaheeda maaliyadda loo maamulo;

t) Inuu hubiyo ururintá dakhliga hay'adda;

j) Inuu sida ugu taxadarka badan u guto waajibaadkiisa si loo hubiyo ilaalinta hantida iyo kaydka hay'adda;

x) Inuu dhowro hannanka hufan ee wax ku oolka ah, oo leh daah-furnaan maamul iyo Maaliyadeed iyo hannan baaritaan gudaha;

kh) Inuu ka hortago is daba-marinta, kharashka micno la'aanta ku baxa, kana dhasha xatooyada iyo midka aan waafaqsaneyn shaqooyinka haya'dda;

d)Inuu dib-u-eegis ku sameeyo soo-jeedinta miisaaniyadda ku saleysan shaqooyinka Istaatistikada, waana inuu soo gudbiyo miisaaniyad isku-jir ah ee haya'dda loona gudbiyo Wasaaradda Qorshaynta.

r) Inuu si waafaqsan sharciga Iibka Qaranka wax ku soo iibsado isagana iibiyo kaas oo keenaya cadaalad, sinnaan, daah-furnaan, tartan xalaal ah iyo qiime macquul ah.

2. Xubin Golaha Maamulka kamid ah uma dhaqmi karto hab ka baxsan mas'uuliyadda Golaha Maamulka iyo hab-raaciisa, iyadoo la eegayo sharcigan sida; inuu adeegsado awood jago, mudnaan, macluumaad qarsoodi ah oo uu helay isaga oo xubin ka ah Golaha Maamulka, iyo inuu si shakhsi ah u qariyo macluumaad dheeraad ah oo uu helay ama si aan hagaagsaneyn uu qof kale ugu faa'iideeyo. Taas oo sababi karta in xubintu ciqaab ama ganaax Goluhu gooyey ku muteysato.

Qodobka 11aad
Xubnaha Golaha Maamulka

1. Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada Qaranku wuxuu ka kooban yahay sagaal xubnood oo uu ka mid yahay Agaasimaha Guud ee Hay'adda Istaatisktida.

b) Xubnaha intooda kale waxaa

c) waxaa Xeer-nidaamiye ku soo saaraya Wasiirka, isaga oo la tashanaya Wasiirrada Qorshaynta ee DXDF inta aanan lasoo xulin lagu soo xulayaa aqoontooda iyo qibradooda shaqo iyadoo lagu soo xulaayo tartan furan.;

t) Habraaca lagu soo xulayo Golaha Maamulka xubnaha.

2. Qof kasta oo la magacaabayo kuna xusan faqrada (1) waa inuu aqoon heer jaamacadeed iyo khibrad shaqo oo aan ka yarayn 5 sano u leeyahay cilmiga Istaatistikada, dhaqaalaha, tiknoolijiyada isgaarsiinta, siyaasadda **ama** sharciga.

3. Marka lasoo dhameystiro xubnaha, Wasiirka ayaa u soo gudbinaya Golaha Wasiirada liiska Xubnaha si ay u ansixiyaan. Raisul Wasaaraha ayaa liiska

xubnaha la ansixiyay u gudbinaayo madaxweeynaha si uu u saxiixo kadibna loogu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dowladda

4. Xubnaha Goluhu kulankooda ugu horeeya ayey ku dooranayaan Guddoomiye iyo Gudoomiye ku-xigeen ay iska dhex dooranayaan xubnaha Golaha Maamulka. Agaasimaha Hay'adda Istaatikada ayaa noqonaya Xoghayaha Golaha Maamulka.
5. Gudoomiye ku-xigeenku wuxuu qabanayaa shaqada gudoomiyaha waqtiyada uu maqan yahay ama markuu awoodi waayo gudashada shaqadiisa ama uu asagu u wakiisho qabashada hawlahaas.

Qodoka 12aad
Muddada Xil-hayta Xubnaha Golaha Maamulka

1. Xubnaha Goluhu waxay xilka haynayaan muddo 5 sano ah, waxayna xaq u leeyihiin in mar labaad loo magacaabo, marka uu ka dhamaado xilliga loogu talo galay. Xubnaha looma magacaabi karo labo mudo xileed ka badan.

Qodoka 13aad
Shuruudda Magacaabista Xubnaha Golaha Maamulka

Qofka loo magacaabayo xubin ka noqoshada Golaha Maamulka waa in uu:

1. Yahay Soomaali;
2. Degan yahay Soomaaliya;
3. Da'diisu ka yareyn shan iyo labaatan (25) sano;
4. Haysto Shahaado heer jaamacadeed iyo khibrad shaqo oo aan ka yarayn 5 sano u leeyahay cilmiga Istaatistikada, dhaqaalaha, tiknoolijiyada isgaarsiinta, siyaasadda **ama** sharciga
5. In uu san ahayn mas'uul xubin ka ah Baarlamaanka Federaalka, **DXDF** iyo dawladaha hoose; hadii uu xubin ka yahay Baarlamaanka Federaalka, Dawlad-gobolleedyadda iyo dawladaha hoose, waa in xilkaas iska so casilaa inta aanan loo magacaabin xubinimadda Golaha Maamulka.
6. Gelin fal-dembiyeed maxkamadi ku xukuntay oo ammaanada iyo sumcadiisa wax yeeleeyey.

Qodoka 14aad
Xil ka-qaadis Xubin Ka mid ah Golaha Maamulka

1. Marka uu Wasiirka soo jeediyo Golaha Wasiirraduna ay ogalaadaan, Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda JFS wuxuu xil-ka-qaadis ku sameyn karaa xubin Golaha Maamulka ka mid ah, waa haddii Wasiirku caddeeyo Ra'iisal Wasaaruhuna ku qanco in shaqsiga xubinta ka ah:
   b) Xilkiisa u gudan waayey xanuun jirka ama maskaxda ah;
   t) Galay fal dambi ah, kaas oo **uu** Wasiirku **hubiyay in uu yahay** mid khatar ah, kuna filan in xilka looga qaado,
   j) U gudan waayey si wanaagsan hawshii xubinimada Golaha Maamulka.
2. Wasiirku wuxuu bixin karaa talada ku-xusan faqrada (1) ee Qodobkan, kadib marka xubinta Golaha Maamulka ee xilka laga qaadayo ay hesho fursad lagu dhagaysto.

Qodoka 15aad:
Banneynta Xubinnimada Golaha Maamulka iyo Buuxinta Xilkaas

1. Xilka xubinta Golaha Maamulka waxay noqonaysaa mid bannaan haddii xubintu:
   b) Ay tahay mid aan buuxin shuruudda ku-xusan qodobka 13aad ee Xeerkan;
   t) Is-casilaad qoraal ah uu u gudbiyo Wasiirka uuna ka aqbalo;
   j) Ka maqnaado saddex kulan oo isku-xigta, isagoo aan ku maqneyn fasax uusan ogeyn Gudoomiyaha Goluhu;
   x) Laga qaado xilka, sida kuxusan Qodobka 14aad ee Xeerkan;
   kh) Geeriyoodo.
2. Haddii xubin Golaha Maamulka kamid ah ay banneyso xilka sida ku cad Faqrada sare ee Qodobkan, xilkaas waa in la buuxiyaa oo loo magacaabaa qofka ku habboon iyadoo la raacayo si waafaqsan Qodobka 11aad ee Xeerkan.

Qodoka 16aad
Guddiyada Golaha Maamulka Istaatistikada

1. Iyada oo la tixraacayo shuruudaha lagama maarmaanka u ah, Goluhu wuxuu go'aaminayaa ka-magacaabidda dhexdiisa Gudiyada Maaliyadda iyo Hanta-dhowrka ee Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada Qaranka.
2. Goluhu wuxuu kale oo magacaabi karaa Guddiyo dheeraad ah marka loo baahdo:
   b) Talo-bixin ku saabsan arrimaha la xiriira awoodaha iyo shaqooyinka Golaha Maamulka; iyo
   t) Ka-caawinta Golaha Maamulka gudashada shaqooyinka iyo awoodaha ku aaddan sida uu hawl ugu idman karo cid Golaha Maamulka ka baxsan.
3. Goluhu waxaa uu u magacaabi karaa xubnaha Gudiyada la dhisay **1- 3 qof** oo aan ka tirsaneyn Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada Qaranka, laakiin Guddi kasta oo la dhisayo waxaa kamid noqonaya hal xubin oo ka tirsan Golaha Maamulka Istaatistikada Qaranka.
4. Marka Xubnaha Guddiyada la dhisayo ay ka kooban yihiin dhowr xubnood, Golaha Maamulka Istaatistikada Qaranku waxaa uu u magacaabayaa xubin asaga kamid ah in uu noqdo madaxa Guddiga.
5. Goluhu kama qaadi karo mas'uuliyadda hawlaha shaqada lagu aaminay Guddiyada la dhisay ee hoos imaanaya qodobkan, haddii aysan Xubnaha Guddigu gudan waayin shaqada loo diray.
6. Shirarka Guddiyada hoose waxaa shir guddoominaya Guddoomiyaha Guddiga, haddii uu ka maqan yahay shirka xubnaha ayaa iska-dhex dooranaya qof shir-guddoomiye ah.
7. Kooramka shirarka Guddi-hoosaadyada waa inta ugu badan tirada guud ahaan ee xubnaha Guddigu marka ay joogaan (50%+1).
8. Go'aan ay gaareen ama hawl ay qabteen guddi-hoosaadka waxaa uu wax kama jiraan noqon karaa oo kaliya marka;
   b) Uusan kooramku dhammeyn; iyo
   t) Kulanka Guddiga uu ku jiro qof aan ka tirsaneyn Guddiga, xataa haddii la gaaray go'aan la isku raacay waqtigaas isaga ah ama uu go'aanka la gaaray ay ogalaadeen inta badan xubnaha Guddiga goob joogga ah marka codka la qaaday.

9. Qofka shir guddoominaya kulanka Guddiga waa inuu sameeyaa diiwaangelin iyo hadal-qoraal lagu sameeyo geedi socodka shirka, waana inuu diiwaangelintaas iyo hadal-qoraalkaba u gudbiyaa Golaha Maamulka Haya'adda Istaatistikada marka uu dhammaado shirka guddi-hoosaadka.
10. Goluhu wuxuu kala diri karaa ama dib-u-habeyn karaan guddi-hoosaadyada, marka ay gudan waayaan shaqada loo idmaday.

Qodoka 17aad
Daah-furnaańta Danaha Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada

1. Xubin kasta oo Golaha Maamulka ka mid ah waa:
   b) Inuu usoo bandhigaa Xubnaha kale ee Golaha Maamulka ganacsiga dadban ama tooska ah ee uu ku jiro ama ay xaaskiisu ku lug leedahay uuna ka caddeeyo Golaha Maamulka hortiisa; iyo
   t) In shirka laga saaro marka ay ku caddaato arrimaha lagu sheegay faqrada 1 (b) ee Qodobkan, ilaa ay Goluhu go'aan ka gaarayaan in danaha ganacsi ee xubinta Golaha Maamulka uusan xiriir la laheyn shaqada Golaha Maamulka.
2. Daah-furka ay bixisay xubin ka tirsan Golaha Maamulka iyadoo la fiirinayo Faqrada (1) ee Qodobkan iyo go'aanka ay qaateen xubnaha kale ee ka tirsan Golaha Maamulka la siinayo daah-furka waa in la diiwaangeliyo, lana diyaariyo Hadal-qoraalka shirka.
3. Xubin kasta oo u hogaansami weyda tallaabooyinka lagu xusay farqada (1) ee Qodobkan, waa dembi uu galay, waxaana lagu ganaaxayaa qadar lacag aan ka yareeyn hal bil mushaar iyo gunno bileedkiisa iyada oo wixii ciqaab ah loo marayo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

Qodoka 18aad
Go'aannada iyo Shirarka Golaha Maamulka

1. Wasiirka waa in uu isugu yeeraa shirka ugu horreeyo ee Golaha Maamulka iyo kuwa aanan caadi ahayn, iyadoo la tixgalinayo faqrada (3) ee Qodobkan.

2. Shirarka Golaha Maamulka waa in lagu qabtaa waqtiyada iyo meelaha loogu talo galay oo Goluhu go'aamiyo, ugu yaraan waa in ay Afar (4) jeer sanadkii qabsadaan shirarkooda.
3. Gudoomiyaha Golaha Maamulka wuxuu isugu yeeri karaa Golaha Maamulka shir gaar ah ama aan caadi ahayn hadii Wasiirku uu ka helo qoraal uu ku codsanayo ama inta badan xubnaha Golaha Maamulka ay codsadaan in la qabto shir gaar ah.
4. Kooramka shirarka Golaha Maamulka wuxuu ku qabsoomi karaa marka ay joogaan tirada ugu badan ee xubnaha Golaha Maamulka (50%+1).
5. Guddoomiyaha Golaha Maamulka ayaa shir Guddoominaya Kulamada Golaha Maamulka, hadii uusan joogin Guddoomiye ku-xigeenka, hadii labadoodu maqan yihiin Xubnaha Golaha Maamulka ayaa iska-dhex dooranaya shir-guddoomiye.
6. Go'aanka ay isku raacaan inta badan xubnaha Golaha Maamulka shirka jooga ayaa ah go'aanka Golaha Maamulka, haddii ay dhacdo inay is le'ekaadaan codadka tirada xubnaha Golaha Maamulka; shir guddoonka dhinaca uu u codeeyo ayaa ansax ah.
7. Go'aan ay gaareen Xubnaha Golaha Maamulka ama shaqo kasta oo ay qabteen waxay wax kama jiraan noqan kartaa haddii;
   b) Uusan Golaha Maamulka u dhameystirneyn tiradii loo baahnaaa ee kulanku ku qabsoomi lahaa;

   t) Kulanka Golaha Maamulka uu ku jiro qof aan ka tirsaneyn Golaha Maamulka, xataa haddii la gaaray go'aan la isku raacay waqtigaas isaga ah ama uu go'aanka la gaaray ay oggalaadeen inta badan xubnaha Golaha Maamulka goob joogga ah marka codka la qaaday.

8. Iyadoo la eegayo sharcigan, Goluhu waxay nidaamin karaan habka shaqada Golaha Maamulka u socoto taas oo ay waajib tahay in Goluhu ku dhaqmaan marka ay shirayaan.
9. Goluhu waa inay si wanaagsan u diyaariyaan hadal-qoraalka shirkooda, iyaga oo adeegsanaya Xog-hayaha Golaha Maamulka .
10. Golaha Maamulka waxay ku marti qaadi karaan shirarka Golaha Maamulka inuu ka qeyb galo qof walba oo ay u arkaan in fikirkiisa muhiim u yahay shirka, laakiin qofkaasi xaq uma laha inuu cod ka dhiibto shirka.
11. Iyadoo la tixgalinayo faqrada (9) ee Qodobkan, wax go'aan ah oo aan qoraal ahayn lagama soo saari karo shirka Golaha Maamulka, laakin

waxaa suurogal ah in Xubnaha Goluhu go'aan ka gaaraan hawlo kale oo ay saxiixeen xubnaha Golaha Maamulka iyagoo ku sugan gudaha Soomaaliya kooramkuna uu buuxo, wuxuu noqonaya go'aankaasi;

b) mid saameyntiisa leh haddii uu ka soo baxay kulan Xubnaha Goluhu isugu yimaadeen oo si sax u qabsoomay,

t) in la diiwaangeliyo go'aannadaas, si loogu ansixiyo shirarka soo socda ee Golaha Maamulka.

Qodoka 19aad
Mushaaraadka iyo Gunnooyinka Xubnaha iyo Guddiyadda Golaha Maamulka

1. Goluhu waa inuu ogolaado gunnooyinka ay muteysteen xubnaha Golaha Maamulka Istaatistikada Qaranka ama xubnaha guddi-hoosaadyada iyadoo la raacayo miisaaniyadda Hay'adda.
2. Goluhu wuxuu dib ugu celinayaa Lacagaha xubnaha Golaha Maamulka Istaatistikada ama Guddi-hoosaadyada Golaha Maamulka ee ah kharashaadka ay ku bixiyeen safaro Caasimadda bannaanka ka ah ama dalka dibbaddiisa ah oo ay galaan waqtiyada ay ka qeyb galayaan shirarka Golaha Maamulka ama Guddi-hoosaadyada

Qodoka 20aad
Xeer-hoosaadyada Golaha Maamulka

1. Goluhu wuxuu sameysanayaa xeer-hoosaadyo la xirrira:

b) Qaabka la-iskugu dubbarido qabashada shirarka Golaha Maamulka, hannaanka shirarka, kooramka iyo qaabka loo diyaarinayo ajendayaasha shirka iyo waxa ka soo baxaya;

t) Habka qorista, tirada, shuruudaha iyo hannaanka shaqaaleysiinta shaqaalaha ay u baahantahay Hay'adda Istaatistikada Qaranka.

j) Shaqada maamulka Haya'adda Istaatistikada Qaranka si aan ka hor-imaaneyn Xeerkan iyo sidii si wanagsan ay ugu gudan lahayd shaqadeeda; iyo

x) Guud ahaan, wax kasta oo Goluhu u arko in **uu** muhiim yahay ama laga miro-dhalinkaro si loo gaaro ujeedooyinka sharcigan.

Cutubka 5aad
Xubnaha Shaqaalaha Hay'adda Istaatistikada
Qodoka 21aad
Magacaabista Agaasimaha Xafiiska Hay'adda Istaatistikada Qaranka

1. Iyadoo la tixgalinayo Qodobbada Xeerkan Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta ayaa soo jeedinaya magacaabista Agaasimaha Hay'adda Istaatistikada Qaranka, ka dib marka ay ogolaadaan Golaha Wasiirrada, Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda JFS ayaa si rasmi ah u magacaabaya Agaasimaha, waxaana magacaabistaas saxiixay Madaxweynaha JFS, kadibna waxaa lagu soo saarayaa faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
2. Qofka loo magacaabayo Agaasimaha waa in uu yahay;
   b) Qof Soomaali ah
   t) Deggan Dalka;
   j) Qof aan Maxkamad ku xukumin si kama danbeys ah dembi la xiriira aamin darro iyo khiyaano uu ku muteeysanayo xabsi aan ganaax lagu badali karin;
   x) Qof haysta Shahaadada Labaad ee Heerka Jaamacadda ku takhasusay cilmiga Istaatistikada, ugu yaraanna toban sano (10) oo khibrad ah u leh hawlaha Istaatistikada, dhaqaalaha iyo Maareeynta Xogta (Management Information Systems);

   Kh) Qof leh aqoon dheeraad ah oo la xiriirta mamulka Istaatistikada si uu u noqdo qof u qalma Agaasimaha Xafiiska Hay'adda Istaatistikada Qaranka;
   d) Qof aan xubin ka ahayn Baarlamaanka, DXDF iyo Dawladaha Hoose.
3. Wasiirka ayaa soo jeedinaya qofka noqonaya Agaasimaha Hay'adda Istatistikadakadib marka uu la tashado Golaha Maamulka Istaatistikadda.
4. Wasiirka ayaa go'aaminaya xaaladaha, shuruudaha ku xeeran iyo gunnooyinka uu qaadanayo Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada si waafaqsan xeerka Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed.
5. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada waxaa uu xafiiska Hay'adda haynayaa muddo Shan (5) sano ah waxaana loo magcaabi karaa xilkaas hal mar kale, marka mudadiisu dhammaato.

6. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada, inta aysan dhammaan mudada xil-hayntiisa waxuu ku waayi karaa xilka xafiiska haddii;
   b) Golaha Maamulka Istaatistikadu soo jeediyo xil ka-qaadistiisa, Wasiirkuna ku qanco soo-jeedinta Golaha Maamulka, iyadoo sabab looga dhigayo anshax-xumo ama ay caddaato in uusan lahayn awood uu si tayo leh ugu guto hawlaha xafiiskiisa; ama
   t) Muddo saddex bilood gudahood ah qoraal is-casilaad uu u gudbiyo Golaha Maamulka Istaatistikada, kaas oo uu ku dalbanayo inuu xilka ka degeyo;

Qodoka 22aad
Kaalinta Agaasimaha Xafiiska Hay'adda Istaatistikada

1. Agaasimaha Xafiiska Hay'adda Istaatistikada waa:
   b) Maamulaha guud ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka;
   t) Mas'uulka fulinta hawlaha Hay'adda iyo kor-meeraha go'aannada Golaha Maamulka, taas oo ay saldhig u tahay ilaalinta iyo kormeerka Maamulka Golaha Maamulka.

2. Agaasimaha Xafiiska Hay'adda Istaatistikada waa inuu:
   b) Siiyaa Wasiirka talo xirfadaysan oo ku saabsan arrimaha la xiriira Istaatistikada
   t) Gutaa awoodaha iyo xilalka Hay'adda ee Qodobada Xeerkan lagu caddeeyey;
   j) Abaabulo Shaqaaleysiinta Shaqaalaha Hay'adda, una maamulo shaqaalaha Hay'adda sida uu qabo Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed.
   x) Horseedo abuuritaanka hawl-karnimo iyo anshaxa shaqaalaha Hay'adda Dhexdooda isagoo adeegsanaya tababarro xirfadeed;
   kh) Diyaariyo isla markaana uu Golaha Maamulka u gudbiyo qorshe-hawleedka, miisaaniyaddaIyo waliba warbixinta hawlaha Hay'adda
   d) Kharashka baxaya u adeegsado si waafaqsan barnaamij-hawleedka Hay'adda iyo miisaaniyadda loo qoondeeyey;
   r) Wakiil ka noqdo Hay'adda xiriirka ay la yeelanayso dhammaan hay'adaha kale ama daraf saddexaad (third party).

Qodobka 23aad
Ku-Xigeenka Agaasimaha Xafiiska Hay'adda Istaatistikada Qaranka

1. Iyadoo la tixgalinayo Qodobbada Xeerkan Wasiirka Wasaaradda ayaa soo jeedinaya magacaabista Agaasime Ku-xigeenka Xafiiska Hay'adda Istaatistikada Qaranka, kadibka marka ay ogolaadaan Golaha Wasiirrada, Ra'iisal Wasaaraha Xukuumadda JFS ayaa si rasmi ah u magacaabaya Agaasima ku-xigeenka, waxaana magacaabistaas saxiixaya Madaxweynaha JFS, kadibna waxaa lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.
2. Qofka loo magacaabayo Agaasime ku-xigeenka waa in uu yahay;
   b) Qof Soomaali ah
   t) Degganaa Dalka;
   j) Qof aan Maxkamad ku xukumin si kama danbeys ah dembi la xiriira aamin darro iyo khiyaano uu ku muteeysanayo xabsi aan ganaax lagu badali Karin
   x) Qof hawl-kar ah oo leh aqoonta looga baahan yahay Istaatistikada'
   kh) Qof haysta Shahaadada Heerka labaad ee Jaamacadda takhasuskiisuna yahay cilmiga Istaatistikada, ugu yaraanna shan sano (5) oo khibrad ah u leh hawlaha Istaatistikada, dhaqaalaha iyo Maareeynta Xogta (Management Information Systems);
   d) Qof leh aqoon dheeraad ah oo la xiriirta mamulka Istaatistikada si uu u noqdo qof u qalma Agaasime ku-xigeenka Xafiiska Hay'adda Istaatistikada Qaranka;
   r) Qof aan xubin ka ahayn Baarlamaanka, DXDF iyo Dawladaha Hoose.
3. Wasiirka ayaa soo jeedinaya qofka noqonaya Agaasime ku-xigeenka Hay'adda Istatistikada kadib marka ay ku raacaan Golaha Maamulka Istaatistikadda.
4. Wasiirka ayaa go'aaminaya xaaladaha, shuruudaha ku xeeran iyo gunnooyinka uu qaadanayo Agaasime ku-xigeenka Istaatistikada si waafaqsan xeerka Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed.
5. Agaasime ku-xigeenka/ Istaatistikada waxaa uu Xafiiska Hay'adda haynayaa muddo Shan (5) sano ah waxaana loo magcaaabi karaa xilkaas hal mar **oo** kale, marka mudadiisu dhammaato.

6. Agaasime ku-xigeenka Xafiiska Istaatistikada, inta aysan dhammaan muddada xil-hayntiisa waxuu ku weyn karaa xilka xafiiska haddii;
   b) Golaha Maamulka Istaatistikadu soo jeediyo xil ka-qaadistiisa, Wasiirkuna ku qanco soo-jeedinta Golaha Maamulka, iyadoo sabab looga dhigayo anshax-xumo ama ay caddaato in uusan lahayn awood uu si tayo leh ugu guto hawlaha xafiiskiisa; ama
   t) Muddo saddex bilood gudahood ah qoraal is-casilaad uu u gudbiyo Golaha Maamulka Istaatistikada, kaas oo uu ku dalbanayo inuu xilka ka degeyo.

Qodobka 24aad
Xubnaha shaqaalaha joogtada ah ee Hay'adda Istaatistikada Qaranka

1. Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada Qaranka ayaa magcaabayashaqaalaha hay'adda iyadoo la tixraacayo kartida iyo shuruudaha ku xusan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed.
2. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada, isagoo la-tashanaya xubnaha kale ee Golaha Maamulka Hay'adda iyo ku-xigeenkiisa waa inuu magcaabo hawl-wadeenada kale ee Hay'adda, kuwaas oo aan lahayn go'aan maamul, isagoo raacaya si waafaqsan Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed.

Qodoka 25aad
Xubnaha Shaqalaha Ku-meel-gaarka ah ee Hay'adda Istaatistikada

1. Agaasimaha Xafiiska Hay'adda Istaatistikada ayaa magcaabi kara saraakiil iyo hawl-wadeenada aan joogto ahayn marka loo baahdo si ay hawlaha Hay'addu ugu socdaan sida la doonayo ee ugu wax-tarka badan oo ku xiriirsan qodobada iyo xaaladaha adeegeed ee ay fulin karto hay'addu.
2. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada waxaa uu qoraal ahaan, ku magacaabi karaa qof sarkaal ah oo awood loo siiyey si uu u fuliyo qodobada Xeerkani ka kooban yahay. Qof kasta oo ugu shaqeeya Hay'adda sida uu qabo Xeerkan qodobadiisu waa in uu Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada hortiisa ku maraa dhaarta qarinta xogta ee ku cad Jadwalka 2 inta uusan bilaabin shaqada loo igmaday.

Qodoka 26aad
Heshiiska Wax-qabadka Shaqaalaha iyo Maamulka Hay'adda

1. Qof kasta oo ka tirsan shaqaalaha maamulka Hay'addu waa in uu la galo Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada heshiis hawl-qabad, kaas oo la-xiriirta:
   b) Qodobada iyo xaaladah magacaabistiisa;
   t) Ujeedooyinka loo qabanayo shaqada iyo waqtiga loo qorsheeyey in lagu qabto shaqadaasi;
   j) In la-qaado talaabada ku haboon si loo hubiyo in lagaaray yoolka howl qabadka;
   x) Wax kasta oo kale oo xiriir la yeelan Kara hawl-qabadka qofka xubinta ka ah shaqaalaha Hay'adda, sida ku cad Xeer-hoosaadka Shaqaalaha ee Hay'adda;
2. Xubin ka tirsan shaqaalaha maamulku marka uu fulin waayo qodobada iyo xaaladaha heshiiska Hawl-qabadka waxaa Xeer ahaan bannaan in laga saaro shaqada Hay'adda iyadoo la tixraacayo sida uu qabo sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliyeed.

Qodobka27aad
Gunnooyinka Maamulka iyo Shaqaalaha Hay'adda Istaatistikada Qaranka

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada, ku-xigeenkiisa, shaqaalaha maamulka iyo kuwa aan maamulka kamid aheyn ee Hay'adda Istaatistikada waxay yeelanayaan gunnooyin waafaqsan habka Sharciga Shaqaalaha Rayidka Soomaaliya.

Cutubka 6aad
Awoodaha Haya'dda Iyo Ururinta Xogta
Qodobka28aad
Ururinta Xogta Istaatistikada

1. Haya'ddu waxay awood u leedahay soo ururinta xogta Istaatistikada Qaranka ama in ay dib-u-soo celiso arrin kasta oo lagu caddeeyey jadwalka 1aad ee Xeerkan.

Qodobka 29aad
Tiro-koob

1. Wasiirka qaabilsan Istaatistikada, isagoo ka talo qaadanaya Golaha Maamulka Istaatistikada wuxuu amar ku bixin karaa isagoo ku baahinaya warbaahinta in la qabto tiro-koob gobol ama degmo ka tirsan dalka, amarkaasna waa in uu caddeynayaa:

   b) Maalmaha la qabanayo tiro-koobka; iyo

   t) Dadka (Howlwadeenadda) iyo hay'adaha ka qeyb qaadanaya iyo ujeedooyinka tiro-koobka loo qabanayo.

Qodobka 30aad
Sahamada Tiro-koobka

1. Agaasimaha Xafiiska Haya'adda Istaatistikada wuxuu qaban karaa in laga sameeyo Soomaaliya ama meelo kamid ah dalka sahamo aan ahayn tiro-koob sida ku cad Qodobka 31aad ee Xeerkan, xog-ururin laga sameynayo Soomaaliya oo aan aheyn tiro- koob iyo ururinta xogta Istaatistikada xiriirka la leh sida ku cad jadwalka 1aad ee Xeerkan.
2. Xogta macluumaadka la soo ururinayo waa la soo bandhigayaa iyadoo la-tixgelinayo wixii la xiriira xogta la-ururinayo laguna sheegay faqradda (1) ee Qodobkan, waqtiga sahamada la qabanayo iyo sida loo qabanayo waxaa go'aaminayo Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada.

Qodobka 31aad
Tiro-koobka iyo Sahanka ay Sameeyaan Hay'adaha Kale

1. Dhammaan isku dayada ay hay'adaha Dawladdu ku doonayaaan inay ku qabtaan tiro-koobyo ama sahamo waddanka gudihiisa laga qabanayo waa inay wada shaqeyn kala yeeshaan Haya'dda Istaatistikada Qaranka.
2. Dhammaan iskudayada ay hay'daha kale ee aan dawliga aheyn ay ku doonayaaan inay ku qabtaan tiro-koobyo ama sahamo heer Qaran ah waa in ay ka helaan oggolaanshaha Hay'adda Istaatistikada.

3. Goluhu wuxuu, isagoo la tashanaya Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada sameyn karaan xeerar ku saabsan hababka la raacayo arrintaan, iyadoo la eegayo qoraalada la gudbiyey sida ku cad faqradda (1) ee isla Qodobkan.
4. Iyadoo la eegayo sharcigan, tiro-koob iyo sahan heer Qaran ah kuma jiraan:
   b) Sahamada Istaatistikada gudaha ee ay qabtaan Wasaaradaha Dawladda;
   t) Tiro-koob ama sahan ay qabtaaan hay'ado gaar ah ayna ku lug-leeyihiin danneeyayaal sida Wasaaradaha Dawladda ama kuwa gaar ah;
   j) Sahamo laga sameeyo suuqyada laguna ogaananayo badeecadaha ay dadku isticmaalaan ama lagu ogaanayo wax soo saarka shirkado.
   x) Sahamo Istaatistikada ay qabanayaaan dadka ama haya'daha la soo xusay.

Qodobka 32aad
Xiriirka Ka Dhexeeya Hay'adda Istaatistikada iyo Hay'adaha Kale

1. Haya'dda Istaatistikada **waxa ay la saxiixan kartaa** heshiis is af-garad hay'adaha kale, taas oo ah in ay mas'uuliyadda u qeybsadaan una dhisaan hab wanaagsan oo ah xiriirinta, horumarinta, habka sahammada, xog is dhaafsiga iyo xiriirka ka dhexeeya haya'dda Istaatistikada iyo hay'adaha kale.

Qodobka 33aad
Foomamka Xog-ururinta

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada waa inuu qeexaa heerarka laga rabo dokumentiyada, foomamka iyo in sida ugu fiican loogu gudbiyo tilmaamaha lagama maarmaanka u ah ururinta macluumaadka, sharcigan ku jira.
2. Dukumentiyada laga soo buuxiyo dadka la wareysto oo dhammeys-tiran waa in lagu caddeeyaa maalinta iyo waqtiga **iyo goobta,** laga soo qaaday waraysiga waana in lagu soo celiyaa haya'dda.

Qodobka 34aad
Codsi inay bixiyaan macluumaad si iskood ah

1. Agaasimaha Xafiiska Istaaatistikada ama sarkaal loo idmaday, iyadoo la fiirinayo xogta la soo ururinayo, wuxuu weydiisan karaa qof kasta inuu:

b) Dokumenti soo buuxiyo;
t) Su'aalo ka jawaabo; ama
j) Bixiyo xog si aan qasab ahayn.

2. Macluumad kasta oo laga helo sida ku xusan Faqrada (1) ee Qodobkan waxay ku xiran tahay mamnuucid in la isticmaalo iyo diidmo in la bixiyo macluumaadka sida ku xusan Qodobka 53aad ee Xeerkan.
3. In kastoo ay liddi ku noqon karto sharci, qofku wuxuu bixin karaa marka loo idmado dokumenti, xog ama nuqul, qofkaasi wuxuu noqonyaa qof ka tirsan Hay'adda Istaatistikada ama sarkaal loo idmaday hadii laga codsado sida ku cad faqrada (1) ee Qodobkan.

Qodobka 35^{aad}
Awoodaha Gelitaanka iyo kormeeridda xogta

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu u magacaabi karaa sarkaal kasta oo ka tirasan haya'dda Istaatistikada waqtiga ku habboon, sarkaalkaas inta uu haysto warqadii magacaabidda wuxuu geli karaa, dhismo kasta isagoo ujeedadiisuna tahay:
   b) Inuu u gudbiyo ogaysiin sida ku cad Qodobka 36aad ee Xeerkan;
   t) Inuu u gudbiyo dokumenti ama ka soo qaado dokumentiyo ama macluumad u diiwaangashan; iyo
   j) Inuu ku sameeyo dabagal uu sharcigan u oggolaanayo.
2. Sarkaalka la magacaabay wuxuu geli karaa goob kasta iyo gaari kasta inta u dhaxeysa **6:00da** subaxnimo (am) ilaa **6:00da** maqribnimo (pm), isagoo ujeedadisu tahay in uu ka helo xog ururin istaatistiko ah sida:
   b)Haddii uu yahay guri deegaan ah loona diido in uu galo, muddo 48 saac gudahood oo ogeysiin la siinayo kadib;
   t) Haddii gurigaas ay deggan tahay qof haween ah oo aan bannaanka u soo bixin (Maqabiyo), sarkaalka doonaya inuu galo gurigaas waa inuu jid kasta oo sharci ah u maraa sidii uu qoftaas haweenka ah uga heli-lahaa macluumaadka uu uga baahan yahay.

Qodobka 36aad
Ogeysiin Xog-bixin

1. Si loogu guulaysto ujeedooyinka Hannaanka Istaatistikada Qaranka, Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu ogeysiis u qori-karaa si toos ah qofka waraysiga laga qaadayo ama qofka loo magacaabo inuu:
   b) Dhammeys-tiro soona celiyo dokumenti iyadoo la raacayo tilmaan kasta oo lagu sheegay ogeysiiska ama qof ahaan xiriir loola sameeyey;
   t) Ka-Jawaab bixiyo su'aalaha uu weydiiyo isaga ama iyada sarkaalka loo ogolaaday inuu waraysto; iyo
   j) Siiyo wixii diiwaan-gelin ah, nuqul kamid ah ama nuqul laga soo saaray diiwan-gelin meel la ogyahay ama waqti la og yahay.
2. Ogeysiiska lagu xusay faqrada (1) ee Qodobkan, waa in lagu caddeyaa waxa u gaar ah sida :
   b) Xogta guud ee dhabta ah ee loo baahan yahay,
   t) Inta jeer iyo waqtiga loo baaahan yahay in xogta la bixiyo,
   j) Noocyada dadka laga rabo inay xogta bixiyaan,
   x) Faqradaha sharcigan ee uu hoos imaanayo ogeysiiska la dirayo.

Qodobka 37aad
Adeegga Ogeysiisyada iyo Dokumentiyada kale

1. Ogeysiis kasta ama dokumenti kasta ee uu gaarsiiyo sarkaalka loo idmaday wuxuu si xaqiiqa ah ugu filan yahay inuu si sax ah u soo baxay looguna gudbiyey magaca Haya'dda Istaatistikada.
2. Ogeysiis ama dokumenti kasta ee meel loo diraayo sida ku cad faqrada (1) ee Qodobkan, waa inuu geeyaa sarkaal loo idmaday ama waa in lagu diraa boosto diiwaan-gashan ama email.

Qodobka 38aad
Ganaaxyada Uu Maamulku Sameeyo

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada, isagoo cuskanaya go'aannada Golaha Maamulka Hay'adda Istaastiskada, wuxuu ganaaxi karaa qof kasta oo:

b) Sabab la'aan awgeed fulin waayey ogeysiis la bixiyey sida ku cad Qodobka 36aad ama 37aad ee xeerkan; ama

t) Diida ama ku-guul-daraysta inuu buuxiyo dokumenti laga rabay ama diiwaan-gelin xog tiro-koob lugu ururinayo, qofkaasi wuxuu mutaysanayaa ganaax maamul oo Goluhu ku soo saarayo xeer-nidaamiye.

2. Qofkii ku qanci-waaya ama diida ganaaxa lagu riday sida ku cad faqradda (1) ee Qodobkan, racfaan ayuu ka qaadan karaa ganaaxa la saaray, wuxuuna racfaankiisa u gudbinayaa Golaha Maamulka Istaatistikada.

3. Racfaanka waa in uu ahaadaa qoraal leh caddeymahan soo socda:

b) Sharraxaad buuxda ee arrimaha la xiriira go'aanka racfaanka laga qaadanayo iyo sababta; iyo

t) In racfaanluhu ku soo gudbiyo racfaankiisa muddo soddon (30) maalmood gudahood ah laga bilaabo maalinta ganaaxa lagu riday, **isaga oo racfaanluhu u marinaya xafiiska ay Hay'adda istaatiiskadu ku leedahay halka uu ku sugan yahay** loona gudbiyaa Golaha Maamulka Istaatistikada.

4. Marka ay helaaan racfaanka, Goluhu waa in uu nuqul kamid ah u gudbiyaa Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada, kaas oo isaguna u bandhigaya Golaha Maamulka qoraal caddeyn ah sababta uu u sameeyey ama u saaray qofkaas ganaaxa.

5. Ka dib marka tixgelin la siiyo caddeymaha ku xusan faqradaha (3)& (4),iyoxaqiiqooyinka kale ee suurogalka ah, Goluhu wuxuu tixgelin siinayaa macluumaadka la xiriira ama uu u baahdo, wuxuuna ku raacayaa, ka duwanaan karaa ama meel iska-dhigi karaa go'aanka ah ganaaaxa la sameeyey.

6. Goluhu waa in uu sida ugu dhaqsaha badan ku wargeliyaa si qoraal ah racfaan laha go'aanka laga gaaray racfaankiisa.

Qodobka 39aad
Faafinta Xogta Istaatistikada

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu hubinayaa dhabnimadda iyo xaqiiqada xog kasta oo la soo ururiyo, marka si wanaagsan loo habeeyo, lana xaqiijiyo tayadeeda iyo saxnimadeeda, kaddib marka la hubiyo

ilaalinteeda, iyadoo la tixgelinayo qofka xogta bixiyey, waa in si guud loo faafiyaa xiliga ugu haboon, iyada oo la adeegsan karo warbaahinta.

Cutubka 7aad
Maaliyadda
Qodobka 40aad
Maal-gelinta Hay'adda Istaatistikada Qaranka

1. Lacagaha hay'addu waxay ka kooban yihiin:
   b) Lacagaha miisaaniyadda loo qoondeeyo;
   t) Deeqo, hadiyado ama kaalmooyin ay haya'ddu ka hesho ilo kale oo uu Golaha Maamulka Istaatistikadu oggolaaday; ama
   j) Lacag kasta oo lagu siiyo haya'adda shaqooyinka ama adeegyada ay sameyso si waafaqsan sharcigan.
2. Dhammaan lacagaha soo gala hay'adda waxaa lagu shubayaa khasnadda mideysan ee Dowladda, hab waafaqsan Sharciga Maaraynta Maaliyaadda Guud.

Qodobka 41aad
Sanad-miisaaniyadeedka Hay'adda

1. Sanad-miisaaniyadeedka haya'dda waa mid la mid ah sanad-miisaaniyadeedka Dawladda Federaalka, waana in xisaabta hay'adda la xiraa dhammaadka sanad-miisaaniyadeedka, lana caddeeyaa hannaanka loo adeegsaday.

Qodobka 42aad
Ganacsiga iyo Qorshaha Maaliyadadda

1. Waa in maamulka hay'addu, soo gudbiyaan qorshaha miisaaniyadda sida uu qabo sharciga maareeynta maaliyadda.
2. Hay'addu waxaay u isticmaaleysaa kharashaadkeeda miisaaniyadeed sida u qabo habraaca miisaniyadda.

Qodobka 43aad
Xisaabta iyo Hanti-dhowrka

1. Si waafaqsan sharciga maareeynta maaliyadda, agaasimaha Xafiiska Istaatistikada waa in uu:

b) Ilaaliyaa xisaabta iyo diiwaanka lagu kaydiyo lacagaha ay hay'addu hesho iyo kharashaadka ay gasho iyo hantida guurtada ama maguurtada ah, deymaha lagu leeyahay iyo dhaqdhaqaaqa lacagaha waqtiga sannad-miisaaniyadeedka; iyo

t) Diyaariyaa xisaabaadka iyo diiwaannada lagu xusay faqradda(b) ee isla Qodobkan, Isagoo howlgelinaayo qof u diiwaan-gashan inuu yahay xisaabiye iyo hanti-dhowre oo ay magacowday haya'ddu.

Qodobka 44aad
Warbixin-sanadeed

1. Golaha Maamulka Hay'addu waa in uu sida ugu dhaqsaha badan uguna habboon u gudbiyaa warbixin-sanadeedka miisaaniyadda hay'adda, iyadoo la raacayo sharciga maamulka maaliyadda ee dawladda.

Qodobka 45aad
Canshuur-dhaafka Hay'adda Istaatistikada

1. Canshuur dhaafka Hay'adda waa inuu waafaqsanaadaa sida uu dhigayo sharciga furdooyinka.

Qodobka 46aad
Kala-diridda Hay'adda Istaatistikada Qaranka

1. Haya'dda Istaatistikada Qaranka lama kala-diri karo marka laga reebo in la helo go'aan uu soo saaro Golaha Wasiirrada Xukuumadda JFS oo sababaysan.

Cutubka 8aad
Wada-shaqeynta Hannaanka Istaatistikada Qaranka
Qodobka 47aad
Xeerka hab-dhaqanka

1. Si loo asaaso ama loo hagaajiyo kalsoonidda lagu qabo xogaha dawladda, Golaha Maamulka Hay'adda Istaatistikada ayaa soo saarayaa xeer-nidaamiye qeexaya wada-shaqeynta, kaas oo dejinaya heerka xirfadeed iyo anshaxeed ee lagu dhaqayo haya'daha soo saara Istaatistikada.

2. Iyadoo aan la xadidaynin faqradda (1) ee Qodobkan, xeer-nidaamiye ku aadan hab-dhaqanka ayaa la sameyn karaa iyadoo la tixgelinayo arrimahan soo socda:
   b) Heerarka xirfadda iyo anshaxa ururinta, soo-saaridda, gorfeynta, faafinta iyo kaydinta xogta rasmiga ah ee ay tahay in la-ilaaliyaa;
   t) In la qaado tallaabooyin lagu hubinayo tayada iyo isbarbar-dhigga xogaha Dawladda iyo xogaha kale; iyo
   j) In la qaado tallaabooyin lagu yareynayo soo-noqnoqashada aan loo baahnayn ama marar badan la soo ururiyo, la soo saaro, la gorfeeyo ama la kaydiyo xogaha Istaatistikada.
3. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu siin karaa hay'adaha soo saara Istaatistikada talo la xiriirta hab-dhaqanka lagu xusay faqradda (1) ee isla qodobkan.

Qodobka 48aad
Isku-duwidda Istaatistikada

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada ayaa bilaabi kara ururinta ama joojinta in la sii-wado xog-ururinta, si waafaqsan sharcigan, **kadib** marka uu oggolaansho ka helo Golaha Maamulka,.
2. Inkasta oo ay jiri-karaan caqabado lid ku ah sharci kasta, haddana:
   b) Qofna awood uma laha inuu bilaabo xog-ururin;
   t) Hay'adaha dawladeed ma bilaabi karaan xog-ururin, iyagoo aan oggalaansho ka helin Hay'adda istaatistikada; iyo
   j) Hay'adaha caalamiga ah ma qaban karaan xog-ururin iyagoo aan oggolaansho sharci ah ka haysan Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyo Hay'adda dawliga ah ee ay khuseyso xogta ay ururinayaan.
3. Si waafaqsan Qodobka 32aad faqradiisa 1aad ee Dastuurka kumeelgaarka ee JFS, Golaha Maamulka Istaatistikada Qaranku wuxuu ogeysiis ku soo saarayaa ama ku baahinayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda xogta la ururiyay si uu qof walbo u helo xogtaasi, waxayna hawshaas ku xiran tahay xaaladaha uu Goluhu tilmaamo, isagoo go'aaminaya in faqradda (2) ee isla qodobkan aan lagu dabaqi karin hay'ad dawladeed oo qabata arrimo gaar ah.
4. Dhammeys-tirka xog-ururin kasta oo ku aadan faqradda (2) ee isla qodobkan, qof kasta ama hay'ad dawladeed oo kasta waxaa waajib ku ah,

in iyagoo aan wax shardi ah ku xirin ay siiyaan Hay'adda Istaatistikada xog walbo ama nuqul walbo oo kamid ah warbixin ay ka qoreen ama xog ay ururiyeen ayna ku jiraan soo-saaridda Istaatistikada.

5. Hay'ad Waddani ah ama mid caalami ah ma sameyn karto wax xog-ururin ah oo aan ahayn cilmi-baaris, iyagoo soo codsanaya oggolaanshaha Hay'adda.
6. Hay'adaha aan faa'iido-doonka ahayn ma sameyn karaan xog-ururin, aan ahayn cilmi-baaris looga dan leeyahay in lagu falanqeeyo arrimha dhaqaalaha iyo bulshada kuna kooban haya'daha iyo qeybaha ay ka shaqeynayaan, iyagoo soo codsanaya oggolaanshaha Hay'adda.
7. Haddii Hay'adda ay oggolaato arrimaha ku xusan faqradda (5) iyo (6) ee isla Qodobkan, Hay'adaha gaarka ah, hay'adaha aan faa'iido-doonka ahayn iyo kuwa caalamiga ah, iyagoo aan waxba ku xirin waa in ay siiyaan Hay'adda xog walba ama nuqul walba **oo** kamid ah warbixinnada ay ka qoreen xog ay ururiyeen ayna ku jiraan soo-saaridda Istaatistikada si waafaqsan Qodobka 32aad Faq. 2aad si loola wadaago muwaadin walbo oo codsada.
8. Inkasta oo ay jiri karaan caqabado sharci ahaan ka hor iman karo, ujeeddadu waxey tahay in lagu caawiyo hay'adda gudashada shaqadeeda waa lama-huraan sida sharcigan uu qabo, waana in madaxda hay'adaha dowladdu ay qaadaan tallaabooyinkan soo socda:
   b) Marka uu sharcigan dhaqan-galo waqtiga loo qabtay gudihiisa, waa in hay'adda la siiyaa macluumaadka ay codsato oo la xiriira xogta juqraafiga, xogta rasmiga ah iyo xogaha ay dowladdu mas'uulka ka tahay;
   t) In ay wargeliyaan markasta oo uu jiro isbedel la taaban karo oo ku dhacay macluumadka la siiyey hay'adda;
   j) In ay siiyaan, iyadoo aan wax abaal-marin ah siinayn xogaha juqraafiga ama macluumaadka Istaatistikada ee dawladda sida ay u codsatay Hay'adda Istaatistikada; iyo
   x) In ay u ogolaadaan hay'adda Istaatistikada ama sarkaalka loo idmaday nuqul,

   Kh) iyadoo aan wax abaal-marin ah lagu siinayn xogaha juqraafiga ama macluumaadka Istaatistikada ee dawladda.

9. Iyadoo ku xiran Qodobka 32aad ee Xeerkan Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu heshiis la geli karaa:
   b) Madaxa hay'adaha dawladda, iyadoo la tixgelinayo macluumaadka Istaatistikada ama xogta ay hay'adda dawlddu awood u leedahay in ay soo ururiso;
   t) Hay'ad kasta oo aan ahayn hay'adaha dawladda oo ku hawlan in ay ururiso xog ama macluumaad Istaatistikada; iyo
   j) Hay'ad kasta, taasoo lala galay heshiis is-af-garad ah sida uu tilmaamayo Qodobka 32aadaad ee Xeerkan.
10. Heshiiska la xiriira faqradda (9) ee Qodobkan wuxuu ku xiran yahay xaaladaha soo socda:
   b) Ururinta macluumaadka Istaatistikada waa in ay qabataa Hay'adda Istaatistikada Qaranka ama, wada qabtaan Hay'adda Istaatistikada Qaranka iyo hay'adaha dawladda ama hay'ado kale sida ku xusan faqradda (9) ee Qodobkan;
   t) Sida ku xusan faqradda hoose ee (j) iyo Qodobka 32aad ee sharcigan, tiro-koobka ama macluumadka soo baxa waa in ay wadaagaan hay'adaha Istaatistikada daneeya ama uu la wadaagaa cidii kale oo sifa sharci ah ku soo codsatay;
   j) Haddii xogta uu bixinayo qof jawaab-bixiye ah kaas oo uu qoray Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada in uu diiddan yahay in aqoonsigiisa la sheego ama si fudud lagu aqoonsado, waa in macluumaadkaas si wanaagsan looga dhigaa qarsoodi ka hor intaan lala wadaagin hay'adaha kale;
   x) Shaqaalaha dawladda ama hay'adaha kale ee lagu xusay faqradda (9) ee Qodobkan kuwaas oo ku hawlan xog-ururin wadajir ah oo uu la qabanayo hay'ado kale ama sida xogtaas lagu heli lahaa, waa in uu maraa dhaarta in xogta la qariyo taasoo la mid ah tan lagu sheegay jadwalka (2) mar hore ha soo dhaarto ama yuusan dhaaran.
11. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu:
   b) Si gaar ah u fuliyaa ama markuu helo codsi Golaha Maamulka uu dib-u-eegis ku sameyn karaa xog-ururinta, soo-saaridda, gorfeynta, galeynta, kaydinta, faafinta, turjumidda iyo isticmaalka xogta rasmiga ah ee Dawladda Federaalka iyo maamul-gobaleedyada; iyo

t) Markuu la tashado ka-dib madaxda hay'adaha dowladda daabacaya oo baahinaya tiro-koobka la ururiyey iyo faaqidaadiisa marka Agaasimaha Istaatistikada uu u arko in ay habboontahay.

Qodobka 49aad
Heerarka Tayada

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada, markuu ogeysiiyo isla markaana lagu soo' saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda, wuxuu śameynayaa heerarka tayada la doonayo in lagu shaqeeyo ee Hannaanka Istaatistikada Qaranka oo dhan.
2. Heerarka tayada lagu xusay faqradda (1) ee Qodobkan waxay la xiriiraan:
   b) Hannaanka kala-saaridda iyo caddeynta loo marayo habka loo dooranayo xogta rasmiga ah ee Istaatistikada dawladda;
   t) Hababka dukumentiyada, macluumaadka iyo xogta loogu bedelayo xogta rasmiga ah ee Istaatistikada;
   j) Hababka loogu sameynayo xogta Mugga-leh ee xogta rasmiga ah ee Istaatistikada;
   x) Habka tayada leh ee la doonayo in xogta Istaatistikada loo ururiyo;
   kh) Qaabka iyo nooca dukumentiga, macluumaadka iyo diiwaanka loogu talo-galay in lagu soo ururiyo xogta Istaatistikada
   d) Dadka loo xilsaarayo in ay dukumentiyada iyo macluumdka soo ururiyaan iyo kuwa xogta macluumaadka laga soo ururinayo, waa in loo maraa habka loo ururiyo xogta Istaatistikada;
   r) In la helo xog iyo macluumaad istaatistika ah oo ujeeddadiisuna tahay ururinta macluumaadka;
   s) Shuruudaha iyo maamuuska waa in la raacaa ka hor inta aan la bixin xogaha yaryar si cilmi-baaris loogu sameeyo;
   sh) Ilaaalinta kaydka xogta, oo ay ku jirto xogta Mugga-leh waa in loo kaydiyaa hab waafaqasan sharciga xogaha waaweyn lagu kaydiyo; iyo
   dh) Arrin kasta oo lagama-maarmaan u ah in la sameeyo xog-ururin.

3. Si waafaqsan heerarka tayada ee lagu xusay faqradda (1) ee isla qodobkan, qof kasta oo ku xad-gudba heerarka tayada wuxuu mutaysanayaa ciqaab maamul oo Goluhu go'aamiyo.

Qodobka 50aad
Kulamada Aqoonyahanada iyo Dadka Adeegsada Istaatistikada

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada waa inuu sannad kasta qabtaa kulan ay isugu imanayaan dadka adeegsada xogta Istaatistikada si dib loogu eego baahida ay u qabaan xogta rasmiga ah.
2. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada **wuxuu la yeelan karaa kulamo gaar ah** aqoonyahannada Istaatistikada, soo saarayaasha Istaatistikada, dadka adeegsada Istaatistikada iyo daneeyayaasha kale, lehna ujeeddooyin waxbarasho oo iskood ah ama codsi ku filan, sida sharcigani qabo.
3. Shirarka ku xusan faqradda (1) iyo (2) ee isla qodobkan waxaa si gaar ah loogu qabanayaa qaabka diyaarinta, daba-galka iyo qiimeynta istaraatiijiyada horumarinta Istaatistikada ee ku xusan Qodobka 52aad ee sharcigan.

Qodobka 51aad
Idmashada Istaatistikada ee Xogta Rasmiga ah

1. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu u shaacin karaa xogta rasmiga ah ee Istaatistika kasta ee ay soo ururiso soona saarto:
   b) Hay'adda Istaatistikada, ama
   t) Hay'ad kasta oo dawladda ka tirsan marka wada-tashi lala sameeyo madaxa hay'adda Istaatistikada.
2. Idmashada lagu xusay faqradda (1) ee isla qodobkan, waa in uu waafaqsanaadaa:
   b) Ujeedooyinka Hannaanka Istaatistikada Qaranka iyo mabaadi'da lagu soo sheegay Qodobka 5aad ee sharcigan; iyo
   t) Habka kale oo Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada u bixiyo heerarka tayada.

Qodobka 52aad
Dejinta Qorshaha Istaraatiijiyadda

1. Hay'adda Istaatistikada waa in ay sameysaa istaraatiijiyadda Qaranka ee horumarinta Istaatistikada taas oo qeyb muhiim ah ka ah Qorshaha Horumarinta Qaranka.
2. Hay'adda Istaatistikada waa in ay sameysataa istaraatijiyad u gaar ah ee horumarinta istaatistikada **taas oo koobeysa** Istaatistikada iyo meelaha ay ku lug leedahay sida ku cad jadwalka 1aad ee sharcigan.

Cutubka 9aad
Faafinta iyo Faaf-reebka (confidentiality) macluumaadka
Qodobka 53aad
Diidmada Bixinta Macluumaad

1. Macluumaadka iyo diiwaanka la siiyey hay'adda, xogta ay ka helaan diiwaanka maamulka xogtaas oo ku saabsan shakhsi, qoys, hay'ad dawladeed ama la xiriirta ururo kale, laima oggola:
   b) In la siiyo dhinac Saddexaad ama cid kale;
   t) Qirasho cad dhegaysiga dacwad socota, marka laga reebo ujeeddooyinka dacwad-dembiyeed sharcigan lagu qeexay; ama
   j) In la siiyo hay'ad dawladeed ujeeddooyin aan Istaatistikada xiriir la lahayn.
2. Macluumaad ama kayd diiwaan laga helay shuruudaha sharcigan ku xusan lama daabici karo ama looma faafin karo hab oggolaanayo aqoonsiga qof gaar ah, qoys ama urur, ilaa oggolaansho laga helo cidda ay khuseyso.
3. Faqraddaha sare ee (1) iyo (2) ee isla qodobkan laguma dabaqi karo dukumentiyo, macluumaad ama diiwaan ku saabsan qof, qoys ama urur haddii:
   b) Xogta mar-hore la daabacay ama laga heli karo kaydka xogta shacabkuna ay heli karaan; ama
   t) La bixiyey qoraal uu ku oggolaanayo in la daabaco oo la faafiyo xogta qof, qoys ama urur.

Qodobka 54aad
Dhaarta Sir-qarinta

1. Qofka shaqaalaha ah ee qabanaya howlaha ku xusan sharcigan waa inuu maraadhaarta xafiiska iyo qarinta xogta lagu qeexay jadwalka 2aad, waana in
   b) Qofka shaqaalaha ama heshiis gelaya uu ku hor dhaarto Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada;
   t) Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu ku hordhaaranayaa Guddoomiyaha Golaha Maamulka Istaatistikada;
   j) Xubnaha Guddiyada Golaha Maamulka Istaatistikada waxay ku hor dhaaranayaan Guddoomiyaha Golaha Maamulka; ama
   x) Xubnaha Golaha Maamulka Istaatistikada, waxay ku hor dhaaranayaan Wasiirka qaabilsan Hay'adda Istaatistikada sameyneysa, inta aysan shaqo bilaabin sida sharcigani qabo.

Qodobka 55aad
Faafinta iyo Awood-u-helidda Xogta

1. Sida sharcigani qabo soo-ururiyeyaasha iyo soo-saarayaasha xogta Istaatistikada loo adeegsaday lacagta dawladda waa inay soo saaraan, faafiyaan, kana dhigaan mid ay heli karaan shacabka iyo dadka adeegsada Istaatistikada si waafaqsan Hannaanka Istaatistikada Qaranka iyo mabaadi'da Istaatistikada lagu sheegay Qodobka 5aad ee sharcigan.
2. Dhamman xog-soo-saarayaasha iyo ilaaliyeyaasha Istaatistikada waa in ay dejiyaan hab macluumaadka lagu heli karo muddo cayiman kana kooban tayada iyo in ay heli karaan dadweynaha:
   b) Hababka iyo qaabka loo ururinayo loona soo saarayo Istaatistikada;
   t) Dukumentiyada xogta rasmiga ah ee la heli karo; iyo
   j) Arrimaha kale ee xiriirka la leh oo la sharraxay.
3. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada waa inuu, ka hor inta uusan bilaabmin Sannad-miisaaniyadeedka hay'adda uu soo bandhigaa tirada xogta la soo ururinayo sannadkaas.
4. Soo-saarayaasha Istaatistikada waxay sii deyn karaan in yar oo xog ah oo loogu talo-galay cilmi-baaris iyo gorfeyn dheeraad ah, Agaasimaha

Xafiiska Istaatistikada waa inuu xil gaar ah iska saaraa ilaalinta iyo qarinta xogtaas, iyadoo ay ku jirto:

b) Xogta waa in aysan lahayn magacyo, cinwaano iyo wax kasta oo lagu aqoonsan karo qofka waraysiga bixiyey; iyo

t) Isticmaalayaasha xogta waa in la mariyaa dhaarta ilaalinta xogta oo la mid ah midda ku xusan jadwalka 2aad ee sharcigan.

Cutubka 10aad

Qodobada Guud

Qodobka 56aad

Muunadda (Sample) Xogta Istaatistikada

1. Istaatistikada waxay xiriir la leedahay dhammaan inta lagu sheegay jadwalka 1aad ee Xeerkan, waxaana lagu soo ururinayaa habka muunadda marka laga reebo tiro-koobka guud ee dhammaan dadka la tirinayo, waxaana muunadda loo adeegsanayaa meesha loo arko in ay ku wanaagsan tahay.
2. Muunadda waxaa kale oo loo isticmaali karaa in lagu tijaabiyo in wareysi la qaado iyo habka wareysiga loo qaadayo inta aan la dhammeys tirin.

Qodobka 57aad

Awood-siinta iyo Waajibaadka Shaqada

1. Goluhu wuxuu si qoraal ah:
   b) Ku siin karaa awood Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada ama howl-wadeennada kale hannaan uu oggolyahay sharcigani; ama
   t) U idman karaa howl gaar ah Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada ama howl wadeen kale si waafaqsan sharcigan.
2. Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada wuxuu si qoraal ah oo waafaqsan sharcigan:
   b) U siin karaa awood gaar ah howl-wadeen ka tirsan Hay'adda; ama
   t) U idman karaa howl-wadeen ka tirsan xafiiska inuu fuliyo shaqo.
3. Golaha Maamulka Istaatistikada ama Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada kama reebbana in uu ka joojiyo awoodda ama shaqo howl-wadeen hayo, sida ku xusan faqradaha sare(1)iyo (2) ee Qodobkan, waxayna waqti kasta:

b) Ka noqon karaan ama dib-u- habayn ku sameyn karaan awoodaha iyo shaqooyinka ay qof u idmadeen; ama

t) Iyaga oo aan ku xad-gudubayn xaquuqaha jira, waxay ka noqon karaan go'aan ay hore u qaateen si waafaqsan awoodaha uu siinayo sharcigani.

Qodobka 58[aad]
Xad-gudubyada La Xiriira Hay'adda Istaatistikada

1. Qof kasta oo ka'shaqeeya xafiiska Hay'adda Istaatistikada wuxuu 'gelayaa xad-gudub haddii:

b) Qofka shaqaala ah macluumaadka uu hayo oo saameeyn ku leh qiimaha suuqa, hanti ama wax-soo-saar, uu ku dhex faafiyo dadweynaha ama uu kaga faa'iidaysto danihiisa gaarka ah;

t) Oggolaansho la'aan uu faafiyo ama gaarsiiyo qof kale xogtii uu shaqadeeda hayey sida sharcigani qabo;

j) Uu u adeegsado awooddiisa shaqada xafiiska, inuu sameeyo wax ka hor imanaayo ama ku guul-daraysto inuu fuliyo, sida ku cad jadwalka 2 ee sharcigan;

x) Uu sameeyo baaritaan xog sida uu sharcigani qabo isagoo qofkaasi uusan lahayn awood loogu oggolaaday inuu howshaas fuliyo;

kh) Uusi toos uga hor-istaago Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada ama shaqaale howl loo idmaday in ay howshooda gutaan si waafaqsan sharcigan;

d) Uu si toos ah u diido ama dayaco inuu ku gudbiyo macluumaad waqtigii loo cayimay ama uu diido inuu ka jawaabo baaritaan isaga lagu hayo si sharcigan waafaqsan;

r) Uu ka bixiyo caddeymo aan run ahayn jawaabaha baaritaannada lagu sameynayo;

s) Uu si toos ah u burburiyo ama u baabi'iyo galalka ay ku jiraan macluumaadka la soo ururiyo, si baalmarsan sharcigan;

sh) Uusan xaq u lahayn in uu qaado xog ama u gudbiyo macluumaad qof kale, isagoo og in falkaasi liddi ku yahay sharcigan; ama

dh) Uu faafiyo ama siiyo macluumaad qof kale, si toos ah ama si dadban, falkaas oo liddi ku ah sharcigan.

Qodobka 59aad
Ciqaabta Lagu Mudan Karo Xad-gudubyada

1. Qofka lagu helo xad-gudubyada ku tilmaaman Qodobka 58aad ee sharcigan, wuxuu mutaysanayaa ciqaabta hoos ku xusan:
   b) Labo bilood ayaa shaqada laga joojinayaa iyo ganaax aan ka badneeyn hal bil mushaar ama gunno; ama
   t) Shaqada ayaa laga saarayaa ama ganaax dhan labo bilood oo mushaar gunno ah, **iyada oo wixii ciqaab ah loo marayo Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed,** haddii Guddigu u arko in uu xad-gudubku culus yahay.

Qodobka 60aad
Xogaha La Xiriira Siyaasadda

1. Qofna kuma qasbana, sharcigan dhexdiisa, in uu bixiyo macluumaad la xiriira arrimaha siyaasadda dalka ama Hay'ad uu ka shaqeeyo.
2. Sarkaalka loo idmado inuu xog soo ururiyo waa inuu u sharraxaa qofka uu wareysanayo habraaca ku xusan faqradda (1) ee isla qodobkan, inta uusan bilaabin wareysiga.

Qodobka 61aad
Xeer-nidaamiyeyaal

1. Golaha Maamulka, isagoo la tashanayo Agaasimaha Xafiiska Istaatistikada, wuxuu dejin karaa xeer-nidaamiyeyaal lagu dhaqan-gelinayo sharcigan, sida:
   b) Arrin kasta oo Goluhu u arko in ay muhiim u tahay qabsoomidda Istaatistikada guud ee Soomaaliya;
   t) Xog-ururin kasta oo aan ahayn Istaatistikada guud sida ku cad faqradda 1(b) ee isla qodobkan;
   j) Qiimeyn uu ku sameeyo adeegyada iyo wax-soo-saarka hay'adda;
   x) Wax-ka-beddel uu ku sameeyo jadwalka (1) ee sharcigan;
   kh) dejinta qiimaha ay mudan tahay ee lagu qaadan karo xogaha hay'adda;
   d) Arrin kasta oo looga baahan yahay oggolaanshaha sharcigan oo leh sharaxaad; iyo
   r) Wax kasta oo Goluhu u arko in ay lagama-maarmaan u tahay in loo sameeyo Xeer- nidaamiyeyaal, si loo gaaro ujeeddooyinka la higsanayo.

2. Xeer-nidaamiyeyaasha lagu xusay faqradda (1) ee isla qodobkan, waxay noqon karaan kuwo keena xil-gudasho-xumo haddii la fulin waayo, taas oo lagu mutaysan karo ganaax lacageed oo uu go'aamiyo Goluhu.

Qodobka 62aad

Lifaaqa Sharciga

1. Sharcigani wuxuu yeelanayaa sida uu tilmaamayo Qodobka 61aad xeer-nidaamiyeyaal iyo Jadwalo kuwaas oo u noqonayo sharcigan lifaaq.

Qodobka 63aad

Baab'in

1. Sharcigani wuxuu baabi'inayaa dhammaan shuruucda ka hor-imaanaysa sharcigan ama aan la socon karin.

Qodobka 64aad

Dhaqan-gal

1. Sharcigani wuxuu dhaqan-gelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha JFS, islamarkaana lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Jadwalka 1aad ee Sharcigan:

Arrimaha Iyo Xogaha Uu U Xilsaaran Yahay in Uu Soo Ururinayo, Soo Saaro Iyo Faafiyo Xafiiska Hay'adda Istaatistikada

Qeybta 1aad

1. Istaatistikada guud
2. Macluumaadka dadka iyo bulshada
3. Macluumaadka dad dano gaar ah leh
4. Istaatistikada dadweynaha;
   i. Tiro-koobka dadweynaha
   ii. Istaatistikada kooxo dad ah oo si gaar ah loo tixgelinayo
5. Istaatistikada guryaha;
   i. Tiro-koobka guryaha dadweynaha
   ii. Tiro-koobka guryaha kale

Qeybta 2aad

1. Istaatistikada shaqaalaha
2. Istaatistikada waxbarashada iyo tababarada
3. Istaatistikada dhaqanka iyo faafinta saxaafadda
4. Istaatistikada dakhliga iyo kharashaadka qoyska iyo xadadkooda kala duwan
5. Istaatistikada ilaalinta bulshada
6. Istaatistikada caafimaadka
7. Istaatistikada jinsiga
8. Kuwa kale ee arimaha bulshada laxiriira macluumadka Istaatistikada.

Qeybta 3aad

1. Istaatistikada dhaqaalaha
2. Xisaabaadka Qaranka
3. Istaatistikada Beeraha iyo Xoolaha
4. Istaatistikada keymaha iyo kalluumeysiga
5. Istaatistikada warshadaha
6. Istaatistikada tamarta
7. Istaatistikada dhismayaasha
8. Istaatistikada ganacsiga
9. Istaatistikada ganacsiga caalamiga:

i. Ganacsiga alaabta
ii. Ganacsiga adeegga
10. Istaatistikada gaadiidka
11. Istaatistikada isgaarsiinta
12. Istaatistikada dalxiiska
13. Istaatistikada adeegyada la qabto
14. Istaatistikada lacagta, maaliyadda iyo caymiska
15. Istaatistikada canshuurta
16. Istaatistikada haraaga lacagta la bixiyo
17. Istaatistikada qiimaha:
    b)Qiimaha badeecadaha
    t) Qiimaha wax soo saarka
18. Istaatistikada cilmiga sayniska iyo tiknoolijiada
19. Istaatistikada kaabayaasha
20. Istaatistikada kale ee dhaqaalaha.

Qeybta 4aad

1. Istaatistikada kheyraadka dabiiciga iyo deegaanka
2. Istaatistikada kheyraadka dabiiciga iyo xisaabta degaanka
3. Istaatistikada saadaasha hawada
4. Istaatistikada dhulka la adeegsado.

SHARCI LR.27 Taariikh: 30/03/2020

ANSIXINTA SHARCIGA JAAN-GOYNTA &TAYA-DHAWRKA SOOMAALIYEED

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/254/12/01//B-10/20 Taariikh: 16/01/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Jaan-goynta & Taya-dhawrka Soomaaliyeed

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaadaySharciga Jaan-goynta & Taya-dhawrka Soomaaliyeed

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 30/03/2020



Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

SHARCIGA JAAN-GOYNTA IYO TAYO-DHAWRKA SOOMAALIYEED

QEYBTA 1AAD
MAGAC, UJEEDDO, ERAY-BIXIN, BAAXADDA IYO AWOODDA SHARCIGA

QODOBKA 1aad
MAGACA SHARCIGA

Sharcigan waxaa lagu magacaabaa "**Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrkaSoomaaliyeed**" (Somali Standards and Quality Control Act).

QODOBKA 2aad
UJEEDDADA SHARCIGA

Ujeeddada Sharciga Jaan-goynta iyo Tayo-dhowrka Soomaaliyeed waa;

1. In uu horumariyo siyaasadda Jaan-goynta iyo Tayo-dhawrka Qaran, iyo In uu daboolo baahiyada loo qabo xeerarka jaangooyooyinka, cabirrada, baarista iyo hubinta tayada badeecadaha.

2. In lagu **hago** xeer-nidaaminta tayo-dhawrka ee lagu maamulo tayada badeecadaha iyo adeegyada, sida kuwa soo gala Dalka ama **laga** dhoofiyo iyo kuwa gudaha Dalka laga soo saaro ama laguisticmaalo.

3. In uu ilaaliyo bad-qabka qofka ama bulshada, caafimaad ahaan iyo dhaqaaleahaan;

4. In lagu dhiso Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;iyo

5. In uu sugo kalsoonida isticmaalaha iyo nabadgelyadiisa, isla markaana wuxuu abuurayaa kalsooni lagu qabo tayada badeecadda dalka soo-gasha, midda ka dhoofta iyo tacabka dalka laga soo saarointaba.

QODOBKA 3aad
QEEXID

Erayadan halkan ku xusan waxaa loo micnaynayaa sida soo socota haddii aan si kale loogu qeexin Sharcigan dhexdiisa:

1. **"Hay'adda Tayo-dhawrka"**: waxaa loola jeedaa Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (Somali Bureau of Standards - SoBS).

2. **"Adeeg"**: waxaa loola jeedaa bixinta baahida bulshada ee aan la taaban karin;

3. **"Agab"**: waxaa loola jeedaa dhammaan badeecadaha kala duwan ee dalka la keeno, laga dhoofiyo ama lagasoo-saaro.

4. **"Anfaaci"**: waxaa loola jeeda wax kasta oo la quuto;

5. **"Baaris"**: waxaa loola jeedaa daba-galka rasmiga ah oo ay hay'addu sameyso si looogaado in loo hoggaansamay sharciyada Hay'adda iyo kuwa dalka guudahaan;

6. **"Been-abuurad"**: waxaa loola jeedaa samaynta walxo qiimo-hoodu liito loonaekaysiiyay kuwo qiimahoodu sareeyo;

7. **"Cabbiraad"**: waxaa loola jeedaa hab cilmi qiyaaseed lagu ogaado tilmaamahadherer, mug, cuf iyo wixii lamid ah oo ay leeyihiinwalxuhu;

8. **"Dhawridda"**: waxaa loola jeedaa ilaalinta heerka tayo-wanaagga dhammaanbadeecadaha dalka ka baxa, soo galaya ama kadhoofaya;

9. **"Dhoofin"**: waxaa loola jeedaa u dirista dal kale alaab ama adeeg yaala Dalkagudihiisa;

10. **"Gole"**: waxaa loola jeedaa xubnaha Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed;

11. **"Hal-beeg caalami"**: waxaa loola jeedaa heer tayeedka ama jaan-gooyada ay oggolaatay Hay'adda tayo-dhawrka caalamka (ISO);
12. **"Hal-beeg"**: waxaa loola jeedaa summad la xafiday oo lagu dabaqayo hannaanka caddaynta agabka ee tilmaamaya helitaanka kalsooni ku filan agabka amaadeegga;
13. **"Hal-beeg Qaran"**: waxaa loola jeedaa heer tayeedka ama jaan-gooyada ay oggolaatay Hay'adda tayo-dhawrka Soomaaliyeed.
14. **"Heer-tayeedka"**: waxa loola jeedaa summad la xafiday oo lagu dabaqayo hannaanka caddaynta agabka ee tilmaamaya helitaanka kalsooni ku filan agabka amaadeegga;
15. **"Jaan-gooyada"**: waxaa loola jeedaa summad la xafiday oo lagu dabaqayo hannaanka caddaynta agabka ee tilmaamaya helitaanka kalsooni ku filan agabka amaadeegga.
16. **"Joojin"**: waxaa loola jeedaa diidmada agabka ku dhaca in uu buuxin waayo heerar tayeedka iyo shuruudaha looga baahan yahay;
17. **"Kormeere"**: waxaa loola jeedaa shaqaale ka tirsan Hay'adda oo hawshiisu tahay daba-galka hawl si gaar ah looguxilsaaray;
18. **"Shahaadada tayada"**: waxaa loola jeedaa qoraal rasmi ah oo kasoo baxay Hay'addatayo-dhawrka Soomaaliyeed kaas oo qeexaya heerka tayada walxaha lagahadlaayo;
19. **"HTS" (SoBS)**: waxaa loola jeedaa Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed (Somali Bureau of Standards oo lasoogaabiyey;
20. **"Summadda tayada"**: waxaa loola jeedaa xaraf ama xarfo qoraal ama sawir iyo wixii la mid ah taas oo macno gaar ah u leh Hay'adda Tayo-dhawrka oo tilmaameysa tayadawalxaha;
21. **"Tayada"**: waxaa loola jeedaa tilmaan lagu garto heerka sarreynta ama hooseynta walxaha;iyo

22. **"Tayo-dhawrka":** waxaa loola jeedaa ilaalinta heerka tayada walxaha.

QODOBKA4aad
KU DHAQANKA SHARCIGAN

1. Sharcigan waxaa lagu maamulayaa dhammaan howlaha Jaangooyoyinka, cabirrada iyobaaridda.

2. Sharcigan waxaa Lagu dhaqayaa tayada badeecadaha ama adeegyada soo-gala Dalka, kuwa laga-dhoofiyo iyo kuwa lagu isticmaalo Dalkagudahiisa.

QEYBTA 2AAD
HAY'ADDA TAYO-DHAWRKA

QODOBKA 5aad
DHISMAHA HAY'ADDA TAYO-DHAWRKA SOOMAALIYEED

1- Si loo gaaro ujeeddooyinka ku xusan qodobka 2[aad]ee Sharcigan, waxaa Sharcigan lagu dhisay **"Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed"** (Somali Bureau of standards - SoBS) si waafaqsan dastuurka **KMG**, taasoo mas'uul ka noqonaysa maamulka iyo nidaaminta Tayo-dhawrka badeecadaha soo gala dalka, kuwa la dhoofiyo iyo kuwa gudaha Dalka laga soo saaro ama lagu isticmaalo.

2- Hay'adda waxay leedahay shaqsiyad-qaanuuneed iyo astaan u gaar ah.

QODOBKA 6aad
XARUNTA HAY'ADDA

Xarunta Hay'addu waa Caasimadda Jamhuuruyada Federaalka Soomaaliya ee Muqdisho, waana in ay xafiisyo ku yeelataa dhammaan magaalo madaxyada Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah **Dowladda** Federaalka iyo xuduudaha laga soo galo dalka.

QODOBKA 7aad
XILKA IYO WAAJIBAADKA HAY'ADDA

Hay'addu, iyadoo raacaysa sharcigan iyo shuruucda kale ee dalka, waajibaadkeeda waxaa ka mid ah:

1- In ay dajiso siyaasad, Xeer-hoosaad, hab-raacyo iyo jaan-goyn sharciga waafaqsan oo lagu cabbiro tayada cuntooyinka iyo badeecadaha lagu isticmaalayodalka.

2- In ay baarto ayna hubiso cuntooyinka iyo badeecdaha kale ee dalka la-keenayo in ay san xanbaarsanayn khatar iyo halis waxyeelo u geysan kara shacabka.

3- In ay diyaariso halbeegyo (standards) iyo cabbirro looga hor-tagayo waxyeelooyinka caafimaad oo ay u keeni karaan bulshada cuntooyinka iyo daawooyinka dhacay, kuwa tayadoodu hooseeyso ama si u la kac ah tayadooda hoos loogudhigay.

4- In ay hubiso tayada wax soo saarka gudaha dalka, si loo ilaaliyo caafimaad ahaan iyo dhaqaale ahaan shacabkaSoomaaliyeed.

5- In ay qeyb ka noqoto habraaca sharci siinta shirkadaha baarayabadeecadaha (Quality Control Companies) ee ka hawl-galaJFS.

6- In ay abuurto Sheybaar Qaran oo lagu hubiyo tayada badeecooyinka iyo agabka dalka la soo geliyo ama laga dhoofiyo.

7- In ay bixiso shahaadooyin dhiiri gelin wanaag iyo astaamo tayo (QualityMark).

8- In ay kor-u-qaaddo wacyiga bulshada ee ku aaddan hal-beegyada iyo Tayo-dhawrka.

QODOBKA 8aad
MADAX-BANNAANIDA HAY'ADDA

Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed waa hay'ad madax-bannaan marka ay gudanayso waajibaadkeeda shaqo si waafaqsan Sharcigan,

waxayna leedahay shaqsiyad-qaanuuneed, waxayna maamul ahaan hoostageysaa Wasaaradda Ganacasiga iyo Warshadaha.

QODOBKA 9aad
MIISAANIYADDA HAY'ADDA

1. Miisaaniyadda Hay'addu waxay ka mid tahay miisaaniyadda guud ee Qaranka.

2. Hay'addu waxay u madax-bannaan tahay maamulka miisaaniyaddeeda iyadoo raacaysa Xeerka maamulka miisaaniyadda ee XukuumaddaJFS.

QODOBKA 10aad
QAAB-DHISMEEDKA HAY'ADDA IYO MUDDADA XIL-HAYNTA GOLAHA HAY'ADDA

Qaab-dhismeedka Hay'adda Tayo dhowrka Soomaaliyeed ee SoBS waxa uu noqonayaa sida soo socta:-

1. Gole maamul (Board of Directors) oo ka kooban 13 xubnoodoo **ugu yaraan 3 ka mid ah ay yihiin haween:**

   a) toban (10) xubnood oo xirfadlayaal sare ah **oo aqoon u leh shaqada Hay'adda uu metelayo, kuwaas** oo ka kala yimid: Wasaaradaha shaqada ku leh Tayodhowrka sida Wasaaradda Ganacsiga, Beeraha, Xanaanadda Xoolaha, Caafimaadka, Hawlaha Guud, Kaluumaysiga, wasaarada gaadiidka, wasaaradda biyaha iyo tamarta, wasaaradda batroolka iyo hay'adda Bey'ada, oo min xubinah.

   b) Xubin ka imaaneysa ganacsatada (Rugtaganacsiga.)

2. Sidoo kale hay'addu waxay yeelaneysaa Maareeye, Maareeye Xigeen iyo waaxyo kala duwan oo mid walba leedahay xil iyo waajibaadcad.

3. Muddada Xil-haynta Golaha Maamulka (Board of Directors) markalagareebomaareeyahaiyomaareeyekuxigeenkawaaafar (4) sano oo hal mar loo cusboonaysiin karo.

4. Golaha Maamulka Hay'adda Tayo dhowrka (Board of Directors) waxay iska dhex dooranayaan Gudoomiyaha Golaha laakiin Maareeyaha iyo Maareeye kuxigeenku isuma sharaxi karaan xilka Guddoomiyaha.

QODOBKA 11aad
SHURUUDAHA XUBINNIMADAGOLAHA

1. Inuu yahay / ay tahay Muwaadin Soomaaliah.
2. In aysan da'diisa/**da'deeda** ka yarayn **30 (Soddon)** sano.
3. In uu haysto/**haysato** Shahaado heer jaamaceed oo la aqoonsan yahay.
4. In uu leeyahay/**leedahay** khibrad shaqo ugu yaraan muddo **5 (Shan)** sano ah marka laga reebo Maareeyaha iyokuxigeenkiisa.
5. In uu/ay dhimir ahaan caafimaadqabo.
6. In ay san maxkamadi ku **xukumin** fal dambiyeed shantii sano ee u dambeysay.

QODOBKA 12aad
XILKA IYO WAAJIBAADKA GOLAHA MAAMULKA (BOARD OF DIRECTORS)

1. Waxay qiimeynayaan ka dibna ansixiyaan halbeegyada iyo cabirrada tayodhowrka ay soo bandhigaan maareeyaha iyo gudiyada farsamada ee Hay'daha Tayo-dhowrkaSoomaaliyeed.
2. Waxay meel-mariyaan miisaaniyada, qaab dhismeedka waaxyaha iyo Qorshe-hoowleedka Hay'adda kaddib marka uu horkeeno Maareeyaha.
3. Golaha maamulka iyaga iyo maareeyaha waa in ay ku soo saaraan shirkooda ugu horreeya xil howleedka maareeye ku xigeenka iyo agaasime waaxeedyadahay'adda.
4. Waxay ku kormeeraan Maamulka hay'adda fulinta howlihii loo ansixiyay.

QODOBKA 13aad
XIL HEYNTA MAAREEYAHA IYO MAAREEYE KU-XIGEENKA

Maareeyaha iyo Maareeye kuxigeenka Hay'adda Tayo-dhowrka Soomaaliyeed waxay xilka haynayaan mudo shan (5) sano oo la cusboonaysiin karo.

QODOBKA 14aad
SHURUUDAHA MAAREEYAHA IYO KU-XIGEENKIISA

1. Maareeyaha iyo Maareeye kuxigeenka Hay'adda Tayo-dhowrka Soomaaliyeed waa in ay ahaadaan xirfadlayaal sare oo aqoon iyo qibrad u leh hawlaha hay'adda iyomaamulka.
2. In ay leeyihiin shahaado Jaamacad ugu yaraan heerka 1aad.
3. Waxaa soo xulaya oo Golaha Wasiirada hor keenaya Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga iyoWarshadaha.

QODOBKA 15aad
XILKA IYO WAAJIBAADKA MAAREEYAHA HAY'ADDA SoBS

1. Maareeyaha Hay'adda Tayo dhowrka Soomaaliyeed waa masuulka ugu sarreeyo Hay'adda kaddib Golaha Maamulka, waana hagaha iyo madaxa maamulka hay'adda Tayo dhowrkaSoomaaliyeed.
2. Waxaa uu masuulka yahay fulinta howl-maalmeedkaHay'adda.
3. Waxaa uu ku matalaa magaca hay'adda xiriirka ay la leedahay Hay'adaha kale ee Dowladda iyo Xiriirka Hay'adaha caalamigaah.
4. Waxa uu diyaariyaa, fuliyaana qorsha-howleedka hay'adda kaddib markay ansixiyaan Golahamaamulka.
5. Wuxuu u kuur-galaa fulinta dhammaan hawlaha Hay'adda ee ku cadsharcigan.

6. Wuxuu u gudbiyaa Wasaaradda Ganacsiga qorsho-sanadeedka Hay'adda;

7. Waxa uu magacaabayaa agaasimayaasha waaxyaha Hey'adda iyo Madaxda. Xafiisyada Dawlad-goboleedyada Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ka dib marka uu kala tashado Wasiiradda Ganacsiga ee MaamulGoboleedyada.

8. Wixii kale ee Sharcigan iyo xeer-hoosaadka hay'addu uxilsaaro.

QODOBKA 16aad
MAS'UULIYADDA MAAREEYE KU-XIGEENKA

1. Wuxuu buuxiyaa kaalinta Maareeyaha marka uu maqan yahay'ama ay ku yimaadaan duruufo ka hor-istaagi kara gudashada waajibaadkiisa.

2. Wuxuu qabanayaa wixii kale ee uu Maareeyuhu uxilsaaro.

QODOBKA 17aad
KULAMADA GOLAHA HAY'ADDA

Golaha Hay'adda Tayo-dhawrka wuxuu yeelan karaa shir caadi ah iyo shir aan caadi ahayn haddii loo baaahdo, waxayna u dhici karaan sida soo socoto:

1. Kulamada caadiga ah ee Golaha waxay noqonayaan sadexdii bilba mar. haddii aysan Goluhu go'aansan in la qabto waqti ka duwan, waxaana isugu yeeraya guddoomiyahagolaha.

2. Guddoomiyuhu wuxuu isugu yeeri karaa kulan deg deg ah oo aan caadi ahayn haddii loo baahdo, sidoo kale haddii ay isku raacaan 2/3 (saddex meelood labo meel) xubnahaGolaha.

3. Kulanka wuxuu ku ansaxayaa marka ay ka soo qeyb-galaan aqlabiyadda xubnaha Golaha Maamulka Hay'adda Tayo-dhawrka,

waxayna go'aanka ku gaarayaan 2/3 (saddex meelood labo meel) ee tirada guud ee xubnaha Golaha.

4. Kulamada caadiga ah xubin kasta waxay xaq u leedahay in la soo gaarsiiyo ajendaha shirka ugu yaraan 24 (labaatan iyo afar) saac ka hor inta uusan qabsoominShirka.

5. Goluhu wuxuu fadhigiisa ku marti-qaadi karaa Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga ama wasiir kale oo ka mid ah Wasaaradaha wada shaqaynta la leh iyo qof kasta oo kasoo qeyb-galkiisa ay u arkaan muhiim, isaga oo aan la heyncod.

QODOBKA 18aad
GUNNADA XUBNAHA GOLAHA

1. Golaha Maamulka hay'addu Shaqadoodu waa shaqo waqti dhimman **(Part- time)**, mana laha Mushahaar joogto ah waayo waa shaqaale dawladeed, marka laga reebo Maareeyaha iyo Ku-xigeenkiisa.

2. Sedax iyo tobanka (13) xubnood waxa keliya oo ay xaq u leeyihiin gunno lagu siinayo fadhiyadooda oo looga bixinayo kharashka ku galay ka soo qaybgalka kulamada.

3. Gunnada xubnaha Goluhu (board of Directors) ku helayaan fadhiyadooda waxaa lagu qeexi doonaa xeer nidaamiye uu ku soo saaridoono wasiirka ganacsiga iyowarshadaha.

QODOBKA 19aad
MASUULIYADDAXOGHAYNTA

Hay'addu waxay yeelanaysaa xog-hayaha Golaha maamulka oo aan ka mid ahayn Golaha, shaqadiisuna tahay sida soosocoto:

1. Wuxuu keydiyaa, ilaaliyaana documentiyada maamulka iyo xog sireedka eehay'adda.

2. Wuxuu diyaariyaa ajandaha shirka Golaha maamulka (Board of Directors) kaddib marka uu kala tashado maareeyaha, isla markaana qoraa doodda shirka, isku dubaridaa gaarsiiyaana xubnaha kale eeGolaha.

3. Waxaa uu gaarsiiyaa xubnaha Golaha Maamulka, fariimaha loo baahan yahay kaddib markuu ka helo maareeyaha amarka ah in la gaarsiiyo.

4. Waa madaxa uga hooseeyo maareeyaha iyo ku xigeenkiisa maamulka howlaha xafiiska isla markaana ah isku xiraha xafiiska iyo hay'adaha kale si waafaqsanxeerkan.

QODOBKA 20aad
WADA-SHAQEYNTA HAY'ADDA IYO WASAARADDA

1. Hay'adda Tayo-dhawrka Soomaaliyeed waxay wada shaqayn iyo la-tashiyo joogta ah la yeelan doontaa Wasaaradaha Dawladda, Dawlad-goboleedyada dalka, Maamulka Gobolka Banaadir, haya'daha Amniga Qaranka iyo ganacsatada Soomaaliyeed; iyo

2. Hay'adda tayo-dhawrka waxay wada-shaqayn joogta ah la yeelanaysaa hay'adaha dawladda si loo waafajiyo Sharciga tayo-dhawrka Soomaaliyeed iyo shuruucda kale eedalka.

QODOBKA 21aad
SABABAHA LAGU WAAYI KARO XILKA

Dhammaan shaqaalaha Hay'adda waxay xilka ku waayi karaan arrimaha soo socda:

b. Geeri

t. Is-casilaad la aqbalay

j. In caafimaad-darro awgeed u-gudan waayo waajibaadkiisa;

x. In lagu helo danbi la xariira shaqadiisa ama maxkamadi xukunto.

QODOBKA 22aad
GUDDIYO FARSAMO

1. Hay'addu waa in ay yagleeshaa guddiyo farsamo oo aqoon iyo takhasus lagu sooxulay.

2. Guddiyadan farsamo waxaa magacaabaya Maareeyaha Hay'adda isagoo la tashanaya GolahaHay'adda.

QODOBKA 23aad
SHAQOOYINKA GUDDIYADA FARSAMO

1. In ay diyaariyaan hal-beegyo iyo Jaangooyooyin faahfaahsan lanafahmi karo kaas oo la xiriira xirfadaha kala duwan ee tayo-dhowrka looga baahanyahay.

2. In ay daraaseeyaan hal-beegyada iyo Jaangooyooyin caalamiga ah,kuwa gobolka iyo ka talo-bixinta sida loogu qaadan karo hal-beegyadaas in ay noqdaan kuwoSoomaaliyeed;

3. in ay joogteeyaan dib u eegista halbeegyada iyo jaangoynta Soomaaliyeed iyo soo jeedinta wax kabadalka howl kasto oo muhiim u ah diyaarinta halbeegyada loobaahnyahay.

4. In la caddeeyo digniinaha luqadaha qalaad ee ku suntan agabka iyo anfaaciga iyo dhammaan badeecadaha keeni kara halis caafimaad, dhaawac iyodhimasho.

QODOBKA 24aad
CODSIGA IYO ILAALINTA XOGAHA

1. Hay'adda tayo-dhawrka Soomaaliyeed waa Hay'adda kaliya ee u xilsaaran xogta khuseeysa hal-beegyada iyo tayo-dhawrka Soomaaliya.

2. Ciddii u baahan Xog ku saabsan hal-beegyada Soomaaliya waxay ka dalban karaan oo kaliyaHay'addaan.

3. Hay'adda waxay ilaalinaysaa sirta ganacsi iyo xogta kale ee qarsoodiga ah oo ay ka soo ururisay shirkadaha si waafaqsan sharcigan iyo shuruucda kale eedalka.

QEYBTA 3AAD
HAL-BEEGYADA TAYO-DHAWRKA
QODOBKA 25aad
UJEEDDADA TAYO-DHAWRKA

Tayo-dhawrka waxaa loola jeedaa:

1. Caddeynta in badeecada ama adeeggu waafaqsan yahay halbeega Dalka, gobolka iyo midkaCaalamiga.

2. In ganacsatada loo fududeeyo sidii ay u xulan lahaayeen agab iyo adeeg waafaqsan halbeegyada Dalka, gobolka iyo kuwa Caalamiga ah.

3. Kor-u-qaadidda tartanka tayaysan ee agabka iyo adeegyada heer Qaran iyo heer Caalami;iyo

4. Abuuridda jawi ay si xor ah oo badeecooyinku isaga gudbi karaan Soomaaliya iyo suuqyadacaalamiga.

QODOBKA 26aad
HAL-BEEGYADA TAYO DHOWRKA EE SI KMG AH LOOGU SHAQEYNAYO

Hay'adda tayo-dhawrka Soomaaliyeed waxay si ku meel gaar ah ugu shaqeynaysaa mid kamida ah hal-beegyada caalamka ee la aqoonsanyahay oo la waafajiyey **Shareecada Islaamka** (Halal Standards) intii laga dhameystirayo xeerar iyo halbeegyo buuxa oo Soomaaliya leedahay.

QODOBKA 27aad
HABABKA DIYAARINTA HAL-BEEGYADA IYO ANSIXINTOODA

1. Guddiga farsamo waxay u soo-gudbinayaan hal-beegyada ay diyaariyeen Maareeyaha Hay'adda, markuu daraaseeyo kaddib wuxuu u bandhigayaa Golaha maamulka ee Hay'adda.
2. Marka ay isla oggolaadaan Golaha Hay'adda tayo-dhawrka soomaaliyeed, waxaa lagu soo saarayaa hal-beegyadaas Faafinta rasmiga ah sidaas ayayna ku dhaqangalayaan.

QODOBKA 28aad
DIIWAANKA HAL-BEEGYADA

1. Hay'adda tayo-dhawrka waxay yeelaneysaa diiwaan u gaar ah hal-beegyada Tayo-dhawrkaDalka.

2. Marka wax laga badalayo ama lagu darayo waxaa lagu cadeynayaa diiwaanka dhammaan Isbadalada iyo qaabka ay u dhaceen.

QODOBKA 29aad
FAAFINTA HAL-BEEGYADA

1. Waxaa waajib ah in lagu faafiyo faafinta rasmiga ah iyo warbaahinta dhammaan hal-beegyada cusub ujeedooyinkooda, tixraacooda, taariikhda la ansixiyay iyo faahfaahinta loo baahan-yahay oo dhan.

2. Goluhu wuxuu wax-ka-beddel ku sameyn karaa ama uu ka saari karaa Halbeeg ama jaangooyo hore loofaafiyey.

QODOBKA 30aad
HAL-BEEGYADA KHASABKA AH

1. Golaha Hay'adda Tayo-dhawrka waxay awood u leeyihiin ayagoo ku saleynayo talo-bixinta guddiyada farsamo, in ay soo saaraan hal-beegyo ama jaangooyooyin lagu xakameynayo badeecooyinka xariir toos ah la leh noolaha iyo bay'ada

2. Waxaa reebban soo dhoofinta, soo-saaridda ama dhoofiska badeeco hal-beegeedda uusan waafaqsaneyn kan lagu caddeeyay go'aannada iyo faafinta rasmiga ah eeHay'adda.

3. Waxaa reebban Isticmaalka summadda ama astaanta tayada Hay'adda ayadoon loo haysan oggolaanshocad.

4. Waxaa reebban in Dalka lasoo galiyo ama laga dhoofiyo agab ama anfac been abuur ah ama tayadeeda lagabeen-sheegay.

5. Waxaa reebban in Dalka lasoo galiyo agab ama anfaaci taariikhdeedu dhacsan tahay ama ka mid ah badeecadaha daaha oo dhicitaankeedu ka dhimantahay wax kayar hal sano.
6. Agabka ama anfaaciga muddada isticmaalkiisu (shelf life) ay ka yartahay hal sano waa inuusan ka yaraan waqtiga u harsan marka uu soo galayo dalka 50% (boqolkiiba konton) guud ahaan waqtigiisa nolosha.

7. Qofkii ku xad gudba faqradaha (1,2,3,4,5,6) ee qodobkan iyo dhammaan go'aannada Hay'adda Tayo-dhawrka, waxaa lala tiigsanayaa Shuruucdadalka.

QODOBKA 31aad
DHAQAN-GELINTA HAL-BEEGYADA

1. Waxaawaajibkuahganacsatadainaydhowraanhal-beegyadaDalka

2. Marka la furayo warshad ama qeybo wax soo saar waa in ay markastaba halbeegooda ku saleysan yahay midka dalka udagsan.

QAYBTA 4AAD
CABIRRADA IYO BAAREYAASHA

QODOBKA 32aad
UJEEDADA CABIRRADA

1. Waxaa loola jeedaa cabbirka hab cilmi qiyaaseed lagu ogaado tilmaamaha dhirir, mug, cuf, iyo wixii lamid ah oo ay leedahay agabka.

2. In la helo cabbirro khaas ah, waxa ay muhiim u tahay horumarinta jaan-goynta loo baahan yahay in lagu jaangooyo badeecadaha noocyadooda kaladuwan.

3. In la dhiirri-geliyo cilmi baarista iyo horumarinta cabbiradda si loo kordhiyo fursadaha hay'aduhu ka heli karaan ama ka qaadankaraan is dhaafsiga farsamada iyagoo adeegsanayacabbiradaas.

QODOBKA 33aad
ADEEGSIGA CABIRRADA

Hay'adda tayo-dhawrka soomaaliyeed waxay ku soo-saaraysaa xeer-hoosaadkeeda diiwaanka cabiradda Qaranka oo faahfaahsan.

QODOBKA 34aad
MAGACAABIDDA IYO AWOODAHA BAAREYAASHA

1. Baareyaasha waa shaqaale ka tirsan hay'adda tayo-dhowrka waxaana magacaabayamaareeyaha.
2. Qof kasta ama xubnaha loo magacaabayo baareyaasha waa inuu:
    a) Yahay Muwaadin Soomaaliah.
    b) Leeyahay aqoon iyo khibrad la xiriirtabaarista.
    c) Ku sifoobay akhlaaq iyodadnimo-wanaag.
    d) Ku sifoobay ammaano iyodhowrsanaan.

3. Baaruhu wuxuu awood u leeyahay in uu hakin karo ama joojin karo agab kasta oo aan waafaqsanaynSharcigan.

4. Hay'adda tayo-dhawrka Soomaaliyeed waxay soo-saaraysaa Xeer-hoosaad lagu tilmaamayo awoodaha iyo hab-sami u socodka howlaha baarista iyobaareyaasha.

QEYBTA 5AAD
ASTAAMAHA IYO SHAHAADADATAYADA

QODOBKA 35aad
ASTAAMAHA HEERKA-TAYADA IYO SHAHAADADA

1. Hay'adda waxay leedahay astaan u gaar ah oo loo yaqaano astaanta tayada, waxaana isticmaalaya wax soo-saaraha, dhoofiyaha iyo soo-dhoofsadaha kaddib markii ay ogaato Hay'adda tayo-dhawrka in badeecada ay waafaqsan tahay hal-beegyada Dalka.

2. Hay'addu waxay bixineysaa shahaado tayo taasoo muujineysa in adeega ama badeecada ay waafaqsan tahay hal-beegyada gaarka u ah badeecadaas.

3. Hay'addu waxay caddeyneysaa shuruudaha iyo habka lagu qaadan karo astaanta iyo shahaadada tayada.

QODOBKA 36aad
GO'AANNADA TAYO DHOWRKA HAY'ADDA

Go'aannada Hay'adda ee ku salaysan baaritaan, waa kama dambeys aan racfaan laga qaadan karin waxayna ku lifaaqeysaa warbixinta sheybaarka.

QODOBKA 37aad
KHIDMADDAHAY'ADDA

Khidmadaha hay'adda ay ku qaadeyso adeegyada ay bixiso waxaa xeer ku saaraaya Wasiirka Wasaarada Ganacsiga iyo Warshadaha ka dib markuu latashado golaha maamulka iyomaareeyaha.

QEYBTA 6AAD
XIRIIRADA HAY'ADDA
QODOBKA 38aad
HABKA WADA-TASHIGA HAY'ADDA IYO GANACSATADA

Wada-tashiga Hay'adda iyo ganacsatada waa saldhigga wada-shaqeynta labada dhinac si loo gaaro himilada, hiigsiga, iyo in la helo tayo-dhawr lagu baahiyo dalka oo dhan, iyadoo laga wada shaqaynayo horumarinta, casriyeynta ganacsiga iyo wax-soo-saarkaDalka.

QODOBKA 39aad
ISKA HOR-IMAADKA DANAHA ISDIIDAN

Madaxda sare ee Hay'adda iyo Shaqaalahaba waxaa ka reebban qabashada howlo ka hor imaan kara hawlaha hay'adda ama carqaladeyn kara wax qabadkeeda.

QEYBTA 7AAD
QODOBBO GUUD
QODOBKA 40aad
KOR-MEERKA IYO KOR-JOOGTAYNTA

Hay'addu waxay si joogto ah u samaynaysaa kormeer ay ku hubinayso in lafuliyay Sharcigan iyo Xeer-nidaaminta ay hay'addu soo saartay.

QODOBKA 41aad
GANAAXA

Hay'addu waxay awood u leedahay in ay ganaaxdo ciddi ku xad gudubta sharcigan, haddiise uu jiro fal dambiyeed waxaa loo gudbinyaa hay'adaha ku shaqada leh.

QODOBKA 42aad
XIRIIRADA HAY'ADDA

Hay'addu waxay dhaqan-gelinaysaa Heshiisyada Caalami ama gobol oo ay Soomaaliya qeybta ka tahay, kuwaas oo la xariira arrimaha hal-beegyada iyo Tayo-dhawrka.

QODOBKA 43aad
FASIRAADDA SHARCIGA

Sharcigan wixii **aan** si cad loogu qeexin, waxaa loo fasirayaa si waafaqsan Dastuurka Dalka iyo Sharciyada kale ee dhaqan-galka ah.

QODOBKA 44aad
BAABI'IN

Sharcigan wuxuu baabi'inayaa Sharci kasta oo ka hor-imaanaya ama aan la socon karin.

QODOBKA 45aad
DHAQAN-GAL

Sharcigan waxaa uu dhaqan-gelayaa marka Madaxweynaha JFS uu saxiixo laguna soo-saaro faafinta Rasmiga ah.

SHARCI LR.28 Taariikh: 19/05/2020

ANSIXINTA SHARCIGA DUULISTA RAYIDKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/258/B-10/20 Taariikh: 20/02/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Duulista Rayidka

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Duulista Rayidka

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO:19/05/2020



MadaxweynahaJ.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

SHARCIGA DUULISTA RAYIDKA

SharciLr._____ee_____
SHARCIGA DUULISTA RAYIDKA

HORDHAC

Iyadoo la raacayo Qodobka 7aad (1) ee Dastruurka KMG Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya wuxuu soo saarey Sharciga Hay'adda Duulista Rayidka Soomaaliyeed.

Qodobka 1aad
Ereybixin

Sharcigan, haddii aysan macnaha guud ahayn ama aan macnahiisa si gaar ah lagu xusin, erey bixintiisu waa sida soo socota:

1. **"Shil"** waxaa loola jeedaa: dhacdo kasta oo la xiriira carqalad deg deg ah oo ku timid hawlgalka diyaarad, taas oo dhacda inta u dhaxaysa wakhtiga qof kasta isu diyaarinayo duulimaad illaa wakhtiga qof kasta ka degayo diyaaradda, ama marka loo eego diyaarad aan cidi wadin, waxay arrintani dhacaysaa inta u dhaxaysa wakhtiga diyaaraddu diyaar u tahay inay duusho illaa inta laga gaarayo dhammaadka duulimaadka in si deg-deg ah matoorka diyaaradda loo damiyo ciladawgeed.
2. **"Shaqo Duulimaad"** macnaheedu wuxuu yahay: duulimaad diyaaradeed oo aan ahayn gaadiidkaganacsiga.
3. **"Gegi-diyaaradeed"** Waxaa loola jeedaa: goob kasta oo dhul ama biyo ah oo loogu talagalay in loo isticmaalo degista, duulista, iyo dhaqdhaqaaqa diyaaradaha; oo ay ku jiraan dhismo kasta oo lagu rakibay qalab lagu hago diyaaradaha, goob kasta ee loo isticmaalo gegidda iyomaaraynteeda.
4. **"Diyaarad"** waxaa loola jeedaa: aalad kasta oo ku duuli karta hawada, marka laga reebo hubka jawaab celinta hawada ka soo horjeeda ee dhulka dushiisa lagahago.
5. **"Wadada Hawada" (AIRWAY)** waxaa loola jeedaa: goob hawo oo loogu talo galay marin diyaaradeed ama qeyb ka mid ah, loona aasaasay qaab u eg marin hawada sare kuyaalla.

6. **"Adeegga Hagidda Diyaaradaha"waa:**
   a) Adeeg is-gaarsiineed, ha ahaato cir ama dhul, oo loogu talagalay bed-qabkadiyaaradda;
   b) Adeegyada hagidda gooshidda hawada, oo loo isticmaalayo raadiyayaasha, raadaaradda iyo qalab muuqaaleed (visual aids to navigation) oo si toos ah loogu hagodiyaaradda.
   c) Adeegyada gaadiidka hawada ee loogu talagalay bed-qabka diyaaradaha; iyo
   d) Adeegyada macluumaadkaduulista

7. **"Wadada Gaadiidka (AIR-ROUTE)"** waxaa loola jeedaa: khad aag xadidan oo hawo iyo dhulba leh oo loo aqoonsaday in ay lagama maarmaan u tahay fulinta xeerarka duulimaadka ee caalamiga ah.

8. **"Shirkadaha gaadiidka duulimaadyada"** waxaa ka mid ah shaqsiyaad, shirkado madax-bannaan, ama hay'adaha aan madax-bannaanayn, shirkadaha ururadda iskaashatooyinka iyo ururada rayidka ah oo ka hawl-gala adeegyada gaadiidka duulimaadyada ee dadwaynuhu kiraysto si waafaqsan sharciga, qaadana dadka, xamuulka amaboostooyinka.

9. **"Adeegyada Gaadiidka Hawada"** macnaheedu waa: adeeg kasta oo hawada ah oo ay sameyso diyaarad ganacsi oo lagu qaado rakaabka, boostada ama shixnadaha;

10. **"Hay'adda"** waxaa loola jeedaa: Hay'adda Duulimaadka Rayidka Soomaaliyeed ee lagu unkay qodobka 2aad eesharcigan

11. **"Shaqaale idman"** macnaheedu waa: shaqaale kasta oo maareeyuhu u idmaday inuu ku shaqeeyo awoodaha ama fuliyo waajibaadka shaqo marka loo eego sida loo sheegay in uu u adeegsado

12. **"Amniga Duulista"** waxaa loola jeedaa: tallaabooyin isugu jira mid dad iyo qalab oo loogu talagalay in duulimaadyada looga ilaaliyo faragelin sharci-darroah.

13. **"Guddiga"** macnaheedu waa: Guddiga Maamulka Hay'adda lagu abuuray qodobka 7aad eesharcigan;

14. **"Wasiirka"** waxaa loola jeedaa: Mas'uulka Wasaaradda qaabilsan arimaha la xiriira Gaadiidka Cirka iyoDuulista

15. **"Shixnad"** waxaa loola jeedaa: xammuul kasta oo lagu qaado diyaarad.

16. **"Shahaado"** waxaa loola jeedaa: habka loo go'aamiyo in qof ama urur uu leeyahay aqoon, karti, iyo xirfad muhiim u ah ama looga baahan yahay hawl-gal gaarah.

17. **"Kharashka"** waxaa loola jeedaa: lacagaha la qabtay ama la qaban doono oo loo adeegsaday xeerkan ama mid ka danbeeyay, ama ka soo baxay shaqo kasta oo ay qabatayhay'addu

18. **"Heshiiska Chicago"** waxaa loola jeedaa: Heshiiska lagu aasaasay Hay'adda Duulimaadka Rayidka Caalamiga ah ee (ICAO) oo ka dhacay Chicago 7^{dii}Disembar 1944, iyo lifaaqyada iyo wax ka beddelkooda.

19. **"Gaadiidka Ganacsiga"** waxaa loola jeedaa: gaadiidka rakaabka ama hantida qaada oo lakiraysto.

20. **"Waddamada Ku Bahoobay"** waxaa loola jeedaa: Dawlad kasta oo ka mid ah Heshiiska Chicago;

21. **"Xakamayn-Ilaaalin (CONTROLLED)"** macnaheedu waa: goob hawadeeda la xakameeyay ama la ilaalinayo marka la kor marayo;

22. **"Shirarka Heshiis"** macnaheedu waa: shir/heshiis ama qawaaniin, iyo wixii lifaaqyo ah oo la xiriira duulimaadyada rayidka ah ee ay Soomaaliya saxiixday, ku biirtey ama qeyb ka tahay, haddii la dhammeeyay, la saxiixay ama la qaatay ka hor ama ka dib bilowgii xeerkan, oo ay ku jiraan HeshiiskaChicago;

23. **"Xubnaha Duulista"** waxaa loola jeedaa: qof kasta oo uu u xilsaaray milkiilaha diyaaradda inuu guto waajib inta lagu jiro duulimaadkadiyaaraddeed;

24. **"Maareeyaha Guud"** waxaa loola jeedaa: Maareeyaha Guud ee Hay'ada oo lagu magacaabay qodobka 14^{aaad} faqradda1^{aad}.

25. **"Sanadka Maaliyadeed"** waxaa loola jeedaa: muddada labo iyo toban bilood ah oo ku eg dhammaadka soddonka Disembar sanad kasta;

26. **"Garoonka/gegida Dowladda"** waxaa loola jeedaa: garoon ama gegi ay Dowladdumaamusho.

27. **"Si Qaldan-u-isticmaal Macluumaad"** macnaheeda waxa loola jeedaa u-isticmaalidda macaluumaadka bed-qabka diyaaradaha ujeeddo ka duwan ujeeddadii marka hore loogu talagaleyururintiisa.

28. **"Dhacdo"** waxaa loola jeedaa: dhacdo aan aheyn shil oo la xiriirta hawlgalinta diyaarad oo saameeya ama saamayn kara amniga hawlgalkadiyaaradaha.

29. **"Duulimaadyada Ganacsiga Gudaha" iyo "Duulimaadyada Ganacsi Dibadda"** waxaa loola jeedaa: duulimaad diyaarad dad, hanti iyo boosto qaadda si loo horumariyo ganacsiga iyo dalxiiska.

30. **"Gaadiidka Duulista ee Gobollada u kala goosha", "Gaadiidka Duulista ee Dibadda",** iyo **"Gaadiidka Duulista ee Shisheeye"** waxaa loola jeedaa gaadiidka duulista oo qaada rekaabka iyo boostada oo la kiraysto si loo horumariyo ganacsiga iyo dalxiiska, kaas oo isagagoosha:
    a) Meel kasta oo ka mid ah Soomaaliya iyo meel ka mid ah gobol kale ama waddan kale oo la isaga gudbo cirka (airspace).
    b) Meel ka mid ah Soomaaliya iyo meel kasta oo kabaxsan.

31. **"Diyaarad Soomaaliyeed"** waxaa loola jeedaa: Diyaarad ka diiwaangashanSoomaaliya;

32. **"Ruqsad"** Waa: shahaado kasta ama oggolaansho dukumiinti oo u oggolaanaya qof kasta inuu sameeyo wax waafaqsan Xeerkan;

33. **"Barnaamijka Amniga Qaranka ee Duulista Rayidka"** waxaa loola jeedaa: nidaam isku dhafan oo ku saabsan shuruucda iyo hawlaha ay soo bandhigtay, fulisayna Dawladdu, oo looga dan-leeyahay ilaalinta falalka sharci-darradda ah ee ku iman kara duulimaadyada rayidka ah.

34. **"Hawl-galiye",** marka laga hadlayo diyaarad, waxaa loola jeedaa: qofka mas'uulka ka ah maareynta diyaaradda.

35. **"Milkiilaha",** marka laga hadlayo diyaarad ama gegi, waxaa loola jeedaa: qof magaciisu ku diiwaan-gashan yahay ama ruqsad u haysta, iyo qof kasta oo wakiil uga ah Soomaaliya milkiile shisheeye.

36. **"Rakaab"** waxaa loola jeedaa; qof kasta oo diyaaradda saaran oo aan ahayn xubin ka mid shaqaalahadiyaaradda
37. **"Gegida diyaaradaha gaarka ah"** waxaa loola jeedaa: gegi kale oo aan hoos iman xukuumadda, hay'ad dowladeed, ciidan ama boliis.
38. **"Faafin"** waxaa loola jeedaa: daabacadaha soo socda oo la soo saarey, ka hor ama ka dib bilowga xeerkan, sida:

a) Ogaysiisyada dadka ku duuladiyaaradaha
b) Daabacaadda macluumaadka duulimaadkahawada
c) Ogeysiisyada farsama-yaqaannadda, injineeradda iyo milkiilayaasha diyaaradaha rayidkaah.
d) Daabacaadaha duulistarayidka;
e) Wareegtooyinka macluumaadka duulimaadkahawada
f) Buugaagta iyo awaamirta hagayaasha,iyo
g) Faafinta kale ee rasmiga ah ee loo soo saaray in ay awood siiso qodobbada xeerkan oo loo samayey in ay u hoggaan-samaan wakiilada sharcigan haysta, sida wakiiladda shixnadaha keena ama cid kasta oo ay u ogolaatay Hay'addu oo ku shaqeeya gaadiidka cirka, ama ilaaliya amniga, taas oo ay Hay'addu raali ka tahay.

39. **"Qofka ay khuseyso"** waxaa loola jeedaa: duuliya xilligaa ee diyaaradda, maamule ama milkiilaha diyaarada wakhtiga shil ama shil halis ah dhacayo ama goobta shilku ka dhacay oo ah meel kamid ah Soomaaliya iyo/ama haddii ay noqoto gegi ku dhaw Soomaaliya milkiilaha ama hawlgeliyagegidaas.
40. **"Gantaal"** waxaa loolaa jeedaa: aallad lagu rido hawada sare oo loogu talagalay in lagu saadaaliyo hawada oo ay gubtaan waxa calooshiisa ku jira, inta aan la ridinna miisanku u yahay wax ka badan 2.2kilograms.
41. **"Arrimaha bed-qabka"** waxaa loola jeedaa: sababaha keena shilalka diyaaradaha ama baaritaanka lagu ogaanayodhacdada.
42. **"Macluumaadka bed-qabka"** waxaa loola jeedaa, macluumaadka lasoo ururiyay iyo nidaamyada computer-ka ee loo abuuray hagaajinta ammaankaduulista.
43. **"Talo soojeedin Bed-qab"** waxaa loola jeedaa: soo jeedinta talo ka timid baaraha u xilsaaran baarista - oo ku saleysan xogta laga helay baadhitaan ama ilo kale, ujeedadeeduna tahay ka hortaga shilalka iyo dhacdooyinka, iyo in aysan jirin wax ujeedo ah in lagu eedeeyo ama masuuliyad shil amadhacdo

44. **"Qofka Xasaasiga u ah Bed-qabka"** waxaa loola jeedaa: qof halis gelin kara amniga duulista haddii qofkaasi uu u qabto shaqadiisa si aan habooneyn, kuwaa waxaa ka mid ah xubnaha farsamo yaqaanada, xubnaha duulista, shaqaalaha dayactirka diyaaradaha, xubna hagista diyaaradaha, iyo baarayaasha ammaanka;
45. **"Baaritaanka"** macnaheedu waa: codsiga farsamo ama hab kale oo loogu talagalay in lagu aqoonsado ama lagu ogaado hubka, waxyaabaha qarxa ama aalabaha kale ee khatarta ah, waxyaabo loo isticmaali karo in lagu galo ficil faragelin sharci darroah;
46. **"Barnaamijka Amniga"** waxaa loola jeedaa: tallaabooyin kasta iyo habraacyo lagu ilaaliyo amnigga iyo falalka looga hortagayo faragelinta sharci-darada ah ee duulimaadyada rayidka;
47. **"Dhacdo Halis ah"** macnaheedu waa: dhacdo ku lug leh diyaradaha, taasoo tilmaamaysa in ay dhici karto in uu jiro shil la xiriira howl-galka diyaaradeed oo dhaca, marka laga hadlayo diyaarad duuliye leh, inta u dhaxaysa marka koridda diyaaradda illaa iyo inta ay dhammaan dadku ka degayaan diyaarada, ama marka laga hadlayo diyaarad aan duuliye lahayn, waxay dhacaysaa inta u dhaxaysa wakhtiga diyaaradu diyaar u noqoto in ay dhaqaaqdo ilaa waqtiga dhamaadka duulista oo ay soo degto lana damiyomatoorka.
48. **"Diyaarad Dowladeed"** waxaa loola jeedaa: diyaaradaha loo isticmaalo adeegyada militari, canshuuraha iyo adeegyada booliiska ama wixii kale ee u diiwaan gashan si dowli ah, iyo fulinta hawl dawladeed.
49. **"Barnaamijka bed-qabka diyaaradaha Dalka"** waxaa loola jeedaa: nidaam ku saabsan sharciyada iyo wax-qabadyada ay soo bandhigtay fulisayna dawladda oo u jeedadeedu tahay tayaynta bed-qabka iyo kor u qaadiska bixinta adeegyada ugu haboon ee duulista.

CUTUBKA 1AAD
QAAB-DHISMEEDKA MAAMULKA HAY'ADA DUULISTA RAYIDKA SOOMAALIYEED

Qodobka 2aad
Aasaasida Hay'ada

1. Hay'adda Duulimaadka Rayidka Soomaaliyeed ayaa lagu aasaasay Sharcigan (wixii hadda ka dambaya waxa loogu yeeri doonaa **"Hay'adda"**).

2. Hay'addu:

   a. Waa Hay'ad dawli ah oo leh **shakhsiyad qaanuuni ah.**
   b. Waxay leedahay shaabad qalalan (commonseal)
   c. Waxay leedahay awood ay wax ku dacweeyso ama lagu dacweeyo magaceeda
   d. Waxay leedahay awood ay hantida maguuraanka ah iyo midda guurtada ah ku wareejiso ama kula soo wareegto, ku qaadato, ku iibsato, ama kuyeelato
   e. Waxay awood u leedahay inay hanti amaahato marka Wasiirka Wasaaradda, Wasiirka Maaliyadda iyo Gudigga Maamulkuansixiyaan
   f. Waxay geli kartaa qandaraas, **si waafaqsan Sharciga Iiibka ee Qaranka.**
   g. Waxay fulin kartaa dhammaan waxyaabaha ama falalka lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadka ku xusan Xeerkan, oo ay tahay inay si sharci ah u fuliyaan ama ay sameeyaan Hay'addahamadaxabannaan
   h. Hay'ada waxaa hogaaminaya Maareeyaha Guud, kaas oo uu soo jeedinayo Wasiirka Wasaaradda, waxaa ansaxinaya Golaha Wasiirada kadib waxaa magacaabi doono Madaxweynaha Jamhuuriyadda FederaalkaSoomaaliya.
   i. Hay'adda waxaa la xisaabtamaya Guddiga Maamulka, guddigaas oo leh awoodda uu sharcigani siiyey iyadoo la eegayo danta guud ee dalka.

Qodobka 3aad
Xarumaha Hay'adda

1. Xarunta dhexe ee Hay'addu waa inay ku taalo caasimadda dalka, **balse** Hay'addu waxay awood u leedahay inay ku shaqayso meel kasta oo dalka ka mid ah, si ay u ilaaliso danta guud ee dadweynaha.

Qodobka 4aad
Ujeedooyinka Hay'adda

1. Ujeedada Hay'adda loo aasaasay waa maamulka iyo maareynta duulimaadyada rayidka ah, garoomada iyo bed-qabka hawada Soomaaliya si waafaqsan qodobbada sharcigan, xeerarka caalamiga ah, kuwa heer-gobol iyo heshiisyada ay dawladda Soomaaliya saxiixday.

Qodobka 5aad
Waajibaadka Hay'adda

1. Hay'addu waxay dejinaysaa xeer-nidaamiyayaasha (regulations), qorshayaasha iyo istiraatijiyadaha soo socda, iyadoo la raacayo sharcigan.
   a) Hawl-galada duulista rayidka ee xuduudahaSoomaaliya;
   b) Hawl-galka Diyaaradaha Soomaaliyeed ee ka baxsan xuduudaha Soomaaliya.
   c) Faafinta habraacyada ku haboon bed-qabka duulista rayidka.
   d) Istiraatijiyadd lagu dhaqan galiyo habraacyada bed-qabka duulista rayidka.
   e) Ka caawinta Wasaarada gaadiidka dhulka iyo cirka dejinta siyaasada qaranka ee duulista iyo diyaarinta qorshe hawleed waafaqsan siyaasaddaqaranka.
   f) Isku-dubaridka qorshe lagu baaro laguna maareeyo maandooriyayaasha.

g) Bixinta shahaadooyinka, ruqsadaha, diiwan-gelinta iyo oggolaanshaha ay ku hawlgalaan shirkadaha iyoshakhsiyaadka ka shaqeeya duulistarayidka

h) Bixinta adeegyada hawomarista.

i) Aasaasida iyo joogtaynta nidaam lagu diiwaan geliyo laguna suntayo diyaaradaha rayidkaah;

j) Horumarinta duulimaadka rayidka ah eeSoomaaliya.

k) Talo siinta Xukuumadda Soomaaliya ee arrimaha ku saabsan duulimaadka Rayidka ah

2. HDRS waxaa kaloo waajibaadkeeda kamid ah iskudubaridka iyo hogaaminta, hawlaha baadi-goobka iyo samatabixinta shilalka diyaaradaha sida:
   a. Fududaynta iyo gacansiinta hawl-wadeeenada baadhitaanka shilalkadiyaaradaha.
   b. Sameynta baaritaan ku saabsan dhacdooyinka halis shil keeni kara.
   c. Xeer-nidaaminta bed-qabka (safety), amniga, dhaqaalaha iyo farsamooyinka duullimaadyada rayidkaah;
   d. Wax ka qabashada dhacdooyinka halis gelin kara amniga duulista;
   e. Aasaasidda, iskuxirka iyo sugida barnaamijyada bedqabka iyo amniga duulista rayidka ah ee heer Qaran.
   f. Ruqsad siinta shirkadahaDiyaaradaha;
   g. Dhaqangelinta habraacyada farsamo (technical standards) ee loo ansixiyey diyaaradaha.
   h. Ruqsad-siinta iyo kormeeerka hawl wadeenadaduulista.
   i. Talo-bixinta farsamo ee naqshadeynta (design), rakibidda, iyo wax ka beddelka raadiyayaasha iyo agabka kale ee loo isticmaalo adeega gooshiddahawada;
   j. Hubinta tayada qalabka, xarumaha iyo nidaamkaHay'adda.
   k. Faafinta qodobadaXeerkan;
   l. Soo saarida xog sax ah oo dhamaystiran wakhtigii loogu talagalay si loogu adeegsado qorsheynta iyo go'aan qaadashada la xiriirta gaadiidkacirka;
   m. Kormeerka iyo dhawrista **qiimaha** adeegyada duulista, ilaalinta xuquuqda macaamiisha, deegaanka, iyo tartan ganacsi oo caddaalad ah;

n. Hirgelinta heshiiska Chicago (Chicago Convention) iyo heshiisyada kale ee caalamiga ah ee la xiriira duulimaadyada Rayidka ah, oo Soomaaliya ay qayb katahay;
o. Gacansiinta baaritaanada shilalka iyo iskuduba-ridka baadigoobka iyo samata-bixinta shilalkadiyaaradaha.-
p. Samaynta cilmibaaris ku saabsan khataraha dhicikara ee la xiriira bed-qabka duulista iyo talaabooyin lagagahortegayo.
q. U kuurgelidda ganacsiga adeegyada duulista ee diyaaradaha imanaya ama ka dhoofaya Soomaaliya si loo kobciyo loona horumariyo gaadiidkacirka.
r. Ka caawinta Wasaaradda Arimaha Dibadda wada xaajoodyada caalamiga ah ee gaadiidka cirka iyo hirgelinta heshiisyadii lagaaray.
s. Samaynta barnaamijyo khaas ah oo ay Hay'addu ku fuliso habraacyada (standards) la xiriira hawl-fududeynta (facilitation), amniga duulista, ilaalinta degaanka, safrinta shixnad khatar ah iyo arin walba oo u baahan in caalamku si isku mid ah uqabto.
t. Kala shaqaynta Hay'adda ICAO hirgelinta siyaasaddaha iyo xeernidaamiyayaashaHay'adda.
u. Kormeerid dhamaystiran oo lagu samaynayo hawlgalada Hay'addaha duulista, iyadoo loo kuurgelayo saamaynta uu ku leeyihiin bedqabkaduulista.
v. Ku samaynta dib u eegis joogto ah bedqabka duulista rayidka ah, si loola socdo heerka bedqabka, loogana hortago khataraha dhici kara.
w. Samaynta qiimeyn joogto ah, si loola jaanqaado isbedbedelada bedqabka eeaduunka.

Qodobka 6aad
Waajibaadyada Kale ee Hay'adda

1. Hay'addu waxay kaloo leedahay hawlaha la xiriira bed-qabka soo socda:
ku dhiirigelinta Hay'addaha duulista gudashada waajibkooda ku aadan bedqab habraaciisu (standard) sareeyo iyagoo adeegsanaya:

   a. Barnaamijyo tababar iyo aqoon kororsi dhamaystiran xaga bedqabka;

b. Talo bixin sax ah oo ku aadan bed-qaabka waqti walba;
c. Kor u qaadista wacyiga bahda duulista iyo muhimada ay u leedahay u hogaansanaanta xeernidaamiyayaashabedqabka.
d. Kor u qaadista wadatashiga iyo xiriirinta dhamaan qaybaha (parties) saameeynta ku leh bedqabka duulistarayidka

2. Iyadoo la tixraacayo xeernidaamiyayaasha waafaqsan qodobada sharcigan, Hay'addu waxay kaloo leedahay waajibaadyada soo socda:
   a. Meelmarinta sharcigan, shuruucda kale ee wadanka iyo xeer-nidaamiyeyaasha ku saabsan caymiska iyo heshiisyada maaliyadda ee DuulistaHawada,
   b. Hay'addu waxay sidoo kale bixinaysaa adeegyada hagida diyaaradaha mara hawada Soomaaliya iyo meel kasta oo ka baxsan xuduudaheeda oo Soomaaliya u xilsaaran tahay, iyada oo la raacayo is-fahan caalami ah oo lagu fulinayo adeega hawada, adeega digniinta (alert services) iyo isku duwidda raadinta iyo samatabixintadiyaaradaha.
   c. Fulinta heshiiska Chicago, casriyeynta lifaaqyadiisa (Chicago convention annexes amendments), iyo xeerarka kale ee Caalamiga ah oo Soomaaliya qayb katahay.
   d. Hay'addu waxay fulinaysaa heshiisyada bedqabka iyo hawo maritsa ee dhexmara Soomaaliya iyo wadamada kale ama Hay'addaha caalamigaah.
3. Hay'ada Duulista Rayidka (HDR) markay gudaneyso mas'uuliyadeeda bedqabka duulista iyo nabadgelyada waxay hawlaheeda la kaashanaysaa laamaha kale eedowladda.

Qodobka 7aad
Guddiga Maamulka (Board of Directors)

1. Guddigu waxay ka kooban yihiin (7) xubnood oo maareeyuhu ka mid yahay, **kuwaas oo labo ka mid ah ay yihiinhaween.**
   a. Labo xubnood waa inay haystaan shahaado jaamacadeed oo la xiriirta duulistahawada.
   b. Hal xubin waa inuu leeyahay takhasus jaamacadeed oo ah sharcigaduulista

c. Labo xubnood waa inay leeyihiin aqoon sare (Master's Degree) oo cilmiga dhaqaalaha **ama** xiriirka caalamiga ah (international relations).
d. Xubinta7aad waa inuu leeyahay aqoon jaamacadeed iyo waayo aragnimo maamul

2. Gudiga waxaa soo-jeedinaya Wasiirka isagoo raacaya nidaamka tartan furan oo cadaalad ku salaysan, **waxaa ansixinaya Golaha Wasiirada, waxaana magacaabaya Ra'iisul Wasaaraha,** waxayna iska dhex dooran doonaanguddoomiye.
3. Mudada gudigu xilka hayn karo waa afar (4) sano oo la cusboonaysiin karo hal mar ookeliya.

Qodobka 8aad
Shuruudaha Xubin-nimada Gudigga

1. Waa inuu yahay muwaadin Soomaaliyeed oo aysan **maxakamadi dembi ku xukumin;**
   Waa in uusan hayn xil ama shaqo ka hor imanysa (conflict of interest) hawsha loo igmaday.

Qodobka 9aad
Waayidda xubinnimada Guddiga

1. Waxaa lagu waayi karaa xubinimada guddiga sida soosocota:
   a. Geeri
   b. Iscasilaad
   c. Qabasho xil ka hor imanaya shaqada loo igmaday (conflict of interest)
   d. Dembi maxkamadi kuxukuntay
   e. Xil gudasho la'aan joogto ah oo ay xaqiijiyaan (2/3) xubnaha gudigu u soo jeediyaan WasaaradaGaadiidka
   f. Xil-gudasho la'aan caafimaad darosababtay
2. **Buuxinta xubintiibannaanaata:**
   a. Gudoomiyuhu waa inuu sida ugu dhaqsaha badan ku wargeliyaa WasaaradaGaadiidka.

b. Wasaaradda waa inay mudo saddex (3) billood gudeheed ah ku soo buuxisaa jagada banaanaatay iyadoo la raacayo sidaku xusan qodobka7aad.

c. Xubinta cusub ee ku soo biirtay guddiga waxay xilka haynaysaa mudada u hartayguddiga.

3. Guddoomiyaha iyo xubnaha ka midka ah Guddiga maamulka waxay yeelanayaan gunooyin iyadoo lagu salaynayo nidaamka iyo shuruucda maaliyadeed eeHay'adda.

Qodobka 10aad
ShaqooyinkaGuddiga

1. Guddigu wuxuu mas'uul kayahay
   a. Dejinta siyaasadda guud eehay'adda;
   b. Korjoogtaynta iyo ilaalinta habsami u socodka shaqo ee Hay'adda
   c. Dejinta qorshe-hawleedka iyo horumarintahay'adda;
   d. Oggolaanshaha miisaaniyadda iyo xisaab-xirka miisaaniyad-sanadeedka; iyo
   e. Anshax-marinta iyo abaal-marinta hawl-wadeennada iyo shaqaalahahay'adda.

Qodobka 11aad
Awoodda Guddiga

1. Guddiga waa inuu si habsami leh u fuliyo hawlaha lagama maarmaanka u ah korjoogtaynta si waafaqsan qodobada sharcigan:
   a Soo-jeedinta waxkabedelka xeerarka la xiriira Duulista Rayidka Soomaaliyeed.
   b Ansixinta xeer-nidaamiyayaasha ay soo jeediso Hay'addu oo waafaqsan heshiiska Chicago iyo heshiisyada kale ee caalamiga ah.
   c Meelmarinta mashaariicda waaweyn (mega projects) sida dhismayaasha iyo qalabaynta xarumaha duulistarayidka.

Qodobka 12aad
Shirarka iyo Kulamada

1. **Guddigu wuxuu shirarkiisa iyo kulamadiisa u qabsanayaa sida soosocota:**
   a Guddidu wuxuu qabanayaa kulamo joogto ah oo lagu qabanayo si waafaqsan qodobka saddexaad ee soosocda.
   b Shirarka waxaa la qabanayaa waqtiyada iyo goobaha Guddigu go'aansado.
   c Goluhu wuxuu kulmayaa ugu yaraan saddex jeer sannad-maaliyadeed (Financial year) walba, iyagoo kulmi doona afartii biloodbamar.
   d Guddoomiyuhu wuxuu isugu wici karaa guddiga shir degdeg ah oo aan caadi ahayn.
   e Waxaa la siinayaa 14 maalmood oo ogeysiis qoraal ah xubnaha gudiga marka la isugu yeerayo kulan caadi ah ama aan caadi ahayn, haddaanay aqlabiyadu isku raacin muddo ka duwan.
   f Kulanka guddigu wuxuu ku qabsoomayaa saddex meelood labo meel marka ay joogaan tirada guud ee xubnahaguddiga.

2. **Maareynta Shirarka iyoKulamada:**
   a) Guddigu wuxuu shirarka iyo kulamada u maareynayaa sida soosocota
   b) Guddiga wuxuu u maareeynayaa kulamadooda siday isku afgartaan. Hadal-qoraalka shirarka (minutes of the meeting). Guddigu waa in uu hayaa ama xafidaa hadal-qoraalka shirarkooda
   c) Guddoomiyaha ayaa guddoominaya kulamada oodhan.
   d) Haddii uusan Guddoomiyahu joogin, xubnahawaxay **magacaabayaan**mid ka mid ah in uu shir gudoomiyo

3. **Cod-Bixinta**
   a) Cod-Bixinta Kulamada iwm. waxay u dhaceysaa sida soo socota:
   b) Guddigu wuxuu ku gaarayaa go'aamadiisa cod hal dheeri ah inta soo xaadirtaykulanka.

c) Shirgudoonka kulanka wuxuu leeyahay cod tixgalin ah, haddii ay is barbar dhacaan codadka xubnaha kale ee guddiga.
d) Marka laga hadlayo qodobka tobnaad (10), Xubnaha Guddida maamulka waxaa kamid ah MaareeyahaGuud
e) Goluhu wuxuu kaydinayaa hadal-qoraalka, xogta iyo go'aamada laga gaarayshirarkooda

Qodobka 13aad
Shaabada Guud eeHay'adda

1. Shaabadda guud ee Hay'adda waa in la xafido, waxaana lagu isticmaalayaa amarka Maareeyaha Guud eeHDR.

Qodobka 14aad
Maareeyaha Guud (MG)

1. Hay'addu waxay yeelanaysaa Maareeye Guud, oo noqonaya mas'uulka ugu sareeya ee maamulaaya hawl-maalmeedka Hay'adda.
   a MG waxaa ka reeban inuu leeyahay ama yeesho dan dhaqaale ama saami shirkad ganacsi oo ku lug leh duulimaadka rayidka.
   b MG waxaa ka reeban inuu qabto shaqo kasta oo kabaxsan tan hay'adda oo la xiriirta DuulistaRayidka.
   c MG waa inuu ka fogaado wax kasta oo dan gaar ah oo kahor imaanaya ama culays ku keeni karta Hay'adda iyoshaqaaleheeda markay fulinayaansharcigan.

Qodobka 15aad
Magacaabista MG

1. MG waxaa loo magacaabaya sida soosocotaa:
   a Wasiirka Wasaaradda ayaa u soo jeedinaya Golaha Wasiirada magacaabista Mareeyaha Guud, ka dib marka ay ansixiyaan Golaha Wasiiraddu waxaa magacaabayaMadaxweynaha.
   b Mudada xil-haynta MG waa 4 sano, taasoo uu Madaxweynuhu u cusboonaysiin karo hal mar oo kale (4 sano).

Qodobka 16aad
Shuruudaha MG

1. Shuruudaha MG looga baahanyay waa inuu yahay:
   a Muwaadin Soomaaliyeed
   b Qof leh khibrad aan ka yarayn 10 (toban) sano oo la xiriirta Duulista Hawada Soomaaliyeed.
   c Qof leh khibrad Maamul iyo Maareeyn aan ka yarayn muddo 5 (shan) sanoah
   d Qof leh ugu yaraan aqoon heerka darajada labaad ee jaamacada (Masters Degree) oo la xiriirta duulista hawada ama maamul iyomaareeynta.
2. Maareyaha Guud wuxuu xilka ku waayikaraa:
   a Geeri ku timaada
   b Xanuun sababay xil-gudasho la'aan oo dhakhtarcadeeyey
   c Inuu is casilo ama uu hawl-gabnoqdo
   d Inuu galay fal dambiyeed Maxkamadi kuxukuntay
   e Inuu jebiyo dastuurka iyo shuruucda **kale ee** dalka uyaala.

Qodobka 17aad
Waajibaadka iyo Awoodaha MG

1. MG wuxuu masuul kayahay:
   a hawl-fulinta lagama maarmaanka u ah gudashada waajibaadkiisa, si ay u suurta galaan ujeedooyinkaHay'adda
   b Hirgelinta xeerarka ku xusan sharcigan iyo xeerka caalamiga ah ee Chicago (ChicagoConvention)
   c Meel-marinta, kormeerida iyo horumarinta nidaamyada duulista hawada
   d Kormeerida ama xayirista Diyaarad haddii la ogaado khatar dhab ah oo ku saabsan nabadgelyadda iyo bed-qabkaDuulista Hawada.
   e Hir-gelinta siyaasadda duulista hawadaqaranka.
   f U warbixinta Guddiga Maamulka (board of directors) howl maalmeedka shaqadaHay'adda

g Fulinta iyo meel marinta awooddaha kala duwan ee Hay'adda
h Gacan ku haynta iyo kormeerida shaqaalaha iyo dhaq-dhaqaaqa shaqo eeHay'adda.

2. MG isagoon jebinayn qodobada sharcigan waa inuu gutaa waajibaadka lagama maarmaanka ah ee soosocda:
   a Sugida hab-sami u socodka DuulistaHawada
   b Bixinta adeega hagidadiyaaradaha.
   c Sugida iyo hubinta heerka farsamooyinka la isla ogolyahay ee diyaaradaha
   d Howl-gelinta kaabayaasha dhaqaalaha ee Duulista Hawada
   e Hubinta kartida iyo xirfada shaqaalaha DuulistaHawada.
   f Hubinta hab-sami u socodka nidaamka, agabka iyoxafiisyadaHay'adda
   g Soo saarista iyo keydinta xog dhameystiran oo ku saabsan Duulista Hawada si loogu adeegsado qorshaynta iyo go'aan qaadashada la xiriirta DuulistaRayidka.

3. MG wuxuu mararka qaar qoraal ahaan ugu wakiilanayaa awoodihiisa oo dhan ama qaar sida Sharcigan u ogol yahay mid ka mid ah Ku-xigeenada Maareeyaha Guud eeHDR.

Qodobka 18aad
Magacaabidda Ku-Xigeenada Maareeyaha Guud ee HDR

1. Ku-xigeenada Maareeyaha Guud ee HDR waxaa soo jeedinaya Wasiirka Wasaaradda Gadiidka Circa iyo Dhulka, waxaana ansixinaya Golaha Wasiirada ka dib waxaa magacaabaya Ra'iisul Wasaraha JFS si loo hubiyo isu-dheeli tirka iyo habsami u socodka hawlaha, Hay'addu waxay yeelanaysaa saddex Ku/xigeen oo kala qaabilsan Xeer-nidaaminta (Regulatory body), garoomada (aerodromes) iyo bixinta adeega gooshidda hawada (Air Naviagation ServicesProvision)

2. Sharuudaha xulista iyo aqoonta waxay kala mid yahiin sharuudaha ku xiran MaareeyahaGuud.

Qodobka 19aad
Shaqaalaha Hay'adda

1. Hay'addu waxay dooranaysaa, shaqaalaysiinaysaa ama magacaabaysaa agaasimayaasha waaxyaha, saraakiisha, shaqaalaha, la taliyayaasha, sharci-yaqaanada iyo wakiilada Hay'adda, kuwaasoo lagama maarmaan u ah inay si habboon u fuliyaan hawlaha Hay'adda si waafaqsan Xeerkan iyada oo la raacayo habraacyada, shuruudaha iyo shaqooyinka looigmaday.

2. Guddiga Maamulku wuxuu, mararka qaarkood, dib u eegayaa mushaharaadka, gunooyinka, xaaladaha iyo heshiisyada ay ku adeegaan shaqalaaha HDR.

3. Shakhsi ka mid ah guddiga, ama sarkaal, shaqaale ama wakiil ka tirsan Hay'adda uma soo jiidi karto gudashada waajibkiisa shaqo wax denbi ama magdhow ah hadduu si daacad ah u gudanayey hawlaha Hay'adda sida ku xusan xeerkanHDR.

4. Qodobka kor ku xusan (1) kama saamaxayo Hay'adda magdhow kolka fulinta xeerkan iyo shuruucda kale ee wadanka keeno dhaawac shakhsi ama burbur hantiyeed taasoo ku timid dayacaad ama masuuliyad darro ay ku kaceen shaqaalaheeda ama wakiilladaHay'adda.

Qodobka 66aad
Qalabka Diyaaradaha

1. Diyaaradi ma shaqayn karto hadaanay ku qalabaysnayn dhamaan agabkii looga baahnaa gooshidda hawada iyo isbedbedelka cimilida sida ku cad shahaadad duulis u-qalanka iyo lifaaqyada heshiiska Chicago (Chicagoconvention).
2. Hay'addu waxay faraysaa diyaaradaha ka diiwaan gashan wadanka in lagu rakibo qalab dheeri ah, si loo sugo bedqabka diyaaradaha, duuliyayaasha iyo rakaabka, loona fududeeyo hawlaha baadigoobka iyobadbaadada.
3. Hadaanay ku qornayn shahaadada duulis u-qalanka, qalab dheeri ah laguma rakibi karo diyaarad ka diiwaan gashan Soomaaliya iyadoon ogolaansho laga helin HDR.
4. Qalab ku qoran shahadadda duulis-karka lagama furi karo diyaarada iyadoon ogolaansho laga helinHDR.

Qodobka 67aad
Tirada Qalabka Ugu Yar
Ee Diyaaradu Ku Shaqayn Karto

1. Shirkadaha diyaaradahu waxay soo gudbinayaan "tirada ugu yare ee qalab ah" ee diyaarad walba oo ay isticmaalaan ay ku shaqayn karto iyagoo la kaashanaya wershadii samaysay diyaarad kasta. Hadii uu jiro qalab ciladaysan ama isticmaalkiisa la xadiday, waa in ogolaansho laga helaa HDR sidaasna diyaarada lagu hawl geliyaa.

Qodobka 68aad
Koormeerada U Qalanka

1. Kormeerayaasha HDR waxay xaq u leeyihiin inay tijaabiyaan ama cilad baaris kusmayaan, qalabka diyaaradu ku shaqyso sida matoorada, raadiyayaasha IWM, iyagoo hubinaya duulis u-qalankadiyaarada.

2. Kormeerayaasha HDR waxay awood u leeyihiin inay galaan meel kasta oo diyaaradda ka mid ah waqti walbaiyagoo hubinayaa

duulis u-qalanka diyaarada, kharashka ku baxa hawshan waxaa qaba shirkada loo shaqaynayo.

3. HDR waxa ay xaq u leedahay in ay fariimo la xiriira duulis u-qalanka u dirto shirkadahadiyaaradaha.

4. HDR waxay xaq u leedahay inay hakad geliso shahaadada duulis-karka hadii lagu xadgubo qodobada xeerkan.

CUTUBKA 7AAD
DUKUMENTIYADDA IYO DIIWAANADA DIYAARADAHA

Qodobka 69aad
Dukumentiyada laga rabo in ay Diyaaraddu sidato

1. Diyaarad kasta oo ka diiwaan gashan Soomaaliya ma duuli karto hadii aanay wadan dukumentiyada hoos kuqoran.
   a. Shahaadada diiwaangelinta diyaarada (certificate of registration).
   b. Shahaadada duulis u-qalanka lagu cadeeyey in aanay cilad qabin duulina karto (Airworthinesscertificate),
   c. Leysamada duuliyayaasha iyo engineeradadiyaarada
   d. Diiwaanka duulimaadyada ay diyaaradu samaysay iyo aqbalaada guud ee la siiyeyduulimaadka.
   e. Shatiga raadiyayaasha saarandiyaarada.
   f. Buugaga hawlgalka iyo dukumentiyada dayactirka iyo dukumentigii kale ee HDR ubaahato.
   g. Liiska rakaabka, xamuulka, boostada iyo soo gudbinta faahfaahin la xiriirta wixii kale ee diyaaradu waddo.
   h. Nuqulada caymiska oo rasmiah.

2. Duulimaadka Caalamiga ah diyaaradaha wadanka gudihiisa isaga goosha waxa laga rabaa arimaha lagu xusay faqrada (1) ee qodobkan,

3. HDR waxa ay ka khafiifin kartaa qayb ka mid ah shuruudaha diyaarad loo duuliyey tijaabo ama tababarduuliye.

Qodobka 70aad
Tusid Dukumiinti

1. Duuliyaha Kowaad iyo shirkada uu u shaqayo waxay u soo gudbinayaan HDR markay codsato dhamaan dukumentiyada iyo xogaha xeerkan ku qeexan ama xeer-nidaamiyayaasha (regulations) kale eeHDR.
2. Hadii HDR la laabato ogolaansho, shahaado, ama shati ay bixisay, milkiiluhu waa inuu dib ugu soo celiyaa dukumentiga haday HDR codsato.

Qodobka 71aad
Sugida Dukumiintiyada

1. Milkiilayaasha ama shirkadaha diyaaraddaha waxaa ku waajib ah in ay kaydiyaan xogaha diyaaradda iyo dukumentiyada hawlwadeenda diyaaradaha. Xogtaas waa la haynayaa xataa hadii la joojiyo isticmaalka diyaaradaas iyadoo la tixgelinayo arrimaha soosocda.
   a Hadii labo shirkadood diyaarad ka diiwaan gashan Soomaaliya la kala wareegaan iyagoo ku sugan wadanka gudihiisa, waxaa shirkadii horay u haysatay diyaaradda laga doonayaa in ay ku wareejiso shirkada dambe dhamaan dukumentiyada ay ku jiraan kuwa dayactirka IWM.

   b Hadii matoor ama marawaxad helikobtar IWM, loo kala furo labo diyaaradood oo Soomaaliya ka diiwaan gashan waxa laga doonayaa shirkada leh diyaarada qalabka laga furay in ay ku wareejiso cidda iska leh diyaarada dambe dhamaan xogaha iyo dukumentiyada qalabka loowareejiyey.

   c Haddi xubin ka tirsan hawl-wadeenada diyaarad ka diiwaangashan Soomaaliya loo wareejiyo shirkad kale si uu ula shaqeeyo, shirkada hore waa inay gacanta u gelisaa tan dambe xogta qofka la soo wareejiyey. Shirkada cusub waa inay dhawrtaa xogta dukumentiyada loo soowareejiyey.

Qodobka 72aad
Dukumiinti Loo Isticmaalo Si Sharci Daro Ah

1. Waxa reeban falalka soosocda:
   a. Isticmaalka shahaado, shati, ogolaansho ama dukumenti kale oo HDR dib ula noqotay, hakisay ama wax kabedeshay.
   b. U gudbinta shahaado, shati, ogolaansho ama dukumenti kale oo ay bixisay HDR in uu isticmaalo qof aan ahayn kii la siiyey.
   c. Isu ekaysiin qof kale iyadoo ujeedadu tahay in la cusboonaysiiyo ama wax laga bedelo shahaado, shati, ogolaansho ama dukumenti kale, si uu u istismaalo shakhsi aan ahayn kii lasiiyey.
   d. Burburin, tirtiris ama wax ka bedel dukumenti iyo xog hoos imanaysa xeerkan ama in lagu kordhiyo xogkhaldan.
   e. Tirtiris xogta ku qoran liiska xamuulka ama in lagu qorobeen abuur lagu talagalay ama khalad udhacay.

CUTUBKA 8AAD
SHATIYO AMA RUQSADO

Qodobka 73aad
Ruqsadda Hawlwadeenada Duulista Iyo Qiimeyntooda

1. Qofkasta oo ka mid ah hawlwadeenada duulimaadyadda iyo duuliye kasta waa in uu haystaa SHATI iyo qiimeyn (rating) ay siisay ama u ansixisay HDR si waafaqsan xeerkan iyo sharciyada kale ee ku haboon. HDR waxay ku xadidi doontaa xeerarkeeda shuruudaha lagu bixiyo, ansixiyo iyo kuwa lagu ogolaado shati, shahaado ama qiimeyn (rating) xirfadeed si waafaqsan lifaaqa koowaad ee heshiiska Chicago (in conformity with Annex 1 to the Chicago Convention.)

2. Shaqaalaha aan duulin laakiin bixiya adeegyada hawo marista sida kuwa haga diyaaradaha iyo hawlaha la xiriira waxay HDR ku waajibinaysaa inay haystaan shatiyo, shahaadooyin iyo qiimeyn-xirfadeed (rating) si waafaqsan xeerarkaHDR.

Qodobka 74aad
Aqoonsiga Shati Iyo Qiimeyn-Xirfadeed (Rating) Wadan Kale Laga Bixiyey

1. Shatiyadaiyo qiimeyn-xirfadeedka (ratings) duuliyayaasha ama shaqaalaha kale, kuwasoo waddan kale laga bixiyey ama laga aqoonsaday, HDR way ansixin kartaa shatiyadaas hadday u dhigmaan ama ka sarayaan heerarka ku xusan lifaaqa kowaad ee Chicago convention.

Qodobka 75aad
Hakad Gelin iyo La Noqosho Shati

1. Hadii milkiilaha shati u hogaansami waayo xeerkan .iyo shuruucda kale ee la jaalka ah, HDR waxay ku wargelin doontaa milkiilaha shatiga qiima dhaca ku yimid iyadoo u qabanaysa mudo uu ku soo kabto. HDR waxay hakad-gelinaysaa ama shatiga kala noqonaysaa milkiiliha waqtiga loo mudeeyey ku soo kaban waaya. Shati kasta oo la hakiyey ama lala noqday HDR ayaa si degdeg ah loogu soo celinayaa.

2. Wuxuu xeerku qabaa, in HDR si degdeg ah hakad u geliso ama dib ula noqoto shati markay dhacdo xaalad degdeg ah oo saamaynaysa bedqabka (safety) guud iyo arimo gaarah.

3. Hadii loo baahdo in rafcaan laga qaato go'aanada HDR, waxa la raacayaa xeerkan iyo xeerarka kale ee dalka udegsan.

Qodobka 76aad
Machadyada Tababarka DuulistaHawada

1. HDR waxay samaynaysaa xeer-nidaamiyayaal lagu dhaqo Machadyada tababara shaqaalaha Duulista Rayiidka, waxayna ansixin doontaa keliya Machadyada buuxiya shuruudaha loo dejiyey.
2. Waxa ka reeban naadiyada daneynaya duulista, dugsiyada tababara duuliyayaasha, shirkadaha ama shakhsiyaad gaar ah inay bixiyaan tabobar duulimaad IWM, hadaanay ogolaansho ka haysan HDR. HDR waxay ogolaansho tababar lagu bixiyo siin doontaa cidii buuxisa shuruudaha udegsan.

CUTUBKA 9AAD
GANACSIGA GAADIIDKA CIRKA

Qodobka 77aad
Xeer-Nidaamiyayaasha Lagu Maamulo Ganacsiga Gaadiidka Cirka

1. HDR waxay dejineysaa oo kormeeri doontaa siyaasad lagu horumariyo ganacsiga gaadiidka cirka, iyadoo eegaysa koboca dhaqaalaha wadanka waqtiga la joogo iyo kan soosocda.
2. HDR iyadoo kaashanaysa Wasaaradda Arrimaha Dibeda waxay kala xaajoonaysaa wadamada kale heshiisyada isdhaafsiga duulimaadyada diyaaradaha iyo heshiis walba oo calami ah lana xiriira gaadiidkacirka.
3. HDR waxay kormeereysaa kana qayb geleysaa wada-hadalada u dhexeeya shirkadaha wadaniga ah iyo kuwa ajnabiga ah, si ay u gaaraan heshiis maalgashi oo wadajir ah iyo ganacsi walba oo la xiriira gaadiidka cirka si waafaqsan shuruudaha wax isku darsiga eeshirkadahaas.
4. HDR waxay kor-meereysaa dhaqdhaqaaqa shirkadaha dalka ee ku ganacsada gaadiidka cirka, iyadoo siinaysa ogolaansho ay ku hawl galaan, waxaanay HDR aqbashaa ama wax ka bedeshaa magaalooyinka diyaaraduhu u safraan (air routes) iyo tirada duulimaadyada (flight frequency).
5. HDR waxay si dhow ula socotaa dhaqdhaqaaqa shirkadaha ajnabiga ah ee ku ganacsada gaadiidka cirka iyo siday u fuliyeen xuquuqada/waajibaadka ku cad heshiiskii laba geesoodka ahaa ee lala galaywadamadooda.
6. HDR waxay hakad gelisnayaa ama xadidaysaa dhaqdhaqaaqa shirkadaha wadaniga ah ama kuwa shisheeye ee ku ganacsada gaadiidka cirka haday shirkadahaasi ku xadgudbaan shuruudihii lagu siiyey shatiga ama heshiiskii laba geesoodka ahaa ee Soomaliya la gashay wadamadooda ama qodobada sharcigan.
7. HDR waxay ogolaansho siinaysaa shirkadaha dalka ama kuwa ajnabiga ah inay samayaan duulimaadyo aan jadwalka ku jirin iyadoo la tix-gelinayo xaalado gaarah.
8. HDR waxay hubineysaa in tartanka shirkadaha sida joogtada ah uduulaiyokuwaaanjadwalkakujirineeqiimahatigidhadaiyo

kirooyinka diyaaradaha uu noqdo mid ku dhaca si cadaalad ah (fair competition).

9. HDR waxay bixinaysaa ogolaansho ay diyaaradaha shisheeya xafiisyo kaga furtaan wadanka ama ku wakiishaan shirkado wadani ah, halka shirkadaha shisheeye si la mid ah wakiil uga noqdaan wadankooda (principal of reciprocity).
10. HDR waxay ogolaansho siinaysaa shirkadaha wadaniga ah ama kuwa shisheeye ku noqdaan wakiilo ganacsi iyo xamuul wadanka gudihiisa iyadoo dejinaysa xeer-nidaamiyayaal lagu maamulo dhaqdhaqaaqooda.
11. HDR Waxaa ku waajibiya in ay dejiso, tafatirto hirgelisana siyasadda iyo stratejiyadda lagu hormarinayo dulimadyadda rayidka ah ee wadanigaah.
12. HDR waxay wada shaqayn dhow la yeelanaysa shirkaddaha dulimadyadda ee wadaniga ah si kor loogu qaadi laha loona kobcin lahaa adeega dayaradaha, dulimadyadda iyo **warshadaha** guud ahaan.
13. HDR waxay ilaalinaysa xuquuqda shirkaddaha wadaniga ah iyadda oo si buxdda ugu dhowraysa xuquuqda dulimadyadda dalka gudihiisa dibidiisa iyo xuquuqda 5 aad iyo 6 aad ee dulimadyadda.
14. HDR waxay si dhow ula socodsiineysaa ulana wadaageysaa macluumaadka soo kordha ee duulista rayidka, kuna casuumeysaa shirarka looga hadlaayo duulimaadyada rayidka dalka iyodibadiisa.
15. HDR waa inay ilaalisaa fasaxa ay siineyso diyaaradaha Ajnabiga oo toos u imaanaya dalka, iyadoo ilaalineysa xuquuqda diyaaradaha wadaniga, waana inay xadaysaa maalmaha duulimaadka ku imaaneyso, waana inaan loo ogolaanin dalka intiisa kale, ayadoo loo daneynayo diyaaradaha Wadaniga ah, sidda ku cad xeeraraka caalamiga ah.

Qodobka 78aad
Bixinta iyo Hakad-Gelinta Shahaadada Hawlgalka (Operational Certificate) iyo Shaqooyinka Lagu Ogolaaday Shahaadada.

1. Shirkadaha diyaaradaha waxaa ka reeban hawlgelinta diyaarad ilaa ay ka helayaan ruqsad ay ku cadahay nooca shaqo ee HDR u ogolaatay. Shirkadaha diyaaradaha waa inay geeyaan nuqul ka mid ah shahaadadooda xarun walba oo ay ka hawlgalaan
2. Shirkadaha diyaaradaha waxay bedelayaan nooca shaqo ee ay qabtaan (specifications), ka dib markay ogolaanshaha ka helaan HDR.
3. HDR waxay awood u leedahay inay joojiso ama xadido dhaqdhaqaaqa ganacsi ee shirkad diyaaradeed oo wadani ama ajnabi ah, haday ku xadgudubto shuruudihii ruqsada lagu siiyey, heshiiskii u dhexayey Soomaaliya iyo dalka diyaarada laga leeyahay ama qodobadaxeerkan.
4. Tirakoobka (Statistics) GaadiidkaCirka
   a) Shirkadaha dalka laga leeyahay iyo kuwa ajnabiga ah ee ka dhex shaqaya ama kor mara Soomaaliya waa inay HDR u soo gudbiyaan dhamaan macluumaadka ay codsato kuwaasoo ay ku jiraan jadwalka duulimaadyada, tirakoobka hawlgalada iyo tirkoobka guud eeduulista,
   b) HDR waxay la wadaagaysaa xogta tirakoobyada Hay'adda ICAO markii loo baahdo.

Qodobka 79aad
Aasaaska Shirkado Diyaaradeed (Shuruudaha Maaliyadeed Iyo Kuwa Ganacsi)

1. HDR oo xiganaysa sharciga shirkadaha (company law), lana kaashanaysa Wasaaradaha khuseeya dhaqaalaha qaranka waxay soo saaraysaa oo faafinaysaa shuruudaha iyo nidaamka looga baahan yahay aasaasida shirkad diyaaradeed oo doonaysa inay Soomaaliya ka ganacsato. Shatiga Hawlgalka Hawada (AOC) waxaa la bixin karaa marka shirkadda la sameeyo.

CUTUBKA 10AAD
KHIDMADAHA
Qodobka 80aad
Khidmada Laga Qaado Gaadiidka Cirka

1. HDR waxay jaangoyneysaa khidmada diiwaangelinta diyaaradaha, bixinta, oggolaanshaha, cusboonaysiinta, beddelidda shatiyada, shahaadooyinka, oggolaanshaha, iyo kharashka laga qaado shirkadaha isticmaala adeegyadaHDR.
2. HDR khidmada kuma kala takoori karto macaamiisha kala duwan ee isticmaala garoomadda iyo hawadda sida uu dhigayo nidaamka caalamiga eeICAO.

Qodobka 81aad
Khidmad ka dhaafid

1. Diyaaradahansoosocdawaalagadhaafayaakhidmadakorlaguxusay
   a. Diyaaradaha ay leeyihiin laamaha kala duwan ee Dawlada Soomaaliya ee aan samaynayn duulimaadganacsi.
   b. Diyaaradaha ku safraya tixgelin diblomaasiyadeed iyo
   c. Diyaardaha ka qayb qaadanaya baadi goobka iyo samato bixinta (Search and RescueOperations)

CUTUBKA 11AAD
HAWLAHA BAADI-GOOBKA IYO SAMATA-BIXINTA

Qodobka 82aad
Isku dubaridka iyo xeer-nidaamiyayaasha

1. HDR ayaa mas'uul ka ah taakulaynta diyaaradaha iyo rakaabka marka ay diyaarad lunto, burburto ama ay la soo gudboonaato xaalad deg-deg ah ama ay ku dhacdo dhibaatooyin khatar gelinayabed-qabkeeda.
2. HDR waxay u xil saari kartaa hawlaha baadi-goobka iyo samata-bixinta, hay'ad kale oo si buuxda ugu qalabaysan adeegyadaas ama aan ka fogeyn goobta masiibadu ka dhacday.
3. Qofna kama reebana bixinta taageero kasta oo lagama maarmaan u ah hawlaha baadi-goobidda iyo samata-bixinta marka Hay'addaha ku hawlani codsadaangurmad.

Qodobka 83aad
Mas'uuliyadaha baadi-goobka iyo samata-bixinta

1. HDR waxay sameeneysaa xarun laga maamulo hawlaha baadi-goobka iyo samata-bixinta waxayna mas'uul ka noqonaysaa iskuduwidda howlgalada gurmadka si waafaqsan nidaamka Hay'adda Caalamiga ah ee Duulista Rayidka kuna xusan Lifaaq 12aad ee Heshiiskii Chicago.

2. HDR waxay abaabulaysaa kooxaha gurmadka ee heer qaran si ay u noqdaan heegan buuxa iyadoo la raacayo qorshayaasha badbaadada ee hore loodejiyay.

3. HDR waxay qaadaysaa talaabooyinka lama huraanka ah si loola shaqayo loona kaashado hay'adaha badbaadada ee ka yimid dalalka shisheeye hawlaha la xiriira baadi goobida iyo samatabixinta

Qodobka 84aad
Baadi-goobida iyo Samatabbixinta Goobaha aan la Ogoleyn in la Dul Maro

1. HDR, iyadoo kormeeraysa, waxay u oggolaanaysaa dadka iyo diyaaraddaha wada hawlaha baadigoobka iyo samata-bixinta goobaha aan la ogolayn in diyaaadi dulmarto marka lagu tuhmo in shil ka dhacaygoobtaas.

Qodobka 85aad
Magdhow iyoKharash

1. Kharashka baadigoobka iyo samata-bixinta waxaa bixinaya shirkada diyaarada leh ama ceysmiskooda, diyaaradaas oo ah mida la badaadinayo, waxay kaloo bixinaysaa khasaaraha ka dhasha hawsha baadigoobka iyo badbaadada iyo mushahar-maalmeedka shaqaalaha aan samafalkaahayn.

Qodobka 86aad
Magdhowga Hawlgalada Baadi-Goobka iyo samata-bixinta

1. Maxkamadaha Soomaliya waxay qaadayaan dacwadaha magdhaw sheegashada hawlaha baadi-goobka iyo samata-bixinta. Marka shilku ka dhaco wadanka Soomaaliya gudahiis, badahafog-fog ama meel ka baxsan madax banaanidaQaranka.

   a Haddii diyaaradda qabatay hawlaha baadi-goob iyo badbaadinta ay ka diiwaan gashantay wadankaSoomaaliya

   b Haddii qofka dacwoonaya uu yahay muwaadinSoomaaliyeed

   c Haddiidiyaarada shilka gashay la ga helo waddanka soomaaliyagudahiisa

CUTUBKA 12AAD
BAARITAANKA SHILALKA DIYAARADAHA
Qodobka 87aad
Shilalka Diyaaradaha Rayidka ah

1. Wasaarada Gadiidka Cirka iyo Dhulka waxaa waajib kuah:

   a In ay dejiyo shuruuc iyo xeer-nidaamiyayaal lagu dhaqo wargelinta iyo warbixinta shilalka diyaaradaha rayidkaah;

   b In ay baarto shilalka, kana warbixiso xaqiiqda, xaaladaha iyo duruufaha la xiriira shil kasta iyo sababtakeentay;

   c In ay qaado tallaabooyin looga hortegayo shilalka diyaaradaha.

   d Waa inay warbixin sugan ka siiso dadweynaha xaalada shilka iyadoo la ilaalinayo danta guud;iyo,

   e In ay ka gun gaarto waxa ugu wanaagsan ee lagu soo afjari karo ama xadaynayo dib u soo noqoshada shilalka ayadoo samaynaysa cilmibaaris iyo baaritaano ku saabsan arrimaha bed-qabka gooshida hawada iyo ka hortaggashilalka

2. Sarkaakiisha ama shaqalaha u xilsaaran shilalka waxay yeelanayaan awood la mid ah tan maareeyaha HDR xagga xog ururinta amabaaritaanada;

a Sharcigani wuxuu Wasaarada u ogolyahay inuu diyaarad kasta oo shil ku lug yeelata, ku sameeyo baaritaan iyo tijaabo lagama maarmaan ah, xaga matoorada diyaaradda, marawaaxdaha iyo qalabka kasta oo diyaaradu ku shaqayso ama hantida saaran diyaaradda ku lugta leh shilkadhacay.

b Wasaarada waxaa sharcigani u oggol yahay in ay baarto haraaga meydka qof kastaoo rakaabka kamid ah si loo ogaado heybta qofka iyo arrimo muhiim ah la xiriira baaritaanka shilkadiyaarada.

Qodobka 88aad
Baabi'inta Caddeymaha Shilka

1. Diyaarad kasta oo rayid ah, matoorada diyaaradda, marwaxadaha, qalabka lagu hago diyaaraddaha, ama hantida saarandiyaaradda shilka gashay waa in la ilaaliyaa, waxaa reeban in wax laga qaado goobta shilku ka dhacay ilaa iyointa baaritaanku socdo si waafaqsanayn xeerarka shilalka u degsan. Qof kasta oo ku xad gudba qodobkan waadembiile.

2. Waxa reeban in qayb ka mid xogaha shilka la baaray ama warbixinada shilalka ee Wasaaradda in loo isticmaalo cadayn maxkamadeed ama in magdhow laguraadiyo.

3. Wasiirku marka uu codsado, laamaha kale ee dawlada iyo Wasaaradaha kale waxaa sharcigani u ogolaanayaa in ay baaritaan ku sameeyaan shilalka diyaaradaha ayna wasiirka u gudbiyaan xaqiiqda, xaaladaha iyo duruufaha ku xeeran arintaas, waxaana loo oggol yahay in uu warbixinadaas ku go'aansado sababaha suurtagalka ah keenayshilka.

CUTUBKA 13AAD
DEMBIYADA IYO GANAAXYADA
Qodobka 89aad
Dambiyada iyo Ganaaxyada

1. Qof kasta oo si ula kac ah u burburiya, uga qaada meeshii loogu talagaly ama waxyeello u geysta hantida HDR ama hor istaagain hantidan lagu qabto hawshii loogu talagalay wuxuu noqon doonaa eedaysane wuxuuna mutaysanayaa ganaax ay go'aamiso Hay'adda ku shaqadaleh.
2. Qof kasta oo hor istaaga ama caqabad ku noqda sarkaal ama shaqaale ka tirsan HDR kaas oo gudanaya waajibaadkiisa shaqo si waafaqsan qodobada Xeerkan ama xeernidaamiyayaashaboos imanaya wuxuu noqon doonaa eedaysnae wuxuuna mutaysanayaa ganaax ay go'aamiso hay'adda ku shaqaleh.

CUTUBKA 13AAD
DHAQAN-GELIN
Qodobka 90aad
Dhaqangalka Sharciga

1. Dhaqan-gelinta sharciga
2. Sharcigan, kadib dhaqan galkiisa, wuxuu burinayaa dhamaan sharciyadii hore ee dalka uga yaallay duulista rayidka.
3. Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa markii uu ansixiyo Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, labadiisa aqal, isla markaana uu saxiixo Madaxweynaha Juhmuuriyadda Federaalka Soomaaliya, laguna soo saaro faafinta rasmigaah.

Qodobka 91aad
Dhamaystirka Sharcigan

1. Qodobada laga waayo sharcigan waxaa loola noqonayaa heshiiska Chicago iyo mucaahadooyinka Soomaaliya ansixisay ee la xiriira duulista rayidkaah.
2. Sharcigan wixii laga waayo waxaa loola noqonayaa sharciyadii ka horeeyay iyo heshiisyada caalamigaah.

XEER MADAXWEYNELr.248 Taariikh:17/02/2020

MAGACAABIS NOOTAAYO

MADAXWAYNAHA J.F.S.

MARKUUARKAY: Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka KMG ah ee J.F.S

MARKUUARKAY: Xeerka Lr. 1 ee soo baxay 02/03/1962kuna saabsan hawlaha Nootaayaha

MARKUUARKAY: Xeerka Lr. 7 ee soo baxay 02/02/1986oo awood u siinaayo Madaxweynaha inuu magacaaboNootaayaha

MARKUUARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Cadaaladda, Ref: WC/XW/E-12/431/018

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhusaxiixo, Waxaa **Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed (Luu)** loo magacaabay inuu noqdo Nootaayo.

Qodobka 2aad

Waxa uu **Dr. Maxamed Maxamuud Maxamed** ka hawlgelayaa Gobolka Banaadir gaar ahaan Magaalada Muqdisho.

Qodobka 3aad

Waxa uuXeerkan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxweynaha J.F.SsaxiixowaxaanalagusoodaabicidoonaaFaafintaRasmigaeeJ.F.S

MUQDISHO: 17/02/2020



Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR.254 Taariikh:16/03/2020

MAGACAABIS XUBNAHA CUSUB EE GUDDIGA MAAMULKA BANGIGA DHEXE

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad, Xarafka 'C' iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka 'K' ee Dastuurka J.F.S

MARKUU ARKAY: Xeer Lr. 130 ee soo baxay 22/04/2012 kuna saabsan Sharciga Bankiga Dhexe ee Soomaaliyeed iyo Hey'adaha Maaliyadda Soomaaliyeed

MARKUU ARKAY: Go'aanka Golaha Wasiirrada SHGW.0092.02.20 Taariikh: 13/02/2020

MARKUU OGAADAY: In ay lagama maarmaan tahay in la magacaabo Xubnaha cusub ee Guddiga Maamulka Bangiga Dhexe

MARKUU TIXGELIYAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada ay leeyihiin mudanayaasha

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha J.F.S. saxiixo Xeerkaan, waxaa Xubnaha Cusub ee Guddiga Maamulka Bangiga Dhexe loo magacaabay xubnaha magacyadoodu hoos ku qoran yihiin:

1.	Prof. Xuseen Axmed Warsame	Xubin
2.	Dr. Aues Abo Scek	Xubin
3.	Dr. Cabdisamad Nuur Looyaan	Xubin
4.	Mr. Sakhaawe-diin Mustafa Maxamed	Xubin
5.	Mr. Cusmaan Salaad Gabeyre	Xubin

Qodobka 2aad

Waxa uu Xeerkaan Madaxweyne Dhaqangelayaa marka uu Madaxweynaha J.F.S saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S

MUQDISHO:16/03/2020

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
KAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: Hanl/060/2020
TAARIIKH 30/6/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

MadaxweynahaJ.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR:259 Taariikh:06/04/2020

MAGACAABIS LA-TALIYE MADAXWEYNE EE DHINACA SHARCIGA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista khabiir la-taliye Madaxweyne ee Dhinaca Sharciga

Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 6daAbriil 2020, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay **Kaise Said Artan** in uu noqdo La-taliye Madaxweynaha ee dhinaca Sharciga

Qodobka 2aad

Xeerkaan waxa uu Dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S

MUQDISHO:06/04/2020

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
WAA LA DIIWAAN GELIYEY
DIIWAAN NO: HHA/052/2020
TAARIIKH 30/6/2020
SAXIIXA HANTIDHAWRKA GUUD

MadaxweynahaJ.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR.267 Taariikh:20/05/2020

MAGACAABIS AGAASIMAHA HAB-MAAMUUSKA MADAXTOOYADA (CHIEF PROTOCOL)

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah Faqradda 1aad Xarafkiisa "A"

MARKA UU ARKAY: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilkan

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista Agaasimaha Hab-maamuuska

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 20-ka May 2020, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay mudane **Yusuf Hassan Salan** in uu noqdo Agaasimaha Hab-maamuuska Madaxtooyada.

Qodobka 2aad

Xeerkaan waxa uu Dhaqangelayaa marka uu saxiixo Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S

MUQDISHO:20/05/2020



MadaxweynahaJ.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR.273 Taariikh:20/06/2020

MAGACAABIS MAAREEYAHA GUUD EE HEY'ADDA DUULISTA RAYIDKA SOOMAALIYEED

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka

MARKA UU ARKAY: Sharciga Lr.28 ee soo baxay 19kii Maajo 2020 kuna saabsan Duulista Rayidka

MARKA UU ARKAY: Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Summad: XRW0184/05/2020 kuna saabsan Soo jeedin Magacaabis Maareeyaha Guud ee Hey'adda Duulista Rayidka.

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo Waayo-aragnimada ay leeyihiin mudanayaasha loo magacaabayo Xilalkan

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in Hey'adda Duulista Rayidka loo magacaabo Maareeye Guud

Madaxweynuhu Waxa uu soo saaray Xeerkan Magacaabis:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo Maanta oo ay taariikhdu tahay 20-ka Juun 2020, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay mudane **Axmed Macallin Xasan** in uu noqdo Maareeyaha Guud ee Hey'adda Duulist Rayidka Soomaaliyeed

Qodobka 2aad

Xeerkaan waxa uu Dhaqangelayaa marka uu Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee J.F.S

MUQDISHO: 20/06/2020



Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

SHARCI LR.36 Taariikh: 31/12/2020

ANSIXINTA SHARCIGA HESHIISKA MIDOWGA AFRIKA EE LA-DAGAALANKA MUSUQ-MAASUQA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "q" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/346/2/B-10/20 Taariikh: 29/09/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga Heshiiska Midowga Africa ee La-Dagaalanka Musuq-maasuqa

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga Heshiiska Midowga Afrika ee La-Dagaalanka Musuq-maasuqa

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 31/12/2020



Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)



Nuqulka Soomaaliga ah

HESHIISKAMIDOWGA AFRIKA
EE KA-HORTAGGA IYO
LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA

HESHIISKAMIDOWGA AFRIKA EE KA-HORTAGGA IYO LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA

Hordhac

Qaramada Xubnaha ka ah Midowga Afrika:

Iyagoo tixgelinaya in Xeerka Asaasiga ah ee Ururka Midowga Afrika uu aqoonsan yahay in xorriyadda, sinnaanta, cadaaladda, nabadda iyo sharafta ay yihiin himmilooyin muhiim ah ee gaaritaanka damaca xalaasha ah ee dadyowga Afrika;

Iyagoo sii tixgelinaya in Qodobka 3aad ee Xeerka Asaasiga ah ee la soo sheegay uu farayo Qaramada Xubnaha ah inay iskuduwaan oo ballaariyaan iskaashigooda, midnimadooda, wadajirkooda iyo dadaaladooda lagu gaarayo nolol wanaagsan oo ay helaan dadyowga Afrika;

Iyagoo garwaaqsan xaqiiqda ah in Xeerka Asaasiga ah ee Midowga Afrika, ayna ku jiraan qaar kale (inter alia), ayaa ku baaqaya baahida loo qabo in la horumariyo oo la ilaaliyo xuquuqda aadanaha iyo dadkaba, la xoojiyo hay'adaha dimuqraadiga ah laguna kobciyo dhaqanka dimuqraadiyadda lana hubiyo dawlad-wanaagga iyo talinta sharciga;

Iyagoo ogsoon baahida loo qabo in la ixtiraamo sharafta aadanaha iyo in la dardar-geliyo horumarinta dhaqaalaha, bulshada, iyo xuquuqda siyaasadeed ee la waafajinayo qodobbada Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadka iyo aaladaha kale ee la xiriira xuquuqda aadanaha;

Iyagoo maanka ku haya Baaqa 1990 ee ku saabsan isbedelada asaasiga ah ee aduunka ka dhacaya iyo saameynta ay ku leeyihiin Africa; ajendayaasha Qaahira 1994 ee Loogu Talo-galay Isu-keenidda

Dhaqaale-bulsheedka Afrika; iyo Qorshe Ficil ka dhan ah xasaanadda oo uu qaatay Kal-fadhigii Sagaal iyo Tobanaad ee Golaha Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Xuquuqda Dadweynaha ee 1996 sida ku xigta uu ansixiyey Kal-fadhiga Afar iyo Lixdanaad ee kullanka caadiga ah ee Golaha Wasiirrada ee lagu qabtay Yaounde, Cameroon ee 1996 kaas iyo kuwa kale, waxay hoosta ka xarriiqeen baahida loo qabo in la dhawro mabaadi'da dawlad-wanaagga, jiritaanka sharciga, xuquuqda aadanaha, dimuqraadiyadda iyo ka-qeyb-galka caanka ah ee dadka Afrikaanka ah ee geedi-socodka dawladnimada.

Iyagoo dareensan saameynada xun ee musuq-maasuqa iyo ku-lug lahaanshaha xasilloonida siyaasadeed, dhaqaale, bulsho iyo dhaqan ee Dalalka Afrika iyo saamaynta ba'an oo ay ku yeelan karto horumarka dhaqaale iyo bulsho ee dadyowga Afrika;

Iyagoo yaqiinsan in musuq-maasuqu uu wiiqayo isla-xisaabtanka iyo daah- furnaanta maamulka arrimaha bulshada iyo sidoo kale horumarka dhaqan- dhaqaale ee qaaradda;

Iyagoo aqoonsan baahida loo qabo in wax laga qabto sababaha salka u ah Musuq-maasuqa qaaradda;

Iyagoo ka qanacsan baahida loo qabo in la dejiyo oo la raaco, iyadoo ah arrinta mudnaanta la siinayo, siyaasad ciqaabeed caadi ah oo looga gol-leeyahay in bulshada laga ilaaliyo musuq-maasuqa, oo ay kamid yihiin qaadashada sharci- dejin ku habboon iyo tallaabooyin ka-hortag oo ku filan;

Iyagoo go'aansan dhisidda iskaashi ka dhexeeya dawladaha iyo dhammaan qeybaha bulshada rayidka ah, gaar ahaan haweenka, dhallinyarada, warbaahinta iyo waaxyaha gaarka loo leeyahay si loola dagaallamo musuq-maasuqa;

Iyagoo dib u xusuusan Qaraarka AHG-Dec 126 (XXXIV) oo uu ansixiyey kal- fadhigii caadiga ahaa ee Afar iyo Soddonaad ee Golaha Madaxda Qaramada iyo Dawladaha bishii Juun 1998 ee

Ouagadougou, Burkina Faso, kana codsaday Xoghayaha Guud inuu qabto, isagoo la kaashanaya Guddiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadyowga, kulan heer sare ee xeel-dheereyaal oo looga tashanayo qaabab iyo kheyraad looga qaadi karo caqabadaha ku gudban dhaqaalaha, xuquuqda bulshada iyo dhaqanka, oo ay kamid yihiin la-dagaallanka Musuq- maasuqa iyo dembi-qabad-la'aanta iyo soo-jeedin sharci-dejin habboon iyo tallaabooyin kale;

Iyagoo dib u sii xusuusan go'aanka kal-fadhiga 37aad ee caadiga ah ee Golaha Hoggaamiyeyaasha Gobollada iyo Dawladda UMA (OAU) ee lagu qabtay Lusaka, Zambia, bishii Luulyo 2001 iyo sidoo kale Baaqa lagu ansixiyey kal-fadhigii kowaad ee Golaha Midowga ee lagu qabtay Durban, Koonfur Afrika bishii Luulyo 2002, la xiriira Iskaashiga Cusub ee Horumarinta Afrika (NEPAD) oo ku baaqaya dejinta qaab isku-dubaridan si loola dagaallamo musuq-maasuqa.

Waxay ku heshiiyeen sidan soo socota:

Qodobka 1aad
Qeexid

1. Si waafaqsan hadafyada Heshiiskan;

   - "**Guddoomiye Guddiga**" waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Golaha MidowgaAfrika;

   - "**La-wareegid**" waxaa loola jeedaa Ciqaab walba ama Natiijo kama-dambeys ah oo laga gaaray soo-celin hanti, faa'iido ama qalab taasoo ka timid amar Maxkamdeed oo Sharci ah, iyadoo la raacayo faa'iidada in ay la leedahay xiriir fal-dembiyeed ama dembiyo kale lala xiriirinayo ama la xiriira musuq-maasuq;

   - "**Musuq-maasuq**" waxaa loola jeedaa falal iyo Hawlo oo lala xiriiriyey fal- dembiyeed ay ku jiraan kuwa lagu qeexay heshiiskan gudahiisa;

- **"Maxkamad Sharci ah"** waxaa loola jeeda Maxkamad si hab-sami ah loogu dhisay sharci gudaha;
- **"Guddi Fullin"** waxaa loola jeedaa Guddiga Fullinta ee Midowga Afrika;
- **"Xaaraan-ku-hodmid"** waxaa loola jeedaa kor-u-kac muhiim ah ee hantiyeed ee ku aaddan Sarkaal dadweyne ama qof kasta oo aan Sharaxaad Maan-gal ah aan ka bixin karin dakhligiisa;
- **"Ganacsi gaar loo leeyahay"** waxaa loola jeedaa Ganacsiga ee dhaqaalaha Qaranka oo ku hoos jira Milkiyat gaar loo leeyahay taasoo qoondeynta kheyraadka wax-soo-saaritaan uu xakameynayo xoogga suuqa, oo ka duwan Awoodda Dawladda iyo qeybaha kale ee dhaqaalaha taasoo aan hoos iman Ganacsiga Dadweynaha ama Xukuumadda;
- **"Faa'iido musuq-maasuq"** waxaa loola jeedaa Hanti walba Maadi ama Macnawi, Guurto ama Ma-guurto, la taaban karo ama aan la taaban karin, iyo Dokuminti kasta ama aalad qaanuun oo caddeynaya lahaansho ama dano lagu kasbaday hantiyahaas fal musuq-maasuq ah;
- **"Sarkaal Dadweyne"** waxaa loola jeedaa Sarkaal kasta ama Shaqaale dawladeed ama hay'adaha dawladda oo ay ku jiraan kuwa la xushay, la magacaabay, ama loo doortay inay Hawlo qabtaan ama mataia Magaca Dawladda ama u adeega Dawladda heer kasta oo ay Darajadeedu tahay;
- **"Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday"** waxaa loola jeedaa dawladda Xubinta ka ah oo laga codsaday in ay soo gudbiso ama bixiso gacan-siin si waafaqsan heshiiskan;
- **"Dawladda Xubinta ah ee codsanaysa"** waxaa loola jeedaa Dawladda Xubinta ka ah oo sameynaysa codsi soo-gudbin ama gacan-siin la xiriira heshiiskan;
- **"Dawladda Xubinta ah"** waxaa loola jeedaa Dawladda xubinta ka ah Midowga Afrika taasoo ansixisay ama qeyb ka noqotay heshiiskan iyo oggolaatay ansixinta qodobbada heshiiskan ama gaaritaanka Guddomiyaha Golaha Midowga Afrika.

2. Heshiiskan gudihiisa, Kali ahaanta waxaa wehliya wadar iyo dhanka kale oo loo rogo (vice versa).

Qodobka 2aad
Himmilooyin

Himmilooyinka Heshiiskan waa in:

1. Gacan laga geysto lana xoojiyo horumarinta Afrika ee Dawlad kasta oo xubin ah, aaladaha looga baahan yahay ka-hortaga, haba-galka ciqaabta iyo baabi'inta musuq-maasuqa iyo Fal-dembiyeedyada lala xiriirinayo, qeybaha Dawladda iyo qeybaha gaar loo leeyahay.

2. Gacan laga siiyo, lana fududeeyo isla markaana la xaqiijiyaa iskaashiga u dhaxeeya Xubnaha Qaramada si loo hubiyo hal-beegyada wax-ku-oolka ah iyo tallaabooyinka ka-hortaga, ka-daba-taga ciqaabta, iyo baab''inta musuq-maasuqa iyo fal-dembiyeedyada la xiriira ee Afrika.

3. La isku-duwo lana turxaan-bixiyo siyaasadaha iyo shuruucda ka dhexeeya Xubnaha Qaramada iyadoo looga gol-leeyahay ka-hortag ka-daba-tag, ciqaab iyo baabi'in Musuq-maasuqa Qaarada oo idil.

4. Gacan la siiyo dhaqan-dhaqaalaha iyadoo la horumarinayo ka-leexinta caqabadaha si loo gaaro baraare dhaqaale iyo bulsho iyo xuquuq-dhaqameed sida ugu wanaagsan ee Xuquuqda Madaniga iyo tan siyaasadda.

5. Asaaso xaalada ugu habboon ee dhiirri-gelinta daah-furnaanta iyo isla- xisaabtanka ee maareynta Arrimaha Dadweynaha.

Qodobka 3aad
Mabaadi'

Qaramada Xubnaha ka ah heshiiskan waxay fulinayaan in ay dhaqan-geliyaanmabaadi'da soo socoto:

1. In ay tixgeliyaan Dimuqraadiyada iyo Hay'adaha, ka-qeyb-galka shacbiga, talintasharciga iyo dawlad-wanaagga.

2. In ay texgeliyaan bini'aadanimada iyo xuquuqda dadka si waafaqsan Axdiga Midowga Afrika oo ku aaddan Bini'aadanka iyo Xuquuqda dadka iyo Heshiisyada kale ee Xuquuqda aadanaha.

3. Daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka ee Maareynta Arrimaha Dadweynaha.

4. Xoojinta Cadaaladda Bulshada si loo xaqiijiyo isku dheelitinnaanta horuminta Dhaqaale-bulsheedka .

5. Dhaleecaynta iyo diidida falalka musuq-maasuqa ah, xad-gudubyada la xiriira iyodembi-qabad-la'aanta.

Qodobka 4aad
Baaxadda Dabaqaada

1. Heshiiskani wuxuu ku dabaqmayaa falalka soo socda ee musuq-maamsuq iyo xad-gudubyada la xiriira:
   b) Ugu-yeerid ama guddoon, si toos ah ama si aan toos ahayn, mas'uul dawladeed ama qof kale, wixii alaab ah oo qiimo lacageed ah ama macaash kale ah, sida hadiyad, adeeg, ballan-qaad, ama faa'iido naftiisa ama Qof kale, ama hay'ad, iyadoo la beddelayo fal kasta ama ka-tagitaan kasta oo lagu fuliyo hawlihiisa dadweyne;
   t) Siinta ama deeq, si toos ah ama si aan toos ahayn, Mas'uul dawladeed ama qof kale, alaabo kasta oo qiimo lacageed ah ama macaash kale ah, sida hadiyad, adeeg, ballan-qaad, ama

faa iido naftiisa, ama qof kale ama hay'ad, iyadoo lagu beddelayo wixii Ficil ama tixgelin gaar ah si loo fuliyo hawlihiisa dadweyne;

j) Bandhig kasta ama badeecad leh qiimo lacageed leh, si toos ah ama aan toos ahayn, Mas'uul Dawladeed ama qof kale ama siin ama waxtar kale dawladeed ama qof kasta oo ujeeddadiisu tahay helitaanka gargaarka sharci-darrada ah ee nafsadiisa ama nafsadeeda ama dhinac saddexaad;

x) U wareejinta shakhsi dawladeed ama qof kale, ula-jeeddooyin aan la xiriirin ujeeddooyinka loogu talo-galay, maslaxadiisa ama faa'iido qof saddexaad, hanti kasta oo Gobolka ama ha'yadeeda, loo wareejiyo hay'ad madaxbannaan ama shaqsi, laga helay mas'uulkii hore ee xafiiskaas;

k) Beecinta ama siinta, ballan-qaadida, codsashada ama aqbalaadda, si toos ah ama si aan toos ahayn, faa'iidooyin kasta oo xad-dhaaf ah oo ka yimaada ama qof kasta oo hagitaan ama u shaqeeya, awood kasta, hay'ad waax gaar ah, naftiisa ama nafteeda ama cid kale , isaga ama iyada inay ku kacdo, ama ka joogso ficil, iyada oo jebinaysa waajibaadkeeda ama waajibaadkeeda;

d- Beecinta, siinta, ballan-qaadida ama aqbalida si toos ah ama saameyn kasta oo aan habooneyn go'aan qaadashada qofkasta oo qabanaya hawlaha qeybta dadweynaha ama waaxda gaarka loo leeyahay iyadoo la tixgelinayo, in faa'iidada aan caadiga ahayn ay tahay mid nafsadeeda ama cid kale, iyo sidoo kale codsi, rasiid ama aqbalaadda deeqda ama ballan-qaad ka faa'iideysigaas, iyadoo la tixgelinayo saameyntaas , in saamaynta la adeegsado ama in kale ama in kale ama saameyntu ay keenayso natiijada la rabay;

r) Xaraan-ku-hodmid;

s) Adeegsiga ama qarinta wixii ka soo baxa fal kasta oo lagu tilmaamay Qodobkan;

Sh) Ka-qeyb-qaadasho maamule ahaan, la-maamule, wakiil, baare, kaalmeeye ama fududayn xaqiiqada kaddib, ama

qaab kale oo kamid ah guddiga ama isku-day guddi, wada-shaqeyn kasta ama shirqool lagu sameeyo, fal kasta oo lagu tilmaamo qodobkan.

2. Heshiiskan wuxuu sidoo kale ku dabaqmayaa heshiis dhexmara labo dhinac ah ama in ka badan oo kamid ah Xubnaha Qaramada ee la xiriira fal kasta ama hawl-qabad kasta ee musuq-maasuq iyo xad-gudubyada la xiriira ee aan lagu xusin Heshiiskan.

Qodobka 5aad

Sharci-dejinta iyo Tallaabooyin kale

Si waafaqsan ujeeddooyinka ku xusan Qodobka 2aad ee Heshiiskan, Xubnaha Qaramada waxay fulinayaan in:

1. Ay qabatimaan sharci-dejin iyo talaabooyin kale ee looga baahan yahay in lagu dejiyo xad-gudubyada, ficillada lagu xusay Qodobka 4aad faqradiisa 1 ee Heshiiskan.

2. Ay xoojiyaan tallaabooyinka kontaroolka qaranka si loo hubiyo in dejinta iyo hawl-gallada shirkadaha shisheeye ee ku sugan dhulalka Xubinta Qaran ay ku xirnaan doonaan ixtiraamka sharciga qaran ee dhaqan-galka ah.

3. Ay dhisaan, gacanta ku hayaan, iyo in ay xoojiyaan hay'adaha madaxa-bannaan ee dawliga ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa ama wakaaladaha.

4. Ay qabatimaan sharci-dejin iyo talaabooyin kale oo abuuri kara, joogtaynaya laguna xoojinayo xisaabinta gudaha, hanta-dhawridda iyo nidaamyada dabo- galka, gaar ahaan dakhliga dadweynaha, risiidhaha dakhli-ururinta iyo cashuuraha, kharashyada iyo hab-raacyada kiraynta, soo-gadashada iyo maareynta badeecadaha iyo adeegyada dawladda.

5. Ay Qabatimaan sharci-dejinta iyo talaabooyinka kalē ee

lagu ilaalinayo dadka xog-bixiyeyaasha ah iyo markhaatiyada musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira, oo ay ku jiraan ilaalinta aqoonsiyadooda.

6. Ay qabatimaan talaabooyin xaqiijinaya in muwaadiniintu soo sheegaan dhacdooyinka musuq-maasuqa iyagoo aan ka cabsanayn aargudasho.

7. Ay qabatimaan tallaabooyinka sharci-dejinta ee qaranka si loo ciqaabto kuwa sameeya warbixinnada beenta ah iyo kuwa si ku-talo-gal ah u bixiya warbixin ka dhan ah dadka aan waxba galabsan ee musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira.
8. Ay qabatimaan isla markaana xoojiyaan qaababka kor loogu qaadayo aqoonta bulshada si loo ixtiraamo wanaagga dadweynaha iyo danaha dadweynaha, iyo wacyiga lagula dagaallamayo musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira, oo ay ku jiraan barnaamijyada waxbarashada dugsiyada iyo wacyi-gelinta warbaahinta, iyo kobcinta jawi karti u leh ixtiraamka anshaxa.

Qodobka 6aad
Dhaqitaanka Faa'iidooyinka Musuq-maasuqa

Xubnaha Qaramadu waxay qabatimayaan sharci-dejintaas iyo tallaabooyinka kale ee lagama-maarmaanka u ah in lagu abuuro xad-gudubyo fal-dembiyeed:

1. Beddelka, wareejinta ama tuurista hantida, iyadoo la ogyahay in hantida noocaas ah uu ka dhasho musuq-maasuq ama xad-gudubyo la xiriira ujeeddadooda qarinta ama ka dhigeysa asalka sharci-darrada ah ee hantida ama caawinta qof kasta oo ku lug leh gelitaanka xad-gudubka inuu ka baxsado cawaaqibka sharciga ah ee falkiisa ama falkeeda.

2. Qarinta ama u ekaanta dabeecada dhabta ah, isha, goobta, dabeecadda, dhaqdhaqaaqa ama lahaanshaha ama xuquuqaha la xiriira hanti ee dhaxalka la xiriira musuq-maasuq ama xad-gudubyada la xiriira;

3. Sheegashada, haysashada ama isticmaalka hantida iyadoo la og yahay waqtiga helitaanka, in hantidaasi la dhaxlay musuq-maasuq ama xad-gudubyo la xiriira.

Qodobka 7aad

La-dagaallanka Musuq-maasuqa iyo Xad-gudubyada la Xiriiraee Adeegga Dadweynaha

Si loola dagaallamo musuq-maasuqa iyo Xad-gudubyada la xiriira ee adeegga dadweynaha, Qaramada Xubnaha ah waxay isku hawlayaan in:

1. Ay weydiistaan dhammaan ama saraakiisha dadweynaha ee la magacaabay inay caddeeyaan hantidooda waqtiga la wareegista xafiiska inta lagu gudo-jiro iyo muddadooda xafiiska adeegga dadweynaha.

2. Ay abuuraan guddi gudaha ah ama hay'ad la mid ah oo loo idmaday inay dejiso xeer-anshaxeed oo ay kormeeraan hirgelintiisa, kuna wacyi-geliyaan kuna tababaraan saraakiisha dadweynaha arrimaha anshaxa.
3. Ay horumariyaan tallaabooyinka anshax-marineed iyo hab-raacyo baaritaan ee ku aaddan musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira iyadoo lagu keydinayo hannaanka tiknoolojiyada iyo kordhinta taxtar kuwa u xilsaaran arrinkan.

4. Ay hubiyaan daah-furnaanta, sinnaan iyo waxtarka maareynta hab-raacyada qandaraas-bixinta iyo kireynta ee adeegga dadweynaha.
5. Iyadoo la cuskanayo qodobbada sharciga maxalliga ah,

xasaanad kasta oo la siiyo saraakiisha dawladda ma noqon doonto wax carqalad ku ah baarista eedeymaha ka dhanka ah iyo dacwad ku soo oogidda saraakiishaas.

Qodobka 8aad
Xaaraan-ku-hodmid

1. Si waafaqsan xeerarka sharcigooda gudaha, Xubnaha Qaramada ayaa fulinaya in ay qabtimaan tallaabooyinka lagama-maarmaanka u ah in la abuuro sharci jideynaya xad-gudub lid ku ah xaraan-ku-hodmidda.

2. Xubnaha Qaramada ee aasaasay xad-gudub lid ku ah xaraan-kku-hodmidda ee sharcigooda gudaha, xad-gudub noocaas ah waxaa loo tixgelin doonaa fal musuq-maasuq ama xad-gudub la xiriira ujeeddooyinka Heshiiskan.

Qodobka 9aad
Helitaan Macluumaad

Xubin Qaran kasta waxay qabatimaysaa sharci-dejintaas iyo talaabooyin kale si loo dhaqan-geliyo xuquuqaha helitaanka macluumaad kasta ee loo baahan yahay in gacan laga geysto ladagaallanka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira.

Qodobka 10aad
Maal-gelinta Axsaabta Siyaasadda

Xubin Qaran kastaa waxay qabatimaysaa sharci-dejin iyo talaabooyin kaleba in:

b) Ay mamnuucaan adeegsiga lacagaha lagu helo iyadoo loo marayo dhaqano sharci-darro ah iyo musuq-maasuq si loogu maal-geliyo axsaabta siyaasadeed;iyo

t) In mabaadi'da daah-furnaanta Lagu daro maal-gelinta axsaabta siyaasadeed.

Qodobka 11aad
Hay'adaha Gaarka ah

Xubnaha Qaramada waxay fulinayaan in:

1. Ay qabatimaan tallabooyinka sharci-dejinta iyo talaabooyinka kale oo looga hortagayo la-dagaallanka falalka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira ee ay geystaan hay'adaha qeybta gaarka loo leeyahay.

2. Ay abuuraan aalado lagu dhiirri-gelinayo ka-qeyb-qaadashadooda hay'adaha gaarka loo leeyahay ee la-dagaallanka tartanka caddaalad-darrada, iyadoo la ixtiraamayo hannaanka qandaraasyada iyo xuquuqda hantida gaarka loo leeyahay.

3. Ay qabatimaan talaabooyinkaas kale ee laga yaabo inay lagama-maarmaan u yihiin ka-hortagga shirkadaha inay bixiyaan laaluush si ay ugu guuleystaan qandaraasyadooda.

Qodobka 12aad
Bulshada Rayidka iyo Warbaahinta

Xubnaha Qaramada waxay fulinayaan in:

1. Si buuxda looga qeyb-qaato la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira iyo in la faafiyo heshiiskan, iyadoo si buuxda looga wada qeyb-gelinayo Warbaahinta iyo Bulshada Rayidka ah.

2. Ay abuuraan jawi karaya in uu awood u siinaya bulshada rayidka iyo warbaahinta inay ku hayaan Dawladaha heerarka ugu sarreeya ee daah-furnaanta iyo isla- xisaabtanka ku aaddan maamulka maareynta ee arrimaha dadweynaha.

3. Ay hubiyaan oo bixiyaan ka-qeyb-gelinta bulshada rayidka hannaanka kor- joogteynta iyo la-tashiga bulshada rayidka ah ee hirgelinta heshiiskan.

4. Ay hubiyaan in Warbaahinta loo oggolaado helitaanka

macluumaadka xaaladaha dacwadaha musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira, iyadoo shuruud looga dhigayo in faafinta macluumaadka noocaas ah aysan saameyn xun ku yeelan habraaca baarista iyo xaqa helitaanka dhegaysiga garsoor caadil ah.

Qodobka 13aad
Ikhtisaaska Maxkamadda

1. Xubin Qaran kasta waxay lahaanaysaa ikhtisaas maxkamadeed oo ku aaddan falalka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriir marka:

b) xad-gudub lagu sameeyo guud ahaan ama qeyb ahaan gudaha xuduudeeda;

t) uu xad-gudub geysto mid kamid ah muwaadiniinteeda meel ka baxsan xuduudeeda ama uu falkaas ku kaco qof deggan xuduudeeda; iyo

j) dembilaha la tuhunsan yahay uu joogo xuduudeeda oo aysan u gudbinayn qofkaasi dal kale.

x) Marka xad-gudubka, in kastoo lagu galay meel ka baxsan xuduudeeda, uu saameynayo, si ku aaddan aragtidda Qaranka ay khusayso, danihiisa muhiimka ah ama dhaawac leh ama raad-reebyo waxyeello ah ama saameynta xad-gudubyadaas ay ku yeeshaan Xubinta Qaran.

2. Heshiiskani ma reebayo ikhtisaas ciqaabeed kasta oo ay fuliso Xubinta Qaran si waafaqsan shuruucdeeda gudaha.

3. Ka sokow faqradda (1) ee isla Qodobkan, qofna laguma maxkamadayn karo labo jeer isla hal xad-gudubi.

Qodobka 14aad
Damaanad-qaadka Ugu Yar ee Garsoor Xaq ah

Si waafaqsan shuruucda gudaha, qof kasta oo lagu eedeeyo inuu ku kacay falal musuq-maasuq iyo xad-gudubyo la xiriira wuxuu heli doonaa maxkamad caddaalad ah ee dacwadaha ciqaabta si waafaqsan damaanadda ugu yar ee ku tibaaxan Axdiga Afrika ee Xuquuqda Aadanaha iyo Dadyowga iyo wixii kale oo kasta ee la xiriira xuquuqda aadanaha ee caalamiga ah oo ay aqoonsan yihiin Xubnaha Qaramada ay khuseyso.

Qodobka 15aad
Dibu-celin

1. Qodobkan waxaa lagu dabaqayaa xad-gudubyada ay abuureen Xubnaha Qaran siwaafaqsan Heshiiskan.

2. Xad-gudubyada ku jira ikhtisaaska heshiiskan waxaa loo qaadanayaa inay ku jiraan shuruucda gudaha ee Xubnaha Qaran sida dembiyo u baahan dib-u-celin. Xubnaha Qaran waxay xad-gudubyadaas ku darayaan xad-gudubyada u baahan dib-u-celineed oo ku jira heshiisyada dib-u-celinta ee ka dhexeeya ama dhexdooda ah.

3. Haddii Xubin Qaran ka yeesho dib-u-celinta mid shuruud ku xiran ee jiritaanka heshiis dib-u-celin ay hesho codsi dib-u-celin ee ka timid Xubin Qaran oo uusan ka dhexayn heshiis noocaas ah, waxay u tixgelinaysaa heshiiskan inuu yahay aasaas sharci ah ee dhammaan xad-gudubyada uu heshiiskani khuseeyo.

4. Xubin Qaran oo aan sameynayn shardi ku xiran jiritaanka heshiis dib-u-celin waxay u aqoonsanaysaa xad-gudubyo uu heshiiskani ku dabaqmayo sidii xad- gudubyo dib-u-celineed oo iyaga dhexdooda ah.

5. Xubin Qaran kasta waxay fulinaysaa in ay celiso qof kasta lagu soo eedeeyey ama lagu helay xad-gudubyo musuq-maasuq iyo xad-gudubyo la xiriira, oo laga fuliyey xudduda Xubin Qaran oo kale oo dib-u-centiisa uu codsaday Xubinta Qarankaas, si waafaqsan sharcigooda gudaha, heshiis kasta oo dib-u-celin oo ku dabaqmaya, ama is-af-garadyo dib-u-celin ama qorsheyaal jira oo ka dhexeeya ama u dhexeeya Xubnaha Qaran.

6. Marka Xubin Qaran xuduudeeda qof ku sugan lagu eedeeyo ama lagu helo xad- gudubyo oo ay diido in celiso qofkaas si waafaqsan in ay ikhtisaas u leedahay qaadidda xad-gudubyadaas, Xubinta Qaran ee laga codsaday waxaa

waajib ku ah in ay u gudbiso dacwada si aan dib-u-dhac lahayn hay'adaheeda awoodda u leh si maxkamadayn loogu sameeyo, haddii aan si kale loogu raacsanayn Xubinta Qaran ee codsanaya, iyadoo loo soo sheegi doonaa natiijada kama-dambaysta ah Xubinta Qaran ee codsanaysa.

7. Iyadoo la raacayo qodobbada shuruucda waddanka iyo heshiisyada dib-u-celinta ee la dabaqi karo, waxaa u bannaan Xubinta Qaran ee la codsaday, kaddib markay ku qanacdo in duruufaha sidaas u baahan yihiin oo ay yihiin kuwo degdeg ah isla markaana ay codsanayso Xubinta Qaran in gacanta lagu dhigo qof la raadinayo wareejintiisa iyo qof xaadir ku ah dhulkeeda ama la qaado talaabooyin kale oo munaasib ah si loo hubiyo in qofkaasi ku sugan yahay hab- raacyada dacwo ee dib-u-celinta.

Qodobka 16aad

La-wareegidda iyo Hantidda & Hab-raacyadda la Xiriira Musuq-maasuqa

1. Xubin Qaran kasta waxay qabatimaysaa inay qaado talaabooyin sharci- dejinta ee lagama-maarmaanka u ah in awood la siiyo:

b) Mas'uuliyiin karti u leh inay baaraan, aqoonsadaan, raad-raacaan, maamulaan, xayiraan ama qabtaan qalabkii iyo waxyaabihii musuq-maasuqu ku xirnaa inta la sugayo xukunka kama-dambaysta ah;

t) La-wareegidda faa'iidooyin ama hanti, qiimaha u dhigmo faa'iidooyinkaas, laga dhaxlay, si waafaqsan xad-gudubyada lagu sheegay heshiiskan; iyo

j) Mag-dhaw faa'iidada lagu helay musuq-maasuqa.

2. Xubinta Qaran ee laga codsaday waxay, sida uu u oggolaanayo sharcigeedu iyo si ku aaddan Xubinta Qaran ee codsanaysa, qabanaysaa isla markaana la wareegaysaa walax kasta:

b) kaasoo loogu baahan karo caddeyn xad-gudub ee la isweydiinayo; ama

t) kaasoo lagu helay natiijada xad-gudub loogu talo-galay soo-celinta la

codsaday iyo kaasoo, waqtiga qabashada lagu helo dadka sheegatay ama la ogaado markaas kaddib.

3. Waxaa bananan Waxyaabaha lagu sheegay faqradda (2) ee Qodobkan, haddii ay arrinkaas Dalbato Xubinta Qaran in lagu wareejiyo Qarankaas xitaa haddii la diido wareejinta qof la codsaday ama laga cudur-daartay wareejintiisa geeri darteed, la waayo ama baxsado qofka la baadi-goobayo.

4. Marka walaxda la soo sheegay lagu helo qabasho ama la-wareeggid xuduuda Xubinta Qaran ee laga codsaday kan dambe wuxuu karaa, si la xiriirta dacwad taagan ama dacwado ciqaab oo socda, si meel-gaar loo hayo ama loo gudbinayo Xubinta Qaran ee codsatay, oo shardigu yahay in loo celinayo Xubinta Qaran ee laga codsaday.

Qodobka 17aad
Qarsoodida Bankiga

1. Xubin Qaran kasta waxay qabatimaysaa inay qaado tallaabooyinka lagama- maarmaanka u ah ee lagu xoojinayo maxkamadaheeda ama hay'adaha kale ee awoodda u leh soo-saarista amarada la-wareegidda ama qaadashada dhaqaalaha bankiyada ama dukumintiyada ganacsiga oo leh aragti hirgelitaan ee heshiiskan.

2. Qaranka codsanaya ma adeegsanayo macluumaad kasta oo la helay taasoo lagu ilaalinayo sirta bankiga ujeeddo kasta oo aan ka ahayn dacwadda loo codsaday macluumaadkaas, haddii aan oggolaansho looga haysan Xubinta Qaran ee la codsaday.

3. Xubnaha Qaran ma dalban karaan sirta bankiga si ay u sababeeyaan diidmadooda iskaashi la xiriira falalka musuq-maasuqa iyo xad-gudubyada la xiriira ee ku aaddan qiyamka heshiiskan.

(a) in kor loo qaado lana xoojiyo tallaabooyinka looga hortagayo la- dagaallanka musuq-maasuqa si hufan oo wax-ku-ool ah;

(b) in kor loo qaado loona taageero iskaashiga caalamiga ah iyo farsamada Caawinta ka hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa, oo ay ku jirto dib u soo-celinta hantida; iyo

(c) in kor loo qaado hufnaanta, isla-xisaabtanka iyo maareyn hab-sami leh ee arrimaha dadweynaha iyo hantida dadweynaha.

QODOBKA 2AAD
QEEXID

Si waafaqsan ujeeddooyinka Heshiiskan, waxaa ereyadan soo socda lagu qeexayaa:

(a) "Sarkaalka dadweynaha" waxaa loola jeedaa: (i) qof kasta oo haya xafiis sharci-dejin, fulin, maamul ama garsoor ee Dawlad Xubin ah , ha ahaado qof la magacaabay ama la doortay, mid ku-meel-gaar ah ama mid joogta ah, qof lacag qaadanaya ama qof aan lacag qaadan, iyadoo aan loo eegin qofkaas darajadiisa; (ii) qof kasta oo kale oo qabta shaqo guud, oo ay ku jiraan hay'ad dawladeed ama shirkad dadweyne, ama bixiya adeeg dadweyne, sida lagu qeexay sharciga gudaha ee Dawladda Xubinta ah iyo sida loogu dabaqay qeybta ku habboon ee sharciga Dawladda Xubinta ah; iyo (iii) qof kasta oo kale oo lagu qeexay inuu yahay "sarkaal dawladeed" sharciga gudaha ee Dawlad Xubin ah. Si kastaba, si waafaqsan ujeeddooyinka qaar kamid ah tallaabooyinka gaarka ah ee ku xusan Cutubka II ee Heshiiskan, "sarkaal dawladeed" waxaa lagu macnayn karaa qof kasta oo qabta hawl dadweyne ama bixiya adeeg dadweyne sida lagu qeexay sharciga gudaha ee Dawladda Xubinta ah iyo sida loogu dabaqay sharciga ku habboon ee Dawladda Xubinta ah;

(b) "Sarkaal Dadweyne ee Shisheeye" waxaa loola jeedaa qof kasta oo haya jago sharci-dejin, fulin, maamul ama jago garsoor dal shisheeye, ha ahaado mid la magacaabay ama la doortay, si ku-meel-gaar ah ama joogto ah,

iyo qof kasta oo qabta shaqo dadweyne, sida hay'ad dadweyne ama ama shirkad dadweyne;

(c) "Sarkaal dadweyne ee urur caalami ah" waxaa loola jeedaa shaqaale dadweyne oo caalami ah ama sarkaal ama qof kasta oo ay magacowdo hay'ad caalami ah, isagoo u matalaya wakiil ahaan.

(d) "Hanti" waxaa loola jeedaa hanti nooc kasta oo ay tahay, walax la taaban karo ama aan la taaban karin, guurto ama ma-guurto, iyo dokumentiyo qaanuuneed ama aalado caddeynaya lahaansho ama dan la xiriirta hantidaas;

(e) "Faa'iidooyin fal-dembiyeed" waxaa loola jeedaa wixii hanti ah oo ka yimaada ama lagu helay fal-dembiyeed, toos ama dadab, loo maray gelitaanka xad-gudub;

(f) "Xannibaad" ama "Xayiraad" waxaa loola jeedaa ku-soo-rogid xayiraad ku-meel-gaar ah, wareejinta, caddeyn, dhaqdhaqaaq hanti, ama gacan-ku-hayn ku-meel-gaar ah ama ilaalin hanti, si ku saleysan amar maxkamadeed ama hay'ad kale oo awood u leh;

(g) "La-wareegid" waxaa loola jeedaa la-wareegid hanti si joogta ah amar ka soo baxay maxkamad ama hay'ad kale oo awood u leh;

(h) "Xad-gudub dahsoon" waxaa loola jeeda dembi kasta oo ka dhasha Faa'iidooyinka laga helo fal-dembiyeed in uu noqonayo xad-gudub sida ku qeexay Qodobka 23aad ee Heshiiskan;

(i) "Gudbin xakameysan" waxaa loola jeedaa farsamada u oggolaanaysa shixnadaha sharci-darrada ah ama tuhun ku jiro inay ka gudbaan, gudaha ama galaan hal waddan ama in ka badan, iyadoo la raacayo aqoonta iyo kormeerka hay'adaha awoodda u leh, iyadoo aragtidu tahay baaritaan Xad-gudub iyo aqoonsiga shakhsiyaadka ku lugta leh gelitaanka xad-gudubka

QODOBKA 3AAD
BAAXADDA HESHIISKAN

1. Iyadoo la dabaqayo Heshiiskan iyo si waafaqsan qodobbadiisa ku saabsan Baarista, dacwad-oogista ee musuq-maasuqa, xannibaada, xayiraada, la-wareegidda iyo dib-u-soo-celinta hantida laga faa'iiday fal-dembiyeed si waafaqsan Heshiiskan.

2. Si waafaqsan ujeeddooyinka lagu hirgelinayo Heshiiskan, ma ahan lagama-maarmaan, marka laga reebo in si kale loogu sheego halkan, si ku aaddan xad-gudubyada ku xusan isaga dhexdiisa in laga dhaxlo waxyeello ama dhaawac hantida dawladda.

QODOBKA 4AAD
ILAALINTA MADAX-BANNAANIDA

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay u fulinayaan waajibaadkooda si ku aaddan Heshiiskan ee qaab waafaqsan maabaadi'da sinnaanta madax-bannaanida iyo in aan la faro-gelin arrimaha gudaha ee Dawladaha kale.

2. Ma jiraan wax Heshiiskan dhexdiisa ah oo u jideynaya Dawlad Xubin ah in ay ka qabato xuduuda Dawlad kale fulinta ikhtisaas iyo waxqabad shaqooyin si buuxda loogu gaar-yeelay hay'adaha Dawladaas kale si waafaqansan sharcigeeda gudaha.

CUTUBKA II
HAL-BEEGYO KA-HORTEGITAAN
QODOBKA 5AAD
SIYAASADO IYO WAXQABADYO KA-HORTIGITAAN EE LA-DAGAALLANKA MUSUQ-MAASUQA

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay, si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, horumarinaysaa oo hirgelinaysaa ama adkeynaysaa si wax-ku-ool ah, siyaasado la-dagaallan musuq-maasuq oo iskuduwan oo kor u qaadaya ka-qeyb-qaadashada bulshada iyo adeegsiga mabaadi'da talinta sharciga, maareyn hab-sami leh ee arrimaha dadweynaha iyo hantida dadweynaha, hufnaan, daah-furnaan iyo isla-xisaabtan.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waxay ku dadaalaysaa dejinta qaab wax-ku-ool ah oo looga hortagayo musuq-maasuqa.

3. Dawlad kasta oo xubin ah heshiiskan, waxay ku dadaalaysaa sameynta qiimeyn-xilliyeed shuruucda khuseysa iyo tallaabooyin maamul, iyadoo looga gol-leeyahay in lagu go'aamiyo ku-filnaanshahooda ku aaddan ka-hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa.

4. Dawladaha Xubnaha ah waxay, si ku habboon oo waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkooda, iska kaashanayaan dhexdooda iyo si khuseysa ururrada caalamiga ah iyo kuwa gobolkeed si kor loogu qaado oo loo horumariyo hab-beegyada lagu tilmaaman Qodobkan. In iskaashiga ay kamid noqonayaan ka-qeyb-galka barnaamijyada iyo mashaariicda caalamiga ah ee looga gol-leeyahay hortagga musuq-maasuqa.

QODOBKA 6AAD
GUDDI AMA GUDDIYO KA-HORTEGID LA-DAGAALLAN MUSUQ-MAASUQ

1. Dawlad kasta oo Xubin ah waxay, si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, xaqiijinaysaa jiritaanka Guddi ama Guddiyo,

sida ugu habboon, oo ka hortaga musuq-maasuqa si ku aaddan hannaankaas sida:
(a) Dhaqan-gelinta siyaasadaha lagu xusay Qodobka 5aad ee Heshiiskan iyo, halka ku habboon, kor-joogteynta iyo iskuduwidda hirgelinta siyaasadahaas; iyo
(b) Kordhinta iyo faafinta aqoonta ku saabsan la-dagaallanka musuq-maasuqa.

2. Dawlad kasta oo Xubin ah waxay siinaysaa Hay'adda ama Hay'adaha ku xusan Faqradda 1aad ee isla Qodobkan madax-bannaanida lagama-maarmaanka u ah, si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, si awood loogu siiyo Guddigaas ama Guddiyaashaas in hawlahooda u gutaan si wax-ku-ool ah kana xor ah saameyn kasta oo aan loo baahnayn, waxaana loo baahan yahay in loo oggolaado helidda agab iyo shaqaale takhasus leh, sidoo kale waxyaabaha ay u baahan yihiin shaqaalahaas oo uu kamid yahay tababar si ay waajibaadkooda ugu gutaan sida looga baahnaa.

3. Dawlad kasta oo Xubin ah waa in ay gaarsiisaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay magaca iyo cinwaanka Hay'adda ama Hay'adaha hay'adda ama mas'uuliyiinta laga yaabo in ay ka caawiyaan dawladaha kale ee xubnaha ka ah heshiiskan hormarinta iyo hirgelinta tallaabooyinka gaarka ah oo looga hortagayo musuq-maasuqa.

QODOBKA 7AAD
QEYBTA DADWEYNAHA

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay, halka ku habboon iyo si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka qaanuunkeeda, ku dadaalaysaa in ay dejiso, sugto, oo xoojiso nidaamyada ku aaddan shaqaaleysiinta, qoridda, haynta, dallacsiinta iyo hawl-gabnimada shaqaalaha rayidka ah iyo, halka ku habboon, saraakiisha dadweynaha ee kale ee aan la dooran:
(a) Taasi waxay ku saleysan tahay mabaadi'da wax-ku-oolnimo, daah-furnaanta, shuruuda hadafka sida mudnaanta, sinnaanta iyo kartida;
(b) Waxay isugu jirtaa hab-raacyo ku habboon xulashada iyo tababarka shakhsiyaadka si loogu wareejiyo jagooyinka dawliga ah ee loo tixgelinayo in ay tahay musuq-maasuq si gaar ah iyo in la hubiyo in loo magacaabay jagooyinka markii loo baahnaa;

(c) Waxay ku dhiirri-gelinaysaa in ay helaan mushaar ku filan oo si siman loo bixiyey iyadoo la raacayo heerka horumarka dhaqaale ee Dawladda Xubinta ah; iyo

(d) Waxay ku dhiirri-gelinaysaa in loo sameeyo aqoon-kororsi iyo tababar si ay ugu suurto-gasho shaqaalahaas in ay u gutaan waajibaadkooda shaqo oo ay u hayeen bulshada sida saxda ah, sharaf leh, waxqabad wanaagsan, iyo in loo oggolaado in ay helaan tababar gaar ah oo ku habboon si ay u helaan wacyi-gelin buuxda khatarta musuq-maasuqa ka dhex-jira shaqadooda Barnaamijyada noocan ah waxay noqon karaan tixraac iyo hal-beegyo wanaagsan meelaha looga dhaqmo sharcigan.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waa in ay tixgelisaa qaadashada sharci-dejin ku habboon iyo tallaabooyin maamul oo waafaqsan ujeeddadooyinka heshiiskan iyo si waafaqsano mabaadi'da asaasiga ah ee sharcigeeda gudaha, si loo qeexo shuruuda khuseysa musharaxnimada iyo doorashada xafiis dadweyne.

3. Dawlad kasta oo xubin ka ah heshiiskan waa in ay tixgelisaa qaadista tallabooyin sharci-dejin iyo maamul ee ku habboon si joogta ah iyadoo raacaysa ujeeddooyinka heshiiskan iyo si waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah sharcigeeda gudaha, si kor loogu qaado daah-furnaanta maal-gelinta musharaxiinta ee loo doortay xafiis dadweyne iyo, halka ku habboon, maal-gelinta axsaabta siyaasadeed.

4. Dawlad kasta oo xubin ah si waafaqsan mabaad'ideeda asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda waxay isku dayeysaa in ay qaadato,joogteyso oo xoojiso nidaamyada dhiirri-gelinaya daah-furnaanta iyo ka-hortagga khilaafaadka danahooda

QODOBKA 8AAD

XEERARKA ANSHAXA EE SARAAKIISHA DADWEYNAHA

1- Si loola dagaalamo musuq-maasuqa, Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ka shaqeyneysaa hormarinta daah-furnaanta, amaanada iyo si ay ku dheehan tahay mas'uuliyad shaqaalaheeda dhexdooda si waafaqasan mabaad'ideed asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda.

2- Si gaar ah Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ku dadaaleysaa in ay ku dabaqdo nidaamyadeeda hay'adeed iyo mid sharciyeed ,xeerarka iyo hal-beegyada wanaagsan si ay u gutaan waajibaadkooda shaqo oo ay u hayeen bulshada sida saxda ah

3- Ujeeddada fulinta faqradaha qodobkan Dawlad kasta oo Xubin ah iyadoo raacaysa mabaad'ideeda asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda in ay fiiro gaar ah u yeelato dadaalada xiriirka la leh oo ay qaadanayaan ururada gobolka iyo gobolada kala duwan sida xeerka anshaxa-marinta caalamiga ah ee shaqaalaha dawladda oo ku jira lifaaqa qaraarka guud ee dib-u-heshiisiinta 15/59 12/ December 1996.

4- Dawlad kasta oo Xubin ah iyadoo raacaysa mabaad'ideeda asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda, waa in ay tixgelisaa abuurista tallaabooyin iyo nidaamyo lagu fududeenayo soo-gudbinta mas'uuliyiinta Dawladda ee ku dhaqaaqa musuq-maasuqa ,hay'adaha awoodda uleh, marka ay falalka noocaan oo kale ah ay ku ogaadaan gudashada waajibaadkooda.

5- Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ku dadaaleysaa si waafaqsan mabaad'ideeda asaasiga ah iyo shuruucda dalkeeda in ay dejiso hal-beegyo iyo nidaamyo ku waajibinaayo shaqaalaha dawladdaas loogu muujiyo hay'adaha loo xilsaaray waxyaabo qaarkood oo ay ku jiraan waxqabadkooda dibadda, maal-gashiga, tabarucaada, faa'iidooyin badan oo u horseedi kara isku-dhac danta shaqadooda shaqaale dawladeed ahaan.

6- Dawlad kasta oo Xubin ah waxay ku dadaaleysaa si waafaqsan mabaad'ideeda asaasiga ah iyo shuruucda dalkeeda in ay qaado anshax-marin iyo tallaabooyin kale oo ka dhan ah shaqaalaha dawladda kuwaasoo ku xad-gudbay xeerarka iyo hal-beegyada lagu asaasay xeerkan si waafaqsan qodobkan.

QODOBKA 9AAD

SOO-GADASHO GUUD IYO MAAREYNTA DHAQAALAHA DADWEYNAHA

1. Dawlad kasta oo Xubin ah si waafaqsan mabaadi'deeda asaaasiga ah iyo shuruucda dalkeeda, waxay qaadeysaa tallaabooyinka lagama-maarmaanka ah si loo abuuro nidaamyada ku habboon wax-soo-gadashada, kuna saleysan daah-furnaanta, tartanka iyo ujeeddada dhabta ah ee go'aan-qaadashada, kuwaasoo wax-ku-ool ah, kana hortegayo musuq-maasuqa, nidaamyada noocaan ah oo tixgelin kara qiimeynta heerka ugu habboon ee codsigooda, waxaa kamid ah arrimaha soo socda:

(a) qeybinta xogta la xiriirta hab-raacyada iyo heshiisyada wax-gadashada oo ay ku jiraan warbixinnada ama dukumintiyada xiriirka la leh heshiisyada, casuumaadaha ka-qeyb-galka, warbixinnada la xiriira heshiiska ama bixinta qandaraasyada, oggolaashaha suurto-galka ah ee qandaraasleyaasha iyadoo la siinayo waqti ku filan oo ay ku diyaariyaan kuna soo gudbiyaan qandaraasyadooda;

(b) in horay loo sii sameeyey loona baahiyey shurudaha ka-qeyb-galka oo

ay kamid yihiin xulashada iyo shuruudaha abaal-marinta ‹xeerarka hindisaha yareynta;

(c) adeegsiga ujeeddooyinka iyo shuruudaha horay loo qorsheeyey si loo qaato go'aan la xiriira wax-soo-gadashada dawladeed,oo loo fududeeyo xaqiijinta adeegsiga saxda ah ee xeerarka ama hab-raacyada;

(d) in la sameeyo Nidaam wax-ku-ool ah oo dib-u-eegis gudaha ah, oo ay ku jirto nidaamka rafcaan-qaadashada, si loo hubiyo waddo sharci ah oo lagu gudbiyo cabashada iyo dib-u-hagaajinta haddii ay dhacdo in la raaci waayo xeerarka ama hab-raacyada loo dejiyey sida ku xusan faqraddan; iyo

(e) in la qaado tallabooyin wax-ku-ool ah markii loo baahdo si loogu habeeyo arrimaha xiriirka la leh shaqaalaha mas'uulka ka ah soo gadashada, sida in la ogeysiiyo maslaxad kasta oo ku jirta in dawladda ay soo gadato waxyaabo gaar ah iyo hab-raaca baaritaannada iyo baahiyaha tababarka.

2. Dawlad kasta oo Xubin ah waxay qaadeysaa si waafaqsan mabaadi'deeda asaasiga ah iyo shuruucda dalkeeda tallaabooyinka ku habboon si kor loogu qaado daah-furnaanta iyo isla-xisaabtanka maamulka maaliyadeed ee dawladda. Tallaabooyinka noocan oo kale ah waa inay ka kooban yihiin waxyaabahan soo socda:

(a) hab-raacyada ee ku tiirsan tahay miisaaniyadda dawladda;

(b) In si ku-meel-gaar ah looga warbixiyo dakhliga soo galay iyo kharashaadka ka baxay ;

(c) Nidaamka xisaabaadka iyo hal-beegyada heerarka xisaabinta iyo kormeerka la xiriira;

(d) Nidaamyada wax-ku-oolka ah ee saameynta leh ee la xiriira maareynta halista ah iyo xakameynta gudaha; iyo

(e) in ay qaado markay ku habboon tahay, tallaabo sixitaan ah oo ku saabsan dacwadaha lagu guul-daraysto in loo hoggaansamo shuruudaha lagu asaasay faqraddan 3.dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa talaabooyin madani iyo mid maamul intaba, iyadoo la raacayo mabaadi'da asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda , si loo ilaaliyo bad-qabka buugaagta xisaabaadka, diiwaannada, bayaannada maaliyadeed ama dukumiintiyo kale ee la xiriira kharashka dawladda iyo dakhliga iyo in laga hortago been-abuurka dukumintiyada noocan oo kale ah.

QODOBKA 10AAD
WARBIXINTA DADWEYNAHA

Iyadoo la tixgelinayo baahida loo qabo la-dagaallanka musuq-maasuqa, Dawlad kasta oo xubin ka ah heshiiskan, si waafaqsan mabaadi'deeda asaasiga ah ee shuruucda dalkeeda, waxay qaadeysaa tallabooyinka lagama-

maarmaanka u ah in kor loogu qaado daah-furnaanta maamulkeeda dawladeed, oo ay kamid tahay qaabka ay u nidaamineyso hawlaheeda, shaqaaleysiinta iyo go'aan-qaadashadeeda iyadoo la tixraacayo markii loo baahdo tallaabooyinka noocan oo kale ah waxaa kamid noqon kara:

(a) ku-tiirsanaanta hab-raacyo ama xeerar u oggolaanaya dadka oo dhan in ay helaan, macluumaad ku saabsan qaabka ay u nidaamineyso hawladeeda, shaqaaleysiinta iyo go'aan-qaadashadeeda ,iyadoo la tixraacayo markii loo baahdo Tallaabooyinka noocan oo kale ah , shaqeynta iyo geedi-socodka go'aan-qaadashada ee maamulkeeda iyadoo la ixtiraamayo ilaalinta macluumaadka gaarka ah iyo macluumaadka shakhsiga, go'aanada iyo ficillada sharciga ee walaac ka muujinaya xubnaha dadweynaha;

(b) fududaynta nidaamyada maamul, markii loo baahdo, si loogu fududeyo dadweynaha gaaritaanka hay'adda awoodda uleh ee go'aanka qaadaneysa; iyo

(c) baahinta macluumaadka, oo ay kujirto warbixino xilliyeed oo kusaabsan halista Musuq-maasuqa uu ku leeyahay maamulkiisa dawladeed.

QODOBKA 11AAD
HAL-BEEGYADA LA XIRIIRA GARSOORKA IYO ADEEGYADA DACWAD-OOGISTA

1. Iyadoo maanka lagu hayo madax-bannaanida Garsoorka iyo tallaabooyinka muhiimka ah ee la-dagaallanka musuq-maasuqa, dawlad kasta oo xubin ah waxay si waafaqsan Mabaadi'da Asaasiga ah ee Nidaamkeeda sharci ee aan ka hor-imaanaynin madax-bannaanida Garsoorka, waxay qaadaysaa tallaabooyin lagu xoojinayo ee looga hortagayo fursadaha musuq-maasuqa ee xubnaha Garsoorka. Tallaabooyinka noocan oo kale ah waxaa kamid noqonaya Xeererka la xiriira Anshaxee Xubnaha Garsoorka.

2. Tallaabooyinka la qaaday iyadoo la raacayo faqradda (1) ee qodobkan, waxaa lagu soo bandhigayaa laguna dabaqayaa adeegga dacwad-oogista ee Dawladaha Xubnaha ah taasoo aysan kamid aheyn qeybta Garsoorka laakiin waxay xaq u yeelanayo madax-bannaani la mid ah Adeegga Garsoorka.

QODOBKA 12AAD
HAY'ADAHA GAARKA AH

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa talaabooyin ku saleysan mabaadi'da asaasiga ah ee shuruucdeeda, si looga hortago musuq-maasuqa la xiriira hay'adaha gaarka ah, xoojinta xisaabinta iyo hal-beegyada hanti-

dhawridda ee hay'adaha gaarka ah iyomarka ay ku habboon tahay bixinta wax-ku-ool ah ee saami-qeybsiga iyo ganaaxyada madaniga ah, maamulka ama ciqaabta fal-dembiyeedyadaciqaabta dembiyada ee ku guul-dareysiga u hoggaansanaanta tallaabooyinka noocaas ah.

2. Tallaabooyinka lagu gaarayo ujeeddooyinkan waxaa kamid noqonaya:-
(a) dhiirri-gelinta wada-shaqeynta hay'adaha sharci-fulinta iyo hay'adaha gaarka
ah;
(b) dhiirri-gelinta horumarinta hal-beegyada iyo hab-raacyada loogu tala-galaydhowridda Hufnaanta hay'adaha gaarka ah oo ay ku jiraan Xeerarka anshaxa ee dhaqan-galka ah, sharafta iyo wax-qabadka saxda ah ee hawlaha ganacsiga iyo dhammaan xirfadaha la xiriira iyo ka-hortagga khilaafaadka danaha, iyo sare u-qaadista adeegsiga dhaqamada ganacsiga wanaaga ee ganacsatada dhexdooda iyo xiriirka qandaraas ee ganacsatada Dawladda;
(c) dhiirri-gelinta daah-furnaanta hay'adaha gaarka ah oo ay ku jirto marka ay ku habboon tahay tallaabooyinka la xiriira aqoonsi sharci iyo dadka caadiga ah ee ku lug leh Asaasidda iyo maareynta Iskaashiga hay'adaha;
(d) ka-hortagga si xun u adeegsiga nidaamyada lagu maamulayo hay'adaha gaarka ah oo ay ku jiraan habr-aacyada ku saabsan kaabida iyo shatiyadaay siiso dawladdu hawlaha Ganacsiga;
(e) ka-hortagga khilaafaadka danaha soo rogaya xayiraad, sida ku habboon ee waqtiga macquulka ah, hawlaha xirfadeed ee saraakiishii hore ee dadweynaha ama shaqaaleysiinta saraakiisha dadweynaha ee hay'adaha gaarka ah kaddib marka ay is casilaan ama hawl-gab noqdaan, marka ay hawlahaas ama shaqooyinkasi toos ula xiriiraan Hawlaha ay hayaan ama kormeerayaan saraakiisha dadweynaha muddadii ay xilka haayeen;
(f) hubinta hay'adaha gaarka ah iyagoo tixgelinayo qaab-dhismeedka iyo cabirka ay leeyihiin kontarool hanti-dhawra gudaha ah oo ka caawinayso ka-hortagga iyo oggaanshaha falalka musuq-maasuqa iyo akoonnada iyo warbixinnada maaliyadeed ee loo baahan yahay ee hay'adaha gaarka ah oo ay ku xiran yihiin hanti-dhawridda ku habboon iyo hab-raacyada shahaadada.

3. Si looga hortago musuq-maasuqa, dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa tallaabooyinka ku habboon, iyadoo la raacayo shuruucdeeda iyo Xeer- hoosaadyadeeda la xiriira dib-u-habeynta dukumintiyada iyo diiwaannada, saacinta warbixinada maaliyadeed iyo xisaabinta iyo hal-beegyada hanti-dhawridda, si loo reebo falalka soo socda ee lagu fuliyey

ujeeddada mid kamidah dembiyadii lagu asaasay si waafaqsan heshiiskan.

(a) asaasidda xisaabaadka ka baxsan buugaagta;

(b) saameynta buugaagta ka baxsan ama aan ku filnayn macaamil ganacsi lacageed;

(c) diiwaan-gelinta kharashaad aan jirin;

(d) soo-gelitaanka deymo leh aqoonsi aan sax aheyn ee sheeyadooda;

(e) adeegsiga dukumiintiyada beenta ah; iyo

(f) u burburinta si ula kac ah dukumiintiyada keydsan ee horay sharcigu u sheegay.

4. Dawlad kasta oo xubin ah waxay u diidaysaa canshuur-dhimista kharashyada inay noqdaan laaluush, tan waa mid kamid ah waxyaabaha tiirarka u ah dembiyada lagu asaasay si waafaqsan qodobbada 15 iyo 16 ee heshiiskan iyo, marka ay ku habboon tahay, kharashyada kale ee la xiriira wanaajinta anshaxa.

QODOBKA 13AAD
KA-QEYB-GALKA BULSHADA

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa talaabooyinka ku habboon oo waafaqsan mabaadi'da asaasiga ah ee shuruucdooda, si kor loogu qaado ka-qeyb-galka shakhsiyaadka firfircoon iyo kooxaha ka baxsan hay'adaha dadweynaha, sida bulshada rayidka, ururada aan-dawliga ahayn iyo ururada ku saleysan bulshada ee ka-hortagga iyo la-dagaallanka musuq-maasuqa iyo in kor loo qaado wacyi-gelinta dadweynaha ee xiriirta jiritaanka, sababaha iyo baaxadda iyo khatarta uu leeyahay musuq-maasuqa. Ka-qeyb-galeyaasha waa in lagu xoojiyaa tallaabooyinkan:

(a) Kobcinta daah-furnaanta iyo kor-u-qaadista ka-qeyb-galka dadweynaha ee Hawlaha go'aan-gaarista;

(b) Hubinta in dadweynuhu ay si wax-ku-ool ah u helaan xogta;

(c) Qadashada macluumaadka hawlaha dadweynaha ee ka-qeyb-galka dulqaad-la'aanta musuq-maasuqa iyo sidoo kale barnaamijyada waxbarashada dadweynaha, oo ay ku jiraan manhajka dugsiyada iyo jaamacadaha;

(d) Ixtiraamka, kobcinta iyo ilaalinta xorriyadda raadinta, helitaanka, Daabicidda iyo faafinta macluumaadka khuseeyo musuq-maasuqa. Xoriyaddaas waxaa laga yaabaa inay ku xirnaato xannibaado gaar ah, laakiin kuwan waxaa kaliya oo ay noqon karaan kuwa sharcigu siiyey oo lagama-maarmaanka ah:-

(i) in la ixtiraamo xuquuqaha ama sharafta dadka kale; iyo
(ii) Ilaalinta amniga qaranka ama dib-u-dhac ku yimid ama caafimaadka guudama akhlaaqda.

2. Dawlad kasta waxay qaadaysaa tallabooyinka ku habboon si loo hubiyo in guddiga la-dagaallanka musuq-maasuqa ee lagu xusay heshiiskan inay og'yihiin dadweynaha iyo bixinta waxyaalaha ay heli karaan guddigaas, marka ay ku habboon tahay warbixinta oo ay iskugu jirta si qarsoodi ah, dhacdooyin kasta oo loo arki karo inay yihiin fal-dembiyeed lagu asaasay si waafaqsan Heshiiskan.

QODOBKA 14AAD
HAL-BEEGYADA LOOGA HORTAGAYO LACAG-DHAQIDA

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay sameynaysaa:
(a) nidaamyo sharci-dejin oo dhammeystiran iyo nidaam kormeer oo loogu talo-galay bankiyada iyo hay'adaha maaliyadeed ee aan ahayn bankiyada, oo ay ku jiraan shakhsiyaadka caadiga ah ama kuwa sharciga ah ee bixiya adeegyo rasmi ah ama aan rasmi ahayn xagga gudbinta lacagta ama qiimaha iyo, marka ay ku habboon tahay, guddigayd kale gaarka ah ee u nugul lacag-dhaqida oo aan u laheyn Awood-xirfadeed, si looga hortaggo loona ogaado dhammaan noocyada lacag-dhaqida, marka la xoojinayo shuruudaha macaamilka iyo marka ay ku habboon tahay, aqoonsiga milkiilaha wax-tarka leh, diiwaan-gelinta iyo soo-gudbinta warbixinta macaamil ganacsi laga shakiyey; iyo
(b) iyadoo aan ku xad-gudbeyn qodobka 46aad ee Heshiiskan, inay hubiso maamulka, sharciyada, fulinta sharci iyo awoodaha kale u heellan la-dagaallanka lacag-dhaqida (oo isugu jirto, marka ay ku habboon tahay shuruucdooda Awoodaha Garsoorka) waxay awood u yeelanayaan iskaashi iyo is-dhaafsi macluumaadka heer Qaran iyo kuwa caalamiga ah marka loo eego shuruudaha u dagsan shuruucdeeda, waxay tixgelinaysaa asaasidda Qeyb Sir-doon-maaliyadeed oo u adeegaysa sidii xarun Qaran oo loogu talo-galay ururinta, falanqeynta iyo faafinta macluumaadka la xiriira lacag-dhaqida.

2. Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelinaysaa hirgelinta hab-beegyada macquul ah oo lagu ogaanayo laguna kormeerayo dhaqdhaqaaqa lacagta caddaanka ah iyo aaladaha gorgortanka ku habboon ee laga gudbinayo xuduudahooda, iyadoo dhawraysohubinta adeegsiga macluumaadka saxda ah oo aan wax

loogu dhimeyn dhaqdhaqaaqa raasamaalka sharci dhan kasta. Hal-beegyada noocan oo kale ah waxaa kamid noqonaya shuruud ah shakhsiyaadka looga baahan yahay iyo ganacsatada iyo in ay ka soo warbixiyaan ka gudbinta xuduud lacag fara badan oo caddaan ah iyo aaladaha gorgortanka ku habboon.

3. Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelinayaan hirgelinta hal-beegyada loogu baahan yahay hay'adaha-maaliyadeed, oo ay ku jiraan kuwa xawaaladaha lacagta:
(a) Ku darista foomamka wareejinta elektarooniga ee lacagaha iyo wixii la xiriira
farriimaha saxda ah iyo macluumaad macno leh oo asal ah;
(b) In la ilaaliyo macluumaadkaas inta lagu gudo-jiro silsiladda bixinta; iyo
(c) Isticmaalidda baaritaan kor loogu qaadaayo wareejinta lacagaha aan ku jirin
macluumaad dhammeystiran oo ku saabsan asalkii.

4. Asaasidda nidaamyo sharci iyo kormeerid iyadoo la raacayo qodobkan iyo qodobbda kale ee heshiiskan, Dawladaha Xubnaha ah waxaa loogu yeerayaa in ay u isticmaalaan hagidda dadaallada la xiriira gobolka, inta u- dhaxeeysa gobolada iyo ururro badan ee ka shaqeeya la-dagaallanka lacag-dhaqida.

5. Dawladaha Xubnaha ah waxay ku dadaalayaan horumarinta iskaashiga caalamiga ah, gobolka iyo iskaashiga laba dhinac ee Garsoorka, fulinta sharciga iyo sharci-dejinta maaliyadeed si loola dagaallamo lacag-dhaqida.

CUTUBKA III
DEMBIYEYNTA IYO FULINTA SHARCIGA

QODOBKA 15^AD
LAALUUSHKA SARAAKIISHA DADWEYNAHA EE QARANKA

Dawlad kasta oo Xubin ah waxay qaadaysaa sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboonee lagu caddeynayo fal-dembiyeed marka si ula kac ah loo geysto:
(a) Ballan-qaadkala siinayo sarkaal dadweyn, si toos ah ama si aan toos ahayn, faa'iido aan caadi aheyn, sarkaalka naftiisa ama nafteeda ama qof kale ama hay'ad, in uu noqdo fal rasmi ama ka fogaado falka. inta uu ku gudo-jiro isaga ama ayada waajibaadkooda rasmiga ah; iyo
(b) codsiga ama oggolaansaha sarkaal dadweyne, si toos ah ama si dadban, Faa'iido aan caad ahayn, sarkaalku nafsdiisa ama nafteeda ama qof kale ama

hay'ad, si uu u noqdo fal rasmi ah ama ka fogaado falka inta uu ku gudo-jiro isaga ama ayada waajibaadkooda rasmiga ah.

QODOBKA 16AAD
LAALUUSHKA SARAAKIISHA DADWEYNAHA EE SHISHEEYE IYO SARAAKIISHA DADWEYNAHA EE URURRADA CAALAMIGA AH

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa sharci-dejin kasta iyo halbeegyada kale ee ku habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed marka si ula kac ah loo galo, ballan-qaadka la siinayo sarkaal dadweyn ee shisheeye ama sarkaal ka tirsan ururrada caalamiga ah, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi ahayn, sarkaalku nafsadiisa ama nafsadeeda ama shakhsi kale ama hay'ad, si uu falka u noqdo rasmi ama ka fogaado falkainta uu ku guda jirto isaga ama ayada waajibaadkooda rasmiga ah, si uu u helo ama u sii haysto ganacsi ama faa'iidooyinka kale ee aan caadi ahayn oo la xiriira dhaqanka Caalamiga ah.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa sharci-dejin kasta iyo halbeegyada kale eek u habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed, markii si ula kac ah loo galay, codsashada ama oggolaanshaha sarkaal dadweyn shisheeye ama sarkaal ka tirsan hay'ad caalamiga ah, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi ahayn, sarkaalka naftiisa ama nafteeda ama shakhsi kale ama hay'ad, si uu u noqdo falka rasmi ah ama ka fogaado falka inta uu ku guda-jiro isaga ama iyada waajibaadkooda rasmiga ah.

QODOBKA 17AAD
KHAYAANO LUNSASHO AMA WAREEJIN KALE EE HANTI UU LEEYAHAY SARKAAL DADWEYNE

Dawlad kasta oo xubin ah wuxuu qaadaysaa sharci-dejin kasta iyo halbeegyada kale ee ku habboon, ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed, markii si ula kac ah loo galo, khayaano, lunsasho ama wareejin kale ee sarkaal dadweyne isaga ama iyada faa'iido ama faa'iido qof kale ama hay'ad, hanti kasta ee guud ama hanti gaar ah ama amniga ama wax kasta oo qiimo leh oo lagu aaminay sarkaalka dadweyne, iyadoo loo maleynayo jagadiisa isaga iyo iyada Samofale.

QODOBKA 18AAD
SAAMEYNTA GANACSIGA

Dawlad kasta waxay tixgelinaysaa qaadista sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed markii si ula kac ah loo geysto:

(a) Ballan-qaadka, la siinayo sarkaal dadweyne ama qof kale, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi aheyn uu amray sarkaal dadweyne ama qof lagu xad-gudbay isaga ama iyada ama saameyn suurta-gal ah, iyadoo ujeeddadu tahay in la helo maamul ama awood dawladeed ee dawlad xubin ka ah faa'iidooyin aan caadi ahayn oo ku saabsan falka asalka ah ama qof kasta oo kale; iyo

(b) Codsashada ama aqbalaadda sarkaal dadweyn ama qof kale, si toos ah ama si dadban, faa'iido aan caadi ahayn naftiisa ama nafteeda ama qof kale uu amray sarkaal dadweyn ama qof lagu xad-gudbay isaga ama iyada ama saameyn suurta-gal ah, iyadoo ujeeddadu tahay in laga helo maamul ama awood dawladeed ee dawlad xubin ka ah faa'iido aan caadi ahayn.

QODOBKA 19AAD
KU XAD-GUDUBKA SHAQOOYINKA

Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa sharci-dejint kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed, marka si ula kac ah loo galo, ku xad-gudubka shaqooyinka ama boosaska, taasi waa, waxqabadka ama ku guul-dareysiga saameyn fal, ku xad-gudubka shuruucda, ee sarkaal dadweyne marka laga saaro shaqadiisa isaga ama iyada, ujeeddaduna tahay helitaanka faa'iido aan caadi ahayn naftiisa ama nafteeda ama qof kale ama hay'ad.

QODOBKA 20AAD
SAAMEYNTA SHARCI-DARRADA AH

Iyadoo la tixraacayo Dastuurka iyo mabaadii'da asaasiga ah ee nidaamkeeda sharciga, Dawlad kasta oo xubin ah, waxay tixgelinayaa sharci-dejin kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboonee lagu caddeynayo fal-dembiyeed markii si ula kac ah loosoo galo, Saameynta Sharci-darrad ah, taasi waa siyaado kasta oo muhiim ah Hantida ee sarkaal dadweyne isaga ama iyada si macquul ah uma sharxi karto macluumaad ku saabsan dakhligiisa sharciga ah isaga/iyada.

QODOBKA 21AAD
LAALUUSHKA HAY'ADAHA GAARKA AH

Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa sharci-dejint kasta iyo hal-beegyada kale ee ku habboon ee lagu caddeynayo fal-dembiyeed, marka si ula kac ah loogu galo hawlaha dhaqaalaha, maaliyada ama hawlaha ganacsiga:

(a) Ballan-qaadka, la siinayo, si toos ah ama si dadban faa'iido aan caadi aheyn qof

kasta oo hagaya ama ka shaqeyanaya, awoodiisiinta hay'ad gaar ah, qofka naftiisa ama nafteeda ama qof kale, si uu u jebiyo waajibaadkiisa ama u joojiyo fal; iyo

(b) Codsashada ama aqbalaadda, si toos ah ama si dadban, faa;iido aan caadi aheyn qof kasta oo hagaya ama ka shaqeeya, awood-siinta hay'ad gaarka ah qofka laftiisa ama nafteeda ama qof kale, si uu u jabiyo waajibaadkiisa, ama u joojiyo fal.

QODOBKA 22AAD
LUNSASHADA HANTIGA SHIRKADAHA GAARKA LOO LEEYAHAY

Dawladda Xubinta ah Heshiiska waxay tixgelinaysaa dhaqan-gelinta Shuruucda iyo hal-beegyada kale oo ku habboon in la asaaso xad-gudubyada Dembileyaasha oo kale, marka lagu galay si Caalami ah xaalada dhaqaale, Maaliyadeed ama hawlo ganacsi, uu lunsaday Shakhsiga Agaasimaha ka ahaa ama ka shaqeeynayey, Awood kasta, hanti kasta oo ay laga leedahay Hay'ad Sharci ku dhisan, hanti gaar ah ama mid Amni, iyo walxo kale oo qiimo leh oo lagu aaminay asaga/iyada oo looga faa'iideystay Xilkiisa ama xilkeeda.

QODOBKA 23AAD
DHAQIDA FAA'IIDADA LAGU HELAY FAL-DEMBIYEEDKA

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa si waafaqsan Mabaadi'da asaasiga ah ee Xeerarka dalka sida Shuruuxda iyo hal-beegyada kale oo ku habboon in la asaaso falal Xad-gudub ahmarka lagu galo si caalami ah:

a) (i) heshiiska ama Xawilaada Hantida iyagoo xog ogaal loo yahay hantidaas in laga faa'iidey fal-dembiyeed ujeedadiisu tahay in la qariyo, ama lagu dhex-mile hantida Asalka ah mida Sharci-darada ah si looga caawiyo qof kasta oo qeyb ka ah Amarada falalka fal-dembiyeedka laga dhigay, si uu uga fogaado natiijada tallaabada sharci .

(ii) qarinta ama ku dhex-melida si qaab sax ah, Ilaha, goobta, hab-dhaqanka, dhaqdhaqaaqa ama Xuquuqda milkiilaha ay ku jirto Xushmada Hantida iyadoo la ogaanayo hantidaas in laga faa'iiday fal-dembiyeed;

b) Nuxurka oo lagu saleyey u-hoggaansanka nidaamka Sharciga;

(i) Soo gadshada iyo Milkiyada ama isticmaalka Hantida, iyadoo la ogyahay Mudda qoraalka qaan-sheega la qaatay, hantidaas oo ah faa'iido lagu helay fal-dembiyeed;

(ii) Ka-qeyb qaadashada, lala xiriiriyey ama shirqool la galay, isku day galid dembi, ama gacan kasiin, fududeyn ama qarinta lagu galay Xad-gudubyo oo fal-dembiyeed ka dhigaya sida ku xusan qodonkan,

2. Iyadoo ujeeddadu tahay dhaqan-gelinta faqradda (1) ee qodobkan: Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa Faqradda (1) ee Qodobkan si loo faafiyo Xaddiga fal-dembiteedka loo cuskaday

a. Dawladda Xubnaha aka ah waxay kusoo darayaa fal-dembiyeedyada lo cuskaday ugu yaraan Darajada wadajirka ah ee Xad-gudubyada Dembeelaha taasoo lagu xusay heshiiskan;

b. Iyadoo ujeeddadu tahay faqrad-hoosaadka (b) ee kore fal-dembiyeedka ee loo cuskaday waxaa in fal-dembiyeed la galay labo jeer si wadjir ah iyo meel ka baxsay Xuduud-dhuleedka Dawladda Xubnaha ka ah iyadoo ka dhigayo Fal-dembiyeed loo cuskaday oo kaliya marka lala xiriiriyo hab-dhaqan ee fal-dembiyeedka si waafaqsan Shuruucda dalka lagu galay Fal-dembiyeedka oo ay tahay in loo tixgeliyo Fal-dembiyeed si waafaqsan Shuruucda Dalka ee Dawladda xubinta ka ah Heshiiska, dhaqa-gelinta iyo dabaqaada qodobkan sidii fal-dembiyeedka uu halkaas ka dhacay oo kale:

c. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay siinaysaa nuqul shuruucdeeda kamid ah siismadaas waxay saameynaysaa qodobkan iyo Xaaladaha isbeddelaya ee ku addan shuruucdaas iyo tilmaamaha kazoo baxa Xoghaye Guud ee Qaramada Midoobay:

d. haddii loo baahdo Mabaadi'da asaasiga u ah shuruucda Dalka ee Dawladda xubinta ka ah Heshiiska waa suurta-gal ah inay keento fal-dembiyeedyada ku xusan faqradda (1) ee qodobkan laguma dabaqayo shakhsiyaadka galay Fal-dembiyeedka asalka ah.

QODOBKA 24AAD

QARIN

Iyadoo aan wax loo dhimeynin faqradaha Qodobka 23aad ee heshiiskan, Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa Dhaqan-gelinta Shuruudahaas iyo Hal-beegyada kale oo ku habboon oo si fal-dembiyeed looga dhigo, marka lagu galo si niyad, marka la galo fal-dembiyeed oo dembi ka dhigayo si waafaqsan Heshiiskan, iaydoo aan la haynin cid ka qeyb-qaadatay fal-

dembiyeedka, Qarinta ama la xiriira hantida la lunsaday, marka shakhsiga qeybta ka ah ogyahay hantidaas tahay faa'iiday lagu helay fal-dembiyeed, sida ku xusan heshiiskan.

QODOBKA 25AAD
IS-HORTAAGA GEEDI-SOCODKA CADAALADDA

Dawlad kasta oo Xubinta ah waxay dabaqaysaa Shuruucdaas iyo hal-beegyadooda taasoo ku habboon ee Dembi ka dhigida fal-dembiyeedka haddii loo galo si ku tallo-gal ah:

(a) isticmaalka Awood-jireed ah ama hanjbaad, cabsi-gelin, Balan aaddan Mudnaan aan Xaq loo yeelan, soo-bandhgid ama bixinta Ballan-qaad ku aaddan in la galo Markhaati-beenaad, iyo in faro-gelin lagu sameeyo gudasho markhaatiga ama gubinta Caddeymo in lagal hab-raacyo xiriir la leh falal laga dhigay dembi si waafaqsan heshiiskan:

(b) isticmaal Awood-jireed, handadaad iyo cabsi-gelin in la faro-gelin lagu sameeyo hawlaha Shaqaale Garsoor, ama saraakiisha Fuliyeyaasha Sharciga oo lala xiriiriyo galay Fal-dembi laga dhigayu si waafaqsan Heshiiskan, iyadoo aan wax loo dhimeynin faqrad hoosaadkan, Dawladda xubinta ka ah Heshiiska waxay xaq u yeelanaysaa in ay sameystaa Shuruuc, taasoo ilaalinaysa Xubnaha kala duwan ee Shaqaalaha Dadweynaha ah.

QODOBKA 26AAD
MAS'UULIYADA SHAKHSIYAADKA SIFO SHARCI LEH

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dabaqeysaa hal-beegyadan sida ku habboon, mabaadi'da Sharci oo lagu kalsoonaan, in Mas'uuliyada Shakhsiyaadka sifo sharci leh oo ka qeyb-qaatay fal-dembiyeedka laga dhigo fal-dembiyeed si waafqsan Heshiiskan.

2. Mabaadi'da Sharci ee Dawladda Xubinta aka ah waxay u hoggaansameysaa I Shakhsiyaadka Sifo sharci leh ay qaadayaa Mas'uuliyad ay suurta-gal tahay in ay noqdaa Dembeele galay kiis Madini ah ama Maamul;

3. Mas'uuliyeed waxaa laga reebayaa Mas'uuliyda Fal-dembiyeedka uu galo shakhsi caadi ah;

4. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay si gaar ah u hubinaysaa in Shakhsiyaadka leh sifo sharci ay u hogaasameen Mas'uuliyada si waafaqsan qodobkan si wax ku-ool ah Dembiyada Ciqaabta ah iyo kuwa aan ahayn iyo sidoo kale Dembiyada Maaliyadeed.

QODOBKA 27AAD
KA-QEYB-QAADASHADA IYO ISKU-DAYGA

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa Shuruucdan iyo hal-beegyada kale oo ku habboo dembi ka dhigaya fal-dembiyeeka si waafqsan Shuruucda dalka, ka –qeyb qaadashada awood kasta ah, gacan-kasiin, caawin, ama ku boorin, fal-dembi laga dhigay si waafaqsan heshiiskan.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa shuruucdan iyo hal-beegyada kale oo ku habboon oo ka dhigaya Fal-dembiyeed si waafaqsan shuruucda Dalka, isku-day kasta oo lagu galo fal-dembiyeed oo laga dhigay dembi si waafaqsan Heshiiskan.

3. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhqan-gelinaysaa shuruucdan iyo hal-beegyada kale eek u habboon oo dhigaya fal-dembiyeed si waafaqsan Shuruucda Dalka u diyaar-garoobida galid Fal-dembiyeed fal-dembi laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan.

QODOBKA 28AAD
OGAANSHAHA IYO NIYADA UJEEDKA TIIRARKA FAL-DEMBIYEEDKA AHAAN

Ogaanshaha, niyada ama ujeedka waxay Caddeyn u noqonayaan dhacdooyinka laga shakisan yahay haddii lagu helo tiirarka Caddeymaha in la galay fal dembi laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan.

QODOBKA 29AAD
XAALADDA XADDIDITAANKA

Dawlad kasta oo xubin ah, waxay is waafajinayaa shuruucdeeda iyo falalka dembiga laga dhigay si waafaqsan Shuruucda dalka marka Xaaladaha Xaddidan ay kala fog tahay waxaa laga bilaabayaa Hab-raacyada Fal-dembiyeedka laga dhigay si waafqsan heshiiskan , waxaanna la Xadidayaa Muddo dheer haddii uu Dembiluhu ka fakaday Cadaaladda iyadoo dib loo dhigayo Dacwadda si waafaqsan Heshiiskan.

QODOBKA 30AAD
DEMBI-OOGISTA, GAR-NAQIDA IYO CIQAABTA

1. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay ka dhigayaan gelitaan Falalka dembiga laga dhigay si waafqsan Heshiiskan kana ratibmeyso mas'uliyad Ciqaabeed si loo ilaaliyo culeyska uu Dembigaas leeyihiin,

2. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay raacaysaa hal-beegyadaas sida ku habboon si loo ilaaliyo si waafaqsan nidaamka Sharciga, iyo Mabaadi'da Dastuurka

iswaafajinta isku-dheeli tirnaanta u dhaxeysa Xasaalanadaha ama Mudnaata Garsoorka oo ay siinayso Shaqaalaheeda si ay wax uga qabtaan Hawlahooda una gutaan waajibaadkooda sidaugu habboon, si wax-ku-ool ah, Baarinaanka, Dembi-oogista, ama Garsoorida oo ku aaddan Falalka Dembiga laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan.

3. Dawlad kasta oo xubin ah waxay damaanad qaaadayaan Saameynta waxyaalaha uu sharciga oggolaanayo iyadoo la tixgelinaayo Shuruucda dalka oo ku aaddan Baritaanka shakhsiyaadka galay falka Dembiga laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan, si loo hubiyo in ay fuliyeen Hay'adaha Sharci-fulinta hab-raaca laga qaadanayo fal-dembiyeedka, iyadoo la tixgelinaayaa baahida loo qabo awgeed in laga waantoobo galitaanka fal-dembiyedka sidaan oo kale ah.

4. Xaaladaha Falka Dembiga laga dhigay si waafqsan heshiiskan, Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa hab-raaca ku habboon si waafaqsan huruucda Dalka, iyadoo la tixgelinayo Xuquuqda Difaaca , si loo hubiyo Dammaanad-qaadka Shardiga looga dhigay in lagu daayo ilaa laga gaarayo Muddada maxkamadeynta ama racfaanka iyadoo lagama-maarmaan ay tahay joogitaanka eedeysanaha si loo raaco Hab-raaca fal-dembiyeedka.

5. Dawlad kasta oo xubin ah, waxay qaadaysaa ciqaabta ugu culuska ah ee Fal-dembiyeedka ay khuseyso, haddii la tixgelinaayo suurta-galnimada sii-deynta ama Sharciga looga dhigay Shakhsiyaadka ku eedeysan gelitaanka Dembiydaas.

6. Dawlad kasta oo xubin ah, inay is waafigiyaan Mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka Sharciga, iyadoo la tixgelinayo hab-raacyada ku aaddan Shaqaalaha Dadweynha kuwaas oo lagu eedeeyey Falalka Dembiga looga dhigay si waafqsan Heshiiskan ama in laga joojiyo shaqada ama la beddelo, ama ay casilaan hay'ad awood u leh iyadoo la tixgelinaayo Mabaadi'da Dembi-la'aanta.

7. Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa marka uu culus yahay fal-dembiyeedka waa in la is waafjiyaa mabaadi'da asaasiga ah ee nidaamka Sharci, iaydoo la raacayo hab-raacyada Mas'uuliyad ka qaadida ee amar-maxkamadeed ama macna kale oo u dhigma, muddada ay xadiday shuruucda Dalka, ee ashqaasta ku eedeysan Fal-dembi laga dhigay in la galay si waafaqsan Heshiiskan waana sida soo socota:

a) haynta Xafiis dadweyne; iyo
b) haynta Xafiis ganacsi qeybi kamid ah ama gabi ahaanba ay leedahay dawladda.

8. Iyadoo aan faqradda (1) ee qodobkan wax loo dhimeynin in la isticmaalo Awood anshax-marin ee Ha'adaha Awoodda u leh ee lidka Shaqaalaha Rayidka ah.

9. Kamid ma ahan heshiiskan wax saameyn ku yeelanaya mabaadi'da Garsoorka, inuu noqdo fal-dembi laga dhigay si waafqsan heshiiskan iyo in lagu dhaqan-gelin karo tilmaamaha difaaca Sharci ama ilaalinta Mabaadi'da kale ee sharciga ee dhawraya hannaanka Shuruucda Dalka ee Dawladda xubinta ka ah Heshiiskan, iyadoo ay jiraan Baaritaan iyo Ciqaabta dembiga si waafqsan shrcigaas.

10. Dawladda xubinta ka ah Heshiiska, waxay ku dhiiri-gelinaysaa in dib-loogu soo celiyo bulshada shakhsiyaadka lagu eedeeyey gelitaanka fal-dembi laga dhigay si waafaqsan heshiiskan.

QODOBKA 31AAD
XAYIRAAD, XANNIBAAD IYO LA-WAREEGID

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadaysaa si ugu soor-galmida ah ee ugu habboon nidaamkeeda Sharci ee Dalka hab-raacyadaas taasoo ku habboon la-wareegid:
a) faa'iido fal-dembiyeed lagu helay eek u aaddan falal heshiiskan uu dembi ka dhigay, ama a hantida qiimihiisa ku dhigma qiimaha Faa'iidada laga helay fal-dembiyeedka; iyo
b) hantida, Agabka, aaladaha kale oo loo isticmaalay ama loo diyaariyey in loo isticmaalo fal-dembiyeed si waafqsan heshiiskan.
2. Dawladda xubinta ka ah Heshiiska waxay qaadayaan hal-beegyada si ku habboon si loo suurta-geliyo aqoonsiga, daba-galka, Xayiraada ama Xannibaada ee Agabyada oo ku xusan faqradda (1) ee qodobkan oo ay ujeedadu tahay la-wareegid kama-dambeys ah.

3. Dawlad kasta oo xubin ah waxay dhaqan-gelinaysaa si waafqsan Shuruucda dalka, Shuruucdaas, iyo Hal-beegyada kale oo ku habboon taasoo suurta-gal ay tahay in ay nidaamiyaan Maalmulka ha'adah Awoodda u leh xayiraada, Xannibaada ama la-wareegidda hantida sida ku xusan Faqradaha (1) iyo (2) ee qodobkan.

4. Haddii faa'iidada lagu helay fal-dembiyeedka la wareejiyo ama la beddelo qeyb kamid ah ama gabi ahaan hanti kale, hantida lagasoo beddelay faa'iidada lagu helay fal-dembiyeed waxay u hoggaasamaysaa hal-beegyada ku xusan qodobkan.

5. faa'iidada lagu helay fal-dembiyeedka haddii lagu dhex-milo hanti lagu helay si sharci ah, hantidaas waxay u hogaasameysaa xayiraa, xannibaad iyo la-wareegid qiimaha lagu milay ee faa'iidad lagu helay fal-dembiyeedka, iaydoo aan wax loo dhimeynin hantida kale ee lagu helay si sharci ah.

6. Dakhliga ama faa'iidada kale oo lagu beddelay faa'iidada lagu helay fal-dembiyeedka oo lagu dhex-milay hantida lagu helay fal-dembiyeedka waxay u hoggaansamayaan sida ku xusan qodobkan isku si iyo isku qiimo oo u dhiganta faa'iidada fal-dembiyeedka lagu helay.

7. Ujeeddada qodobkan iyo qodobka 55aad heshiiskan, Dawlad kasta oo xubin ah, waxaa awood loo siinayaa Hay'adaha awoodda u leh sida maxkamadaha in ay amraan Bankiga, Maaliyadda, ganacsiga, diiwaalka in uu noqdo mid la heli karo, ama la xanibi karo,

8. Dawladda xubinta ah ma diidi karto fulinta faqradaha Qodobkan iyadoo salka ku haysa sirta Bankiga.

9. Dawladda Xubinta ah, waxay tixgelinaysaa suurto-galnimada inuu caddeeyo dembiilaha ilaha dhaqaale ee lagu helay si sharci ah, oo lagu eedeynyo in laga helay fal-dembiyeed iyo hanti kale oo ay tahay in lala wareego iyadoo la raacayo Mabaadi'da Asaasiga ah ee shuruucda dalka iyo Hab-raacyada kale ee Garsoor iyo hab-raacyada kale.

10. faqradaha qodobkan laguma fasiri karo Xuquuqda dhinaca seddexaad si nayad wanaag ah.

11. Qodobkan kamid ma ahan mid raad ku yeelanaya mabaadi'da Garsooka, iyadoo la fulinayo hab-raacyada la tilmaamay lana waafajinayo Shuruucda

dalka ee Dawladaha Xubnaha ka ah kuwaas ay tahay inay u hoggaansamaan qodobadan.

QODOBKA 32AAD
ILAALINTA MARKHAATIGA, KHUBARADDA IYO DHIBANEYAASHA

1. Dawladda kasta oo xubin ah, waxay qaadaysaa hal-beegyo ku habboon si waafqsan heshiiskan iyo nidaamka Shuruucda dalka iyadoo u jeeddadu tahay in la siiyo ilaalin wax-ku-ool ah Markhaatiyaasha iyo Xeel-dheereyaasha kuwaas oo ku markhaati furaya Falalka Dembiga laga dhigay si waafaqsan heshiiskan, sidoo kale, qaraabadooda iyo shakhsiyaadka xiriirka la leh in laga ilaaliyo aar-gudasho iyo cabsi-gelin kasta oo suurta-gal ah, iyadoo aan wax loo dhimeyn Hal-beegyada faqradda (1) ee qodobkan, ee ku aaddan Xuquuqda eedeysanaha iyadoo ay ku jirto xaqa geedi-socodka Garsoorka:
   a) abuurida hab-raaca ilaalinta jireed ee shakhsigaas si ku habboon iyo in loo oggolaasho meel ay degaan haddii suurta-gal tahay , inaan la faafinin Macluumaadka aqoosigooda iyo meesha ay degan yihiin iyo in shardi lagu xiro faafinteeda; iyo
   b) siinta xeer-hoosaad bixinta caddeynta Marag-furka iyo Khubaradda taasoo lagu ilaalinayo bad-qabkooda sida in loo oggolaado inay isticmaalaam Xiriirka teknoolijiyada sida Vedios ama waxyaalaha kale oo la adeegsado.

2. Dawlad kasta oo Xubinta ka ah, waxay tixgelinaysaa inay gasho heshiis amahhal-beegyo ee Dawladaha kale ee xubnaha ka ah, ee ku aaddan beddelida meelaha ay joogaan shakhsiyaadkaas sida ku xusan faqradda (1) ee qodobkan.

3. Faqradaha qodobkan waxaa lagu dabaqayaa dhibaneyaasha, marka ay yihiin Markhaatiyaal.

4. Dawlad kasta oo xubin ah waxy u hoggaansamaysaa Shuruucda dalka iyo suurta-galnimada aragtida ku aaddan dhebaneyaasha iyo ina tixgeliso marxalaha ku habboon hab-raacyada Garsoor ee lidka ku ah Dembileyaasha iyadoo aan wax loo dhimeynin xaqa difaaca.

QODBKA 33AAD
ILAALINTA SHAKHSIYAADKA WARBIXIYEYAASHA

Dawlad kasta oo xubin ah, waxay tixgelinaysaa iyadoo la kaashanaysa nidaamka Sharci ee Dalka hal-beegyo ku habboon oo la siinayo ilaalo ku aaddan dhaqan kasta oo aan loo baahnayn, oo ku aaddan shakhsi kasta oo sabab wax-ku-ool ah ku wargeliya Hay'adaha ay khuseyso si niyad-wanaag ah

dhacdo kasta oo ku saabsan Falalka dembiga laga dhigay si waafaqsan Heshiiskan.

QODOBKA 34AAD
CAWAAQIBTA FALALKA MUSUQ-MAASUQA

Iyadoo la tixgelinayo xuquuqda dhinaca seddexaad awgeed, si niyad-wanaag ah, dawlad kasta oo xubin ah, waxay qaadaysaa ha-beegyo si waafqasan Mabaadi'ada asaasiga ah ee Shuruucda dalka, oo lagula tacaalayo caqabadaha Musuq-maasuqa. Sidaas darteed, Dawladaha Xubnaha ah waxay texgelinaysaa musuq-maasuqa inuu yahay hawlaha ugu muhiimsan oo la qaadanayo hab-raac sharci si loo baabi'iyo ama loogala noqdo heshiiska am aka qaadida Mudnaanta ama Xasaanada iyo wixii la mid ah sida Jeegaga, iyo qaadashada hab-raacyo kale oo cadaaladeed.

QODOBKA 35AAD
MAG-DHAW-KA-BIXINTA WAXYEELLO

Dawlad kasta oo xubin ah waa inay ku dartaa shuruucda dalkeeda in mag-dhaw la siiyo qof walbo oo waxyeello ka soo gaarto fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan, marka uu dacwad gudbisto.

QODOBKA 36AAD
HAY'ADAHA AWOODDA U LEH

Dawlad kasta oo xubin ah waa inay ku dartaa shuruucda dalkeeda hay'ad, Gollo ama shakhsiyaad awood u leh ka-hortagga Musuq-maasuqa ee fulinta sharciga. Hay'ad, Gole ama shakhsiyaad u madax-bannaan si waafaqsan shuruucdeeda Dawladda xubinta ka ah Heshiiska, si ay awood uguyeeshaan gudshada shaqooyinkooda si hufan iyadoo wax saameyn ku yeelanin shakhsiyaadka ama shaqaalaha waxaa lagama-maarmaan ah inay helaan Hay'adaha ama Golaha tababar sare iyo agab ay ku fuliyaan.

QODOBKA 37AAD
ISKAASHIGA HAY'ADAHA FULINTA SAHARCI

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadeysaa tallaabo ku habboon si loo dhiirri-geliyo qof kasta oo fal-dembiyeed ka qeybqaatayn sida ku xusan heshiiskan, si ay u helaan macaluumaat faa'iido leh hay'adaha awoodda u leh iyadoo u jeeddada tahay hannaanka barista caddeynta iyo ka-gacansiinta Hay'adaha awaooda u leh oo ka qeybqaadanaysaain laga-xaninbo dembiilayaasha faa'iidada ay ka heleen fal-dembiyeedka iyo dib-u-soo-celinta faa'iidadaas.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waa in ay qaadataa suurta-galnimada, dacwadaha ku habboon si loo yareeyo ciqaabta eedeysanaha soo bandhiga iskaashi la taaban karo oo ku aaddan baaritaanka ama dacwad-oogidda dembiga si waafaqsan heshiiskan.

3. Dawlad kasta oo xubin ah heshiiskan waa in ay tixgelisaa In la siiyo xasaanad dacwad-ku-qaadidda, iyadaoo la raacayo mabaadi'da asaasiga ah ee sharcigeeda, qof kasta oo siiya iskaashi muhiim ah baaritaanka ama dacwad ku soo oogidda dembi gaar ah iyadoo la raacayo heshiiskan.

4. Badbaadinta dadkaas iyadoo la ilaalinayo kala-duwanaashada xaaladaha, sida ku xusan Qodobka 32aad ee heshiiskan.

5. Haddii lagu helo qof sida ku cad farqada (1) ee qodobkan joogana dawlad kamid ah dawladaha Xubnaha ah waxay iskaashi wax-ku-ool ah kasiinaysaa Hay'adaha Awoodda u leh ee dawladda kale, Dawladaha Xubnaha ah ay quseyso waxay tixgelinayaan gelitaanka heshiisyada ama sida ay ukala-horeyaan si waafaqsan sharuucda dalkooda, ee ku aaddan suurto-galnimada ay siinayaan dawladda kale wada-shaqeynta sida ku xusan faqradaha (2) iyo (3) ee qodobkan.

QODOBKA 38AAD
ISKAASHIGA U DHEXEEYA HAY'ADAHA QARAN

Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadanaysaa tallaabo lagu dhiirri-geliyo, si waafaqsan shuruucdooda, iskaashiga ka dhexeeya hay'adaha Qaran, sida sarkaal dadweyne iyo dhinaca kale, Hay'adaha mas'uulka ka ah baarista dembiyada ciqaabta iyo dacwo-oogidda. Waxaa kamida iskaashiga sidan:

b) wargelinta kama-dambaysta ah ee hay'adaha, inay jiraan sababo maan-gal ah oo la aaminsan yahay in dembiyo kasta oo ku xusan qodobbada 15aad, 21aad iyo 23aad ee heshiiskan; ama

t) hay'adaha waxay siinayaan dhammaan macluumaadka lagama-maarmaanka ah marka laga soo codsado.

QODOBKA 39AAD
ISKAASHIGA U DHEXEEYA SHIRKAD DADWAYNE IYO SHIRKAD GAARKA LOO LEEYAHAY

1. Dawlad kasta oo ee xubin ah waxay qaadanaysaa tallaabo lagama-maarmaanka u ah in lagu dhiirri-geliyo, iyadoo raacayso shuruucdeeda,

iskaashiga ka dhexeeya Hay'adaha baaritaanka iyo Maxkamadaha Qaran, shirkadaha gaarka loo leeyahay iyo urrurada ganacsi ee arrimaha ku aaddan galitaanka fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan.

2. Dawlad kasta oo xubin ah waxay tixgelinaysaa iyadoo dhiirri-gelinayso ilaalinta muwaadiniinteeda iyo dadka kale ee leh deganaanshaha dhulkeeda si loo ogeysiiyo muwaadin hay'adaha baarista iyo dacwad-oogidda galitaanka fal-dembiyeed sida ku xusan heshiiskan.

QODOBKA 40AAD
SIRTA BANKIYADA

Dawlad kasta oo xubin ah waxay hubinaysaa xaladaha baaritaan ee dembiyada ka dhaca dalkeeda sida ku xusan heshiiskan, xeer-nidaamiyaha dalkeeda markay jiraan aallado ku habboon oo suurta-gelinaya in laga gudbo caqabadaha ka imaan kara dhaqan-gelinta shuruucda sirta bankiyada.

QODOBKA 41AAD
DIIWAANKA DEMBIGA

Dawlad kasta ee xubin ah waxaa u bannaan in ay qaadato waxa kaga aaddan hal-beegyada sharci-dejinta iyo hal-beegyada kale isla markaana ilaalinaysa waxyaabihii hore ee dawladda kale, iyadoo ay tahay ujeeddada si loo adeegsado macluumaadka ee looga gol-leeyahay sida ugu habboon. Hab-raaca ciqaabta ee la xiriira dembiyada ku xusan heshiiskan.

QODOBKA 42AAD
IKHTISAAS

1. Dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadanaysaa hal-beegayada kaga aaddan asaasidda iyo Ikhtisaaska dembiyada ku xusan heshiiskan haddii ay dhacaan labadan arrin:

a) haddii fal-dembiyeedka lagu galo dhul ay leedahay dawlad xubin ka ah heshiiskan; iyo

b) haddii uu fal-dembiyeedka uu ka dhaco markab dushiisa uu ka taagan yahay calanka dawladda xubinta ka ah heshiiskan, ama diyaarad ku diiwaan-gashan si waafaqsan shuruucda dalkaas, xilliga dembiga uu dhacay.

2. Iyadoo ilaalinaysa Qodobka 4aad ee heshiisakan Dawlad kasta ee xubin ah sidoo kale waxaa u bannaan inay Go'aan ka gaarto ikhtisaaka Maxkamadaha dembi kasta oo sidaan oo kale:

a) haddii uu galo dembiga qof kamid ah muwaadiniinta dawlad xubin ka ah ama;

b) haddii uu galo dembiga qof kamid ah muwaadiniinta dawlad xubin ka ah, ama qof si joogta ah u dagan ama qof jinsiyad-laawe ah oo ka haysta degenaansho joogta ah dalkeeda;

c) fal-dembiyeedyada ku xusan faqradda (1) xarafkeeda (b) (ii) qodobka 23aad ee heshiiskan, haddii fal-demiyeedka lagu galo meel ka baxsan dhulkeeda tahayna u jeedada galid fal-dembi sida ku xusan faqradda (1) (a) ama (ii) (b) (i) ee Qodobka 23aad dhulkeeda dhaxdiisa si waafaqsan heshiiskan; ama

d) haddii dembiga laga galay dawlad xubin ka ah Heshiiskan.

3. Ujeeddada Qodobka 44aad ee heshiiskan, dawlad kasta oo xubin ah waxay qaadanaysaa talloobooyin kaga aaddan go'aanka ikhtisaaska Garsooraha dembiyada ku xusan heshiiskan markuu eedeysanaha joogo dhulkeeda ayna dhiibin qofkaas kaliya sabtoo ah wuxuu kamid yahay muwaadiniinteeda.

4. Waxaa u bannaan sidoo kale dawlad kasta oo xubin ah inay qaadato go'aanka ikhtisaaska dembiyada ku xusan heshiiskan markuu eedeysanaha joogo dhulkeeda aysan dhiibin.

5. Haddii ay ogaato Dawladda Xubinta ah waxay qaadanaysaa ikhtisaaska sida ku xusan faqradda (1) ama (2) ee qodobkan, ama ku ogaatay qaab kale, dawlad kasta oo Dawladaha Xubnaha ah waxay sameynayaan baaritaan iyo hab-raaca dacwad-oogid ee la xiriirta isla arrintaan, hay'adaha awoodda u leh ayaa qaadayaan ee dawladahaas xubinta ah, sida loogu baahado, waa inay ka fadhadaan ujeeddada hab-raaca garsoor.

6. Iyadoon wax loo dhimayn hal-beegga xeerka calamiga ah kama reebayso heshiiskan ikhtisaas kasta oo dembi oo lagu asaasay shruucda Dawladda Xubinta ah.

CUTUBKA IV
ISKAASHIGA CAALAMIGA AH
Qodobka 43aad
Iskaashiga Caalamiga ah

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay iska kaashanayaan arrimaha dembiyada sida ku xusan qodobbada 44aad ilaa 50aad ee heshiiskan. Sida ugu habboon oo la jaan-qaadi kara shuruucda dalalkooda. Dawladaha Xubnaha ah

waxay tixgelinayaan inay iska caawiyaan hab-raaca baarista arrimaha ku aaddan madaniga iyo maamulka ee la xiriira Musuq-maasuqa.

2. Arrimaha iskaashiga calimaga ah, marakasta ay jiraan dembiyo kala duwan ay tahay shardi, waxaa loo qaadanayaa in la fuliyey iyadoo loo fiirinayo shuruucda Dawladda xubinta ka ah Heshiiska ee laga codsaday in ay isku si u qiimeynayaan faldembiyeedka ama eray-bixin la mid ah Dawladda xubinta ka ah Heshiiska ee soo codsatay, haddii uu yahay falka mid ku saleysan dembi ay iska caawinayaan waa fal-dembiyeed sida uu qabo shuruucda labad dawladood.

Qodobka 44aad
Wareejin

1. Qodobkan waxaa lagu daaqaayaa dembiya ku usan heshiiskan haddii ay arrinta tahay qofka codsiga dib-u-celinta uu joogo dhulka Dawladda xubinta ka ah Heshiiska ee laga codsaday, waxaa loo shardinayaa dembiga codsiga wareejinta waxaa lagu ciqaabayaa sida uu qabo sharciyada dawladda laga codsaday iyo dawladda codsatay.

2. Iyadoo aan la qaadanayn faqradda (1) ee qodobkan, dawladda xubinta ah ee sharci ahaan u oggolaanaya inay wareejiso qof kasta oo kamid ah dembiyada ku xusan heshiiskan oo aan lagu ciqaabi karin sharuucda dalkeeda.

3. Haddii codsiyada wareejintu ay ku jiraan dembiyo kala duwan, oo ugu yaraan mid kamid ah lagu soo wareejin karo sida ku xusan qodobkan qaarna aan lagu soo wareejin karin sabab la xiriirta muddadooda xabsiga balse la xiriira dembiyada ku xusan heshiiskan, waxaa u bannaan dawladda laga codsaday inay dabaqdo qodobkan sidoo kale wixii la xiriira dembiyadaas.

4. Dembiyo kasta oo qodobkan lagu dabaqo waxaa loo qaadanayaa in lagu soo daro sidii dembi ciqaab ah oo lagu wareejiyo heshiis kasta oo wareejin ka dhexeysa Dawladdaha. Dawladuhu waxay ballan-qaadayaan inay ku daraan dembiyada sida dembiyada lagu wareejinayo ee heshiis kasta oo is dhaafsi ah oo lagu dhammeeyo dhexdooda. Dawladda xubinta ah oo uu sharcigeedu sidaas oggol yahay, haddii ay dhacdo in ay u adeegsato Heshiiskan inuu yahay asaaska wareejin, looma tixgelinayo mid kamid ah dembiyadii lagu asaasay iyadoo la raacayo heshiiskan inuu yahay dembi siyaasadeed.

5. Haddii dawlad xubin ah sameyso wareejin shardi ku ah jiritaanka heshiiska uu ka helo codsi wareejin dawladda kale oo aan lahayn heshiis wax-is- dhaafsi ah, waxaa loo qaadanayaa heshiiskan inuu yahay asaaska sharciga ee wareejinta marka loo fiiriyo wixii dembi ah ee qodobkan lagu dabaqayo.

6. Dawladda xubinta ah haddii ay sameyso ku wareejin shuruudo ku saabsan jiritaanka heshiiskan waa:
b) Wakhtiga la dhigayo ansixinta, aqbalaadda ama oggolaanshaha ama helitaanka heshiiskan, loo sheegayo Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay waxa loo qaadanayaa Baaqaani inuu yahay asaaska sharciga ee iskaashiga ku saabsanaan dawladaha kale ee xubinta ka ah heshiiskan; iyo
t) Haddeysan u qaadanin heshiiskan mid salka ku haya sharci iskaashi ku saabsan wareejin, in la raadiyo, meesha ku habboon, si loo soo gabagabeeyo heshiisyada ku saabsan wareejinta dawladaha kale ee xubnaha ka ah Heshiiskan si loo hirgeliyo qodobkan.

7. Dawladaha xubnaha ah ee aan sameyneyn shuruudaha wareejinta jiritaanka heshiiska waxay qaadayaan dembiyada uu qodobkani u adeegsanayo dembiyada wareejinta ay is-dhaafsanayaan dhexdooda.

8. Wareejinta waxay ku xirnaanaysaa shuruudaha ku xusan Sharciga dawladda xubinta ah ee laga codsaday ama heshiisyada ciqaabta ee lagu dabaqayo, oo ay ku jiraan, inta u dhexaysa, shuruudaha la xiriira ciqaabta ugu yar ee looga baahan yahay wareejinta iyo sababaha dawladda laga codsaday oo diidi karta wareejinta.

9. Dawladaha Xubnaha ah waa in ay ku dhaqmaan sharuucda dalkooda, iyna ku dadaalaan in ay dedejiyaan hab-raacyada wareejinta iyo in ay fududeeyaan shuruudaha caddeynta ee la xiriira fal kasta oo qodobkan lagu dabaqayo.

10. Iyadoo ilaalinaysa shuruucda dalkeeda iyo heshiisyada wareejinta, waxaa u bannaan dawladda xubinta ah ee laga codsaday, markay ku qanacdo in ay tahay duruufaha ay sababayaan oo ay degdeg yihiin oo ay codsanayaan Dawladahaas xubnaha ah, qaadashada qof loo codsaday wareejinta eedeyntiisa qofkaas oo jooga dhulkeeda ama la hayo ama la qaado tallaabooyin kale oo ku habboon si loo hubiyo hab-raaca wareejinta.

11. Dawlad xubin ah ee dhulkeeda uu joogo dembile la sheegay, haddii ay dhacdo looma gudbin karo qofkaas ee la xariira dembiga iyadoo la ilaalinayo dhaqan-gelinta qodobkan ku saleysan yahay oo keliya ama kamid yahay muwaadiniinteeda, markuu codsiga dawlad xubin ah oo codsanaysa wareejin, waxaa waajib ku ah inay soo gudbiso dacwada iyadoo aan dib-u-dhac ku imaan hay'adaha awooddo u leh ay tahay ujeeddada dacwad-qaadista, hay'adaha waxay qaadanayaan go'aan hab-raaca dacwada qaab la mid ah sida fal-dembiyeed kale oo dabiici ah marka loo eego Dawladda Xubinta ah shuruucda dalkeeda, Dawladaha Xubnaha ah oo ay khusayso waa inay iskaashi yeeshaan, gaar ahaan dhinacyada hab-raaca iyo caddeymaha, si loo hubiyo wax-ku-oolnimada dacwadan oo kale.

12. Markasta oo dawlad xubin ah oo loo oggol yahay sida ku cad sharciga dalkeeda inay wareejiso ama haddii ay dhiibto mid kamid ah muwaadiniinteeda keliya shuruuda ah in qofka lagu soo celinayo dalkaas si uu ugu qaato xukunka u harsan ama dacwadda lagu soo oogay ama si loo dhammeystiro hab-raaca ee wareejinta qofka la codsaday ee Dawladda Xubinta ah ama ogaalto wareejinta iyo dawladda kale ee soo wareejinta qofka iyo ikhtiyaarka heshiisyo kale oo ay u aragto inay ku habboon yihiin, shuruudaha ku xiran wareejinta dembiilayaasha ah ama la wareejinayo ma tahay mid ku filan gudashada waajibaadka sida ku xusan faqradda (11) ee qodobkan.

13. Haddii wareejinta, loo raadsaday ujeeddooyin meel-marin xukun, sababtoo ah qofkaas wuxuu yahay muwaadin ka tirsan dawladda laga codsaday, haddii uu qabo sharcigeeda gudaha si loo waafaqo codsiyada sharcigan, marka ay dabaqayso dawaladda xubinta ah ee codstay. Iyadoo ay tahay waajib-ahaanshaha fulinta ciqaabta shariciga dalkeeda codsashada ama wixii ka haray.

14. Qof kasta oo khuseeya hab-raaca dacwadaha lagu qaadayo fal-dembiyeed kasta oo qodobkani dabaqayo waxaa loo dammaanad-qaadayaa in si cadaalad ah loola dhaqmayo dhammaan heerarka dacwadaha, oo ay kujiraan dhammaan xuquuqaha iyo dammaanadda sida uu qabo sharciga Dawladda xubinta ah ee uu joogo dhulkeeda qofkaasi.

15. Wax Heshiiskan ah looma fasirayo in lagu soo rogay waajib ka-saarid wareejin haddii dawladda xubinta ah ee la codsaday uu leeyahay

sababo xoojinayo oo maan-gal ah in codsigan loo sameeyey ujeeddo maxkamadayn ama ciqaabid qofka sabab la xiriirta jinsi ahaan, sinjigiisa, diintiisa, dhalasho, asal ama fikrado siyaasadeed ama u-hoggaansanaanta codsiga waxay u horseedaysaa nacaybka qofka ee mid kamid ah sababahan dartood.

16. Dawladaha xubnaha ah uma bannaana inay diidaan codsi ku aaddan wareejin iyadoo ku saleyneysa oo keliya in dembigu sidoo kale uu ku lug leeyahay arrimo dhaqaale.

17. Ka hor diidmada wareejinta, Dawladda xubinta ah waxay, haddii ay habboon tahay, la-tashanaysaa Dawladda xubinta ah ee codsatay si ay u siiso fursad ku filan oo ay ku soo bandhigto fikradeeda iyo inay soo gudbiso macluumaadka la xiriira cedeynta.

18. Dawladaha Xubnaha ah waa in ay isku dayaan in ay soo gabagabeeyaan heshiisyo laba-geesood ah iyo heshiisyo dhinacyo badan leh ama habka loo fulinayo ama kor loogu qaadayo wareejin wax-ku-ool ah.

QODOBKA 45AAD
WAREEJINTA XUKUMANEYAASHA

Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelin karaan gelitaanka heshiis laba-geesood ah ama in ka badan oo ku saabsan wareejinta dadka lagu xukumay ciqaab xabsi ama ciqaab kale oo xoriyad-ka-qaadis ah, in ay galeen falal-dembiyeed si waafaqsan Heshiiskan si ay halkaas ugu dhammeystaan muddada xabsiga lagu xukumay.

QODOBKA 46AAD
ISKAASHIGA SHARCI EE WADAAGGA AH

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay qaarkood qaarka kale siin karaan taalmo sharci oo wadaag ah xilliga lagu jiro baaritaanka, daba-galka iyo maxkamadeynta la xiriirta fal-dembiyeedyada lagu xusay Heshiiskan.

2. Iskaashiga Sharci ee wadaagga ah waxaa loo bixinayaa sida ugu fiican iyadoo la raacayo shuruucda dawladda xubinta ah ee codsigaas heshay iyo heshiisyada, axdiyada la xiriira arrintan. Marka la joogo baaritaanka, daba-galka iyo maxkamadeynta gaarka ah ee fal-dembiyeedyada ay bannaan tahay in lagu qaado qofka sharciga ah, si waafaqsan Qodobka 26aad ee heshiiskan, ee dawladda xubinta ah ee codsanaysa.

3. Waxaa la oggol yahay in la codsado kaalmo sharci ee wadaag ah marka lagu bixinayo si waafaqsan qodobkan, ee ujeeddooyinkan soo socda:

(a) helidda caddeymo ama marag-fur dad;

(b) gaarsiinta dokumentiyada Garsoorka;

(c) fulinta hawlaha baaritaan, xannibaad, iyo xayiraad;

(d) baaritaanka walxaha iyo goobaha;

(e) bixinta xogaha, walxaha, caddeymaha iyo qiimeynta xeel-dheereyaasha;

(f) bixinta asalka iyo nuqulada la xiriira oo ay ku jiraan diiwaanada dawladda, kuwa maaliyada iyo bankiyada diiwaanada shirkadaha, xarumaha ganacsiga;

(g) caddeynta faa'iidooyinka laga helay fal-dembiyeedyada, hantida, walxaha, agabyada kale, ama waxyaabaha kale ee ujeeddada tahay in wax lagu caddeeyo;

(h) fududeynta soo-taagidda dembileyaasha si iskood ah dawladda xubinta ah ee codsatay;

(i) hab walba oo iskaashi ah oo aan ka hor-imaanayn shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee heshay codsiga;

(j) caddeynta faa'iidooyinka fal-dembiyeedka sida ku cad qodobbada Cutubka 5aad ee heshiiskan, xannibaadda iyo raad-raaca; iyo

(k) dib-u-soo-celinta Hantida sida ku cad Qodobka 5aad ee heshiiskan.

4. Iyadoo aan wax loo dhimeyn shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah Laamaha u xilsaaran dawladda xubinta ah iyadoo aan helin wax codsi ah waxay u diri kartaa xogaha la xiriira fal-dembiyeedyada laamaha u xilsaaran ee dawladda kale ee xubinta ah, marka ay u aragto in xogahaasi gacan ka siin karaan dawladaasi in ay sameyso baaritaan iyo maxkamadeyn ku dhammaanaysa si guul ah, ama ay keento in loo gudbiyo dawladda xubinta ah ee kale codsi waafaqsan Heshiiskan.

5. Laamaha ay khuseyso ee helaysa xogaha waa in ay qarisaa xogahaasi, si ku-meel-gaar ah, ama waxay ku soo rogeysaa xadidaad isticmaal ka xogahaasi. Waxaase ka reebneyn dawladda xubinta ah ee codsiga heshay in ay faafiso xogahaasi si ay u bariyeesho qof eedeysane ah, marka ay halkaasi joogto dawladda xubinta ee heshay codsiga waxay gaarsiinaysaa dawladda kale ee xubinta ah ee soo dirtay codsiga inta aysan faafineyso xogahaasi, waxay la tashaneysaa dawladda xubinta ah ee soo dirtay codsiga haddii sidaa laga soo codsado. Haddii ay ku dhici weyso sidaas xaalad gaar ah awgeed,

Dawladda Xubinta ah ee heshay codsiga waxay gaarsiineysaa dawladda xubinta ah ee soo dirsatay codsiga faafinta xogahaasi si daahid-la'aan ah.

6. Axkaamta ku xusan qodobkan ma taabanayso waajibaadka ka dhalanaya heshiis kale, oo labo-geesood ah ama in ka badan ee xukumaya ama xukumi doona qeyb ahaan ama dhammaan iskaashiga sharciga ee wadaagga ah.

7. Faqradaha 9aad ilaa 20aad ee qodobkan ayaa lagu dabaqayaa codsiyada lagu soo gudbiyo si waafaqsan qodobkan, haddii dawladaha xubnaha uu khuseeyo aysan ku xirneyn heshiis is-dhaafsi kaalmo sharci. Haddii ay dawladaha xubnaha ku xiran yihiin heshiis noocaasi ah, waxaa waajib ku ah in ay dhaqan-geliyaan axkaamta ku aaddan ee heshiiskaas, haddii aysan dawladaha xubnaha isku raacin dhaqan-gelinta faqradaha 9aad ilaa 29aad ee qodobkan bedelkiisa. Waxaa si adag loogu boorinayaa dawladaha xubnaha ah in ay dhaqan-geliyaan faqradahaan haddii ay u sahlan tahay.

8. Dawladaha Xubnaha ah, waxaa ka-reebban in ay diiidaan bixinta kaalmo sharciga ee wadaagga ah, si waafaqsan qodobkan iyagoo xujo ka dhiganaya qarsoodidda Bankiyada.

9. (a) Dawladda xubinta ee heshay codsiga rabtana inay aqbasho codsiga kaalmada sharciga, si waafaqsan qodobkan iyadoo ka maran is-dhex-gelinta fal-dembiyeedyada, waxay isha ku haynaysaa ujeeddada Heshiiskan sida lagu soo caddeeyey Qodobka 1aad ee heshiiskan; iyo

(b) Dawladda xubinta ah, waxaa u bannaan inay diido bixinta kaalmada sharci iyadoo la dhaqan-gelinayo is-dhex-galka dembiyada sida ku cad qodobkan.

10. Waxaa la oggol yahay wareejinta qof walba oo xayiran ama looga xukumay ciqaab dhul dawlad xubin ah lagana doonayo inuu yimaado dawlad xubin ah oo kale si loo aqoonsado ama uu u bixiyo marag-fur, ama uu gacan ka geysan karo sidii loo heli lahaa caddeymo looga gol-leeyahay baaritaan, dabagal ama maxkamadeyn ku saabsan fal-dembiyeedyada ku jira heshiiskan, haddii labadan shardi ee soo socda la helo:

(a) oggolaanshaha qofkaasi si xor iyo oggaal leh; iyo

(b) heshiiska laamaha ay khuseyso ee labada dawladood oo xubnaha ah, iyagoo ku xiraya shuruudaha ay u arkaan inay ku habboon yihiin.

11. Ujeeddooyinka faqradda 10aad ee Qodobkan:

(a) dawladda xubinta ah ee laga soo wareejiyey qofka waxay u xilsaaran tahay kuna waajib ah inay hayso, haddii aysan dawladda xubinta ah ee laga soo wareejiyey qofkaasi diidin ama laga oggolaansho-weydiin;
(b) dawladda xubinta ah ee laga soo wareejiyey qofka waa inay u fulisaa si aan dib-u-dhac lahayn waajibka ka saaran dib-ugu-celinta gacanta dawladda xubinta ah ee laga soo wareejiyey sida horey la iskugu raacay ama si walba oo kale. Laamaha ay khuseyso ee labo dawladood oo xubino ah;
(c) dawladda xubinta ah ee lagu soo wareejiyey qofka waxaa ka-reebban inay shardi uga dhigto dawladda xubinta ah ee wareejisay bilaabista hab-raaca la-wareegidda si dib loogu celiyo qofkaas; iyo
(d) waxaa lagu tirinayaa muddada uu qofka ku xiran yahay dawladda xubinta ah ee lagu soo wareejiyey inay ku jirto muddada ciqaabta lagaga xukumay dawladda kale ee xubinta ah ee laga soo wareejiyey.

12. Ma bannaana in la daba-galo qofka lagu soo wareejiyo si waafaqsan faqradaha 10aad iyo 11aad ee qodobkan, jinsiyada uu rabo ha wato, ama in la xayiro, ama la ciqaabo ama in lagu soo rogo xadidaad xoriyad-ka-qaadis dhulka dawladda xubinta loo wareejiyey, sabab ah fal ama eedeyn hore oo ah ka-bixid dhulka dawladda xubinta ah ee loo wareejiyey. Haddii aysan oggolaan dawladda xubinta ah ee loo soo wareejiyey.

13. Dawlad walba oo xubin ah waxay magacaabeysaa awood dhexe oo qaadata mas'uuliyada iyo qabashada codsiyada kaalmo sharci oo wadaag ah, sidoo kale fulinta codsiyadaas iyo u gudbinta laamaha ay khuseyso fulinteeda. Haddiise dawladda xubinta ah leedahay goob gaar ah ama gobol gaar ah oo leh nidaam madax-bannaan ee kaalmo sharci oo wadaag ah waxaa u bannaan dawladdaas inay magacaabato kaligeed awood dhexe oo qabata isla hawlaha ay qabtaan gobolkaas, dawladda dhexena waxay qaadaneysaa fulinta codsiyada ay heshay iyo inay si degdeg u gudbiso hab munaasib ah. Dawladda dhexe waxay u gudbineysaa codsiga laamaha ay khuseyso fulinta codsigaas. Iyadoo ku dhiiri-gelinaysa laamaha ay khuseyso fulinta codsigaas sida degdeg ah oo nabad ah. waxaa la gaarsiinayaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay iyadoo loo marayo laanta dhexe eek u magacaaban ujeedkan waqtiga ay dawladda xubinta ah gudbineyso dukumentiyadeeda meel-marinta heshiiskan ama aqbalaadda ama oggolaanshaha ama kamid-noqoshada. Codsiyada kaalmada sharciga ee wadaaga ah iyo dhambaalada la xiriiira waxaa lagu hagaajinayaa ama loo dirayaa laamaha dhexe oo ay soo magacaabayaan dawladda xubinta ah. Codsiyadan wax uma dhimayaan xaqa dawladda xubinta ee ah inay ku shardiso ku hagaajinta codsiyada iyo

dhambaalda iyadoo loo marayo marinnada diblamaasiyadeed. Xaaladaha degdega ah haddii ay labada dawladood ee xubinta ah isku-raacaan inay isku mariyaan ururka Booliska caalamiga eek a hortagga dembiyada, haddii ay suurta-gal tahay.

14. Codsiyada waxaa lagu soo-gudbinaa iyagoo qoraal ah, ama haddii ay suurta-gal tahay hab kale oo abuuri kara dukumenti qoraal ah, luqada laga oggol yahay dawladda xubinta ah ee codsiga loo diray sidoo kale inuu qoraalka noqdo mid ay dawladda xubinta hubin karto sax ahaanshihiisa. Waxaa loogu gudbinaa Xoghayaha Guud ee Qaramada Midoobay luqad ama luqadaha laga oggol yahay dawladaha xubnaha ah marka ay gudbineyso warqada oggolaanshaha heshiiskan ama aqbalidda ama sixiixidda ama kamid-noqoshada. Xaaladaha degdega ah marka labo dawladood isku waafaqaan sidaas waxaa la oggol yahay in codsiyada laga soo gudbiyo si hadal ah (oral) kaddibna laga dhigo qoraal.

15. Codsiga kaalmada sharciga wadaagga ah wuxuu ka koobnaanayaa:
(a) Aqoonsiga dawladda codsiga gudbineysa;
(b) Mawduuca iyo nooca baaritaanka, dacwad-qaadista ama hab-raaca garsoorka ee la xiriira iyo magaca maamulka qabanaya baaritaanka, dacwad-qaadista iyo hab-raaca garsoorka;
(c) Qoraal kooban oo la xiriira mawduuca, marka laga reebo waxyaabaha ku saabsan codsiyada lagu soo gudbiyey ujeeddo ah gaarsiinta dekumentiyada garsoorka;
(d) Sharraxaad kaalmada la sheegay iyo faahfaahinta hab-raacyada gaarka ah oo ay dawladda xubinta ah ee codsanaysa rabto inay raacdo;
(e) Aqoonsiga qofka ay khuseyso, halka uu joogo iyo jinsiyadiisa, marka ay suurta-gal tahay; iyo
(f) Ujeeddada laga doonayo caddeymaha, xogta ama hab-raacyada.

16. Dawladda xubinta ah, oo codsiga heshay waxaa loo oggol yahay inay dalbato xogaha dheeriga ah marka ay u aragto inuu yahay lagama-maarmaan fulinta codsiga si waafaqsan shuruucdeeda gudaha, ama suurta-gal tahay inay fududeyso fulinteeda.

17. Codsiyada waxaa loo fulinayaa si waafaqsan shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee heshay codsiga, iyo sidoo kale si waafaqsan hab-raaca lu xaqiddan codsiga, marka ay u suurta-gal tahay haddii uusan ka hor-imaanayn shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee heshay codsiga.

18. Haddii qof jooga dhulka dawlad xubin ah, lagana rabo in la maqlo marag-furkiisa, ama xeel-dheere looga baahdo inuu horyimaado laamaha garsoorka dawlad kale oo xubin ah ayna suurta-gal tahay lana jaan-qaadaysa mabaadi'da asaasiga ah ee shuruucda gudaha dalkaas, waxaa u bannaan dawladda xubinta ah ee kowaad inay oggolaato, iyadoo fulinaysa codsiga dawladda xubinta ah ee kale. Qabashada fadhi dhageysi iyadoo la adeegsanayo fogaan-arag (video) haddii ay adkaato hor keenista qofka garsoorka dawlad xubinta ah ee codsiga leh, waxaa u bannaan labada dawladood ee xubnaha ah inay isku raacaan maamulidda fadhiga gar-maqalka laanta garsoorka ee dawladda xubinta ah ee codsiga wadata ayna goobjoog ka noqdaan laamaha garsoorka ee dawladda xubinta ah ee heshay codsiga.

19. Dawladda Xubinta ah ee codsiga leh uma bannaana in xogaha iyo caddeymaha ay ka heshay dawladda xubinta ee codsiga heshay inay u isticmaasho baaritaano iyo maxkameyn aan ku jirin codsiga ay soo gudbisay iyadoo aan oggolaansho hore ka haysanin dawladda xubinta ah ee codsiga loo gudbiyey. Faqraddan kuma jiro wax u diidayo dawladda xubinta ee codsiga gudbisay inay faafiso hab-raacyada, xogaha iyo caddeymaha barriyeelayo qof eedeysane ah. Marka halkaas marayso dawladda xubinta ah ee codsanaysa inta aysan faafinta xogaha iyo caddeymaha waa inay ogeysiisaa kana tala-gelisaa dawladda xubinta ee codsiga heshay marka laga dalbado. Haddii ay suura-geli weyso iyadoo jirto xaalad gaar ah waxay ogeysiinaysaa dawladda xubinta ah ee codsiga heshay inay faafiso si tartiib ah.

20. Waxaa u bannaan dawladda xubinta ah ee codsiga leh inay ku shardiso dawladda xubinta ah ee codsiga heshay inay ilaaliso sir ahaanshaha codsiga iyo ujeedkiisa, marka laga reebo inta lagama-maarmaanka u ah fulintiisa. Haddii ay noqon weyso dawladda xubinta ah ee codsiga heshay waa inay u hoggaansantaa shardiga qarsoodida, waxaa waajib ku ah gaarsiinta dawladda xubinta ah ee codsiga leh si degdeg ah.

21. Waxaa bannaan diidmada bixinta kaalmada sharciga ee wadaagga ah haddii ay jiraan arrimahan soo socda:

a) Haddii aan lagu soo-gudbin si waafaqsan axkaamta qodobkan;
b) Haddii ay dawladda xubinta ah ee heshay codsiga u aragto fulintiisa mid wax-u-dhimaya madax-bannaanideeda, nabadgelyadeeda, nidaamkeeda guud iyo danaheeda asaasiga ah;

c) Haddii uu shuruucda gudaha ee dawladda xubinta ah ee codsiga heshay ka reebayo laamaheeda inay fuliyaan hab-raacyada laga codsaday ee ku saabsan fal-dembiyeedyada la mid ka ah, xitaa haddii uu fal-dembiyeedkaasi ku jiro gacanta laamaha garsoorka si baaritaan, iyo daba-gal loogu sameeyo; iyo
d) Haddii ka-jawaabista codsiga ay ka hor-imaanayso nidaamka sharci ee dawladda xubinta ah ee codsiga heshay inta ku saabsan kaalmada sharci ee wadaagga ah.

22. Dawladda xubinta ah uma bannaana inay u diido codsiga kaalmada sharciga ee wadaagga ah inuu la xiriiro arrimo maaliyadeed awgeed.

23. Waa in la sheegaa sababaha diidmo walba oo ku saabsan kaalmada sharci ee wadaagga ah.

24. Dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waxay fulinaysaa codsiga kaalmada sharci ee wadaagga ah xilliga ugu sokeeya ee suurta-galka ah, waxay ilaalinaysaa waqtiga ugu gaaban oo ay codsatay dawladda xubinta ah, waxaa la rabaa in sababaha lagu sheego codsiga, dawladda xubinta ah ee codsiga leh waxaa u bannaan inay u soo gudbiso weydiimaheeda maan-galka ah si ay u hesho xoggo ku aaddan hab-raacyada ay u martay dawladda xubinta ee codsiga heshay ka-jawaabidda codsigeeda iyo hormaradda ay ka sameysay arrintaas. Dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waa inay kaga jawaabta weydiimahaas iyo horumarka laga gaaray fulinta codsiga. Dawladda xubinta ah ee codsanaysa waxay si degdeg ah u gaarsiinaysaa codsigeeda ah baahida ay u qabto kaalmo sharci.

25. Dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waxaa u bannaan inay dib u dhigto kaalmada sharci ee wadaagga ah inay ka hor-imaanayso baaritaanada iyo hab-raaca garsoor ee socda awgeed.

26. Ka hor inta aan la diidin codsiga sida ku cad faqradda 21aad ee qodobkan ama aan dib loo dhigin sida ku xusan faqradda 25aad ee qodobkan, dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waxay la tashan doontaa dawladda xubinta ee gudbisay codsiga si ay uga fiirsato ay bixin karta caawinaad sharci, iyadoo ay ku xiran tahay shuruudaha iyo shuruudaha sida ay u aragto in loo baahan yahay. Haddii dawladda xubinta ah ee codsanaysa ay aqbasho caawinnaadda ku saleysan shuruudahaas, waa inuu u hoggaansamaa leh shuruudaha.

27. Iyadoo aan wax loo dhimmeyn dabaqaadda faqradda 12aad ee qodobkan, ma bannaano in la daba-galo, la soo xiro ama la ciqaabo markhaati ama xeel-dheere ama qof kale, iyadoo laga duulayo codsiga dawladda xubinta ah ee codsiga leh iany soo gudbiso marag-furkeeda hab-raaca garsoor, ama in ay gacan ka geystaan baaritaanka iyo daba-galka iyo hab-raaca garsoorka ka jira dhulka dawladda xubinta ah ee codsatay.

28. Dawladda xubinta ah ee codsiga heshay waxay qaadaneysaa bixinta lacagaha caadiga ah ee ku baxa fulinta codsiga, haddii aysan labada dawladood ee xubnaha ah aysan isku raacin si kale. Haddiise fulinta codsiga uu ku baxayo kharash fara badan labada dawladood ee xubnaha ah ay khuseyso arrinta ayaa ka wada-tashanayo xadididda iyo fulinta qodobada iyo shuruudaha lagu heshiiyey, iyo sidoo kale qaabka loo bixinayo kharashaadkaas.

29. Dawladda Xubinta ah ee laga codsaday:

(a) waxay siinaysaa dawladda xubinta ah ee codsiga soo gudbisay nuqullo kamid ah diiwaanada, dekumentiyada iyo xogaha dawladeed ee u oggolaanayo shuruucda dalkaas inay helaan dadweynahooda;

(b) dawladda xubinta ah ee heshay codsiga waxaa loo oggol yahay inay siiso dawladda xubinta ah ee soo gudbisay codsiga dhammaan ama qeyb kamid ah shuruudaha ay u aragto inay habboon yihiin, nuqullo kamid ah diiwaanada, dekumentiyada iyo xogaha dawladeed ee u oggolaanaya shuruucda dalkaas inay helaan dadweynahooda.

30. Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelinayaan, haddii ay lama-huraan tahay, suurta-galnimada in ay dhammeystiraan heshiisyo iyo af-garadyo labo-geesood ah ama ka badan oo u adeegaya ujeeddooyinka dhaqan-gelinta Qodobkan ama horumarinta axkaamtiisa.

QODOBKA 47AAD
WAREEJINTA DACWADAHA FAL-DEMBIYEEDYADA

Dawladaha Xubnaha ah waxay tixgelinayaan suurta-galnimada isu-wareejinta dhexdooda ee maxkamadaynta fal-dembiyeed lagu abuuray si waafaqsan Heshiiskan ee dacwadaha wareejintaas loo tixgelinayo in ay noqdaan kuwo ku saleysan danaha maamul hab-sami leh ee cadaalad, gaar ahaan dacwadaha ay ku shuqlan yihiin dhawr ikhtisaas, oo looga gol-leeyahay in diirrada la saaro maxkamadeynta.

QODOBKA 48AAD
ISKAASHIGA FULINTA SHARCIGA

1. Dawladaha Xubnaha ah waxay yeelanayaan iska-kaashi adag oo dhexdooda ah, si ku aaddan nidaamyadooda gudaha ee sharci iyo maamul, si ay u horumariyaan waxtarnimada falka fulinta sharciga si looga hortago fal-dembiyeedyada ku xusan Heshiiskan. Dawalada Xubnaha ah waxay, si gaar ah, u qaadayaan tallaabooyin waxtar leh:
   (a) In la horumariyo iyo, haddii ay lama-huraan tahay, in la abuuro marino xiriir ee hay'adahooda awoodda leh, wakaaladaha iyo adeegyada si loo fududeeyo is-dhaafsiga xogaha si nabdoon oo degdeg ah dhammaan qeybaha fal-dembiyeedka ee ku xusan Heshiiskan, sida, haddii ay dawladaha xubnaha ah ee ay khusayso la habboonaato, isku-xirnaansho hawlaha fal-dembiyeed ee kale;
   (b) In la kaashado dawladaha kale ee xubnaha ah, si loo fuliyo baaritaano la xiriira fal-dembiyeedyada ku xusan Heshiiskan ee khuseeya:
      (i) Aqoonsiga dadka looga shakisan yahay inay gacan ku leeyihiin fal-dembiyeedka iyo meelaha laga heli karo iyo hawlahooda, sidoo kale goobaha ay ku sugan yihiin dadka kale ee uu khuseeyo;
      (ii) Dhaqdhaqaaqa faa'iidada laga helay fal-dembiyeedka iyo hantida laga helo gelidda fal-dembiyeedka; iyo
      (iii) Dhaqdhaqaaqa hantida ama agabka ama qalabka kale ee loo isticmaalay ama ujeeddada ahayd in lagu galo fal-dembiyeed;
   (c) Sameynta marka lagama-maarmaanka ay tahay in la bixiyo noocyada iyo tirada walxaha iyadoo ujeedka yahay falanqeyn iyo baaritaan;
   (d) Dawladaha Xubnaha ah waxay yeelanayaan isweydaarsi xogaha marinnada iyo hababka loo isticmaalo fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan, sidoo kale isticmaalka dhalashooyinka been-abuurka ah iyo dukumentiyada been-abuurka ah iyo hababka kale ee qarinta hawlaha;
   (e) Si loo fududeeyo isku-duwid wax-ku-ool ah oo u dhexeysa mas'uuliyiinta awoodda u leh, wakaaladaha iyo adeegyada si loo dardar-geliyo is-weydaarsiga saraakiisha iyo xeel-dheereyaasha kale, si waafaqsan heshiisyada labo-geesoodka ah ama heshiisyada u dhexeeya Dawladaha Xubnaha ah; iyo
   (f) In la is-weydaarsado macluumaadka iyo isku-duwidda hawlaha maamul, iyo hab-raacyada ku habboon ee loo qaadayo iyadoo ujeeddada tahay ka-hortagga fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan;

2. Iyadoo la dhaqan-gelinayo heshiiskan, Dawladaha Xubnaha ah waxay gelayaan heshiisyo iyo is-af-garad labo-geesood ah ama in ka badan si ay iskaashi toos ah u yeeshaan laamaha ay khuseyso fulinta sharciga. Marka wax-

ka-bedel lagu saameynayo heshiiska iyo af-garadka jiro. Haddii uusan jirin heshiis iyo af-garad u dhexeeya Dawladaha Xubnaha ah oo ku saabsan iskaashiga sharci waxaa u bannaan dawladda xubinta ah inay heshiiskan ka dhigto mid bud-dhig u ah iskaashiga sharci ee wadaagga ah marka la fulinayo sharciga ujeedkiisa yahay fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan. Dawladaha Xubnaha ah waxay ka faa'ideysanayaan heshiisyada iyo af-garadka, ayna ku jiraan hay'adaha caalamiga ah iyo kuwa gobolka si loo adkeeyo xiriirka iskaashi ee dawladaha ay khuseyso.

3. Dawladaha Xubnaha ah waxay yeelanayaan iskaashi inta ay awoodooda gaarsiisan tahay si ay uga hortagaan fal-dembiyeedyada ku xusan heshiiskan ee lagu galay aaladaha casriga ah.

QODOBKA 49^AAD
BAARITAANNADA WADAAGGA AH

Dawladda xubinta ah waxay eegaysaa gellida heshiisyo iyo af-garadyo labo-geesood ah ama ka badan oo u oggolaanayo laamaha ay khuseyso inay asaasaan hay'ado baaritaan oo wadaag ah, daba-gal iyo garsoor u dhexeeya dawlad iyo wax ka badan. Marka aysan wax heshiis ah ama is-af-garasho oo arrintan ku saabsan waxaa la oggol yahay sameynta baaritaan wadaag ah sida ay tahayba. Dawladaha Xubnaha ah oo ay khuseyso waxay damaanad-qaadayaan ilaalinta iyo ixtiraamka madax-banaanida dawladda xubinta ah ee baaritaannada ka wada dhulkeeda.

QODOBKA 50^AAD
HAB-RAACYADA BAARITAANKA GAARKA AH

1. Si loola dagaallamo musuq-maasuqa si hufan, Dawlad kasta oo Xubin ah, Awoodda oggolaansho ee mabaadi'da asaasiga ah ee sharciyadeeda iyadoo la raacayo shuruudaha uu farayo sharcigeeda, qaado tallaabooyinkan oo kale sida loogu baahan yahay, iyadoo loo adeegsanayo, in loo oggolaado adeegsiga munaasib ah Mas'uuliyiinta karti u leh gaarsiinta la xakameeyey iyo, meeshii ay u aragto inay ku habboon tahay, mid kale farsamooyinka baarista gaarka ah, sida elektiroonigga ama qaabab kale oo ka war-haynta iyo baadhitaan hawleed, gudaha dhulkiisa, iyo in loo oggolaado oggolaanshaha gudaha maxkamadda caddeynta laga soo saaray halkaas.

2. Ujeeddada baarista dembiyada kooban ee Heshiiskani gaaray, Dawladaha Xubnaha ah waxaa lagu dhiirri-gelinayaa inay soo gabagabeeyaan, marka lagama-maarmaanka ay tahay, heshiisyada, dhinacyo badan ama

qabanqaabooyin loo adeegsanayo baaritaanka noocaas ah hab-raacyada macnaha guud ee iskaashiga heerka caalamiga ah. Heshiisyada noocan oo kale ah ama qabanqaabooyinka waa in la soo gabagabeeyaa lana hirgeliyaa si buuxda u-hoggaansanaanta mabda'a sinnaanta madax-bannaanida dawladaha, waa in si adag loogu fuliyaa iyadoo la raacayo shuruudaha heshiisyadaas.

3. Marka aanu jirin heshiiska ku xusan faqradda (2) ee qodobkan, go'aannada loo adeegsado hab-raacyada baarista khaaska ah ee Heerka caalamiga ah waa in lagu saleeyaa kiis-kiis iyadoo ay suurta-gal tahay, markii loo baahdo, tixgeliyaana abaabulka dhaqaale iyo fahamka si qaddarin leh Ku dhaqmidda awoodda Dawladaha Xubnaha ah.

4. Go'aannada loo adeegsado keenista la xakameynayo heerarka caalamiga ah, waxaa oggolaanaya Dawladaha Xubnaha ka ah heshiiska, waxaa kamid ah habab ay kamid yihiin go'aannadata iyo u oggolaanshaha badeecadda ama lacagaha inay sii socdaan ama laga saaro ama lagu beddelo gabi ahaan.

CUTUBKA V
SOO-CELINTA HANTIDA MUUQATA

QODOBKA 51AAD
XUKUN GUUD

Soo-celinta hantida sida ku xusan cutubkan waa mabda' asaas u ah heshiiska, iyo Dawladaha Xubnaha ah waa inay midba midka kale u awoodi karo iskaashi dhinacan oo kale ah.

QODOBKA 52AAD
KA-HORTAGGA IYO OGAANSHADA WAREEJINTA FAA'IIDOOYINKA FAL-DEMBIYEEDKA

1. Iyadoon ka marnayn qodobka 14aad ee heshiiskan, Dawlad kasta waxay qaadaysaa talaabooyinka loo baahdo, si waafaqsan shuruucdeeda, hay'adaha maaliyadda u baahan xaddiddaada si loo xaqiijiyo aqoonsiga macaamiisha, inay qaadaan tallaabooyin suurta-gal ah, si loo go'aamiyo aqoonsiga milkiilayaasha ka faa'iida Lacagta lagu shubay xisaabaadka qiimahoodu sareeya iyo in la sameeyo kor-joogteyn kor loogu qaadayo akoonadaas oo la dalbaday laguna matalayo shakhsiyaadka, ku aaminay shaqooyin caan ah oo bulshada ka tirsan iyo xubnaha qoyskooda iyo xiritaan dhow iskaashatada.

Baaritaanka la xoojinayo waa in loo sababeeyaa si suurta-gal ah ee loogu talo-galay in lagu ogaado shaki macaamil ganacsi oo loogu talo-galay in lagu wargaliyo mas'uuliyiinta kartida leh mana aha inay ahaato waxaa loo dhisay sidii looga niyad-jebin lahaa ama looga mabnuuci lahaa hay'adaha maaliyadeed inay ganacsi sameeyaan oo ay la jiraan macaamiil sharci ah.

2. Si loo fududeeyo fulinta qorshaha qoran ee faqradda (1) ee qodobkan, Dawlad kasta, si waafaqsan shuruucdeeda, waxa dhiirri-geliyey dadaallo ku habboon oo ka socda gobolka, dhex-dhexaadin iyo dhinacyo badan ururada ka dhanka ah lacagta la dhaqay.
   (a) Bixinta tallaabooyinka ku saabsan noocyada shakhsiyad qaanuuneed, xisaabaadka hay'adaha maaliyadeed ee ku jira xaddidiisa sharciga ayaa la filayaa inay ku dabaqaan kor-u-qaadida kormeerka, noocyada xisaabaadka iyo macaamil ganacsiyeedka si gaar ah loogu bixiyo feejignaan iyo furitaan xisaabeed oo munaasib ah, dayactir iyo diiwaan-geliin tallaabooyin la qaado oo la xiriira xisaabaadkaas; iyo
   (b) Gaarsiinta hay'adaha maaliyadda ka tirsan ikhtsaasyeyada garsoorka marka xukunka lagu dhisayo codsi Dawlad xubin ka ah oo kale ama iskiis u gaar ah, ee aqoonsiga khaas ahaan kuwa dabiiciga ah ama kuwa sharciga ah oo akoonnada ay hay'addu yeelan doonto lala xisaabtami doono, waxaa la rajeynayaa in lagu dabaqo baaritaan kor loo qaaday, marka lagu daro kuwa dhaqaalaha haysta Hay'aduhu haddii kale way garan karaan.
3. Sida ku cad faqradda (2)(b) ee qodobkan, Dawlad kasta waxay yeelanaysaa fulin tallaabooyin lagu hubinayo in hay'adda maaliyada ay ilaalin ku filan diiwaan-geliyaan, muddo ku habboon oo waqti ah, akoonnada iyo macaamillada ku lug leh shakhsiyaadka lagu sheegay faqradda (1) ee qodobkan, oo ay ugu yar tahay, waxaa ku jira macluumaad la xiriira aqoonsiga macmiilka, iyo inta suurta-gal ah, milkiilaha waxtarka leh.

4. Ujeeddada laga leeyahay ka-hortagida iyo ogaanshaha wareejinta faa'iidooyinka fal-dembiyada lagu asaasay si waafaqsan hesiiska, Dawlad kasta waxay yeelanaysaa qorsha tallaabooyin ku habboon oo wax-ku-ool ah si looga hortago, iyadoo la kaashanayo hayadaha sharciga ah iyo kormeerka, saameynta maamullo aan lahayn Jiritaankaas oo aan ku lug lahayn ururo maaliyadeed nidaamsan. Waxaa intaa dheer, Qeybaha Dawladaha ayaa laga yaabaa inay tixgeliyaan inay u baahan yihiin hay'adaha maaliyadeed inay diidaan inay galaan in la sii wado ama la sii socodsiiyo xiriir banki oo xiriir la leh.

5. Dawlad kasta waxay tixgelin doontaa asaaska, si waafaqsan sharcdeeda, in la unko nidaam wax-ku-ool ah oo maaliyadeed looguna talo-galay shaqaalaha guud ee rasmiga ah. Dawlad kasta oo xubin ah waxay sidoo kale tixgelinaysaa qaadista tallaabooyinka sida lagama-maarmaanka u ah oggolaanshaha awoodaheeda gaarka ah inay macluumaadkaas la wadaagaan mas'uuliyiinta kartida u leh Qeybaha kale ee Dawladaha Xubnaha ah marka ay lagama-maarmaan tahay in la hubiyo faa'iidooyinka laga helay fal-dembiyeedka, si waafaqsan heshiiskan.

6. Dawlad kasta waxay tixgelinaysaa qaadidda tallaabooyinkaas, iyadoo waafaqsan shuruucdeeda, laguna waajib yeelo shaqaalaha guud Saraakiisha dano ka leh koonto maaliyadeed oo waddan shisheeye ah looga warbixiyo xiriirkaas inuu la leeyahay mas'uuliyiinta ku habboon iyo diiwaannada habboon ee la xiriira xisaabaadkooda.

QODOBKA 53AAD
TALLAABOOYINKA DIB-U-SOO-CELINTA TOOSKA AH EE HANTIDA

Dawlad kasta waa inay waafajisaa shuruucdeeda in ay:

a. Qaado tallaabooyin lagama-maarmaan u ah inay u oggolaato Dawlad dhinac kale in lagu oogo dacwad madani ah maxkamadda horteeda si loo caddeeyo lahaansho hanti lagu helay fal-dembiyeedka la asaasay iyadoo la raacayo heshiiskan, ama si loo caddeeyo milkiyadahaas;
b. Qaado tallaabooyin lagama-maarmaan u ah in ay maxkamadda oggolaato si loo amro kuwa galay fal-dembiyadka, si waafaqsan heshiiskan in ay magdhaw bixiso dawladda dhinaca ka ah waxyeelada ka dhalatay fal-dembiyeedkaas;
c. Qaado qorshaha waajibka ah si ay u oggolaato maxkamaddeeda ama awoodeheeda gaarka ah, marka ay go'aansato qaadashada arrimaha soo baxay, si ay u aqoonsato dalabka dawlad dhinac kale ah ay la wareegto hantida laga helay fal-dembiyeed lagu asaasay si waafaqsan heshiiskan.

QODOBKA 54AAD
HAB-RAACYADA DIB-U-SOO-CELINTA HANTIDA IYADOO LOO MARAYO ISKAASHI CAALAMI AH EE DHINACYADA WADA-SHAQEYNTA LEH

1. Dawlad kasta, si uu u bixiyo iskaashi sharciyeed wadajirka ah sida ku xusan Qodobka 55aad ee heshiiskan oo la xiriira hantida laga helay fal-dembiyeedka uu galy iyadoo la waafajinayo heshiiskan ama la xiriirta hawsha, si waafaqsan shuruucdeeda waa in ay:

(a) Qaado waxa ku waajibinaya qorshaha saamaxaada, si awoodda gaarka ah loo fuliyo ama amarka la-wareegista ee ay soo saartay maxkamad Dawlad dhinac kale ah;

(b) Qaado waxa ku waajibinayo qorshaha saamaxaada, marka ay tahay ikhtisaaska garsooraha, inay amarto la-wareegista hantida asal ahaan shisheeye ah, iyadoo loo xukumayo arrimo fal-dembiyeed lacag dhaqis ah ama dembiyo kale, taa oo ka tirsan ikhtisaaskeeda garsoor ama hab-raacyo kale oo loo oggol yahay shuruucdeeda; iyo

(c) Iyadoo loo eegayo qaadista qorshaha saamaxaadda ka soo baxday la wareegidda hantidaas iyadoo aan dembi lagu xukumin dacwadaha suurto-galka ahayn sabab taasoo la xiriirta geeri, ama ka-carar, ama ka-maqnaansho ama xaalad kale oo munaasib ah.

2. Dawlad kasta oo xubin ka ah, si ay u suurawdo horudhac iskaashi sharci taasoo ku dhisan dalab la soo qadimayo iyadoo la dhaqan-gelinayo faqradda (2) ee qodobka (55) ee heshiiskan, si waafaqsan shuruucdeeda, waa in ay:

(a) Qaado waajibnimadka qorshaha saamaxaada awoodeheeda gaarka ah ee xannimaada ama xayiraad hantiyadeed, iyadoo lagu dhisayo amarka xannibaada ama xayiraada ka soo baxda maxkamada ama awoodda gaarka ah ee dawlad xubin ka ah asaaska suurta galka ah ee keenaya codsiga dawlad xubin ka ah oo la aamino iyadoo ay kala kulantay codsi, sababahaas oo dhammays tirayo qaadashada qorshaha qabiilkan in hantidaas ay u quduucdo si qaado ah amarka la-wareegista ah ujeeddooyinka faqradda (1)(b) ee qodobkan;

(b) Qaado waajibnimadka qorshaha saamaxaada awoodeheeda gaarka ah ee xannimaada ama xayiraad hantiyadeed, iyadoo lagu dhisayo amarka xannibaada ama xayiraada ka soo baxda maxkamada ama awoodda gaarka ah ee dawlad xubin ka ah asaaska suurta-galka ah ee keenaya codsiga dawlad xubin ka ah oo la aamino iyadoo ay kala kulantay codsi, sababahaas oo dhammays tirayo qaadashada qorshaha qabiilkan in hantidaas ay u quduucdo si qaado ah amarka la-wareegista ah ujeeddooyinka faqradda (1)(b) ee qodobkan;

(c) Iyadoo la eegayo qaadashada qorshahan laguna biirinayo saamaxaada si awoodeeda gaarka ah ay oogu ilaaliso hantidaas oo lala wareegayo awgeed, iyadoo lagu dhisayo tusaalahan ama tuhmo fal-dembiyeed la xiriira xayiraada hantidaas.

QODOBKA 56AAD
WADA-SHAQEYN GAAR AH

Iyadoo aan loo kala eexaneyn sharciga wadanka, dawlad kasta oo qeyb ka ah heshiiskan waxay ku dadaaleysaa inay qaado tallaabooyin ay ugu

oggolaaneyso inay ku gudbiso, iyadoo aan laga hor-imaanin baaritaankeeda, dacwad-qaadista ama nidaamka garsoorka, macluumaadka ku saabsan ka-hortagga dembiyada lagu asaasay si waafaqsan heshiiskan, dawladaha kale ee qeybta ka ah iyadoo aan horay loo sii sheegin codsi hore, marka ay u aragto siidaynta macluumaadka oo ay ka caawin karto dawladaha gobolka bilaabida ama sameynta baaritaannada, dacwad-qaadista ama habsami-u-socodka garsoorka, ama wax kasta oo ay codsadaan dawladaha gobolka ee lagu xusay cutubyada heshiiskan.

QODOBKA 57AAD
SOO-NOQOSHADA IYO TUURISTA HANTIDA

1. Hantida lagu wareejiyey dawladaha gobolka iyadoo la raacayo Qodobka 31 ama 55 ee heshiiskan, oo ay ku jiraan soo-celinta hantiyeed dawladaha gobolku usooceliyaan milkiilayaashii hore ee sharciga, waa in la siiyaa iyadoo la raacayo faqradda (3) ee Qodobkan, dawladaha gobolka iyadoo la raacayo qodobbada lagu sheegay qodobkan lagu heshiiyey Heshiis iyo sharciga. Dawlad kasta oo qeybta ka ah waxay asaasay sharci-dejin iyo talaabooyin kale ee lagama-maarmaanka u ah, iyadoo la raacayo mabaadi'da asaasiga ah ee sharcigeeda, si awood loogu siiyo mas'uuliyiinta awoodda u leh inay soo celiyaan hantida la la wareegay, iyagoo raacaya codsiyada ay soo gudbiyeen dawladaha kale ee qeybta ka ah, iyadoo la raacayo heshiiskan, lana tixgelinayo xuquuqda dhinac saddexaad si niyad-wanaag leh.

2. Sida ku xusan qodobbada 46aad iyo 55aad ee heshiiskan iyo faqradda (1) iyo (2) ee qodobkan, dawladaha qeybta ka ah waxaa laga codsanayaa: (a) Dhacdada lunsiga hantida dadweynaha ama ku-takri-falidda hantida guud sida ku xusan qodobbada 17aad iyo 23aad ee heshiiskan. Marka la wareejiyo sida ku xusan qodobka 55aad iyo ku saleysan xukunka kama dambaysta ah ee laga codsaday dawladaha gobolka, waxaa lagama-maarmaan ah in laga codsado dawladaha qeybta ka ah, iyaga oo ku celinaya hantida la wareejiyey ay codsaden dawladaha kale ee xafladda; (b) Marka laga hadlayo wixii ka soo baxa fal-dembiyeed kasta oo lagu xusay heshiiskan, wareejinta fulinta si waafaqsan qodobka 55aad ee heshiiskan iyadoo ku saleysan xukunka kama dambaysta ah ee looga codsanayo dawladaha Gobolka, shuruudaha looga tanaasuli karo dawladaha Gobolka codsiyadooda, soo-celinta hantida lala wareegay ee dawladaha Gobolka. Dhinacyada codsanaya, markay codsanayaan dawladaha qeybta ka ah inay si macquul ah u muujiyaan lahaanshiyaha hantida la la wareegayo ee dawladuhu codsadeen, iyo goorta la codsaday ama la aqoonsaday waxyeelada ka imaanaysa codsiga dawladaha oo ah asaaska soo-celinta hantida la wareejiyey; (c) si wadajir ah.

3. Xaaladaha kale, kala hormarinta ku soo-celinta hantida la gu wareejiyey codsigii dawladda, soo-celinta hantidaas milkiilayaashii hore ee sharciga lagu susay ama mag-dhaw dhibanayaasha dembiga laga galay.
MARKUU ARKAY: Qodobka 64 (1) ee Dastuurka Federaalka oo xeeriyey in "Xubnaha Golaha Shacabka waxaa si toos ah, qarsoodi ah, oo madaxbannaan kusoo dooranaya shacbka Jamhuuriyadda Federaalka ee Somaaliya" iyo Qodobka 72 (1) ee Dastuurka Federaalka oo xeeriyey in "Xubnaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka ay si toos ah, qarsoodi ah oo madaxbannaan usoo dooranayo shacbka Dawladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka";

MARKUU DHEGEYSTAY: Warbixinta Guddiga Madaxabannaan ee Doorashooyinka Qaranka ee ku saabsanayd doorashada tooska ah, qarsoodi ah, oo madaxbannan ee 2020-2021 uu ka jeediyey Golaha Shacbka Kalfadhigiisa 7-aad Kulankiisa 10-aad ee 27kii Juun 2020;

MARKUU DHAGEYSTAY: Hadaljeedinta Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya oo ka horjeediyay Golaha Shacabka kala fadhiga 7aad Kulankiisa 2aad Gaarkan ah ee 15kii Agoosto 2020 kuna ballan qaaday in Heshiisyada Jiheynta Siyaasadda Doorashooyinka 2020-2021 lagu gaaro Golaha Wadatahashiga Qaranka ansixin loo horkeeni doono kulanka guud ee Labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Warqadda Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Lr.

JFS/XM/001/LA/9/20 ee 24.09.2020 kuna saabsan codsi sharciyenta Heshiis Siyaasadeedka ay wadajirka u gaareen xubnaha Golaha Wadatashiga Qaranka;

MARKUU KA BAARAANDEGAY: Heshiiska Siyaasadeed iyo talooyinka halkaan ku lifaaqan, oo ay wada gaareen Xubnaha Golaha Wadatashiga Qaranka, oo uu hoggaaminaayay Madaxweynaha JFS, kuna saabsan jiheynta Siyaasadda Doorashooyinka ay ku imaanayaan Xubnaha labada Aqal ee Baarlamaanka Federaalka 11-aad ee Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: In ay lagama maarmaan tahay in dhammaadka muddada xilhaynta Baarlamaanka 10-aad ka hor la isla meel dhigo tabta ugu haboon oo lagu keeni karo xubnaha Labada Aqal ee Baarlamaanka 11-aad ee Soomaaliya;

MARKUU GARWAAQSADAY: Daruufaha oo Dalka hadda ku suganyahay aysan suurtogelinayn Qabashada Doorasho toos ah oo ku dhacda waqtigeeda; ayna suurtagal tahay in xubnaha Baarlamaanka 11-aad Doorashooyinkoodu ku yimaado dib u dhac keeni kara firaaq saameeya sharciyada jiritaanka Hay'adaha Dastuuriga ee Dawladda Federaalka Soomaaliya;

MARKUU ARKAY: Sharciga wax-ka-beddelidda Dastuurka Federaalka Lr. 20 ee 27.06.2016;

MARKUU ARKAY: Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal Lr. 23 ee 20.02.2020;

MARKUU ARKAY: Qodobka 69 (1) (a) iyo (b) ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya oo xeeriyey Awoodaha Golaha Shacabka iyo Qodobka 71 (b) ee Dastuurka Federaalka oo xeeriyey awoodaha sharcidajinta Aqalka Sare;

Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya kala fadhigiisa 7aad kulankiisa 6-aad wadajirka ah oo lagu qabtay Xarunta Golaha Shacabka 26.09.2020, oo ay goobjoog yihiin 215 Xubnood kamid ah Golaha Shacabka iyo 40 xubnood ka mid ah Aqalka Sare oo codeynaya wuxuu ansaxiyey Sharcigan:

Qodobka 1-aad:
Dib u dhigista Doorashada Tooska ah

1. Ayadoo aan waxba loo dhimaynin Qodobbada 64 (1) iyo 72 (1) Dastuurka Federaalka Soomaaliya, ayaa sharcigan dib loogu dhigay qabashada Doorashooyinka tooska ah ee Labada Aqal ee Baarlamaanka 11-aad 2020-2021 iyo dhaqangalka Sharciga Doorashooyinka Qaranka ee Heer Federaal Lr. 23 ee 20.02.2020.

2. Xubnaha Labada Aqal ee Baarlamaanka 11-aad ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya waxaa lagu soo dooranayaa nidaamka Doorashada Dadban.

Qodobka 2-aad:
Sharciyeynta Heshiiska Siyaasadeed ee Doorashada

1. Qodobkan waxaa lagu sharciyeyey Heshiiska siyaasadeed ee Golaha Wadatashiga Qaranka ku taariikhaysan 17.09.2020, oo lagu jiheeyey qaabka Doorashada 2020-21 ay ku

imanayaan Baarlamaanka 11-aad ee Soomaaliya.

2. Qodobka 4-aad ee Heshiis-siyaasadeed ku xusan farqadda 1-aad ee qodobkan, ayadoo aan nuxurkeeda wax loo dhimeyn waxaa loo xeeriyey loona siiqeeyey sidan: "In Xulista Ergada ay iska kaashadaan Odayaasha Dhaganka iyo Bulshada Rayadka ee Beesha kursiga iska leh, Dawlado-Goboleedyadane ay yeeshaan diiwaangelinta Eragada."

3. Heshiiska siyaasadced ee halkan ku lifaagan kuna xusan faqradda 1-aad ee Qodobkan waa qayb ka mid ah nuxurka sharcigan oo aan ka go'i karin.

Qodobka 3-aad:
Xilhaynta Hay'adaha Dastuuriga ah ee Dawladda

1. Si aysan u dhicin firaaq ku yimaada sharciyadda jiritaanka Hay'adaha Dastuuriga ah ee Dawladda Federaalka; Baarlamaanka 10-aad awoodihiisa Dastuuriga ah u dhamaystirantahay ayaa xilkiisa sii haynaya ilaa iyo maalinta la dhaariyo xildhibaannada loo Soo doortay Baarlamaanka cusub ee 11-aad ee Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 60-aad ee Dastuurka Faderaalka iyo wax-ka-beddelka lagu sameeyey Sharciga Lr. 20 ee 27.06.2016.

2. Hay'adaha kale ee Dastuuriga ah ee Dawladda Federaalka ayaa xilalkooda sii haynaya ilaa iyo inta laga dhiso hay'ad walba Hay'addii beddeli lahayd.

Qodobka 4-aad:
Dhaqangalka Sharciga

Sharcigan wuxuu dhaqangal noqonayaa ka dib markuu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo, Madaxweynaha JFS Xeer Madaxweyne ku meelmariyo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka ee Soomaaliya si waafaqsan Qodobka 84-aad iyo Qodobka 85-aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya.

M.ne Maxamed Mursal Sh. Cabdiraxmaan
Guddoomiyaha Golaha Shacabka

M.ne Cabdi Xaashi Cabdullaahi
Guddoomiyaha Aqalka Sare

Muqdisho 26ka Sebteembar 2020

Shirka Wadatashiga Doorashooyinka iyo Dhammeystirka
Heshiisyadii
Samareeb 1-3
Muqdisho Sebteembar 17, 2020

WAR-MURTIYEED

Shir ay yeesheen Madaxda Dowlada Federaalka ah iyo Dowladaha Xubnaha ka ah oo uu shir guddoominayey Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo, ayna ka qayb-galeen Ku-simaha Raysul Wasaaraha Mudane Mahdi Maxamed Guuleed, Madaxweynaha Dowlada Puntland Mudane Saciid Cabdullaahi Deni, Madaxweynaha Jubbaland Mudane Axmed Maxamed Islaam, Madaxweynaha Koonfur Galbeed Mudane Cabdicasiis Xasan Maxamed, Madaxweynaha Galmudug Mudane Axmed Cabdi Kaariye, Madaxweynaha Hirshabelle Mudane Maxamed Cabdi Waare iyo Guddoomiyaha Gobolka Banaadir ahna Duqa Muqdisho Mudane Cumar Maxamuud Maxamed. Shirkaas wuxuu ka dhacay magaalada Mugdisho intii u dhaxaysay 13-17 Sebteember 2020.

Shirkan waxa uu dabasocday Kulamo isdaba joog ahaa oo kasoo bilowday Samareeb 1 oo ay isugu yimaadeen Madaxweynayaasha Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federalka ah ee Puntland, Jubbaland, Galmudug, Hirshabelle iyo Koonfur Galbeed, oo uu ka dhashay Samareeb 2 oo ay wadatashi ku yeesheen Madaxda Dowlada Federaalka ah iyo Madaxda

Dowladaha Xubnaha ka ah Dowlada Federaalka ah iyo Gobolka Banaadir oo la xiriiray sidii dalka doorasho waqligeeda ku qabsoonta ay uga dhici lahayd. Waxaa xusid mudan in shirkan Muqdisho uu dhammeytir u yahay heshiiskii Samareeb 3.

Shir-madaxeedkan inta uu socday waxaa la isla gorfeeyay xaaladaha siyaasadeed, amni iyo bulsho ee ku hareeraysan qabsoomidda doorashada Barlamaanka Federaalka ah iyo tan Madaxweynaha, taas oo ku dhacda waqtigeeda si waafaqsan heshiisyadii Samareeb.

Haddaba iyadoo taas laga ambaqaadayo, waxay Madaxdu ku dul shaqeeyeen heshiiskii kasoo baxay Samareeb 3 Falanqeyn dheer keddib, iyaga oo dhawraya midnimada dalka iyo wadajirkiisa, tixgelinayana xaaladaha amni iyo siyaasadeed ee dalka ka jira, loona qaban lahaa doorasho xilligeeda ku dhacda, waxay isla qaateen qodobada soo socda;

1. In Dowladda Federaalka ay magacawdo Guddi Doorasho oo heer Federaal ah kaas oo kaashanaya Guddi Doorasho oo heer Dowlad Goboleed ah.

2. In deegaan doorashooyinka Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka laga asteeyo labo magaalo oo ah caasimadaha Gobollada oo ku dhisan yahay Dowlad Goboleed kasta.

3. In tirada ergada Xiidhibaan walba u codeynaysa ay noqato 101 ergo oo mataleysa beesha wadaagta kursigaas.

4. in xulista ergada ay iska kaashanayaan odayaasha dhaqanka, bulshada rayidka ah iyo Dowlad Goboleedka.

5. In qoondada haweenka ee 30% ah la ilaaliyo.

6. In Baarlamaanka heer Dowlad Goboleed ay soo doortaan Xildhibaannada Aqalka Sare.

7. In Xildhibaannada Aqalka Sare ee Soomaaliland ay soo doorataan ergo matasha oo wada jir ah.

8. In doorashada Xildhibaannada labada Aqal ee Soomaaliland ay ka dhacdo magaalada Muqdisho.

9. Qorshaha doorashooyinka dalka waxa uu bilaabanayaa 1-da Nofeembar 2020.

10. In sugidda amniga doorashooyinka ay ka wada shaqeeyaan hay'daha amniga ee Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladaha Xubnaha ka ah.

11. Heshiiskan siyaasadeed waxaa loo gudbinayaa Baarlamaanka Federaalka si ay u meel mariyaan.

12. Madaxdu waxa ay adkaynayaan in xorriyadda hadalku ay tahay lama taabtaan sida ku cad Dastuurka KMG ah iyo Xeerka Saxaafadda ee dalka, sidaa darteed, waa in warbaahinta fursad loo siyaa in ay Si xor ah u tabiso goobaha ay codbixintu ka dhacayso, lagana fogaado wax walba oo ka hor.

13. Shirku waxa uu uga mahadcelinayaa Madaxda iyo bulshada Dowladda Galmudug sida ay u martigeliyeen shirarkii taariikhiga ahaa ee Samareeb 1-3. Sidoo kale, waxaa ammaan mudan shacabka iyo Maamuika Gobolka Banaadir sidii diirranayd ee ay usoo dhaweeyeen Madaxda Dowlad Goboleedyada iyo wufuuddii la socotay.

14. Waxaan bogaadinaynaa Madaxweynaha JFS Mudane Maxamed Cabdullaahi Farmaajo hoggaaminta kudhisan isku haynta dalka muujiyay muddadii ay wadahadalladu socdeen, isaga oo xoogga saarayo wadajir iyo wada-ogol lagu dhammeeyo arrimaha doorashooyinka.

15. Ugu dambeyntii, Shirku waxa uu ku bogaadinaayaa Beesha Caalamka kaalinta muuqata ee ay ka geysaneyso dibu dhiska iyo horumarinta dowladnimada Soomaaliya.

ANSIXINTA SHARCIGA GOLAHA MIHNADLAYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKUU ARKAY: Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Qodobka 90aad, Xarafka "F" ee Dastuurka KMG

MARKUU ARKAY: Warqadda Guddoomiyaha Golaha Shacabka GSH/292 Taariikh: 06/07/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga **Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka**

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga **Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka**

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 16/11/2020



Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

Sharci Lr._____ ee _____

Sharciga Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka

QODOBKA 1aad
Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ)

1. Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) waa gole madax bannaan oo leh sifo-qaanuuneed marka uu gudanayo xilalkiisa iyo waajibaadkiisa la xiriira howlaha loo igmaday.

2. Ujeeddooyinka Golaha:

b) Ka ilaalinta bulshada waxyeellada ka soo gaari karta xadgudubyada ka dhasha howl-gallada caafimaadka.

t) Horumarinta anshaxa iyo xushmadda u dhexeysa heerarka mihnadleyaasha caafimaadka ee Soomaaliya.

j) Diiwaan-gelinta iyo ruqsad-siinta mihnadlayaasha caafimaad iyo xeer-nidaaminta hab-dhaqankooda mihnadeed.

x) Siinta ruqsado xarumaha adeegyada caafimaadka ee buuxiyay shuruudaha looga baahan yahay.

kh) Aqoonsi-siinta xarumaha waxbarashada caafimaadka ee soo saara kaadirka (mihnadleyda) caafimaad.

d) Meel-marinta ama joojinta manaahijta iyo barnaamijyada

tababarada caafimaadka ee kala duwan.

r) Xaqiijinta bad-qabka iyo tayada adeegyada caafimaad ee la siiyo bulshada Soomaaliyeed.

s) Ka jawaabidda baahida loo qabo in mihnadleyaasha caafimaadka ee kala duwan loo sameeyo xeer u gaar ah, kaas oo lagu dhisayo gole guud oo ay ku jiraan dhammaan ururada mihnadleyda caafimaad sida Guddiga dhakhaatirta caafimadka guud iyo ilkaha, umulisooyinka, kalkaaliyeyaasha, daawo-yaqaannada iyo mihnadaha kale ee caafimaadka la xiriira.

Qodobka 2 aad
Erey Bixin

Golaha: waxaa loola jeedaa Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ).

Xeer-nidaamin: waxaa loola jeedaa nidaamka mihnadeed ee waxqabadka ama hab-socodyada kaas oo ku yimaada xeerar iyo hab-raacyo uu soo saaray Goluhu.

Ansixin: waxaa loola jeedaa xaqiijinta taaba-galnimo, awoodda, ama waxtarnimada machad tababarid caafimaad ama rug caafimaad oo la meel-mariyey iyo barnaamij howleedkooda.

Karti Mihnadeed: waxaa loola jeedaa awoodda hawl-wadeen caafimaad uu ku abuuri karo tayo mihnad aqooneed, mihnad, iyo mabaadi' ee khuseeya mihnad ku aadan hawl gaar ah ee dhammaan hawl-gallada caafimaadka iyo waxbarashadiisa.

Xarumaha Waxbarasho Caafimaad: waxaa loola jeedaa Jaamacadaha, Machadyada, Kulliyadaha, Dugsiyada iyo

Xarumaha ku hawlan tababaridda qeybo gaar ah ee la xiriira hawlaha caafimaad ama qeyb kasta oo ku lug leh daawada.

Mihnad: waxaa loola jeedaa gacan-ku-hayn shaqo xilli dheer ee barasho gaar ahaaneed iyo shahaado aqoon toos ah oo lagu qaatay muddo waqtiyeysan.

Mihnadle Caafimaad: waxaa loola jeedaa qof leh shahaado aqooneed oo uu ka qaatay xarun waxbarasho caafimaad ee la aqoonsan yahay oo diiwaan-gashan lehna ruqsad uu ku qabto mihnad qeexan ee dhanka daryeelka caafimaadka oo ka tirsan qeybaha caafimaadka.

Shahaado Caafimaad: waxaa loola jeedaa marag-kac rasmi ah iyo dhab ahaansho leh oo caddeynaya in mihnadle caafimaad si guul ah u dhammeystay barnaamij waxbarasho uu ku qaatay xarun waxbarasho caafimaad oo la aqoonsan yahay.

Mihnadle Caafimaad ee Shisheeye: waxaa loola jeedaa qof shisheeye ah ee shahaadooyinka aqooneed ee qof aan Soomaali ahayn ka qaatay xarun waxbarasho caafimaad ee la aqoonsan yahay.

Shahaado Mihnad Caafimaad ee Shisheeye: waxaa loola jeedaa shahaadooyin aqooneed oo ay bixisay xarun waxbarasho caafimaad shisheeye oo la aqoonsan yahay.

Anshax-xumo Mihnadle Caafimaad: waxaa loola jeedaa fal sharci-darro, anshax-xumo, ama meel-uga-dhac heerarka mihnadda caafimaad oo lid ku ah hab-raacyada xuquuqda adeegyada caafimaad.

Xil-gudasho xumo hawl caafimaad: waxaa loola jeedaa jebin xil daryeel caafimaad ee mihnadlaha ka saaran bukaanka, taas oo ay ka dhalato waxyeello soo gaarta bukaanka.

Anshaxa Mihnadda Caafimaad: waxaa loola jeedaa mabaadi'da dhawrta ama saameysa anshaxa mihnadlaha caafimaad ee adeeg-siinta bukaanka.

Isku-filnaansho: waxaa loola jeedaa bukaanka dhimmir ahaan fayo-qabka ah oo leh karti xusuus iyo qiimeyn warbixin la siiyey inta lagu guda Jiro baarista iyo daaweynta; si uu u qaato go'aan maan-gal ah iyo lahaansho isku-filnaansho, go'aan-qaadasho iyo in loo tixgeliyo in uu yahay qof leh shuruudaha sharcigu tilmaamay.

Isku-filane: waxaa loola jeedaa in bukaanku leeyahay awood go'aan-qaadasho.

Oggolaansho Xor ah: waxaa loola jeedaa oggolaansho xor ah oo aan la isku khasbin oo uu bixiyey bukaan isku-filan oo la siiyey macluumaad buuxa oo ku aadan hab-raaca daawada ee isaga khuseeya.

Oggolaansho Wakiil: waxaa loola jeedaa oggolaansho laga helay qof ka wakiil ah qof aan isku-filnayn ha ahaado waayeel, carruur ama qof aanay u suurtogaleynin in uu oggolaansho bixiyo.

Kala-soocitaanka Mihnadeed: waxaa loola jeedaa kala-caddeynta iyo xaqiijinta shahaadooyinka aqooneed, waayo-arragnimo, iyo waxyaabaha la xiriira si loo hubiyo in ugu yaraan heerarka looga baahan yahay qeybta caafimaad ee khusaysa hawl-galkan loo fuliyey si hab-sami leh.

Qiimeyn Mihnadeed: waxaa loola jeedaa hab-raaca uu dejiyey Goluhu si uu u go'aamiyo awoodda xil-gudasho iyo mihnad oo ay wehliso heerka aqoonta iyo mihnadda ee codsadaha.

Xarumaha Adeegga Caafimaadka: waxaa loola jeedaa xarumaha guud iyo kuwa gaarka ah ee laga bixiyo adeegyada caafimaad ee baarista, daaweynta, ka-hortagga, baxnaaninta ama laga qeybiyo walxaha daawada, qalabka kaabayaasha iyo aaladaha.

Xarumaha Adeegyo Caafimaad ee Guud: waxaa loola jeedaa xarun shaqaynaysa ee u furan dadweynaha xilli kasta, taas oo bixisa daryeel caafimaad ee ku habboon heerka loogu talo-galay xaruntaas.

Diiwaan-gelin: waxaa loola jeedaa hab-socodka dilwaan-gelineed ee mihnadle caafimaad oo soo dhammeystiray shuruudihii uu uga baahnaa Goluhu; si uu u bixiyo adeegyo gaar ah oo si rasmi ah looga diiwaan-geliyo diiwaanka uu gacanta ku hayo Golaha.

Dib-u-diiwaan-gelin: waxaa loola jeeda dib u diiwaan gelinta shahaadooyin dheeraad ah oo Goluhu aqoonsan yahay ee uu la yimaado mihnadle caafimaad oo hore u diiwaan gashanaa.

Cusboonaysiin Diiwaangelin: waxaa loola cusboonaysiinta macluumaadka mihnadle caafimaad iyo ku-howlanaanshihiisa in uu sii wato howl-galkiisa, tababarka iyo barnaamijyada waxbarasho ka dib marka ay dhammaato muddada diiwaan-gelinta.

Ruqsad: waxaa loola jeedaa oggolaanshaha uu bixiyey Golaha, una oggolaanaya ruqsadlaha in uu uga howl-galo si sharci ah qeyb gaar ah oo ka mid ah mihnadaha caafimaad oo isaga/iyada ruqsadda loo siiyey.

Dib-u-ruqsad-siin: waxaa loola jeedaa cusboonaysiinta ruqsada howl-gal ka dib marka ay dhacdo.

Bah-wadaag Caafimaad: waxaa loola jeedaa mihnadaha daryeelka caafimaad ee ka baxsan daawada.

QODOBKA 3aad
Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka

1. Waxaa la dhisay Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka wuxuuna ka kooban yahay **15** (Shan iyo toban) xubnood kuwaas oo ugu yaraan **30%** ay noqonayaan haween. Xubnaha waxay ka imaanayaan hay'adaha soo socdo:
   b) 2 xubin Wasaaradda Caafimaadka
   t) 1 xubin Wasaaradda Tacliinta Sare
   j) 1 xubin Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka
   x) 3 xubin Ururka Dhaqaatiirta Soomaaliyeed
   kh) 1 xubin Ururka Kalkaaliyeyaasha Soomaaliyeed
   d) 1 xubin Ururka Umulisooyinka Soomaaliyeed
   r) 1 xubin Xarumaha Waxbarashada Caafimaadka
   s) 1 xubin Ururka Farsamo-yaqaannada Sheybaarka Soomaaliyeed
   sh) 1 xubin Ururka Daawo-yaqaannada Soomaaliyeed
   c) 1 xubin Ururka Fayo-dhawrka Soomaaliyeed
   g) 1 xubin Adeegyada Caafimaad ee Gaarka loo leeyahay
   f) 1 xubin Bulshada Rayidka Soomaaliyeed
2. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka waxaa iska dhex dooranaya Xubnaha Golaha.
3. Haddii uu bannaanaado xil (jago) xubinnimo ee Golaha, qofka buuxinaya waxaa lagu magacaabayaa muddo afar toddobaad gudahood ah wuxuuna dhammeystirayaa inta ka harsan muddo-xileedka xubinta uu beddelay.
4. Waxaa waajib ah in wargelin qoraal ah mudo soddon (30)

maalmood ku siman loogu soo gudbiyo Guddoomiyaha ka hor inta xubin Golaha ka mid ah aysan is casilin.

5. Anshax iyo akhlaaq xumida ay 2/3 ee Goluhu u arkaan in ay waxyeello ama culeys ku yahay magaca, sharafta iyo jiritaanka Golaha, qofka xubinta ah ee ku lug leh arrimahaas waa laga saarayaa Golaha, waana la bedelayaa.

6. Goluhu wuxuu yeelanayaa astaan iyo shaabbad u gaar ah oo lagu isticmaalo ujeeddooyinka sharcigan uu jideeyay.

7. Goluhu wuxuu u qoondeynayaa xubnaha Golaha gunno maalmeed oo ay ku jiraan gunno xil-gudasho, gunno safar ama ka qeybgal shir.
8. Muddada xilhaynta xafiiska ee xubnaha Golaha waa saddex sannadood, oo la cusboonaysiin karo hal mar oo kaliya.
9. Dhammaadka muddada xilhaynta, xubintu way sii haynaysaa xilka xafiiska inta xubin kale laga soo magacaabayo.
10. Xubnaha Goluhu waxay wadanayaan howlahooda gaarka ah ee ka baxsan shaqada Golaha marka laga reebo waqtiga ay xubnuhu ku gudo jiraan xil-gudashada Golaha.
11. Looma oggola in xubini ay isla waqti qabato wax ka badan hal xil (mas'uuliyad).

QODOBKA 4aad
Magacaabidda Xubnaha Golaha

1. Hay'adaha, ha ahaadaan hay'adaha dowladda ama kuwa gaarka ah, waxay soo magacaabanayaan musharraxiinta uga mid noqonaya Golaha iyada oo go'aanka ansixinta ugu dambaysa uu gaarayo guddi ay Wasaaradda Caafimaadku u magacowdo iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha Caafimaadka ee Dowlad Goboleedyada in ay hubiyaan shuruudaha xubinnimada isla markaasna ku soo

dhammeystiraan.

Xubnaha Golaha muddo aan ka badneyn seddex bilood. Marka xubinnimada buuxda la oggolaado, xubintu waxay u howlgaleysaa si madax-bannaan iyada oo wakiil ka ah danaha iyo ujeeddooyinka Golaha.

2. Marka ay buuxiyaan shuruudaha guud, xubnaha Golaha waxaa lagu xulayaa shuruudahaan:

b) Caddeymo sugaya aqoonta mihnadda caafimaadka;

t) Aqoon mihnadeed sare iyo karti dheeraad ah;

j) Waayo-aragnimada mihnadda;

x) Naxariis iyo daacadnidmo sare;

kh) U hoggaansanaanta anshaxa iyo akhlaaqda mihnadda;

d) Dhaqan iyo akhlaaq wanaagsan.

QODOBKA 5 aad
Shuruudaha Guud ee Xubinnimada Golaha

Shuruudaha guud ee looga baahan yahay qofka xubin buuxda ka noqonaya GMCQ waa in uu yahay:

1. In uu yahay muwaadin Soomaali ah, deggan Soomaliya.
2. In uu leeyahay dhaqan suuban, xushmad sare-na ku dhex leh Bulshada Soomaaliyeed, iyo aragti sane oo xambaarsan daacadnimo.
3. In uu leeyahay ugu yaraan shahaadooyinka aqooneed ee looga baahan yahay mihnadlayaasha caafimaad. Sida oo kale, Mihnadlayaasha ka baxsan caafimaadka waa in ay leeyihiin shahaadooyin meel-mar ah ee qeybaha muhiimka u ah bulshada ee maaddooyinka la xiriira caafimaadka.
4. In uusan u oollin fal-dembiyeed ay si kama dambays ah

maxkamadi ugu xukuntay ama uusan ahayn eedeysane sugaya maxkamad Dalka gudihiisa ama dibaddiisaba.

5. In uusan si muuqata ugu jirin howlaha khuseeya ganacsi iyo howl kasta oo saameyn ku yeelan karta ama ay is-diidayaan danaha Golaha;

6. In si xor ah uu u oggolaado xubinnimada mushaar la'aanta ah ee uu kaga mid noqonayo xubnaha Golaha.

QODOBKA 6aad
Heerarka iyo Xuquuqda Xubinnimada

1. Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) wuxuu leeyahay xubinnimo seddex heer ah iyada oo heer walba uu leeyahay kaalin iyo xuquuqo u gaar ah waxayna kala

b) Xubinnimada Rasmiga ah
t) Xubinnimada Aragti-wadaagta
j) Xubinnimada Xiriir wadaagta

Qodobka 7aad
Xubnaha Rasmiga ah

1. Xubinnimada rasmiga ah ee Golaha waxay u furan tahay hay'adaha lagu cayimay **Qod.3aad** ee Xeerkan.

2. Xubnaha rasmiga ah ee Golaha waxay leeyihiin xuquuqda soo socota: b) Cod bixin marka Goluhu uu kulansan yahay;

t) Soo jeedin qaraaro ku saleysan xeer hoosaadyada Golaha;

j) Helitaanka warbixin kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay si buuxda uga qeyb qaataan howlaha Golaha.

x) Helitaanka warbixin kasta ee uu hayo Goluhu, ha khusayso Golaha, xubin kasta, aragti-wadaag, ama xiriir-wadaag, ama cid kale, taas oo lagu siinayo xubnaha codsi iyo in Goluhu tixgelin ahaan la qumanaato.

Qodobka 8aad
Aragti-wadaag (Partners)

1. Goluhu wuxuu xubinnimo aragti-wadaag siinayaa ama u diidayaa ururada heer Qaran, kuwa ka dhexeeya dowlado badan ama ururo leh aragti caalami ah kuwaas oo aragti ama khibrad ku soo kordhin kara Golaha marka uu fulinayo howlaha la xiriira xeer nidaaminta caafimaadka oo ay ka mid yihiin caddeymaha shahaadooyinka, qiimeynta, imtixaan qaadidda iyo tayaynta waxbarashada ama wixii kale ee la xiriira tayada iyo hufnaanta wax-qabadka mihnadleyaasha caafimaadka.

2. Xubnaha aragti-wadaagta ah waxay leeyihiin xuquuqda soo socoto:

b) Ka qeybgalka shirarka Golaha iyaga oo aan codeyneynin.

t) U soo jeedinta GMCQ qaraaro iyada oo habraaca gudbinta qaraaradaas la waafajinayo xeer hoosaadyada uu soo saaro Golaha;

j) Ka qeybqaadashada guddiyada joogtada ah oo dhan ama kooxo hawleedka Golaha marka laga reebo howlaha maamulka.

x) Helitaanka warbixinta kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay si buuxda uga qeyb qaataan howlaha Golaha.

kh) Helitaanka warbixin kasta ee uu hayo Goluhu, ha khusayso Golaha, xubin kasta, aragti-wadaag, ama xiriir-wadaag, ama cid kale, taas oo lagu siinayo codsi iyo in Goluhu tixgelin ahaan la qumanaato.

Qodobka 9aad
Xiriir - wadaag (Associates)

1. Golaha wuxuu xubinnimo xiriir-wadaag siinayaa ama u diidayaa urur kasta oo xiriir la leh Golaha kaas oo ka shaqeeya xeer nidaaminta mihnadaha daryeelka caafimaad.

2. Xiriir wadaagtu waxay leeyihiin xuquuqda soo socoto:

b) Ka qeybgalka guddiyada joogtada ah oo dhan ama kooxo howleedka Golaha marka laga reebo howlaha maamulka.

t) Ka-qeybgalka kulanka guud ee Golaha iyaga oo aan codeyneynin

j) Helitaanka warbixin kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay si buuxda uga qeyb qaataan howlaha Golaha.

x) Helitaanka warbixin kasta ee uu hayo Goluhu, ha khusayso Golaha, xubin kasta, aragti-wadaag, ama xiriir-wadaag, ama cid kale, taas oo lagu siinayo codsi iyo in Goluhu tixgelin ahaan la qumanaato.

QODOBKA 10aad
Awoodaha iyo Xilalka Golaha

Golaha wuxuu leeyahay awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Diiwaan gelinta iyo rukhsadsiinta xubnaha leh aqoonta mihnadaha caafimaad iyo xeer nidaaminta anshaxa mihnadeedka ee hawlwadeennada caafimaad.
2. Gacan ku haynta hannaanka habboon ee howlqabad oo ay wadaagaan howlwadeennada caafimaadka si waafaqsan mabda'a xeer-nidaaminta iyo dhiirri-gelinta caafimaadka Bulshada.
3. Horumarinta habboon ee heerarka kala duwan ee shaqaalaha caafimaadka
4. Dhiirigelinta jiritaanka iyo mansabka mihnadda caafimaadka iyo masuuliyadda lagu joojinayo adeegyada

aan loo baahneyn ama laga rnaarmi karo gabi ahaanba ama qeyb ahaanba.

5. Ruqsadsiinta iyo aqoonsiga xarumaha caafimaad ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, sidoo kale hubinta tayada rugaha caafimaad, adeegyada caafimaadka la bixiyo iyo xarumaha waxbarasho ee bixiya aqoonta caafimaadka.
6. Metelidda howlwadeennada caafimaad iyo ka shaqeynta danahooda.
7. Baarista eedeymaha iyo anshax xumida mihnadeed iyo saarista ciqaabaha ku habboon inta sharcigu uu jideeyay.
8. Ka hortagga iyo ka caawinta bulshada dhammaan howlaha la xiriira adeegga caafimaad ee aan hufneyn.
9. Talo siinta Wasaaradda Caafimadka, wasaaradaha kale ee ay khusayso, bahwadaagta caafimaadka iyo daneeyayaasha arrimaha la xiriira mihnadda caafimaadka.
10. Fulinta dhammaan waxyaalahaas iyo wax-qabadka howlaha loogu igmaday xeerkan iyo xeerarka kale ee Dalka.

QODOBKA 11aad
Waayista Xubinnimada Golaha

Qof kasta oo laga helo qodobada hoos ku xusan wuxuu luminayaa xubinnimada GMCQ:

1. Haddii uusan ahayn muwaadin Soomaali ah ama aanu haysan ruqsad uu uga howlgalo adeegga caafimaad;
2. Haddii magaciisa hore looga tiray diiwaanka Golaha.
3. Haddii lagu xukumay fal-dembiyeedyo ama gef asluubeed/ anshax xumo.
4. Haddii uusan dhimmir ahaan fayo gab ahayn.

QODOBKA 12aad
Dhammaadka Xubinnimada Golaha

Xubinnimada Golaha waxaa jiritaankeedu dhammaanayaa haddii la helo arrimaha soo socda:

1. Xubinta oo xilka laga qaado si waafaqsan Qodobka 3aad.
2. Xubinta oo geeriyoota; ama
3. Haddii xubin aysan ka soo qeyb gelin 3 jeer oo isku xigta kulamada Golaha iyada oo uusan jirin fasax sharci ah, caddeyn caafimaad, xaalado kale oo meel-mar ah oo ku yimid duruufo deg deg ah iyo xaalad ka baxsan awoodda aadanaha.

QODOBKA 13aad
Shaqaalaha Golaha

Shaqaalaha Golaha (Xubnaha Maamulka) waxay ka koobnaanayaan xubnaha soo socda:

1. Xoghayaha Guud ee Golaha; oo ah madaxa ugu sarreeya xagga maamulka
2. Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ee Golaha;
3. Sarkaalka Diiwaan gelinta, Ruqsadda iyo aqoonsiga;
4. Sarkaalka tababarrada iyo kor u qaadista heerka aqoonta
5. Sarkaalka Hubinta Tayada;
6. Sarkaalka arrimaha sharciga iyo anshax mihnadeedka.
7. Khasnaji
8. Xisaabiye

QODOBKA 14aad
Awoodaha iyo Xilalka Xoghaynta Guud

Xoghaynta Guud waxay yeelanaysaa awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Gacansiinta guddi hoosaadyo uu abuuro Golaha, isku duwidda iyo kormeeridda howlahooda.
2. Xaqiijinta hirgelinta go'aanada la gudbiyey si waafaqsan xeernidaaminta
3. Fulinta go'aannada Golaha.
4. Metelaadda iyo qabashada xilalka Golaha xilliga uusan Goluhu kulansanayn; marka laga reebo awoodda in la laalo, wax laga beddelo, ama laga noqdo go'aannada Golaha.
5. Qabashada howl maalmeedka Golaha.
6. Hirgelinta wixii kale ee howlo ah ee uu u tilmaamo Goluhu.
7. Diyaarinta iyo gudbinta warbixinnada Golaha.

QODOBKA 15aad
Kulamada Xoghaynta Guud

1. Xoghaynta Guud waxay dejinaysaa xeer hoosaadyadeeda iyo habraaca kulamadeeda.
2. Kulamada Xoghaynta Guud waxaa isugu yeeraya xoghayaha guud hadba sida loogu baando.
3. Tirada looga baahan yahay kulamada waa goob joognimada in ka badan kala bar (50% +1) xubnaha maamulka.
4. Go'aan kasta oo lagu gaarayo kulamada maamul waa in lagu meelmariyo cod aqlabiyad ah, haddii ay codadku isla ekaadaan, waxaa la raacayaa dhanka uu u codeeyo Xoghayaha Guud.

QODOBKA 16aad
Kulamada iyo Go'aannada Golaha

1. Sida caadiga ah, Goluhu wuxuu kulamadiisa rasmiga ah qabsanayaa afar jeer sanadkiiba. Guddoomiyhu wuxuu

isugu yeeri karaa kulamo dheeraad ah haddii ay noqoto lama huraan.

2. Kulamada Goluha waxaa shir guddoominaya Guddoomiyaha, balse haddii Guddoomiyuhu maqan yahay, waxaa shir guddoominaya Guddoomiye Ku-xigeenka, haddii labaduba maqan yihiin waxay iska dhex dooranyaan guddoomiye ku meel gaar ah.
3. Kulanka Golaha wuxuu ku guntamayaa goob joognimada boqolkiiba konton oo hal lagu daray ee tirada guud ee xubnaha Golaha.
4. Go'aanka kulanka Golaha wuxuu noqonayaa ra'yiga aqlabiyadda. Haddii ay dhacdo in codadku isla ekaadaan, qofka shir guddoominaya kulanka wuxuu lahaanayaa codka lagu kala baxayo.
5. Xogahayaha Guud waa in uu si rasmi ah u diiwaangaliyaa go'aannada Golaha.
6. Hadal qoraallada (minutes) kulanka waxaa la gaarsiinayaa ama loo qeybinayaa dhammaan xubnaha si ay taladooda uga soo dhiibtaan ka dibna ay u ansixiyaan.
7. Gunnooyinka iyo tas-hiilaadka kale ee ay ku helaan xubnuhu ka qeyb galka kulamada waxaa isla meel dhigaya xubnaha Golaha.
8. Habraacyada kale ee la xiriira kulanka Golaha waxaa go'aaminaya Golaha.
9. Qaadashada shaqaalaha maamulka iyo kuwa hoose si waafaqsan xeerarka shaqada Dowladda.

QODOBKA 17aad
Guddiyo Gaar Ah

1. Goluhu wuxuu abuurayaa seddex guddi oo gaar ah kuwaas oo lagu xulan doono aqoontooda, mihnadooda iyo waayo aragnimada ballaaran ee howshan ay u leeyihiin:

b) **Guddiga Cilmi Baarista Caafimaadka:**

Guddigani wuxuu darsayaa oo dib u eegayaa barotokoollada cilmi baarista khusaysa caafimaadka oo loo soo gudbiyo Golaha si ay u oggolaadaan.

t) **Guddiga Anshaxa Mihnadleyaasha:**

Guddigani waxay shaqadiisu tahay wax ka qabashada eedaymaha la xiriira anshax-xumada mihnadlayaasha iyo cabashooyinka kale ee xiriirka la leh ee la soo gaarsiiyo Golaha.

j) **Guddiga Qiimeynta Mihnadlayaasha:**

Guddi takhasus weyn leh oo loo xilsaaray in ay qaadaan imtixaan iyo habraacyada kale ee loogu talogalay in codsadayaashu maraan si ay u suurowdo in la kala sooco lana diiwaan galiyo.

2. Guddi kasta wuxuu iska dhex-dooranayaa guddoomiye iyada oo Wasaaradda Caafimaadka goobjoog ka tahay.
3. Guddiyadu waxay warbixin iyo talooyin siinayaan Guddoomiyaha, ka dibna, Golaha ayaa ka baaraan degaya talooyinkaas isagoo si habboon u waafajinaya siyaasadaha iyo qorshaha istiraatiijiyadeed ee u degsan.

QODOBKA 18aad
Cilmi-baarista Caafimaadka

Goluhu wuxuu qorsheynayaa isla markaana qeybinayaa:

1. Tilmaamo ku aaddan cilmi-baarista caafimaadka oo ku habboon howlwadeennada caafimaadka Soomaaliya;
2. Natiijada ka soo baxda cilmi baarista waxaa wadaagaya cilmi baareyaasha iyo shakhsiyaadka daneynaya iyaga oo ku helaya si lacag la'aan ah; iyo
3. Natiijada cilmi baarista waxaa lagu qeybin karaa ama lagu faafin karaa ansixinta Golaha.

QODOBKA 19aad
Abuurista Maktabadda Asaasiga ah ee Golaha

1. Goluhu wuxuu ka hirgelinayaa xarunta xafiiskiisa maktabad qalabeysan intii la awoodi karo, taas oo fududayn karta dib u eegista macluumaad iyo cilmi barista si loogu adeegsado tixraac ahaan, waana in ay bixisaa adeegyada soo socdo:

b) Bixinta macluumaadka khuseeya xeer nidaaminta hay'adaha ku howlan mihnadaha caafimaad;

t) Daraasadaha adkaynaya xushmadda loo hayo hannaanka xeernidaaminta caafimaad.

2. Goluhu wuxuu siinayaa waxbarasho iyo baraarujin dhammaan xubnihiisa iyo guud ahaan mihnadlayaasha caafimaad iyo inta kale ee daneyneysa kuna howlan sharciyada caafimaadka iyo saameynta ay ku leedahay caafimaadka iyo horumarka bulshadda.

QODOBKA 20aad
Dhaqaalaha Golaha iyo Ilaha Laga Helayo

Goluhu wuxuu uruurinayaa isla markaasna maamulayaa dhaqaalaha soo socdo:

1. Khidmadda diiwaan gelinta, ruqsad bixinta, iyo aqoonsi siinta mihnadlayaasha caafimaadka, goobaha adeega caafimaad, iyo xarumaha waxbarashada caafimaadka;
2. Dakhliga uu ka helo Goluhu ganaaxa ama ciqaabaha kale
3. Qoondo miisaaniyadeed oo ay Xukuumadda Soomaaliya siineyso Golaha;
4. Dhaqaalihii kale ee laga helo ilo kale.

QODOBKA 21aad
Isticmaalka Dhaqaalaha Golaha

1. Goluhu wuxuu dhaqaalaha uu helo u adeegsanayaa ujeeddo ku aadan bixinta kharashyada uu galo ee la xiriira hirgelinta awoodihiisa iyo waajibaadkiisa, gudashada xilalkiisa iyo shaqooyinkiisa.

2. Goluhu waa in uu soo bandhigaa:
   b) Xisaabaad buuxa oo sax ah oo lagu keydiyo dhammaan dhaqaalaha uu Goluhu helay iyo kharashaadka uu galay.
   t) Warbixin sanadeedka dakhliga iyo kharashka oo loo diyaariyo si ku aaddan sanad miisaaniyadeed kasta iyo xisaab xir muujinaya xaaladiisa maaliyadeed ee dhammaadka sanad miisaaniyadeedkaas; iyo

3. Warbixin sanadeedka iyo xisaab xirka waa in uu ansixiyaa hantidhawre ay aqoonsan tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya.

4. Guddomiyaha wuxuu warbixin maaliyadeed oo faahfaahsan seddexdii biloodba mar u gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda taas oo si cad u muujinaysa kharashka, haraaga, iyo sidoo kale qorshe howleedyo faahfaahsan ee lagu talo jiro in la hirgeliyo ka hor warbixin maaliyadeedka soo socota.

QODOBKA 22aad
Xiriirka Iskaashi ee Golaha

1. Goluhu wuxuu la yeelanayaa xiriir dhow oo ku dhisan is-fahan iyo wada shaqeyn Wasaaradda Caafimaadka (WC), wasaaradaha ay khuseyso, hay'daha kale ee dowladeed, Wasaaradaha Caafimaadka ee Dowlad Goboleedyada iyo

hay'adaha kale ee daneeya adeegga caafimaadka, isaga oo wada shaqeyn dhow kala yeelanaya meelaha ay ka mid yihiin:

b) Ka shaqeynta iyo is dhaafsiga iskaashi dhinacyada farsamada iyo horumarinta Mihnadlayaasha caafimaaadka;

t) Iskaashi xagga horumarinta adeegyada iyo xarumaha caafimaad;

j) Hirgelinta aqoon. isweydaarsiyo iyo tababaro;

x) Is-dhaafsiga macluumaadka iyo isu gudbinta khibradaha sare;

kh) Isu gudbinta mihnadaha iyo kor u qaadida kartida.

QODOBKA 23 aad
Khidmado

1. Goluhu wuxuu khidmado saarayaa diiwaan gelinta, ruqsad bixinta, iyo ansixinta arrimaha soo socdo:
   a) Machadyada tababarada caafimaad ee gaarka loo leeyahay
   b) Rugaha caafimaad ee gaarka loo leeyahay
   c) Mihnadlayaasha caafimaad ee muwaadiniinta ah iyo kuwa shisheeye oo loo sameynayo diiwaan gelin, ruqsadsiin iyo dib u ruqsadsiin
   d) Howl haynta mihnadleyda iyada oo khidmad laga qaadaayo sannadkiiba mar
   e) Dib u eegid barotokoolada cilmi baarista caafimaad.

2. Goluhu wuxuu go'aamin karaa khidmado kala duwan ee heerarka kala duwan ee mihnadlayaasha caafimaad.

QODOBKA 24aad
Diiwaan-gelinta, Ruqsad-siin iyo Ansixinta

Diiwaan gelinta, rukhsadsiinta iyo ansixinta waxaa la sameynayaa iyada oo la tixgelinayo mabaadii'da soo socota:

1. Dhammaan xarumaha waxbarashada caafimaad ee Soomaaliya ee gaarka loo leeyahay waa in laga anxisiyaa xafiiska Golaha si loo hubiyo taabo galnimadooda.

2. Marka ardaygu uu soo qalinjebiyo waa in uu soo codsadaa diiwaangelin iyo ruqsadsiin. Diiwaangelinta waxay qeexeysaa/ caddeyneysaa nooca barnaamijka (meheradda), heerka adeegga ee loo oggolaan karo iyo shahaadooyinka uu haysto.

3. Sharci ahaan, waxaa ka reeban dhammaan mihnadlayaasha caafimaad ee shisheeye in ay u howl-galaan sidii howlwadeenno caafimaad, ka hor inta aan la diiwaan gelin ama ruqsad la siin.

4. Rug kasta oo adeegyo caafimaad siisa bulshada waa in ay yihiin kuwo diiwaan gashan, ruqsad leh, loona oggolaaday fulinta adeegyo caafimaad.

5. Dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan xarumaha waxbarashada caafimaad ee gaarka ah iyo goobaha caafimaad waa in uu soo gudbiyaa codsigooda mas'uul derejo sare leh oo meteli kara xarunta ama goobta caafimaad.

QODOBKA 25aad
Codsi Diiwaan-gelin

1. Qofka doonaya in loo diiwaan geliyo mihnadle caafimaad wuxuu ka codsanayaa Golaha isagoo soo buuxinaya warqadda codsiga isla markaana bixinaya khidmada looga baahan yahay ka hor inta uusan howlgelin.
2. Codsiga waa in ay la socdaan caddeynta shahaadooyinka codsadaha, fayo qabka jireed iyo midda dhimireed, sida oo kalena, warqadda dembi la'aanta.
3. Goluhu, soddon (30) cisho gudahood marka uu helo codsiga wuxuu si waafaqsan Faqradda (1) oggolaanayaa ama diidayaa codsiga.
4. Goluhu, haddii uu ku qanco mudnaanshaha codsadaha wuxuu sii wadayaa dhameystirka hab socodka diiwaan gelinta.
5. Goluhu, haddii uu diido codsi wuxuu si hab-sami ah u wargelinayaa codsadaha isagoo u sheegaya sababaha keenay diidmada.
6. Goluhu ma diiwaan gelinayo codsadeyaasha hore magacyadooda looga saaray diiwaan midkan la mid ah ee dal kale sababo la xiriira anshaxxumo xitaa haddii ay buuxiyaan dhammaan shuruudihii looga baahnaa.

QODOBKA 26aad
Shuruudaha Diiwaan-gelinta ee Mihnadlayaasha Caafimaad

1. Qofna looma oggola in loo diiwaan geliyo mihnadle caafimaad haddii qofkaasi uusan:

   b) Haysan shahaado asaasi ah oo uu bixiyey machad ama xarun waxbarasho uu Goluhu aqoonsanyahay.

t) Ka gudbin kulan wareysiga iyo imtixaanka uu la yeelanayo Goluhu;

j) soo dhammeystirin dhammaan shuruudaha uu go'aamiyay Goluhu.

2. Goluhu, haddii codsadaha buuxiyo shuruudaha Xeerkani tilmaamayo, wuxuu u diiwaan gelinayaa codsadaha in uu yahay mihnadle caafimaad isagoo siinaya shahaado diiwaan gelin.

QoDOBIKA 27aad
Heerarka Diiwaan gelinta

Golaha wuxuu bixinayaa heerarka diiwaangelin ee hoos ku tilmaaman:

1. Diiwaan gelin ku meel gaar ah
2. Diiwaan-gelin buuxdo
3. Diiwaan gelin takhasusle

QODOBKA 28aad
Diiwaan gelin Ku meelgaar ah

1. Qof haysta shahaado ay bixisay xarun waxbarasho ee uu aqoonsan yahay Goluhu, wuxuu xaq u leeyahay diiwaan gelin ku meel gaar ah; taas uu ku howlgelayo muddo cayiman iyada oo lagu kormeerayo lana hubinayo wax qabadkiisa ka hor inta aan loo diiwangelinin si buuxda.

2. Goluhu, marka qof u soo gudbiyo codsigiisa si waafaqsan faqradda (1), wuxuu siinayaa shahaado diiwaan gelin oo ku-meelgaar ah

   b) Codsaduhu buuxiyo shuruudaha diiwaan gelinta ku meel gaarka ah; **t)** Goluhu go'aamiyo in tababarka uu

hore u qaatay codsaduhu uu u dhigmo kan looga baahan yahay diiwaan gelinta ku meel gaarka ah.

3. Goluhu, haddii ay dhacdo in uu diido diiwaan gelinta ku meel gaarka ah, wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha isagoo u sheegaya sababaha lagu diiday codsigiisa.
4. Qofka haysta shahaado diiwaan gelin oo ku meel gaar ah wuxuu si ku meel gaar ah uga hawlgeli karaa howlaha adeegyada caafimaad ee Soomaaliya iyada oo la kormeerayo.
5. Qofka haysta diiwaan gelinta ku meel gaarka ah wuxuu ka howlgeli karaa oo keliya rug caafimaad ama xarun waxbarasho oo Goluhu aqoonsan yahay.
6. Goluhu waa in uusan qofna ku diiwaan gelin shahaado ku meel gaar ah muddo ka badan laba sano.

QODOBKA 29aad
Diiwaan-gelin Buuxdo

1. Mihnadlaha caafimaadka wuxuu xaq u leeyahay diiwaan gelin buuxda ee mihnadda caafimaad ee ay shahaadooyinkiisu la xiriiraan haddii:

   b) Qofku haysto shahaado la aqoonsan yahay oo ah heer diblooma, derejada kowaad ee jaamacadeed ee la xiriirta qeyb gaar ah ee mihnad caafimaad ee ay bixisay xarun waxbarasho oo si sharci ah uga diiwaan gashan Soomaaliya, ama xarun waxbarasho shisheeye oo la aqoonsan yahay;

   t) Markii hore uu ku meel gaar ahaan u diiwan gashanaa soona dhammaystay muddadii diiwaan gelinta ku meel gaarka ahayd.

   j) Uu keeno caddeynta dukumiintiyada asalka ah ee la xiriira aqoontiisa.

1. Qofka si ku meel gaar ah u diiwaan gashan wuxuu gelayaa imtixaan iyada oo la qiimeynayo kartidiisa aqooneed iyo habsami u fulinta wax qabadka mihnadda caafimaad ka hor inta uusan u gudbin diiwaan gelinta buuxda.

2. Shahaadooyinka ku xusan faqradda (1) ka sokow, waa in qofku ka qanciyaa Golaha waayo aragnimada looga baahan yahay: adeegidda waqti buuxda oo ay wehliso khibrad muddo afar iyo labaatan bilood ee isbitaal uu aqoonsan yahay Goluhu.

3. Diiwaan gelinta buuxda waxay jiraysaa muddo seddex sanadood ah laga bilaabo taariikhda la bixiyay.

QODOBKA 30aad
Diiwaan gelin Takhasusle

1. Qofku wuxuu xaq u leeyahay diiwaan gelin takhasusle ee takhasus mihnad caafimaad oo la aqoonsan yahay haddii:

b) Qofku haysto shahaadada derejada labaad ee jaamacadeed oo takhasus la aqoonsan yahay ah;

t) Qofku uu mudan yahay una qalmo diiwaan gelinta takhasus la aqoonsan yahay ee mihnad caafimaad.

2. Raadraaca mihnad caafimaad ee takhasuska waa in ay lahaato tixraac hone oo caddeynaya in takhasus mihnadlaha caafimaad ay xiriir toos ah la leedahay waxbarashadii bore.
3. Diiwaan gelinta guud ee mihnadda caafimaad ee takhasuska waa in ay noqoto mid leh tixraac diiwaan gelineed oo sugeysa in mihnadan ay tahay takhasus la aqoonsan yahay.
4. Muddada diiwaan gelinta mihnadle caafimaad ee la

siiyay diiwaan gelin takhasus la aqoonsan yahay waa in aysan ka badneyn 24 bilood.

QODOBKA 31aad
Beddelaadda Macluumaad

1. Mihnadlaha diiwaan gashan waa in uu ku wargeliyaa xoghayaha guud wax kasta oo beddelaad ah oo ku dhaca macluumaadka gaarka ah ee qofkaas ee la xiriirta diiwaan gelinta, muddo toddoba maalmood gudahood ah.

QODOBKA 32aad
Kala Noqoshada Diiwaan-gelinta

1. Goluhu wuxuu kala noqonayaa diiwaan gelinta mihnadlaha caafimaad haddii:

   b) Goluhu helo sababo meel mar ah ee uu ku rumeysan karo in diiwaan gelinta lagu helay hab musuq ah, been abuur ama qarinta xaqiiqada dhabta ah;

   t) Mihnadlaha caafimaadka ay ku caddaato in uu galay xad-gudub anshax xumo mihnadeed ama howlo lid ku ah xurmad mihnadeedka iyo niyad wanaagga;

   j) Mihnadlaha caafimaadka uu ka howl galo rug caafimaad oo uusan diiwaan gelin u haysan;

   x) Muddada diiwaan gelinta ee mihnadlaha caafimaadka ay dhacdo; kh) Mihnadlaha caafimaadka lagu helo xadgudub sharci kasta oo jira; d) Xilligii diiwaan gelinta ay soo if-baxaan xaalado muujinaya inmihnadlaha uusan uqalmin in la diiwaan geliyo.

2. Goluhu wuxuu kala noqonayaa diiwaan gelinta buuxda haddii qofku;

   b) Uu waxyeelo u leeyahay in uu ka howlgalo mihnadaha

caafimaadka taas oo saameyn karta badqabka bulshada;

t) Uu leeyahay taariikh fal-dambiyeed oo gaarsiisan in uu saameyn xun ku yeesho shakhsiyaadka ka howlgala mihnadda;

j) Haddii Qaab howleedka, baaxadda, iyo muddada waxqabadkii hore ee mihnadda aysan ku filnayn in ay buuxiyaan shuruudaha asaasiga ah.

3. Goluhu wuxuu, ka hor inta uusan kala laaban diiwaan gelinta mihnadlaha caafimaad si waafaqsan Faqradda (1), siinayaa mihnadlaha fursan lagu dhegeysto.
4. Ka hor inta uusan baabi'in diiwaan gelinta mihnadda caafimaad, Goluhu wuxuu xayiraad saarayaa howlihiisa muddadaas iyada oo qodobada iyo shuruudaha Golaha la tixgelinayo.
5. Haddii Goluhu baabi'iyo diiwaan gelinta qof si waafaqsan Qodobkan, magaca qofka waa in laga saaraa Diiwaanka iyada oo aan dib loogu soo celin Karin haddii aan la helin shuruudo u oggolaanaya in dib loo diiwaan geliyo kuwaas oo Goluhu ku qancay.

QODOBKA 33aad
Ka noqoshada Diiwaan-gelinta Shahaado

1. Haddii Goluhu helo macluumaad in magaca qofka lagu diiwaan geliyay si musuq ah ama khalad ah oo la xaqiijiyey baaris ka dib in arrinkani uu yahay dhab, Goluhu waxa uu hakin karaa ku shaqeynteeda isla markaana dib uga noqon karaa diiwaan gelinta shahaadada qofkaas.

QODOBKA 34aad
Dib-u-diiwaan gelin

1. Mihnadlaha haysta shahaadado hore loo diiwaan geliyay muddadii loogu talo galayna ay dhamaatay wuxuu ka soo codsan karaa Golaha shahaado dib u cusbooneysiin isaga oo raacaya hannaanka loo dejiyay isla markaana bixinaya khidmadda looga baahan yahay.
2. Goluhu wuxuu muddo shan iyo toban maalmood gudahood ah ka dib helitaanka codsiga si waafaqsan faqradda (1), oggolaanayaa ama diidayaa codsigaas.

3. Goluhu wuxuu, haddii ay dhacdo in uu diido codsiga si waafaqsan faqradda (2), ku wargelinayaa codsadaha si habsami leh asagoona u sheegaya sababaha diidmada .

4. Hadii lagala noqdo mihnadlaha caafimaad diiwaan gelinta ama la laalo, taas oo waafaqsan qodobada iyo shuruudaha uu Goluhu go'aamiyo, mihnadlaha caafimaad ee arrintaasi saameysay wuxuu codsan karaa dib u diiwaan gelin.

5. Sida ku cad qodobada xeerkan, Goluhu wuxuu siin karaa shahaado dib u diiwaan gelin:

b) Haystaha shahaado diiwaan gelin ku meel gaar ah, haddii haystuhu:

1. Uu ka howlgalo rug caafimaad oo uu oggolaaday Goluhu muddo aan ka yareyn afar iyo labaatan bilood.

2. Ka gudbo imtixaanka laga qaaday

3. Uu leeyahay asluub wanaagsan iyo hab dhaqan

mihnadeed oo habboon

4. Uu buuxiyo shuruudaha kale ee looga baahan yahay

t) Haystaha shahaado diiwaan gelin buuxda, haddii uu buuxiyo:

1. Shuruudaha looga baahan yahay horumarinta joogtada ah ee mihnada Mihnadle Caafimaad oo diiwaan gashan.

2. Shuruudaha ku aadan hab dhaqanka, baaxadda iyo muddada uu shaqada soo hayay ee codsaduhu doonayo in loo diiwaan geliyo;

3. Awoodda howlwadeen-ku u leeyahay in uu wax kula xiriiro Afka Soomaaliga.

QODOBKA 35aad
Nuqul Sameyn Shahaado Diiwaan gelin

1. Haddii qof ay shahaado u diiwaan gashan ay ka baaba'do ama ka lunto wuxuu ka soo codsan karaa Golaha in loo sameeyo nuqul cusub oo la xiriira diiwaan gelinta shahaadadiisa.

2. Helitaanka codsiga ka dib si waafaqsan farqadda 1aad, xoghayaha guud wuxuu siinayaa codsadaha nuqul shahaadoo diiwaangelin.

QODOBKA 36aad
Shuruudaha Diiwaangelinta Mihnadleyaasha Caafimaadka ee Shisheeye

1. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye ee doonaya in uu is-diiwaan-geliyo waa in uu:-

   b) Haystaa Deganaansho Sharci ah ee Soomaaliya
   t) Haystaa Shahaado Jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;
   j) Ka gudbaa imtixaanka loogu talogalay.
   x) Soo buuxiyaa shuruudaha kale ee ku cad foomka diiwaan gelinta

2. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye oo buuxiyay shuruudaha ku tilmaaman faqradda (1) waxaa kormeer iyo mas'uuliyad ku leh xarunta caafimaad ee uu shaqada u hayo.

QODOBKA 37aad
Diiwaan gelin ku meel gaar ah ee Mihnadleyaasha Shisheeye

1. Mihnadlaha Caafimaad ee shisheeye wuxuu codsan karaa diiwaan gelin ku meel gaar ah.
2. Goluhu wuxuu siinayaa codsadaha shisheeye shahaado diiwaan gelin ku meel gaar ah ka dib helitaanka codsiga lagu soo gudbiyey si waafaqsan faqradda (1), haddii codsaduhu:

   b) Haysto degenaansho sharci ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya;
   t) Leeyahay aqoon iyo tababar ku filan;

   j) Ka gudbay kulan wareysiga iyo imtixaanka Goluhu ka qaaday;

   x) Soo gudbiyo shahaado asluub wanaag uu ka soo qaatay hay'ado mihnadeed oo laga aqoonsan yahay Dalka uu mihnadluhu ka diiwaan gashan yahay;

kh) Soo gudbiyo caddeyn ku aadan in mihnadluhu leeyahay aqoon ku filan ee afka Carabiga, Ingiriisia ama luqad kale oo la turjumi karo

d) Uga shaqaynayo Soomaaliya codsiga Xukuumadda ama xarun caafimaad oo oggolaansho u haysata keenista mihnadlaha Shisheeye.

3. Muddada la siinayo mihnadlaha caafimaadka shisheeye shahaadada diiwaan gelinta ku meel gaarka ah waa muddo ku siman lix bilood.
4. Goluhu wuxu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha shisheeye haddii ay dhacdo in uu diido codsiga diiwaan gelinta ku meel gaarka ah isagoo u sheegaya sababaha keenay diidmada.
5. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye oo haysta shahaado diiwaan gelin ku meel gaar ah waa loo cusbooneysiin karaa shahaadadiisa haddii uu:

b) Dhammeysto lix bilood oo shaqo xiriir ah ee rug caafimaad oo leh Derajada A ma derajada B.

t) Soo-gudbiyo qoraal uu bixiyey kormeeraha qofkaas ee rugta caafimaad oo caddeynaya in qofku uu si habsami ah u gutay xilkiisa.

QODOBKA 38aad
Diiwaan gelin Xaddidan

1. Mihnadlaha Caafimaad ee shisheeye wuxuu xaq uu leeyahay in uu isku diiwaangeliyo diiwaan-gelin xaddidan haddii:

b) Uu heysto degenaansho sharci ah ee Soomaaliya.

t) Hore loogu soo diiwaan-geliyay si ku meel gaar ah.
j) Uu ka gudbo imtixaanka laga qaaday.
x) ay soo gudbisay codsigiisa rug caafimaad oo la aqoonsan yahay

2. Goluhu wuxuu ku diiwaan-gelinayaa mihnad-laha shisheeye darajo u dhiganta tii uu uga shaqeynayay dalka uu ka yimid, haddii:

b)Uu heysto degenaansho sharci ah ee Soomaaliya
t) Uu leeyahay asluub wanaag mihnadeed ee Dalka uu ka yimid oo la xiriirta adeegga caafimaad, iyo
j) Uu ka gudbay imtixaanka uu ka qaaday Goluhu.

3. Mihnadlaha shisheeye kuma haysan karo diiwaan gelinta xadidan wax ka badan hal takhasus.
4. Goluhu wuxuu qeexayaa qodobada iyo shuruudaha looga baahan yahay diiwaan-gelinta xadidan si waafaqsan qodobkaan, sida oo kale-na howlaha la qabanayo, ama dabeecadda kormeerka loo baahan yahay ee mihnadalaha caafimaad ee shisheeye.
5. Muddada la siinayo mihnadlaha caafimaadka shisheeye shahaadada diiwaan gelinta xadidan waa muddo ku siman labo iyo toban bilood.
6. Goluhu wuxuu u cusbooneysiinayaa diiwaan gelinta muddada xadidan ee mihnadle caafimaad ee shisheeye si waafaqsan qodobbadan iyo shuruudo uu Goluhu go'aamiyey haddii xarunta caafimaadku ay soo codsato.

QODOBKA 39aad
Mamnuucidda Howl-galka Mihnadleyaasha aan Diiwaan-gashanayn

1. Cidna looma oggola in ay u howlgasho mihnadle caafimaad ahaan, haddii uusan qofkaasi u diiwaan-gashanayn howlgalkaas.

2. Qofka u qalma mihnaddaas balse aan diiwaan gashanayn, oo ku xad gudba faqradda (1) wuxuu gelayaa xad gudub isagoo mutaysanaya, haddii lagu helo, ciqaab ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Dollarka Mareykanka ah (ama Shilin Soomaali u dhigma).
3. Qof aan u qalmin isla markaana ku xad-guba faqradda 1aad wuxuu gelayaa xad-gudub uu ku mutaysanayo, haddii lagu helo, ciqaab ganaax lacageed oo aan ka badnayn afar kun oo Dollarka Mareykanka ah (ama Shilin Soomaali u dhigma) wixii fal dembiyeed ah ee ka dhasha howlqabadka waxaa lala tiigsanayaa ciqaabaha uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

QODOBKA 40aad
Xadgudubyada ka yimaada Mihnadle Caafimaad

Mihnadlaha caafimaad ee heysta shahaadado uu Goluhu diiwaan geliyay, wuxuu gelayaa xadgudub haddii uu:

1. Beddelo ama tirtiro macluumaadka ku qoran shahaada diiwaan gelitna ama nuqulka shahaado kale uu bixiyey Golaha.
2. Been abuuro ama adeegsado mansab howlwadeen caafimaad oo diiwaan gashan iyada oo aan lagu diiwaan gelinin sida uu qabo xeerkani.
3. Howlgeliyo xarun waxbarasho caafimaad **(XWC)** ama Xarun bixisa adeegyo caafimaad **(XAC)** oo Goluhu siinin oggolaansho.
4. Qariyo xaqiiqada dhabta ah ama lagu helo isku day metelaad iyo musuq ku saleysan.
5. Siiyo shahaado aqooneed ee mihnadda caafimaadka qof aan ku guulaysan imtixaannada mihnadeed ee looga baahnaa in ay bixiyaan xarumaha waxbarashada caafimaad ee la aqoon yahay.

6. Been abuuro shahaado diiwaan gelin ama shahaado kale oo uu bixiyey Goluhu
7. Ku shaqeysto mihnad caafimaad oo aan loo heysan ruqsad shaqaynaysa oo uu bixiyey Goluhu
8. Fuliyo adeegyo daryeel caafimaad oo dhaafsan heerka loo xaddiday mihnadlaha caafimaad ee diiwaan gashan.
9. Bixiyo adeeg caafimaad sida Baarista, Daweynta, Qalliin oo waxyeelo u geysta bukaanka taas oo ku timaada dayacaad iyo xil gudasho xumi.
10. Faafiyo xog bukaanka iyada oo aysan jirin wax khasbaya.
11. Dayaco bukaanka ama uga faa'iideysto danihiisa gaar ahaaneed.
12. Xurmeyn waaya hab raaca daweynta, anshaxa iyo xushmadda xirfadda caafimaadka.
13. Qofkii gala xad-gudubyada ku cad faqradaha kore, haddii lagu helo , waxaa la saarayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn kun Dollarka Mareykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma), iyo ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

QODOBKA 41aad
Diiwaan-gelinta Xarunta Caafimaad

1. Codsiga diiwaan gelinta ee xarun caafimaad waa in loo soo gudbiyaa Golaha ka hor inta aysan rugaha caafimaad ka howl gelin adeegyada caafimaadka.
2. Goluhu wuxuu diiwaan gelinayaa xarumaha caafimaadka ee gaarka loo leeyahay.
3. Marka la dhameystiro diiwaan gelinta xarunta ayaa lo aqoonsanayaa xarun si sharci ah u diiwaan-gashan.
4. Xoghayaha guud wuxuu diiwaan-gelinayaa goobaha laga bixiyo dawooyinka iyo xarumaha caafimaad ee yaryar.
5. Diiwaan-gelinta rugaha caafimaad ee la dhammeystiray waxay jireysaa laba sano laga billaabo taariikhda diiwaan gelinta iyada oo la cusbooneysiinayo labadii sanaba mar.

QODOBKA 42aad

Codsi Ruqsada Howlqabad ee Mihnadle Caafimaad

1. Mihnadlaha Caafimaadka waa in uu soo codsada ruqsad howlqabad si waafaqsan hannaanka degsan ee la xiriira daweynta guud, ilkaha, kalkaaliyenimada, umulisonimada, ama mihnad kale ee gaar ahaaneed.

2. Mihnadlaha caafimaad ma codsan karo ruqsad howl qabad isaga oo aan marka hore is diiwaan gelin.

3. Nuqulka asalka ah ee shahaadada diiwaan gelinta waa in uu la socdaa codsiga ruqsadda.

4. Xogahayaha Guud waa in uu hubiyaa in codsadaha ruqsadda soo dhammeystiray shuruudaha looga baahan yahay oo ay ka mid yihiin shahaadooyinka, imtixaanka, khibradda looga baahan yahay, iyo wareysiyada uu la yeelanayo Golaha.

5. Golahu haddii uu ku qanco in codsaduhu soo buuxiyay shuruudaha ku xusan faqradda (4) wuxuu si rasmi ah u oggolaanayaa in la siiyo codsadaha ruqsad howlqabad.

6. Mihnadlaha Caafimaad wuxuu sanadka koowaad ee shaqadiisa lagu ruqsadsiinayaa hal sano oo tijaabo ah si loo hubiyo kartida iyo waxtarka shaqadiisa.

7. Haddii Goluhu diido codsiga ruqsad siinta, xoghayaha guud wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha go'aanka Golaha isaga oo u sheegaya sababaha diidmada.

8. Ruqsadda Howlqabad ee lagu bixiyey sida ku tilmaaman Faqradda (5) waxay jiraysaa labo sano laga bilaabo taariikhda la bixiyey iyada oo la cusbooneysiinaayo labadii sanaba mar.

QODOBKA 43aad
Mamnuucidda Howlqabadka Mihnadlaha aan Ruqsadda Heysan

1. Qofna uma howlgeli karo sidii mihnadle caafimaad isaga oo aan haysan ruqsad uu bixiyay Goluhu.
2. Qofka ku xadgudba Faqradda (1) wuxuu gelayaa xad gudub isaga oo mutaysanaya ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma), wixii ciqaab ah ee ka dhasha howlqabadkiisa waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

QODOBKA 44aad
Cusbooneysiin Ruqsad Howl-qabad

1. Mihnadlaha caafimaad ee ay dhacdo ruqsaddiisa howl-qabad waa inuu Golaha u soo gudbiyaa codsi cusbooneysiin ee ruqsadd howl qabadka.
2. Mihnadlaha caafimaadka marka uu soo gudbinayo codsiga cusbooneysiinta ruqsadda waa in:
   b) Uu buuxiyo foomka cusbooneysiinta ruqsadda
   t) Uu la yimaado caddeyn kartidiisa mihnadeed iyo asluub wanaag ay sugtay xarun caafimaad oo leh ruqsad
   j) Uu la yimaado shahaadooyinka ama caddeymaha horumarinta joogtada ah ee aqoontiisa mihnadadeed.

   x. Uu maraa baaritaanka caafimaad
   kh) Uu galo imtixaanka, wareysiga, iyo qiimeynta uu Goluhu ka qaado

3. Xoghayaha Guud waa inuu hubiyaa in codsadaha cusbooneysiinta ruqsadda soo dhammeystiray shuruudaha ku xusan Faqradda (2)

4. Goluhu haddii uu ku qanco in codsaduhu soo buuxiyay shuruudaha cusbooneysiinta ruqsadda ee ku xusan

Faqradda (2) wuxuu si rasmi ah u oggolaanayaa in loo cusbooneysiiyo codsadaha ruqsad howlqabad

5. Haddii Goluhu diido codsiga cusbooneysiinta ruqsad howl-qabad, xoghayaha guud wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha go'aanka Golaha isaga oo u sheegaya sababaha diidmada.
6. Mihnadlaha da'diisu ka weyn tahay lixdan iyo shan **(65)** sano wuxuu marayaa baaritaanka badqabka caafimaad oo lagu hubinay fayo qabka aragga, maqalka, iyo maskaxda mihnadlaha soo codsaday cusbooneysiinta ruqsadda.
7. Ruqsadda la bixiyay oo aan la cusbooneysiin sida ku tilmaaman Faqradda (1) waa waxba kama jiraan
8. Mihnadle Caafimaad ee sii wata howl-qabadkiisa ka dib marka ruqsaddiisa laga dhigo wax kama jiraan wuxuu gelayaa xad gudub uu ku mutaysanayo, haddii lagu helo, ganaax lacageed oo aan ka badnayn Todobo Boqol oo Dollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma), wixii xadgudub ah ee ka dhasha howl qabadka mihnadlaha waxaa lala tiigsanayaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

QODOBKA 45aad
Muujin Ruqsadeed

1. Mihnadlaha la siiyay ruqsad adeeg gaar ahaaneed ee caafimaad wuxuu ku muujinayaa ruqsaddiisa meel laga arki karo oo ka mid ah goobta shaqada.

QODOBKA 46aad
Kala – Noqosho Ruqsad

1. Goluhu wuxuu kala noqonayaa shahaadada howl qabadka haddii haystaha:

   b) Lagu helo xad gudub ku salaysan anshax xum mihnadeed

   t) La xaqiijiyo in uusan maskax ahaan fayo qab ahayn

j) Uu galo fal-dambiyeed maxkmadi xukuntay
x) Ilaalin waayo ama ku xadgudbo anshaxa caafimaadka
kh) Uu shahaadada howl-qabad uu ku helay si musuq ah, been abuur ah ama qarin xaqiiqada dhabta ah.
d) Uu galo xad-gudub ka dhan ah Xeerkan ana uu meel uga dhaco nidaamka anshaxa.

2. Haddii diiwaan-gelinta mihnadlaha caafimaad lagala noqdo, shahaadada howl qabad ee uu haysto mihnadluhu waxay noqonaysaa waxba kama jiraan, waana in dib loogu celiyaa Golaha.
3. Goluhu wuxuu siinayaa mihnadlaha caafimaad fursad lagu dhageysto ka hor inta uusan kala noqon shahaadada howl qabad ee mihnadlaha caafimaad sida uu tilmaamayo Qodobkani.
4. Goluhu wuxuu ka hakinayaa mihnadlaha caafimaad howsha muddada ay barista ku socoto si waafaqsan Xeerkan iyo Shuruudaha uu Goluhu go'aamiyo ka hor inta uusan kala noqon shahaadada howl qabad ee mihnadlahaas caafimaad.

QODOBKA 47aad
Codsi Oggolaansho Howl-gelin Xarun Caafimaad

1. Qofka doonaya in uu furto xarun caafimaad waa in uu ka codsadaa Golaha ruqsad ka hor inta aan la howlgelin xaruntaas.
2. Xarunta Caafimaad ee la siiyay ruqsad, waxaa ruqsadeeda lagu muujinayaa meel muuqata oo ka mid ah xarunta Caafimaadka.
3. Haddii mihnadlaha la siiyay ruqsadda xarunta uu go'aansado in uu joojiyo adeegga caafimaad ee xarunta wuxuu ruqsadda u soo celinayaa Golaha.
4. Golaha kaliya ayaa wax ka-beddeli kara ruqsadda haddii:

b) Cid kale la wareegto xarunta caafimaad ee uu lahaa ruqsadle kale, isago ku beddelaya magaca cida la wareegaysa; ama

t) Magaca Xarunta caafimaad isbeddelo, iyadoo magaca cusub lagu beddelayo kii hore

QODOBKA 48aad
Mamnuucidda Howlgelinta Xarun Caafimaad aan Heysan Ruqsad

1. Lama howlgelin karo xarun caafimaad iyada oo aan marka hore la siin ruqsad ay ku howl-gash ee uu bixiyey Goluhu.
2. Haddii lagu helo xarun caafimaad in ay jebisay Faqradda (1) waxay gelaysaa xad gudub iyada oo mutaysanaysa ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Dollarka Maraykanka ah (ama Shilin Soomaali u dhigma).
3. Fal-dembiyeedyada ay galaan howlwadeennada ka howl-gala xarun ku xad-gudubtay faqradda 1- ee qodobkaan waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

QODOBKA 49aad
Cusbooneysiin Ruqsad Xarun Caafimaad

1. Derejo kasta oo ruqsadda lagu bixiyey waa in la cusbooneysiiyaa halkii sanaba (1 sano) mar laga bilaabo taariikhda la bixiyay.
2. Goluhu wuxuu cusbooneysiinayaa ruqsadda xarunta caafimaad ee lagu bixiyay si waafaqsan Xeerkan haddii:

b) Xaruntu ay si buuxda u dhaqan geliso nidaamka derejada lagu ruqsad siiyay.

t) Xaruntu ay gudbiso macluumaad dhammeystiran uu Goluhu u baahan yahay oo shuruud u ah cusbooneysiinta ruqsadda; iyo

j) Milkiilaha ama qofka mas'uulka ka ah xarunta Caafimaad uu bixiyo khidmada cusbooneysiinta.

QODOBKA 50aad
Diidmo Bixin Ruqsad Xarun Caafimaad

1. Goluhu ma oggolaanay codsi ruqsad bixin lagu howl geliyo xarun caafimad haddii:

   b)Milkiilaha ama qofka mas'uulka ka ah xarunta caafimaad uu faraha kula jiro xad-gudub ka dhan ah qodobada Xeerkan;

   t) Mihnadlaha caafimaad ee ka mas'uulka ah xarunta uusan lahayn diiwaan-gelin isla markaana haysan ruqsad howl-gal oo shaqeynaysa

   j) Xarunta Caafimaad aysan buuxin dhismo ahaan, shaqaale ahaan, qalab ama qaab-dhismeedka hay'ad ee looga baahnaa ruqsad siinta

   x) Mihnadlaha caafimaad ee mas'uulka ka ah xarunta caafimaad uusan haysan shahaado diiwaan-gelin ugu yaraan muddo gaaraysa saddex sanadood ka hor taariikhda codsiga.

   Kh) Goluhu wuxuu ku qanci waayo in mihnadlaha caafimaad uu si habboon uga diiwaan gashan yahay isla markaana leeyahay waayo aragnimo dal kale oo u dhiganta midda looga baahan yahay Soomaaliya.

2. Goluhu wuxuu si habboon ugu wargelinayaa codsadaha haddii la diido codsiga ruqsadda xarunta caafimaad sida ku tilmaaman Faqradda (1), isagoo u sheegaya sababaha

diidmada.

QODOBKA 51aad
Baarista Rugaha / Xarumaha Caafimaad

1. Xarun kasta oo caafimaad waxaa la baarayaa ka hor inta aan la bixin ruqsadda iyo ugu yaraan lix bilood oo kasta.
2. Xarunta Caafimaad waxaa baaraya khubaro aqoon iyo waayo aragnimo ballaaran leh oo uu Goluhu magacaabo.
3. Baareyaasha waxay muujinayaan caddeymahooda si loo aqoonsado xilliga ay ku howlan yihiin baaritaanka.
4. Baareyaasha waxay awood u leeyihiin in ay si habboon u galaan ama u baaraan goobaha loo adeegsado ama baareyaashu ku qancaan in loo adeegsado xarun caafimaad.
5. Baareyaasha waxay baari karaan ruqsadda howl-galka ee mihnadleyaasha ka howlgala xarunta caafimaad iyo diiwaanka lagu qoro warbixinta loo baahan yahay sida uu qabo Xeerkani
6. Baareyaasha waxay baari karaan xarunta caafimaad iyo qalabka ay xaruntu adeegsato iyada oo laga fiirinaayo in ay waafaqsan tahay nidaamka lagu ruqsad siiyay.
7. Mas'uulka ama cid ka tirsan xarunta caafimaad haddii uu:-

   b)Dib u dhig ama is-hortaag ku sameeyo baare gudanaya howlihiisa barista;

   t) Diida in uu si hufan gacan u siiyo baaraha si uu u guto waajibaadkiisa;

   j) siiya baaraha macluumaad been ama habaabin ah wuxuu gelayaa xad gudub uu ku mutaysanayo ganaax lacageed oo aan ka badnayn kun oo Dollarka Maraykanka ah (ama Shilin Soomaali u dhigma) iyo ciqaabta uu u jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

8. Baareyaasha waxay u soo gudbinayaan Golaha warbixin qoraal ah oo la xiriirta natiijooyinka barista.

QODOBKA 52aad
Xiritaanka Xarun caafimaad

1. Goluhu wuxuu awood u leeyahay in uu amro xiritaanka xarunta caafimaad haddii:
   b) Xarunta Caafimaad ay ku xad gudubto shuruudaha ruqsadda lagu siiyay;
   t) Xarunta Caafimaad aan lagu ruqsad siin si waafaqsan Xeerkan;
   j) Xarunta caafimaad ay ku caddaato in adeeg ay bixisay uu waxyeello ka soo gaartay bukaan taas oo ku timid tayo xumo, aqoon yari, ama dayacaad.
   x) Xarunta Caafimaad ee jebisa qodobada Xeerkan ama sharci kale

2. Goluhu wuxuu siinayaa xarunta caafimaadka wargelin qoraal ah oo ku aaddan xad-gudubka ay gashay marka uu helo warbixinta baaritaanka oo faah-faahinaysa in xarunta caafimaad aysan fulin shuruudaha ama ay bixiso adeegyo dhaafsan heerka ruqsadda la siiyay.
3. Rugta caafimaad marka ay hesho wargelinta ku tilmaaman Faqradda (2), waxay muddo todobo maalmood gudahood ah u soo gudbinaysaa xoghayaha guud qorshaha sixitaanka xad-gudubka oo faah-faahinaya jadwal taariikhaysan oo lagu dhammeystirayo sixitaanka xadgudubk ay gashay.
4. Rugta caafimaad, marka ay soo gudbiso qorshaha sixitaanka sida ku xusan Faqradda (3) uuna oggolaado Goluhu, waxay dhaqa gelinaysaa jadwalka uu ka kooban yahay qorshahaas.

5. Haddii Goluhu uu ku qanci waayo qorshaha sixitaanka xadgudubka, Goluhu wuxuu la noqonayaa ruqsadda goobta caafimaad, isla markaana wuxuu amrayaa xiritaanka rugta.
6. Haddii Goluhu uu ku qanco in xadgudubka lagu helay xarunta caafimaadka uu khatar weyn ku yahay caafimaadka bulshada wuxuu isla markiiba xirayaa xarunta isaga oo kala noqonayaa ruqsadda.

QODOBKA 53aad

Ansixinta Xarun Waxbarasho Caafimaad

1. Haddii xarunta waxbarasho uusan ansixin Goluhu, kama bixin karto Soomaaliya waxbarasho caafimaad nooc kasta oo ay tahay, taas oo ujeedkeedu yahay in loo tabobaro qof ka howl-gelidda mihnad caafimaad ama uu qabto howl kale oo la xariirta baaris caafimaad, daaweyn, ama adeeg kale, daawoyaqaan, ama ka hortaga cudurada.

2. Xarun kasta oo doonaysa in ay bixiso waxbarasho ama tab obarid qeybo la xiriira caafimaadka waa in ay codsi u soo gudbisaq Golaha ka hor inta aysan billaabin waxbarashada ama tabobarka.

3. Codsiga ku salaysan Faqradda (2) waa in ay la socdaan-

b) Faah-faahinta iyo caddeymaha la xiriira waxbarashadaas, ama barrnaamijyada tabobarada; iyo

t) Bixinta khidmadda looga baahan yahay.

4. Ka dib tixgelinta codsiga, hubinta caddeymaha iyo faah-faahinta ku xusan Faqradda (3), Goluhu wuxuu qaadayaa tallaabada ku habboon: b) In uu bixiyo oggolaanshada;

t) In uu diido ogolaanshada.

5. Marka Goluhu uu qaato go'aanka, xoghayaha guud waa in:

b) Uu ku wargeliyaa xarunta waxbarashada caafimaadka si qoraal ah go'aan kasta oo lagu gaaray si waafaqsan Faqradda (4);

t) Uu siiyaa shahaadada ansixinta xarunta waxbarashada caafimaadka ee codsigeedii la oggolaaday.

j) Uu diiwaanka geliyo faah-faahinta oggolaanshada Golaha.

x) Uu ku wargeliyo xarunta waxbarashada caafimaadka si qoraal ah, haddii oggolaanshada loo diiday iyo sababaha keenay diidmada.

6. Xaruntu waxay u dhaqan gelinaysaa ansixinta la bixiyay oo ay la socdaan shuruudaha lagu ansixiyay si hufan oo waafaqsan shuruuddii lagu bixiyay muddada xaruntaasi ay shaqaynayso.

7. Goluhu wuxuu magacaabi karaa baareyaal waqtiyo kala duwan si ay:

b) U baaraan in shuruudaha uu dejiyay Goluhu si waafaqsan Faqradda (5) ee xarumaha waxbarasho caafimaad si haboon loo fuliyey;

t) Warbixin u siiyaan Golaha natiijooyinka warbixinta baaritaanka iyo waxa lagu soo gunaanaday.

8. Goluhu wuxuu awood u leeyahay in uu ka laabtao oggolaasho uu hore u bixiyey si qoraal ah haddii ay u caddaato in xaruntaas waxbarasho ay ku guul darraysatay in ay dhaqan geliso shuruudaha ka dib marka xarunta waxbarasho la siiyo fursad lagu dhegaysto.

9. Xoghayaha guud waa in uu ku wargeliyaa si qoraal ah xarunta waxbarasho oo ay khusayso go'aan kasta ee Goluhu gaaray.

10. Xarunta waxbarasho ee ku tilmaaman Faqradda (8) waa in muddo soddon maalmood gudahood u soo celisaa Golaha shahaadada ansixinta laga bilaabo taariikhda wargelinta.

11. Xoghayaha guud waa in uu:

b) Baabi'iyaa shahaadada ansixinta ee hore loo siiyay xarunta waxbarashada caafimaadka, iyo

t) Geliyaa diiwaanka macluumaadka baabi'inta shahaadadaas.

12. Xarun kasta ee waxbarasho caafimaad oo mas'uuliyiinteeda ku guul darraystaan in ay dhaqan geliyaan si waafaqsan Faqradaha (1) iyo (6) waxay geleysaa xad gudub, haddii lagu helo, waxayna mutaysanaysaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn saddex kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma) iyo joojinta bixinta adeegga waxbarashada caafimaadka.

13. Xeerkani kama hor istaagayo in lagu tabobaro xarumaha caafimaadka ardayda ujeedadoodu tahay in ay kororsadaan aqoontooda si ay u helaan shahaado diiwaan gelin haddii ay si toos ah u kormeerayaan mihnadleyaal leh aqoon sare oo diiwaan gashan lana ilaalinayo habraaca tabobarada uu Goluhu dejiyay.

QODOBKA 54aad
Ansixinta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad

1. Xarunta waxbarasho ee fulinaysa tabobar mihnadeed caafimaad oo cusub waa in ay u soo gudbisaa Golaha codsiga ansixinta barnaamijkeeda ka hor billowga tab abarka. Dhammaan barnaamijyada tabobar ee hore u jiray waxaa ansixinaya Golaha.

2. Goluhu wuxuu go'aaminayaa ka dib marka uu si qoto dheer u baaro barnaamijka tababar ee la soo jeediyey in uu ansixiyo haddii uu buuxiyo dhammaan shuruudaha looga baahan yahay, ama uu diido haddii uu ku qanci waayo.

3. Goluhu ma oggolaanayo haddii xarun tababar sameyso tababar aan lagu ansixin si waafaqsan Xeerkan, shahaadooyinka tababarkaasi lagu qaato looma aqoonsanayo kuwo taabbo-gal ah.

4. Xarun waxbarasho caafimaad ma bixin karto tababar la xiriira caafimaadka oo loogu diyaarinayo arday mihnado caafimaad, haddii uusan Goluhu hore u ansixin barnaamijka tababarkaas.

5. Xarunta waxbarasho ee ku xad-gudbta Faqradda (4), howlwadeennadeedu waxay gelayaan xad-gudub ay ku mutaysanayaan ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma) iyo joojinta bixinta adeegga waxbarasho caafimaad.

QODOBKA 55aad
Qiimeynta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad

1. Goluhu wuxuu qiimeynayaa barnaamijyada ay qabanayaan xarumaha lagu barto mihnadaha caafimaadka ee kala duwan iyada oo sharci ahaan laga eegayo arrimahaan soo socda:

b) Muddada barnaamijka tababarka uu soconayo

t) Shuruudaha uu Goluhu ku aqoonsanayo barnaamijkaasi tababar ee gaarka ah;

j) Heerarka ugu yar ee lagu aqbali karo in barnaamijka tababarka uu soo saaro mihnadleyaal caafimaad oo loo diiwaan gelin karo mihnadle caafimaad ahaan

x) Shuruudaha looga baahan yahay in uu buuxiyo barnaamijka tabobarka, kuwaas oo ay ka mid yihiin manhajka wax lagu barayo oo tayaysan, shahaadooyinka aqooneed ee howl-wadeennada Kulliyadda, qalabka muhiimka u ah tayada barnaamijkaas waxbarasho iyo hannaanka shaqaalaynta howlwadeennada kulliyadda.

QODOBKA 56aad
Dib-u-eegista Barnaamijyada
Waxbarasho Ee Hore Loo Ansixiyay

1. Goluhu wuxuu dib u eegayaa dhammaan barnaamijyada tab abar ee hore loo ansixiyay sanad walba mar laga billaabo marka oggolaanshada kowaad la siiyay isaga oo si gaar ah tixgelin u siinaya heerka waxqabad ee howlwadeennada ka soo qalin jebiyay barnaamijyadaas tabobar.

2. Goluhu wuxuu ka noqon karaa oggolaanshada barnaamij tababar marka ay u caddaato in barnaamijka tabobar uusan hadda ka dib la jaan-qaadi karin shuuruudaha Xeerkan, ama barnaamijka tabobar uu si is-daba-joog ah u buuxin waayo ama ka hooseeyo heerarka looga baahan yahay barnaamijkaas.

QODOBKA 57aad
Ansixinta Adeeg Daryeel Caafimaad

1. Xarunta bixisa adeegyo caafimaad oo kala duwan ama soo kordhisa adeeg cusub waxay Golaha ka soo codsanaysaa in loo ansixiyo adeegyadaasi si waafaqsan xeerkan iyada oo bixinaysa khidmadda looga baahan yahay.

2. Ka dib helitaanka codsiga ku tilmaaman Faqradda (1), Goluhu wuxuuu u dirayaa baare xarunta caafimaad si loo soo hubiyo in xaruntaasi ay buuxisay shuruudihii ku xirnaa ansixin adeeggaas.

3. Golaha marka uu ku qanco in rugta caafimaad ay buuxisay shuruudaha ansixinta, wuxuu siinaysaa xaruntaas ansixin muddo hal sano ah.

4. Golaha wuxuu ku bixinayaa ansixinta adeegga daryeel shuruudaha u degsan oo khuseeya:

   b) Nooca adeegga caafimaad ee la bixinayo

   t) Aqoonta iyo khibradda mihnadlayaasha bixinaya adeegga

j) Qalabka iyo mashiinada la adeegsanayo.
x) Habraacyada daweynta ama qalliinka.
kh) Heerka ruqsada xarunta caafimaad.
d) tabobaridda mihnadlayaasha ka qeyb qaadanaya bixinta adeeggaas.

5. Goluhu ma siinayo xarunta caafimaad ansixin haddii adeegga caafimaad uu xumaan iyo liidnimo u keenayo bukaanka iyo hannaanka daryeelka caafimaadka.

6. Goluhu haddii uu diido codsiga ansixinta wuxuu si qoraal ah ku wargelinayaa xarunta caafimaad isaga oo qeexaya sababaha diidmada.

7. Adeegga caafimaad ee ku cusub Soomaaliya marka uu soo buuxiyo shuruudaha faqrada (4), Goluhu wuxuu siinayaa ansixin ku meel gaar ah oo muddadiisu tahay seddex bilood.

8. Golaha wuxuu baaritaan iyo qiimeyn qorsheysan ku sameynayaan hanaanka iyo natiijada adeegga cusub ee caafimaad isaga oo u xil saaraya khubarro uu soo magacaabay Goluhu waxayna baarayaan:
   b) Uruurinta xogta la xiriirta adeeggaas.
   t) Natiijada/faa'iidada uu ka helayo bukaanka marka uu helo adeeggaas.

9. Golaha wuxuu go'aan ka gaarayaa warbixinta faah-faahsan oo ay soo gudbiyaan khubarada isagoo go'aaminaya in:
   b) Uu sii socdo bixinta adeegga caafimaad ee cusub.
   t) La joojiyo adeegga caafimaad ee cusub.

10. Goluhu haddii uu bixinayo ansixin adeeg caafimaad wuxuu ku meel marinayaa heerka ruqsadda ee xarunta caafimaad ay mudan tahay.

QODOBKA 58aad
Cusbooneysiin Ansixin

1. Ansixinta la siiyey adeeg daryeel walba oo ay bixiyaan xarumaha caafimaad waxaa si joogto ah loo cusboonaysiinayaa labo iyo tobankii (12) biloodba mar.
2. Goluhu wuxuu weydiisan karaa warbixin faahfaahsan iyo xog la xariirta adeegga caafimaad ka hor cusbooneysiinta ansixinta.
3. Goluhu wuxuu dalbanayaa in baaritaanno lagu sameeyo adeegyada caafimaadka oo dhan si loo hubiyo in si joogto ah loo dhaqan-geliyay shuruudihii loo baahnaa.
4. Haddii adeegga caafimaad uu soo buuxin waayo shuruudaha cusbooneysiinta ama aan laga helin xarunta caafimaad warbixin iyo xog faah-faahsan, Goluhu waxaa uu joojinayaa cusbooneysiinta ansixinta adeegaas.

QODOBKA 59aad
Kala -noqosho Ansixin

1. Marka xarunta caafimaad ay ku xad-gudubto shuruudaha lagu bixiyay ansixinta, Goluhu wuxuu kala noqonayaa ansixinta si qoraal alma ugu wargelinayaa cidda ay khuseyso.

2. Inta kala-noqoshadu dhaqan-galka tahay looma oggola xaruntaas in ay bixiso adeeg caafimaad iyada oo aan dib u helin ansixin kale.

QODOBKA 60aad
Shahaadooyinka Waxbarasho ee Shisheeye

1. Goluhu wuxuu tixgelinayaa shahaadooyinka mihnadlayaasha caafimaad ee shisheeye haddii:

b) Lagu bixiyay af-Ingiriisi ama Af-Carabi

t) Ay ka wadato tas-diiqin iyo shaabad Wasaaradaha Tacliinta Sare iyo Arrimaha Dibedda ee Dalka lagu bixiyey shahaadada.

j) Ay ka wadato tas-diiqin iyo shaabadayn Safaaradda Soomaaliya u fadhida Dalka shahaadada lagu bixiyey.

x) Tas-diiqin ay bixisay Wasaaradda Hidaha iyo Tacliinta Sare ee Soomaaliya ay ku sugayso in shahaadada tahay mid meel mar ah.

2. Haddii ay dhacdo in shahaadada lagu bixiyey luqado kale oo aan ahayn Ingiriis iyo Carabi, waa in lagu turjumaa luqadaha Soomaaliga, Carabiga ama Ingiriisiga isla markaasna la waafajiyaa shuruudaha ku tilmaaman Faqradda (1).

QODOBKA 61aad

Aqoonsiga Ururada Mihnadlayaasha Caafimaadka

Xeerkani wuxuu aqoonsanayaa dhammaan ururada mihnadleyaasha caafimaadka ee kala duwan oo ay leeyihiin mihnadyaal caafimaad oo la aqoonsan yahay haddii ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:

1. Xubnaha Ururka aysan ka yarayn toban iyo kow (11) xubnood;
2. In ururku leeyahay dastuur shaqaynaya oo qeexaya xuquuqda iyo xilalka xubnaha, sida oo kalena muujinaya himillooyinkiisa, qaabdhismeedka ururka iyo xeerar lagu nidaaminayo anshaxa mihnadlayaasha xubnaha ururka.
3. In nuqulka dastuurka loo soo gudbiyo Golaha.
4. In shahaadooyinka xubnaha ururka ay si toos ah ula xiriiraan mihnadda ururka caafimaadka ee ay ka tirsan yihiin.

QODOBKA 62aad
Xayeysiin

1. Qofna ma xayeysiin karo adeeg caafimaad:

b) Haddii uu yahay mid ku saleysan been, dhagar ama marin habaabin; t) Bixiya hadiyado, qiimo dhimis ama ka dhaadhicin lagu soo jiidanayo qof si uu u isticmaalo adeegga caafimaad, haddii xayeysiintu aysan qeexin qodobbada iyo shuruudaha adeeggaas.

j) Adeegsada caddeymo looga gol-leeyahay marin habaabin ku aadan ka ganacsiga adeegga caafimaadka.

x) Abuuraya rajooyin dhalanteed ah oo la xariira dhiirrigelin adeeg ama daaweyn aan waxtar lahayn.

kh) Toos ama si dadban u dhiirrigelinaya kala saarid la'aanta baaritaanka, daweynta, iyo takhasusyada mihnadda caafimaadka.

2. Haddii lagu xad-gudbo habraacyada xayeysiinta isla markaana lagu helo xad-gudubkaas, waxaa qofka ama xarunta caafimad ay mutaysanaysaa ganaax:

b) Haddii uu shakhsi yahay kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin somaali u dhigma)

t) Haddii ay tahay xarun caafimaad labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma).

3. Xad-gudub ku xusan Faqradda (1aad) laguma qaadayo qofka ama xarunta uu ganacsigiisa/ganacsigeeda qeyb ka yahay daabicidda ama faafinta xayeysiin ay hay'ad ama qof kale leeyahay.

QODOBKA 63aad
Ilaalinta Hor Gale Magac

1. Sida uu qabo Xeerkani, cidna ma adeegsan karto hor gale magac uusan sharcigu u oggolaanin sida "Dhakhtar", iyada oo dhammaystiran ama la soo gaabiyay, ama wax u dhigma ee luqad kale, ama eray kasta oo leh qeexid guud oo ku tusinaya daryeel caafimaad oo la siiyo shakhsiyaad ku sugan Soomaaliya.
2. Qof aan ahayn dhakhtar caafimaad ama mid ilko, waa in uusan:

b) U howl gelin sidii dhakhtar caafimaad ama mid ilko, sida oo kalena, aan loo shaqaaleysiin adeeg bixiye daryeel caafimaad.

t) Uusan qaban howlo caafimaad oo dadku u qaadan karaan in qofkaasi yahay takhtar caafimaad ama mid ilko.

3. Qof aan ahayn mihnadle caafimaad oo diiwaan-gashan oo looma oggola in uu si ogaal ama xilkasnimo xumo ah:

b) U qaato ama adeegsado mansab ah "mihnadle caafimaad oo diiwaan gashan"

t) U qaato ama u adeegsado mansab, magac, magac-horaad, astaan, eray, calaamad, ama qeexid muujinaysa in uu si sharci ah uga howlgalo mihnad caafimaad.

4. Qofka ku xadgudba Faqraddaha (1), (2) iyo (3) wuxuu gelayaa xadgudub uu ku mutaysanayo, marka lagu helo, ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma) ama ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
5. Qof ama rug caafimaad ma howl gelin karaan qof aan lagu diiwaan gelin mihnadle caafimaad. Haddii ay jebiyaan faritaankan waxay mutaysanayaan ganaaxyo gaaraya ugu badnaan:

b) Haddii uu yahay shakhsi kun iyo shan boqol oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma)

t) Haddii ay tahay xarun labo kun iyo shan boqol oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma)

6. Mihnadle caafimaad oo diiwaan gashan looma oggola in magaciisa uu ku howl galo ama xaruntiisa uu ka howl geliyo qof kale oo aan ahayn mihnadle caafimaad oo diiwaan gashan. Ciddii ku xad gudubta faqraddan waxay mutaysanaysaa ganaax lacageed aan ka badnayn kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shillin Soomali u dhigma) ama ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

QODOBKA 64aad

Xakamaynta Adeegsiga Mansabyada Takhasusle

1. Qof aan ahayn howlwaadeen caafimaad oo takhsusle ah looma oggola in uu si oggaal ama xilkasnimo-xumo ah:

b) U qaato ama u adeegsado mansabka "mihnadle caafimaad takhasusle";

t) U qaato ama u adeegsado mansab, magac, magac-horaad, astaan, eray ama qeexid muujinaysa xaalado in la adeegsanayo ama si cad looga fahmayo: in uu yahay mihnadle caafimaad takhasusle ah ama in awood loo siiyey ama u qalmo in uu ka howl-galo takhasus gaar ah.

2. Ciddii ku xad-gudbta qodobkan waxay mutaysanaysaa ganaaxyada soo socda:

b) Haddii uu shakhsi yahay kun iyo shan boqol oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma)

t) Haddii ay xarun tahay seddex kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhiganta).

QODOBKA 65aad
Xeer-hoosaadyo iyo Xeer nidaamiyeyaal

Goluhu wuxuu soo saari karaa xeer hoosaadyo ama xeer nidaamiyeyaal ku saabsan arrimaha uu xeeriyay Xeerkan waxaana xeer hoosaadyadani lagu dhaqayaa meelaha soo socda:

1. Mihnadlayaasha caafimaad ee leh diiwaan gelin iyo ruqsad.
2. Rugaha adeegyada caafimaad.
3. Xarumaha waxbarashada caafimaad.
4. Cilmi barista caafimaadka ee Dalka.
5. Ururada mihnadaha caafimaad ee la aqoonsan yahay

QODOBKA 66aad
Kala Dirista Golaha

1. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya (Golaha Wasiirada) waxay kala diri kartaa Golaha (GMCQ) haddii uu ku guul-darraysto gudashada awoodaha loo igmaday si waafaqsan Xeerkan ama shuruucda kale.
2. Ka dib marka la kala diro Golaha si waafaqsan Faqradda (1), Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay la wareegaysaa xisaabta iyo hantida kale ee Golaha, sida oo kale, waxayna hirgelin kartaa dhammaan awoodaha iyo howlaha ku xusan xeerka u degsanaa golaha la kala diray.
3. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay magacaabaysaa guddi ku meel gaar ah oo ka howl-gala fulinta awoodaha iyo howlaha ku xusan xeerka GMCQ.
4. Xukuumaddu waxay ku dhisaysaa gole cusub muddo seddex bilood gudahood ah marka la kala diro Golaha.
5. Xukuumaddu waxay ku wareejinaysaa golaha cusub xisaabta iyo hantida la gala wareegay golihii la kala diray si waafaqsan Faqradda (2).

Qodobka 67aad
Xarunta Rasmiga ee GMCQ iyo Baaxadda Awoodaha Golaha

1. Xarunta rasmiga ah ee GMCQ waa magaala madaxda Dalka ee Muqdisho.
2. Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka wuxuu xafiisyo ku yeelan karaa Dowlad Goboleedyada xubinta ka ah Dowladda Federaalka.
3. Goluhu wuxuu ku metelaa mihnadleyaasha caafimaadka fagaareyaasha caalamiga ah iyo kuwa urur goboledyada adduunka.

QODOBKA 68aad
Wax Ka Bedelidda Xeerka

1. Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka iyaga oo u maraya Wasaaradda Caafimaadka waxay Baarlamaanka Federaalka u soo jeedin karaan wax-ka-beddel lagu sameeyo xeerkan.
2. Baarlmaanka Federaalka isaga oo tixgelinaya talo soo jeedinta Wasaaradda ama si iskiis ah ayuu wax uga beddelayaa Xeerkan.

QODOBKA 69aad
Racfaan

1. Qofkii ku qanci waaya go'aan ama amar uu soo saaray Golaha GMCQ ee ku salaysan Xeerkan wuxuu racfaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare muddo ku siman soddon maalmood, laga billaabo taariikhda uu soo baxay go'aankaas ama amarkaas.

QODOBKA 70aad
Warbixin sanadeed

1. Dhammaadka sanad kasta, gaar ahaan 3' bilood ee ugu dambeeya sanadka (Oktoobar, Nofeembar, ama Diseembar), Guddoomiyaha Golaha waa in uu u gudbiyaa warbixin sannadeedka Golaha Wasaaradda Caafimaadka (WC) iyo Guddiyada Arrimaha Bulshadda ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya.

QODOBKA 71aad
Baab'in

1. Xeerkani wuxuu baab'inayaa sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin.

QODOBKA 72aad
Muddada Kala Guurka

1. Lix blood ka dib marka uu dhaqan galo Xeerkani, looma oggola cid aan diiwaan gashanayn ama aan haysan ruqsad howlgal ee mihnad caafimaad ama xarun adeeg caafimaad ama waxbarasho in ay ka howl galaan si toos ah ama si dadban Dalka Soomaaliya.

QODOBKA 73aad
Dhaqan-galka Xeerkan

1. Xeerkan wuxuu dhaqan-gal noqonayaa marka uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo, saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JFS.
2. Wasaaraadda Caafimaadka ayaa u xilsaaran hirgelinta Xeerkan iyada oo aan lagu xadgudbin madax-bannaanida Golaha.

XEER MADAXWEYNE LR.286 Taariikh: 02/08/2020

MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE WASAARADDA QORSHEYNTA, IYO HORUMARINTA DHAQAALAHA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka

MARKA UU ARKAY: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG

MARKA UU ARKAY: Soo jeedinta Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha SUMMAD: WQM&HD/259/2020

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilka Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista in Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha loo magacaabo Agaasime Guud

Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 8-da August 2020, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay Mudane **Cabdiqaadir Maxamed Aadan (Cabdul)** in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 02/08/2020

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
XAFIISKA HANTIDHAWRKA GUUD
DIIWAAN NO: HHAN/073/2020
TAARIIKH: 19/12/2020
SAXIIXA:
HANTIDHAWRAHA GUUD
Md.Maxamed Maxamuud Call

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

MAGACAABIS AGAASIMAHA GUUD EE WASAARADDA BETROOLKA IYO MACDANTA

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka

MARKA UU ARKAY: Qodobka 90aad ee Dastuurka KMG ah

MARKA UU ARKAY: Soo jeedinta Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka SUMMAD: XRW/210/08/2020, Taariikh: 06/08/2020 kuna saabsan soo Jeedin Magacaabis Agaasimaha Guud ee Magacaabis Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Betroolka Iyo Macdanta

MARKA UU ARKAY: Aqoonta iyo Waayo-aragnimada uu leeyahay mudanaha loo magacaabayo xilka Agaasimaha Guud ee Agaasimaha Guud Ee Wasaaradda Betroolka Iyo Macdanta

MARKA UU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo magacaabista in Wasaaradda Betroolka Iyo Macdanta loo magacaabo Agaasime Guud

Waxa Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 9-ka August 2020, Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed waxa uu u magacaabay Mudane **Maxamed Xaashi Cabdi Carabey** in uu noqdo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Betroolka Iyo Macdanta.

Qodobka 2aad

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxaa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 09/08/2020

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)

XEER MADAXWEYNE LR.328 Taariikh: 22/11/2020

MAGACAABIS XUBNAHA MAAMULKA HEY'ADDA BATROOLKA SOOMAALIYEED

MADAXWAYNAHA J.F.S

MARKA UU ARKAY: Qodobka 87aad iyo 90aad ee Dastuurka KMG ah ee Dalka

MARKUU ARKAY: Sharci Lr. 19, Taariikh: 08/02/2020 kuna saabsan SHARCIGA BATROOLKA JF SOOMAALIYA

MARKUU ARKAY: Xeer Ra'iisu-Wasaare Lr. 105 iyo Go'aanka Shirka Golaha Wasiirrada: SHGW.0099.07.20 ee 30/07/2020 kuna saabsan magacaabista Xubnaha Maamulka Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed

MARKUU TIXGELIYAY: Baahida loo qabo in la magacaabo Xubnaha Maamulka Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed

Wuxuu Xeeriyay:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Xeerkan, waxaa la magacaabay Guddoomiyaha, ku xigeenkiisa iyo Xubnaha Maamulka Hey'adda Batroolka Soomaaliyeed.

1. Mudane Ibraahin Cali Xuseen
   - *Guddoomiyaha Hey'adda B. Soomaaliyeed*

2. Marwo Caasha Cusmaan Axmed
   - *Guddoomiye-ku-xigeenka Hey'adda B.S.*

3. Mudane Ibraahin Axmed Layte - *Xubin*

4. Mudane Cabdulqaadir Aadan Maxamuud - *Xubin*

5. Mudane Ibraahin Cabdulqaadir Maxamed - *Xubin*

6. Mudane Axmed Xaaji Cabdi - *Xubin*

7. Mudane Cabdixafiid Cali Dirir - *Xubin*

8. Mudane Mahad Maxamed Sh. Xasan - *Xubin*

Qodobka 2aad

Waxa uu dhaqangelayaa Xeerkan Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo, waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

MUQDISHO: 22/11/2020

Madaxweynaha J.F.S
Maxamed Cabdullaahi Maxamed (Farmaajo)